

<b>JAMHUURIYADDA</b>		<b>SOMALILAND</b>
<b>FAAFINTA RASMIGA AH</b>		
<b>SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE</b>	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA <i>E-mail: <a href="mailto:Garyagaankaguud@gmail.com">Garyagaankaguud@gmail.com</a></i>		
<b>Sanadka: 5aad</b>	<b>Cadadka: 7aad ee july</b>	<b>Taariikh: 06/08/2016</b>
<b>QIIMAHA CADADKA: SL. Sh. RUKUNKA (Subscription):</b>		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.</i>		

**TUSMADA CADADKA**

<b><u>QAYBTA KOWAAD: XEERARKA</u></b>		
<b>BAARLAMAANKA IYO XEER</b>		
<b>NIDAAMIYAYAASHA:</b>		
1) Dhaqan-galka Xeerka Dakhliga Cashuuraha Beriga Somaliland, Xeer Lr. 72/2016		<b>412</b>
2) Dhaqan-galka Xeerka Kastamada Somaliland, Xeer Lr. 73/2016		<b>635</b>
<b><u>QAYBTA LABAAD: XEER</u></b>		
<b>NIDAAMIYAYAASHA IYO</b>		
<b>DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:</b>		
2) <u>XEER MADAXWEYNE</u> : 0649/072016 Cafis Madaxweyne		<b>773</b>
3) <u>XEER MADAXWEYNE</u> : 0650/072016 Magacaabid Degmo		<b>774</b>
4) <u>XEER MADAXWEYNE</u> : 0651/072016		<b>775</b>

Magacaabid Degmo

5) **XEER MADAXWEYNE** : 0652/072016

Magacaabid Degmo

6) **XEER MADAXWEYNE** : 0653/072016

Magacaabid Degmo

7) **XEER MADAXWEYNE** : 0654/072016

Magacaabid Degmo

8) **XEER MADAXWEYNE** : 0655/072016

Magacaabid Degmo

9) **XEER MADAXWEYNE** : 0656/072016

Magacaabid Degmo

10) **XEER MADAXWEYNE** : 0657/072016

Cafis Madaxweyne



779

780

781

**QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOOYINKA,  
WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER  
NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM**

9) SOOMA BIXIN

**QAYBTA AFRAAD: AMARADA &  
GO'AANADA MAAMUL**

12) Diiwaan Gelin Shirikada SOMPOLAH GROUP

**Xafiiska Xeer illaalinta Guud**

13) Diiwaan Gelin Shirikada BIG BOOS  
CONSTRUCTION AND CONTRACTOR COMPANY

**Xafiiska Xeer illaalinta Guud**

14) Diiwaan Gelin Shirkada SERVICE SOLUTIONS  
GROUP (SSG)

**Xafiiska Xeer illaalinta Guud**

15) Diiwaan Gelin Shirkada HARGEISA  
AUTHOMOTIVE LIMITED

**Xafiiska Xeer illaalinta Guud**

16) Diiwaan Gelin Shirikada AL-HUSEINI GROUP  
TRADING

**Xafiiska Xeer illaalinta Guud**

17) Diiwaan Gelin Shirikada HORN GARDENS

782

783

785

786

787

COMPANY	789
<b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	
18) Cadeyn Midow Shirikadeed (Join Venture), GENERAL ELECTRIC COMPANY IYO AT MIS, ELECTRIC COMPANY.	790
<b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	
19) Diiwaan Gelin Shirikada PRECISE CONTRUCTION LIMITED	792
<b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	
20) Diiwaan Gelin Shirikada HORN AQUA TECH.	
<b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	
21) Diiwaan Gelin Shirikada HILAAL SOM GENERAL TRADING COMPANY	793
<b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	
22) Diiwaan Gelin Shirikada HARAR TRANSPORTATION SERVICE	794
<b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	
23) Cadeyn Midow Shirikadeed (Join Venture), MUUQBILE CONSTRUCTION COMPANY, HALDOOR ENGINEERING CONSULTING AND CONSTRUCTION COMPANY IYO AL-NUR CONSTRUCTION COMAPY	796 797
<b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	
24) Baafin Dacweynsane, Maxkamadda Degmada Hageisa	
<b><u>QAYBTA SHANAAD : OGEYSIISYADA</u></b>	799
<i>Sooma bixin</i>	

**QAYBTA KOWAAD:**

**XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER**

**NIDAAMIYAYAASHA:**



THE VICE-PRESIDENT

Ref: JSL/MX/WM/XER/04-00263/162016

Date: 16/07/2016

**XEER MADAXWEYNE LR: 0659/072016**

**DHAQANGALKA XEERKA DAKHLIGA CASHUURAHA BERIGA  
SOMALILAND XEER LR. 72/2016**

**MADAXWEYNE KU-XIGEENKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

Markuu Arkay: Qodobka 91(1) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-30/697/2016, ee Ansixinta Xeerka Dakhliga JSL,

Markuu Helay: Qodobada 75, 76 iyo 77 (5) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Xeerka Dakhliga Cashuuraha Beriga Somaliland ee Xeer Lr. 72/2016.

Allaa Mahad Leh,

Eng. C/raxmaan C/laahi Ismaaciil (saylici)  
Madaxweyne ku-xigeenka JSL ahna Ku-simaha Madaxweynaha



PL: 14  
RECEIVED  
S/H/S  
19/07/2016



**Ujeedo:- Go'aanka ansixinta Xeerka Dakhliga JSI**

**(Xeer Lr.72)**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

- Markuu arkay:-** Qodobka 14<sup>aad</sup>, 34<sup>aad</sup> (3), 53<sup>aad</sup>, 54<sup>aad</sup>, 55<sup>aad</sup>, 74<sup>aad</sup>, 77<sup>aad</sup> iyo 78<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.
- Markuu Aqoonsaday:-** Waajibaadka Dastuuriga ah ee kasaaran Golaha wakiilada Xeerarka maaliyada iyo dhamaan arimaha la xidhiidha ee ay ka mid tahay in la helo Xeer si loo fuliyo awoda Golaha ee dabagelka iyo ilaalinta hadntida qaranKa.
- Markuu arkay:-** Baahida loo qabo In la diyaariyo Xeer lagu nidaamiyo Dakhliga guud ee dalka, Cashuuraha, ilaha dhaqaalaha iyo fulinta iyo dabagalka miisaaniyada.
- Markuu xaqiiqsaday:-** In Xeerarkii hore u jirey aaney ka turjumeyn baahida si ku saabsan diyaarinta Dakhliga iyo dhisida hay'addaha Maamula ilaha Dakhliga sida kastamada iyo cashuuraha bariga.
- Markuu Ogaaday:-** In Dakhligu halbawle u yahay socodsiinta hawlaha qaran una baahantahay in tub haboon loo jeexo Maamulkeeda, diyarinteedaiyo dabagalkeeda.
- Markuu tixgaliyay:-** Doodihii, aragtiyihii iyo afkaartii qiimaha lahayd ee qaybaha kala duwan ee bulshada sida, Aqoonyahanada, sharciyaqaanada, iyo mudanayaashu ka soo jeediyeen si loo helo xeer Hay'addaha Dakhliga ah oo ku dhisan aqoon lagana wada qayb qaatay doodiisa.

**Markuu u codeyay:-**

ansxinta xeerka Kastamada Xeer Lr. 2016 ee  
Kalfadhigii 30<sup>aad</sup> fadhigisi 14<sup>aad</sup> taariikhduna Aheyd  
20/4/2016 oo ay goob joog ahaayeen(42) Mudane oo ka  
mida ah Golaha Wakiilada.

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah (36) oo gacan taag ah ku ogolaaday Xeerka Dakhliga Cashuuraha  
Beriga Somaliland Xeer Lr.72, halka saddex (3) mudane ka diideen, laba (2)  
mudanena ka aamuseen, Guddoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

Allaa Mahad Leh

C/risaaq Siciid Ayaanle

Xoghavaha Guud ee Golaha Wakiilada



Daashe Maxamed Faarax

K/s Guddoomivaha Golaha Wakiilada

# Jamhuuriyada Somaliland

## GOLAHA WAKIILADU



### Markuu arkay:-

Qodobka 14<sup>aad</sup>, 34<sup>aad</sup> (3), 53<sup>aad</sup>, 54<sup>aad</sup>, 55<sup>aad</sup>, 74<sup>aad</sup>, 77<sup>aad</sup> iyo 78<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

### Markuu

### Aqoonsaday:-

Waajibaadka Dastuuriga ah ee kasaaran Golaha wakiilada Xeerarka maaliyada iyo dhamaan arimaha la xidhiidha ee ay ka mid tahay in la helo Xeer si loo fuliyo awoda Golaha ee dabagelka iyo ilaalinta hadntida qaranka.

### Markuu arkay:-

Baahida loo qabo In la diyaariyo Xeer lagu nidaamiyo Dakhliga guud ee dalka, Cashuuraha, ilaha dhaqaalaha iyo fulinta iyo dabagalka miisaaniyada.

### Markuu

### xaqiiqsaday:-

In Xeerarkii hore u jirey aaney ka turjumeyn baahida si ku saabsan diyaarinta Dakhliga iyo dhisida hay'addaha Maamula ilaha Dakhliga sida kastamada iyo cashuuraha bariga.

### Markuu Ogaaday:-

In Dakhligu halbawle u yahay socodsiinta hawlaha qaran una baahantahay in tub haboon loo jeexo Maamulkeeda, diyarintedaiyo dabagalkeeda.

### Markuu tixgaliyay:-

Doodihii, aragtiyihii iyo afkaartii qiimaha lahayd ee qaybaha kala duwan ee bulshada sida, Aqoonyahanada, sharciyaqaanada, iyo mudanayaashu ka soo jeediyeen si loo helo xeer Hay'addaha Dakhliga ah oo ku dhisan

aqoon lagana wada qayb qaatay  
doodiisa.



**Wuxuu Soosaaray**  
**Xeerka Dakhliga Guud iyo Cashuuraha Somaliland**  
(XEER Lr. 72/2016)  
CUTUBKA 1

**GOGOL DHIGGA XEERARKA**

**QAYBTA 1**

**DHAQANGELINTA IYO FASIRAADA**

**Qodobka 1<sup>aad</sup>**  
**Magaca Xeerka**

Magaca Xeerkan waxa weeye “**Xeerka Dakhliga Guud iyo Cashuuraha Somaliland**” Xeer Lr. 72/2016.

**Qodobka 2<sup>aad</sup>**  
**Erey Bixinta Xeerka**

Xeerkan haddii aan si kale loo waajihin waxyaabaha soo socda waxaa looga jeedaa:-

“Urur ciyaareed aan macaashdoon ahayn” (Amateur association):-

Waxa loo la jeedaa urur kasta oo ujeedadiisa ugu muhiimsani ama ujeeddadiisa kaliya tahay horumarinta ama maamulida ciyaarah ama ciyaar iyo kuwa xubnaahooddu ka kooban yihiin kaliya xubno ciyaareed aan macaash doon ahayn ama kuwo urur ahaan ula bahoobay, xubnaahooduna ka kooban yihiin kaliya shakhsiyadd ciyaareed oo aan macaash raadis aheyn.



**“Ansaxin” (Approved):-**

Waxa loola jeedaa ansixinta uu sameeyay wasiirku si waafaqsan xeernidaamiyaha lagu tilmaamaya Qodobkan 51aad



**“Khasaaraha la qiimeeyey” (Assessed lost):-**

Waxa loola jeedaa sida uu ugu dhigan yahay Qodobkan 89aad.

**“Xaqiijin” (Assessment):-**

Waxaa loola jeedaa:-

- I. Hubsiiimada dakhliga la cashuurayo, iyo xadiga cashruureed ee Cashuur bixiye ka bixin doono cashuur sanad dakhliyeedka sida ku xusan xeerkan, waxaa ku jira qiimaynta la rumeysan yahay sida ku xusan Qodobkan 137aad
- II. Hubsiiimadadakhliga kirada, iyo qadarka cashuureed ee uu ka bixinayo shakhsidakhliyeedkiiba sida uu dhigayo xeerkani.
- III. Hubsiiimada qiimaha ganaax cashuureed ee u ku bixinayo shakhsigu sida ku xusan xeerkan.
- IV. Go’aan kasta oo agaasime, kaas oo xeerkani oo u qalma in lagu sameyo is hortaag iyo rafcaan.

**“La jire (associate)”**

Waxaa loo la jeedaa:-

- (i) Qof kasta oo aan ahayn shaqaale, isla markaasna ku hawl gala tilmaamaha, codsiga, soo jeeddinta, ama rabitaanka shakhsi kale, ha lahaadaan xidhiidh ganacsi ama yay lahaanin iyo haddii ay amaradaasi, codsiyadda, soo jeedinta

,rabitaanaddu yihiin qaar lagula xidhiidhey shakhsiga hore ee sare ku xusan, haddaba xaaladdan labadoodaba, waxaa loo qaadan doonaa sidii laba wadajireyaal.

(ii) Iyadoon la soo koobin sida guud ee uu u dhigey qodobka (e)(i), kuwan soo socda waxaa loo qaadan Karaa la jire qof:-

**(A)** Qaraabo qof, hadiiba agaasimuhu uu ku qanco in labadooduba ay ku hawl galaan si waafaqsan tilmaamaha, codsiyadda, soo jeedimaha, ama rabitaanka qofka kale;

**(B)** Wadaage qof, haddiiba uu agaasimuhu ku qanco waxaa in labadooduba ay ku hawl galan si waafaqsan tilmaamaha, codsiyadda, soo jeedimaha, ama Rabitaanka shakhsiga kale;

**(C)** Wadaag taas oo qof kastaa uu yahay la wadaage, iyadoo qofkaasi kaligii ama si wadajir ah, iyadoo la dabaqayo qodobkan, ay maamulayaan 50% wax ka badan oo xuuquuqo dakhliya, ama raasamaalka wadaaga.

**(D)** Amaan hayaha amaano haynta, taas oo qofka ama la jirahiisu iyadoo mar labaad la dabaqayo qodobkan, uu ka faaideysto ama laga yaabo in uu ka faaideysto.

**(E)** Shirkadd (Company) taas oo qof, kaligii ama uu raacsan

yahay la jire ama la jireyaal iyadoo la dabaqayo qodobkan, uu gacanta ku hayo, si toosa ama si isku badhxaan, boqolkiiba konton ama wax ka badan oo awoodda codbixinta ee shirkadda si toosa ah ama shirkaddo (Company), wadaag, Amaano hayn isku badhxaan .

- (F)** Haddii uu qofku yahay wadaage, la wadaagaha la wadaaga dhexdeediisa, kaas oo kaligii ama uu raacsan yahay wada-jir ahaan, la-jiro iyadoo la dabaqayo qodobkan, in uu gacanta ku hayo boqolkiiba konton ama wax kabadn ooxuquuq dakhliya ama hantidda shirkadda ah.
- (G)** Haddii qof uu yahay amaano hayaha amaano u haya, qof kasta oo kale oo ka faaideysto ama laga yaabo inuu ka faaideysto doono.
- (H)** Markuu qofku yahay shirkadd(Company):-
- (i) Qofka kaligii ama ay la socdaan la jire ama la jireyaal iyadoo mar labaad la dabaqayo qodobkan, gacanta ku haya boqolkiiba konton ama wax kabadan oo awood Codeynta ee shirkadda, oo si toosa ama iyagoo kali ama isutag shirkado, wadaag,

ama amaano hayn;

(ii) Shirkado kale taas oo qofka lagu soo sheegay faqradda hoose(i), uu yahay la jire ama jajireyaal iyadoo marlabaad la dabaqayo qodobkan, uu gacanta ku hayo boqolkiiba konton ama in kabadan oo awood codbixin shirkad kale ah, si toosa ama si kale ugu xidhan shirkado, wadaagyo, ama Amaano hayn;

**“Hay’ad”(Authority):-**

Waxaa loola jeedda hayada Dakhliga Somaliland ee lagu aasaasay Qodobkan 190

**“Laan” (Branch):-**

waxa loola jeeddaa goob uu qof ku ganacsaddo oo ay ku jirto:-

- I. Goobku uu qof ku ku wado ganacsiiga kaas oo aan ahayn wakiil guud oo qaab madax banaan iskii ugu fuliya hawl caadiya oo wakiilasho, ganacsi sidaas;
- II. Goobta uu qof uu isticmaalo, isticmaalayo, ama uu rakibeyo qaybo mashiino baaxad leh ; ama
- III. Goobta uu qof ugu kaga hawl galo dhismaha, isku-xidhxidhida iyo rakibaada mashruuc gaadhaya sagaashan cisho ama wax kabadan, waxaa ku jira

**“Ganacsi” (Bussenes):-**

meesha uu shakhsigu ugu hawlgalo kormeer la xidhiidha mashruucaas. Waxaa ku jira hawlaha ganacsi kasta, xirfad, shaqo, ama sahamin/ socdaal oo leh ujeedo ganacsi, balse aanay ku jirin shaqo.

**“Hanti ganacsi (Business asset):-**

Waxaa loola jeeddaa hantidda loo isticmaalo ama loo diyaariyey loona hayo si loogu isticmaalo ganacsi;waxaana ku jira hanti kasta oo loo hayo iib ganacsi ama hanti kasta oo shirkadeed ama wadaag.

**“Deyn ganacsi” (Business debt):-**

Waxaa loola jeedaa:-

- a) Haddii Deynle ama qaanle:-
  - I. Qaan waajibtay ama mid laga helayo hati ganacsi ama kharash loo isticmaalayo ganacsi;ama
  - II. Qaan waajibtay oo gaadhay wakhtigii lagu bixinayey oo laga helayo hanti ganacsi ama lagu galayo kharash ganacasi;ama
  - III. Qaankasta oo waajibtay oo la xidhiidha wadaag ama shirkad;ama.
- b) haddii qaamaysane, waajib deynneed oo kasta oo lagu leeyahay qaamaysane taas oo lagu galay ama ka soo jeeda hawlaha ganacsi ee uu leeyahay qaamaysanaha.

**(“Dakhli Ganacsi”**

Wuxuu macnaheeddu yahay sida lagu

**(Business income):-**

sheegay Qodobka 69aad

**Dakhliga Cashuur Galka ah”(Chargeable income):-**

wuxuu leeyahay maana sida lagu sheegay Qodobkan 66aad

**“Dakhli amaano Cashuur galka ah” oo la xidhiidha sanad dakhliyeedka:-**

Macneheeda waxaa loola jeedaa:

- a) Dakhliga duuduuban ee Amaano hayn (trust) ee sanadkaas la xisaabiyey waa hddii amaana haye yahay cashuur bixiye dalka deggan oo laga jaray.
- b) Wadarta xadiga lagu ogolaaday xeerkani in loo jaro kharashaad ama khasaare uu amaano haye galey iyadoo dakhli la raadinayo.

**“Agaasime”:-**

Waxaa loola jeedaa Agaasimaha guud ee lagu magaacabay gudaha cutubka 5aad ee Xeerkan.

**“Shirkad”:-**

Macnaheedu waa shakhsiyaad isutagey ama aan isutagin, haddii ay yihiin qaar loo maray aasaasidooda ama lagu aqoonsadey si waafaqsan sharciga Somaliland ama meel kale, laakiin kuma jiro shuraakadda amaano hayn ama wadaag.

**”Saldhiga qiimaha” (Cost base):-**

Waxaa loola jeedaa marka laga hadlayo hanti sida lagu sheegay Qodobkan 102<sup>aad</sup>

**“Maxkamadd” (Court):-**

Macnaheedu waa hadba Maxkamawooda u leh.

**“Buundo lacageed” (Currency point):-**

waxay u taagan tahay qadarka shilin Somaliland ee lagu sheegay jaantuska

**“Saami (Debenture)”:-**

**amaah**

kowaad ee xeerkan. (eeg jaantuska kowaad ee Xeerka)

Waa saami amaah ku dhashay oo ay ku jiraan saamiga amaahda ku dhashay ee suuqyaalka Ah (Debenture stock), guryo amaah ah (Mortgage), alaabta dhismo amaahaa, (mortgage stock), qaan, hanti qaameysan, ama shay lamidda oo ka marag kacaya qaan, ha ahaato mid damaanad leh ama mid aan damaanad lahayn.

**”Qaan bislaatay” (Debt obligation):-**

Macnaheedu wuxuu yahay waajibaad bixinta qaan lacageed oo la siinayo qofka lahaa oo ku jirto xisaabaadka taagan ee la bixinayo iyo waajibaadka ka dhashay balanqaadyada, wax iswaydaarsiga iyo damaanad qaadka.

**“Ku tiirsane” (Dependant):-**

Marka lag hadlayo qofka xidhiidh la leh xubin ka tirsan sanduuqa dhaqaalaha hawlgabka, macnaheedu waa xaaska xubintaas, ilmo kasta, oo uu ku jiro kuwa la korsadey kaas oo ka yar sideed iyo toban jir, ama qaraabo kasta oo kale, taas oo agaasimuhu uu ku qancay ku tiirsanaanta taageeradda xubintaas.

**“Hantida qiima dhacaysa” (depreciable asset):-**

Macnaheedu waa warshad kasta ama makiinad, ama wax kasta oo qalaba, ah, agab, ama sheyo la mida, kuwaas oo gabi ahaanba ama qayb ahaanba la isticmaaley, ama loo diyaariyay inuu dakhli ku soo saaro oo ku jirta wadarta



**“Dhaqan  
(Disposal):-**

**ka bax”**

dakhliga oo ay dhici karto inay qiima beesho, gabaw darteed ama dhaqan bax awgeed.

Waxay leedahay macnaha ku jira Qodobkan 101aad.

**“Macaash  
(Dividend):-**

**saami”**

Waxaa ku jira:

- a) Markey shirkadu u soo saarto saamiyaasha warqad muujineysa deyn dulsaar leh ama qiimaha uu joogo saamigu wakhtigaas:-
  - I. Marka ay dhacdo in saamiileyaashu tix-galiyaan,qadarka lamidka ah ama ka badan qiimihii asalka ahaa ama qiimaha uu joogo hadda saamiga amaahda ka dhashay;ama
  - II. Marka ay dhacdo in aanay saamiileyaashu qadarkaasi siinin,qadarka lamidka ah ama kabadan qiimihii asalka ahaa ama qiimaha uu joogo hadda saamiga amaahda ka dhashay,inta ay isdheer yihiin,;ama
- b) Qaybin kasta ama ka noqosho kasta oo saami iibsi, ama la sameeyey iyadoo lagu jiro xaalad musalaf, si loo helo qiimaha uguyare ee saamiga la gadey, ama laga noqdey, ama u taagan musalaf.
- c) Xaaladda qayb ahaan la celiyo raasamaalka, gudid kasta oo la sameeyo oo ka baxsan qiimaha



	<p>saamiyaddii la carbuuntay oo jabey.</p> <p>d) Xaaladda dib loo dhiso shirkadda, gudid kasta oo lagu sameeyo saamiyadda oo ka baxsan qiimahii la carbuuntay ka hor dib udhiska.</p> <p>Qiimaha deyn kasta, ama xadiga qiimaha loo gudey hanti ama adeeg, qiimaha hanta kasta ama adeeg la qabtay, ama xadiga xil daymeed oo uu soo saartay shirkaddu, si ay uga faaideyso, saamiileyaasha shirkadda ama la jire saamiile iilaa heerka ay kale wareejinta nooceedu yahay macaash qaybsi.</p>
<b>“Shaqaaale” (employee):-</b>	Waxaa loola jeedaa qof kasta oo ku hawlan ama haya shaqo.
<b>“Loo Shaqeeye” (Employer):-</b>	Macnaheeddu waa shakhsi kasta oo hawlgaliya ama mashahar siiya shaqaale.
<b>“Shaqo (Employment):-</b>	<p>Macnaheeddu waa:</p> <ol style="list-style-type: none"> <li>I. Jagadda uu hayo qof shaqo haya ama ku guda jira shaqo uu uhayo qof kale.</li> <li>II. Agaasinka shirkadeed</li> <li>III. Jagadda uu hayo ku hela mushahar sugan ama mid aan sugneyn.</li> <li>IV. Xil haynta ama ku hawlgalidda xilka xafiis kasta oo dawladeed.</li> </ol>
<b>“Dakhliga shaqo”:-</b>	Waxay ay leedahay macnaha ku xusan Qodobkan 70aad

**“Urur leh cashuur dhaaf”  
(Exempt organisation):-**

Macnaheeddu waa shirkadd kasta, hayadd, ama amaano haye qaantuuni ah.



- a) Kaas oo ah:-
  - I. Urur ciyaareed aan macaash doon ahayn
  - II. Urur diineed, samafal, ama wax barasho dan guud ; ama
  - III. Urur ganacsi, shaqaale, ama dalad ururo Loo shaqaaye oo lagu diiwaan galiyay sharciga Somaliland, ama urur ujeeddada loo asaasey tahay si loo dhiiri galiyo beeraha, macdan ,dalxiiska, warshadaynta ,ama ganacsiga iyo warshadaha Somaliland; iyo
- b) Mid lagu soo saarey goaan qoraal oo uu soo saarey agaasimaaha markaas xilka haya, taas oo sheegeysa in uu yahay urur laga dhaafey Cashuurta.
- c) Mid aan ahayn mid wareejin karo dakhligiisa, hantidiis a ama rasamaalkiisa si looga faa'iideysto dano shakhsiya.

**Dhaqasho (Farming):-**

Macnaheeddu waa xoolo dhaqid, beer fallid, bustaan/asando, cilmi-beereed ama hawlo kasta oo la mida.

**Hay'ad Maaliyadeed  
(Financial institution):-**

macnaheeddu waa qof kasta oo ku hawlan ka ganacsiga lacago uu ka gudoomo dadwaynaha ama ka ogolaansho siinta dhigaal lacageed oo lagu bixin doono marka dib loogu baahdo, ka dib muddo cayiman, ama

ogeysiis ka dib, ama hawl kasta oo la mida oo iib ama isku badelka warqadaha deynta, shahaadooyinka, balan qaadyadda, ama damaanadaha kale, iyo u isticmaalka dhaqaalaha gabi ahaanba ama qayb ahaan amaaho, maalgashi, ama hawl-gal kasta oo kale oo uu sharci baneeyey ama hab-dhaqan macaamilka bangiyada ee xisaabaadka (Account) iyo helista ka iman karta ganacsigaas.

**Dakhli ilo Shisheeye (Foreign-source income):-**

Macnaheeddu waa dakhli kasta oo kayimi ilo ka baxsan gudaha Somaliland.

**Dakhli duuduuban- (Gross income):-**

Wuxuu leeyahay macnaha ku xusan Qodobka 68aad

**Faa'iidada duuduuban (gross turnover):-**

marka ay tahay cashuur bixiye degan sanad dakhliyeed kasta, macnaheeddu waa:-

- a) Qadarka ku yaala xisaabta ka la aqoonsan yahay ee cashuur bixiyaha ee ah iibka guud ee laga helay ganacsiga ama hawsha Sanad dakhliyeedkaas, oo ay ku jirto dakhliga guud ee ka soo baxay, iibka badeecada dhaqan ka baxa ahayd , iyadoon laga jarin kharash ama khasaare oo la galey sidii qadarkaas loo heli lahaa;
- b) haddiiba ay jirto Qadarka ku yaala xisaabta la aqoonsan yahay ee cashuur bixiyaha qadarkaas u soo baxay faaiido ahaan cashuur

<p><b>Qofka lixaadka la (Incapacitated person):-</b></p>	<p>bixiyaha sanad dakhliyeedkaas taas oo laga helay dhaqan ka baxa hantida ganacsiga, oo aanay ku jirin badeecadda ganacsigu haddii uu ka badan yahay khasaaraha uu galay Cashuur bixiyuhu Sanadkaas ee dhaqan ka baxa hantida.</p> <p>Macnaheedu waa qof kasta oo deegaan ah oo lagu xaqiijiyay shuruucda Somaliland in uu ku suga yahay xaalad caafimaad daro maskaxeed.</p>
<p><b>Amaano hayaha qofka lixaadka la (Incapacitated person's trust):-</b></p>	<p>Macnaheedu waa AMAANO-HAYN loo asaasay si loogu faa'iideeyo shakhsi aan lixaad lahayn.</p>
<p><b>dhisme warshadeed (Industrial building):-</b></p>	<p>macnaheedu waa dhisme kasta oo gabi ahaan ama qayb ahaan loo isticmaalay ama loo diyaariyey si loogu adeegsado:-</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>a) Hawlaha warshadaynta</li> <li>b) Daraasada ama horumarinta sare u qaadaysa hababka cusub ee warshadaynta ;</li> <li>c) Hawl-gal macdan qodid;</li> <li>d) Ganacsi hudheel loogu talo galay;</li> <li>e) Cusbitaal loogu talo galay;</li> <li>f) Goob ganacsi loogu talo galay;</li> </ul>
<p><b>Heshiis caalamiya (International agreement):-</b></p>	<p>Macnaheedu waa:-</p> <p>(a) Heshiis lala galay dawlad Shisheeye oo qeexaya ka dhaafidda laba jeer cashuurista caalamiga ah iyo ka hortaga cashuur la baxsiga sanadlaha ah;ama</p> <p>(b) Heshiis lala galay dawlad</p>

	Shisheeye oo qeexaya iskaashi laba geesood ah oo lagu maareeynayo fulinta waajibaadka cashuureed.
<b>Dhisme caymiska Nafta (Life insurance building):-</b>	Waxaa loola jeedaa macnaha lagu sheegay Qodobkan 67aad (3)
<b>Hay'addaha la cayimay- (Listed institution):-</b>	Macnaheddu waa hayaddaha lagu cayimay shaxdda labaad ee Xeerkan.
<b>Hayad Wadani ah (Local authority):-</b>	Macnaheeddu waa hayad kasta oo dawladeed oo lagu aasaasay sharciga Somaliland oo leh awood gacan ku haynta kharashka ka soo baxay dakhliga ka soo baxay taciifad ama cashuuraha uu sharci ku waajibiyay dadka degaan u ah goobta lagu aasaasay hayadaas.
<b>Khidmada maamulka (Management charge):-</b>	Macnaheeddu waa lacaq bixin kasta ee la siiyay qof kasta, oo aan ahayn mushahar shaqo, oo loo bixiyay khidmad maamul si kastaba ha loo xisaabiyee.
<b>Warshadayn- (Manufacturing):-</b>	Macnaheeddu waxa weeye marka uu ku dhaco isbedel gabi ahaan hantida guurtada ah oo ay ku jiraan koranto dhalinta iyo biyo siinta.
<b>Wasiir (Minister):-</b>	Waxaa loola jeedaa Wasiirka haya xilka Wasiirka Wasaarada Maaliyadda.
<b>Macdan qodista "(Mining operations):-</b>	Waxaa ku jira qaab kasta ama hab kasta oo macdan lagaga helayo dhulka ama wax ciida ka mid ah.

**Bixinta khayraadka  
dabiiciga ah-(Natural  
resource payment):-**

Macnaheeddu waa:-

- (i) Bixinta, oo ay ku jirto abaalgud ama wax la mida oo lagu bixinayo in macdan lagu gurto ama khayraad nool ama aan noolayn lagaga gurto dhulka, ;
- (ii) Bixinta, loo xisaabiyay gabi ahaanba ama qayb ahaan oo ku salaysan tirada ama qiimaha macdanta ama khayraadka nool ama ama aan noolayn ee dhulka laga gurtay.

**Qiiimaha magac u yaalka ah  
(Nomial Value):-**

**Marka la xidhiidhinayo saami ama saami amaah ka dhashay,** Macnahiisu waa qadarka la laga bixiyey saamiga oo naqadda ama qadarka uu hore u taagnaa saamiga amaahda ka dhashay, oo ay ku jirto qiimaha dheeraadka ah ee laga bixiyey saamiga ama saamiga amaahda ka dhashay.

**Qof aan deegaan ahayn  
(Non-Resident person):-**

Waxaa loola jeedaa macnaha lagu sheegay Qodobkan 65aad

**Wadaag-(Partnership):-**


Macnaheeddu waa isutaga shakhsiyaad ganacsi ku hawlan oo macaash wadaag ah.

**Bixin-(Payment):-**

Waxa ku jira qadar kasta oo la bixiyay ama la bixin doono naqad ahaan ama alaab ahaan, iyo nooc kasta oo leh qofka isku badalasho qiimadeed ama faa,iddo.

**Qof-(person):-**

Waxaa ku jira qofka caadiya ah, wadaage, Amaano-haye, shirkadd, sanduuq hawl-gab, dawlad, maamulka hoose siyaasada dawladda, iyo hayadaha la cayimay.



**Dakhli hantiyeed (Property Income):-**

Waxaa loola jeedaa macnaha lagu sheegay Qodobkan 71aad

**Cashuur-bixiyaha ku meelgaadh ah (Provisionnel payement):-**

Macnaheeddu waa dadka lagu yeelan karo cashuurta ku meel gaadh ah sida ku xusan Qodobkan 139aad.

**ka faa'iideyste mudnaanta leh (Qualified beneficiary):-**

Macnaheeddu waa shakhsiga lagu sheegay ee AMAANO-HAYN;

**ka faaideyste mudan AMAANO-HAYN (Qualified beneficiary trust):-**

Macnaheeddu waa:-

- a) AMAANO-HAYN xidhiidh ahaan uu shakhsiga, aan ahayn ka ku deeqay, uu leeyahay awoodda kaliya ee uu isticmaali karo shakhsigaasi (to vest corpus) ama dakhliga AMAANO-HAYN ee shakhsigaas;ama
- b) AMAANO-HAYN kaas oo ka faideystaha kaliya uu yahay shakhsi ama askhaas dhaxlayaashiisa ama cidda uu magacaabay, Laakiin kuma jirto AMAANO-HAYN taas oo ka faa'ideysteyaashu yahay shakhsi aan Awood la'a.

**Qaraabo- (relative):-**

Marka lala xidhiidhinayo qof-macnaheeddu waa:-

- I. ka farcame, ku abtirsade mid ka

	<p>mid ah awoowyoyaasha qofkaas ayaa loo aqoonsanayaa qaraabe, ama ilmo uu korsaday ee qofkaas, ama lamaanaha is qaba midkood qofkaas, ama</p> <p>II. qaraabada Lamaanaha is qaba midkood ama ee qof kasta ee lagu cayimay faqradda sare ku xusan (i) ee xubintan</p>
<p><b>Kiro- (Rent):-</b></p>	<p>Macnaheeddu waa bixin kasta oo ay ku jirto hore-marin ama qiime u dhigma oo loo bixiyay si isticmaalka ama degitaan ama xaqa isticmaalka ama degidda dhul ama dhisme;</p>
<p><b>Dakhli kiro (Rental income):-</b></p>	<p>Markay la xidhiidho sanad dakhliyeed qofka, macnaheeddu waa wadarta isugeyntqadarka kiro ee ka soo gashay qofkaas kiro hanti ma guurto ah oo ku taal Somaliland iyadoo laga goynayo kharashaadka iyo khasaaraha uu ku galay qofka leh hantidaas;</p>
<p><b>Xeerarka la laalay (Repealed legislation):-</b></p>	<p>Macnaheeddu waa Xeerka Cashuuraha Toosan L/No: 89/96, Xeerka Cashuurta Gadida ee L/NO : 84/96, &amp; dhamaan Xeerndaamiyeyaashoodii loo soo saarey.</p>
<p><b>Shirkad deggan:-</b></p>	<p>Waxaa loola jeedaa micnaha lagu sheegay Qodobkan 61aad</p>
<p><b>Qof degan:-</b></p>	<p>Waxaa loola jeedaa micnaha lagu sheegay Qodobkan 60aad</p>
<p><b>Wadaage deggan:-</b></p>	<p>Waxaa loola jeedaa micnaha lagu sheegay Qodobkan 63aad</p>



**Shakhsi deggan:-**

Macnaheeddu waa ruux degan, shirkadd degan, wadaag degan, amaano haye, degan, maal hawlgab degan, dawladda Somaliland, ama qayb hoosaad siyaasadeed ee dawladda Somaliland.

**Sanduuq hawl-gab oo deggan:-**

Waxaa loola jeedaa micnaha lagu sheegay Qodobkan 64aad

**Cashuur bixiye degan:-**

Waxaa loola jeedaa cashuur bixiye dalka deggan

**AMAANO-HAYE deggan:-**

Waxaa loola jeedaa micnaha lagu sheegay Qodobka 62aad

**Sanduuqa hawl-gabka:-**

Macnahiisu waa lacag hawlgab ama sanduuq loo aasaasay in si joogto ah oo lagu ilaaliyo oo loogu daryeelo kaliya midkood ama labaddaba ujeeddooyinkan soo socda:-

- I. gunada la siiyo xubnaha sanduuqa markii ay hawlgab noqdaan.
- II. gunada la siiyo ku tiirsanayaasha xubnaha sundaaqa haddey dhimasho ku timaado qofka xubin ka ah sanduuqa hawl-gabka ah.

**Dakhli (Revenue):-**

Macnaheeddu waa cashuuro, takhliifaad, ajuuroyin, ganaaxyo, ama lacago kale oo xeerkani soo rogay ama lagu soo ururiyey, iyo qodobadda gaarka ah ee xeerarka uu dhigey

**Ammaan/Abaal  
(Royalty):-**

**Saddo-**

jaantuska todobaad.

Macnaheeddu waa:-



I. Waa lacag bixin kasta, oo ay ku jirto Abaalmarinama wax u dhigma oo kale, si loogu helo:-

a) Isticmaalka ama xaqa isticmaalka, xuquuqda ikhtiraac kasta, nashqad kasta, calaamad ganacsi, iyo xuquuq dabacadeed, ama qaab kasta, hanaan, qorshe, qaaciddo, ama hab, ama hanti kasta, ama xaq kasta oo dabeecad la mida leh.

b) Isticmaalka, ama xaqa isticmaalka:

II. Sawirkasta oo dhaqdhaqaaq filim leh.

III. Maqal iyo muuqaal kasta, hadday yihiin qaar lagu kaydiyey qaab filim, cajaladeed,cajaladda siidhii,ama noocyo kale si oo lagu xidhi karo tiifiiga ama radiyo warbaahineed;ama

IV. Dhawaq kasta oo loo kaydiyey ama lagu xayeysiinayo si loogu xidho shayadda aan kor ku soo sheegnay faqradda (I)(b)(ii)

c) Isticmaalka ama xaqa isticmaalka, ama qabashadda ama xaqa helista, wax kasta oo muuqaal ah ama maqal ah, oo la isugu gudbiyo dayax

gacmeedka xadhkaha  
teleefoonka ama xadhkaha  
isgaadhssinta ee badda hoos  
mara, miiqyadda danaaka  
xanbaara, am farsamo casriya  
oo la mida oo loo isticmaalo  
warbaahinta talefishanka ama  
raadiyowga.

- d) Faafinta, ama bilaabidda si loo faafiyo, wax kasta oo saynis ah farsamo, warshado ama aqoon ganacsi, ama xog;
- e) Istickmaalka ama xaqa isticmaalka hanti kasta oo lataaban karo oo guurto ah;
- f) Sameynta ama in la bilaabo sameynta, iyo gacan siinta arrimaha ku xusan faqradda i) A) Illaa E) ee qodobkan.
- g) Gabi ahaana ama qayb ahaan wixii ka dhasha arimaha xaga sare lagu soo sheegay ee ku xusan faqradda hoose (i)(A) illaa (F); ama (ii) Faaido kasta oo laga helo tuurista xuquuq kasta ama hanti kasta lagu sheegay faqradda (i) ee Qodobkan.

**Wareejiye (Settlor):-**

Macnaheeddu waa qof kasta oo kala wareejiyey hanti ama u badalay ama u rogay wax faaido leh, iyadoo wax faaido ah ugu jirin ama ay faaidada ku jirtaa ay tahay mid ka hooseysa qiimaha suuqa ee Hantidaas la wareejiyay ama faadidaas la badalay malintii la wareejiyay ama la badalay, hantidaas la wareejiyey ama faadidaas la badalay

**Wareejiye AMAANO-HAYN  
(Settlor trust):-**

maalintii la wareejiyey ama la badalay;

Macnaheeddu waa AMAANO-HAYN lagu aaminaay dhamaantii ama qayb kamida waxa uu leeyahay wareejiyuhuu:-

(i) Awood uu ka noqda ama uu badelo AMAANO-HAYN si uu u heli lahaa manaafacaadka rasamaalka ama wixii dakhliya Amaano-haynta.

(ii) Dib u celinta dulsaarka raasamaalkii Amaano-haynta ama dakhligii soo galay.

**Deganaansho muddo  
gaaban:-**

Macnaheeddu waa ruuxa degan, oo aan ahayn muwaadin Somaliland u dhashay . balse jooga Somaliland muddo ama mudooyin aan ka badnayn laba sanno.

**Sanad dakhliyeedka la  
badashay:-**

Waxaa loola jeedaa Micnaha lagu sheegay Qodobkan 90aad

**Cashuur:-**

Macnaheeddu waa cashuur kasta oo lagu soo ragoy xeerkan

**tab/Xeelad Cashuur ka  
dhuumasho:-**

Waxaa ku jirta macaamilo kasta oo ujeedadeedu tahay ka dhuumasho ama hoos udhigid cashuur waajibaadtay.

**Loo-shaqeeye cashuurta  
laga dhaafay:-**

Macnaheeddu waa loo- shaqeeye dakhligiisa laga dhaafay Cashuurta.

**Cashuur bixiye:-**

Macnaheeddu waa qof kasta oo hela qadar cashuur-galka ah si Xeerkan

waafaqsan waxaa ku jiraan kuwan:-

- I. Qofkasta oo gata khasaare la qiimeeyey Sanad dakhliyeedka; ama
- II. Ujeeddo kasta oo waajibinaysa Xisaab celin, qof kasta uu sharcigu farayo keenista Xisaabcelin.



**Heshiis gacansiin farsamo:-**

Macnaheeddu waa heshiis balanqaad oo ka dhexeeya Dawladda Somaliland iyo dawladda shisheeye ama hayaddaha lagu cayimay bixinta heshiish lagu gacansiinayo farsamo-ahaan Somaliland.

**Badeecad ganacsi:-**

Waxaa ku jira wax kasta oo la soo saaray, la warshadeeyey, la soo iibsaday, ama haddii kale la warshadayn doono, la iibin doono, la bedelan doono, alaabta kale ee u diyaarsan in la quto.

**Sanad dakhliyeedka ku meel-gaadhka ah:-**

Waxaa loola jeedaa macnaha lagu sheegay Qodobka 90aad

**AMAANO- (Trust):-**


Waxaa loola jeedaa hab kasta oo loo diyaariyay hatida amoono-ahaan oo loogu dhiibay amaano-haye.

**Amaano-haye:-**

Waxa Ku Jira:-

- I. Qof kasta oo la magacaabo ama ku yimaadda heshiish

dhinacyada wada gaadheen, dardaaran, aman. Ama caday maxkamadeed ama hawlgalin Xeer.



- II. Fulliye, maamule, barbaariye (tutor), ama hor jooge.
- III. Xaraashe musalaf ama maamul garsoor.
- IV. Qof kasta oo leh maamulka ama illaalinta hantidda amaano loo hayo.
- V. Qof kasta oo ku sifoobay daacadnimo amaano hayn.
- VI. Qof kasta oo haya masuuliyad gaar ah ama mid rasmi ah, uu ku hayo, ku agaasimo, ku illaaliyo, ama ku maareeyo hanti kasta oo uu leeyahay qof sharci ahaan naafo ah.
- VII. Qof kasta oo maamula hantida ay leedahay hayad samafal gaar ah ama mid la mid ah.


**Lahaansho qarsoon:-**

Arrin la xidhiidha shaqsi aan ahayn qof caadi ah, macnaheeddu waa dulsaar loo hayo ama lagu leeyahay, shaqsigaas si toos aha ama si dadban oo uga jirta shirkaddo, wadaagyo, ama qof AMAAN u hayo ama mid shaqsi / qof aanu

**Wakiil Cashuur-haye:-**

dhamaanteed wada lahayn.

Waxaa loola jeedaa qofka loo xilsaaray qabshada/haynta cashuureed si waafaqsan Xeerkan.



**Sanad Dakhliyeed:-**

Waxaa loola jeedaa muddo dhan laba iyo toban bilood ah oo ku dhamaanaysa 31december, oo ay ku jirto sanad dakhliyeed la badeshay iyo sanad dakhliyeedka Ku meel gaadhka ah.


**Qodobka 3aad**  
**Ujeedooyinka Xeerka**

1. In Hay'adda Dakhliga Somaliland noqoto mid u madax banana shaqadeeda
2. In La Tayeeyo Qaabka Dakhli Uruurinta Iyo Cashuuraha Bariga.
3. In Xeerkan Si Siman Loogu Fuliyo Dhamaan cid kasta oo cashuuri ku waajibtey ha noqdo muwaadin ama ajaanib kuu doono.
4. In Si Cad Muwaadiniinta Loogu Shaaciyo Habka Dakhli Uruurinta Cashuuraha.
5. In Muwaadiniintu Xaq U Lahaadaan Helista Xogta Dhabta Ah Ee Cashuuraha Dakhliga Soo Xerooday.
6. In La Kobciyo Dakhliga Dawlada.
7. In La Fududeeyo Qaabka Dakhli Uruurinta Cashuuraha Barriga.

**Qodobka 4aad**  
**Saldhiga Sharci ee Cashuuraha**

1. Qof kastaa waxaa ku waajib ah inuu bixiyo cashuurta qofkaasi lagu leeyahay.
2. Qofna lama waydiin karo inuu bixiyo cashuur aan lagu jideyn xeerkan iyo Xeerarka kale ee Cashuuraha.

**Qodobka 5aad**  
**Shakhsiyaadka Xeerka lagu sheegay**



Dadka hoos ku xusan waxa lagu dhaqayaa xeerkan:


- a) Qofka caadiya iyo kan qaanuuniga ah oo loo aqoonsaday cashuur bixiyeyaal si waafaqsan xeerkan
- b) Dhamaan shaqsiyaadka loo aqoonsady wakiilo cashuureed sida waafaqsan xeerkan
- c) Xafiisyada cashuuraha, Wakiillada iyo shaqaalahooda oo ay ku jiraan shaqaalaha hayada dakhliga Somaaliland.
- d) Xafiisyada Kastamada, Wakiillada iyo shaqaalahooda waa marka xilka cashuur ururintu iyo tacriifada sida xeerkani qabo ay saaran tahay Agaasimaha Katamada,.
- e) Wasaaradda Maaliyadda, Wakiiladda Maaliyadda Marka xilka cashuur qabashada iyo ururinteeduba iyo haynteeduba loo xil saaray Wakiillada Maaliyadda
- f) Wakiillada kale iyo saraakiisha u xil saaran cashuur ururinta, qabashada ama hirgalinta,
- g) Xubnaha Maxkamadda Gaarka ee Cashuuraha iyo
- h) shaqsi kasta oo kale kaas oo xaquuqdiisa iyo awoodiisa uu qeexay xeerkani.

**Qodobka 6aad**  
**Shaqsiyaadka Cashuur-dhaafka leh**

- 1) Dawladda jamhuuriyadda Somaliland, ha'ayadaha dawladda, iyo samafalada ama ururada aan macaash doonka ahayn, kuwaas oo la ansixiyay lagana diiwaan galiyay hayada Dakhliga Somaliland waxa loo tixgelin doonaa shaqsiyaadka leh Cashuur-dhaaf, waxa laga dhaafi doonaa cashuurta ilaa xadka uu xeerkani lagu qeexay.
- 2) Dawladaha Shisheeye, wakiiladda diblomaasiyiinta Shisheeye, saraakiisha qunsuladda Shisheeye, ururadda caalamiga ah iyo saraakiisha ururadda caalamiga kuwaas oo laga dhaafay



cashuurta si waafaqsan heshiisyadda caalamiga ah, waxa laga dhaafay in la cashuuro illaa iyo xadka ay sheegayaan heshiisyadaasi iyo inta ay cashuur-dhaaf uu siiyey xeerkani;



## **QAYBTA 2**

### **URURINTA IYO SOO CELINTA CASHUURTA**

#### **Qodobka 7aad**

#### **Wakhtiga ay waajib noqoneyso in cashuurta la bixiyo**

(1) sida uu dhigayo xeerkani, cashuurta laga qaadayo qiimayn kasta waa in la bixiyaa-

(a) Xaalada cashuur bixineed oo loo raacayo Qodobkan 137aad, marka la gaadho wakhtiga ay tahay in la Keeno xisaab celinta dakhliga ay ku saabsan tahay qiimayntu.

(b) Xaalad kale oo kast, (30) soddon maalmood guddahood oo ka billabmaya taariikhda ogeysiiska qiimaynta.

(2) sida ku cad faqradda 3aad ee Qodobkani, Haddii uu cashuur bixiyahu uu soo gudbiyay qoraal uu ku diidan yahay qiimaynta cashuureed, inta laga gaadhayo go'aan kama danbaysta ah waxa uu sii bixinayaa boqolkiiba soddon (30%) ka mid ah qiimayntaas cashuureed ee uu ka cabanayo, ama qaybta cashuurta aanay doodi ka taagnayn, hadba kii badan labadaas.

(3) Agaasimahu wuxuu ka dhimi karaa ama aqbali karaa inuu qabto qadar ka yar kii looga baahnaa inuu bixiyo sida ku xusan farqada 2aad ee Qodobkani, waa haddii ay diidmadu qiimaynta leedahay sababo garawshiiyo leh oo macquula .

(4) Marka cashuur bixiyahu arji qoraal ah oo ku sababeeyo arimo dhab ah usoo qoro agaasimaha, waxa

loo ogolaan karaa in cashuurta lagu bixiyo si qayb qayb ah -(installment) oo isleeg ama qadaro kale duduwan ah sida uu agaasimahu hadba go'aansado isagoo ku salaynaya hadba duruufta arinkaas sida tahay.

(5) Marka laysla ogolaado in cashuurta lagu bixiyo si qayb-qayb ah (hafto ah) (installments) haddii ay dhacdo in laga baaqsado in la bixiyo haftooyinkaas waqtigeedii, waxay noqonayaa hadhaaga ku taagan ayaa gabi ahaantiisba si degdega loo bixinayaa mar keliyah

(6) Ogolaanshaha xusan farqada 5aad ee qodobkani, ka dhaafi mayso ganaaxyada ka dhasha dib u dhaca bixinta cashuurta ee haftada ahayd sida ku xusan Qodobka 16aad ee bixin la'aanta hadhaaga cashuurta bisil.

### **Qodobka 8aad** **Cashuur qaan ahaan u waajibtay**

(1) Cashuur, marka ay noqoto mid bisil oo ay tahay in la bixiyo waa qaan ay leedahay dawladda Somaliland ay waajib tahay in la bixiyo, waa in lagu bixiyaa hadba goobta iyo habka uu tilmaamay agaasimuhu

(2) Cashuurta aan la bixin marka ay taagan tahay bixinteedu sarkaalka masuulka ka ah ayaa kaga dacwoon kara Maxkamadda awooda u leh horteeda isagoo metalaya magaca agaasinka si loo soo xereeyo Cashuurtaas, isagoo raacaya tilmaamaha Garyaqaanka guud qaranka.

(3) Dacwad kasta oo ku saabsan qodobkani, waxa looga baahan yahay agaasimaha caddayn saxeexan oo uu ku sheegayo magaca iyo cinwaanka shakhsiga qaameysan iyo qadarka laga doonayo shakhsigaas taas oo u noqon doonta marag muujin ku filan qadarka cashuurta lagu leeyahay ee ay tahay in uu bixiyo shakhsigaasi.

### **Qodobka 9aad** **Caddaynta Cashuur la'aanta**

Haddaan Warqadda Cashuur la'aanta aanu wadanin cashuurbixiyuhu ee uu ku caddaynayo inaan cashuur lagu lahayn:-



- A. Waaxda Socdaalku waa inaanay u ogolaanin cashuur bixiyaha aan degaanka ahayn inuu dalka ka baxo.
- B. Hayadaha dawladda iyo kuwa aan dawliga ahaynba waa inaanay qaansheeg u fasixin cashuur bixiye aan wadan cadayntaas
- C. Nootaayooyinku hanti ma kala wareejin karaan.
- D. Shati ganacsi lama bixin karo lamana cusboonaysin karo.
- E. Tartan qandaraas lagama qayb gali karo

### **Qodobka 10<sup>aad</sup>**

### **Cashuur ka soo celinta shaqi uu cashuur bixiyuhu lacag ku yeeshay**

(1) Marka uu cashuur bixiyahu uu ku guul dareysto in uu bixiyo cashuurt dakhliyeedka taariikhda ay taagan tahay bixinteeddu isla markaana cashuurta ay tahay in la bixiyo aan lagu muransaneyn agaasimahu ogaysiis qoran wuu kaga codsan karaa shaqsi kasta -

- a) Cidda uu ku leeyahay ama u haysa lacagta cashuur bixiyaha;
- b) Cida lacag ka haysa ama cida cashuur bixiyaha laga yaabo in muddo ka dib u hayn doonto lacag, ama xisaab u haysa cashuur bixiyaha;
- c) U haysa ama uu kaga tagayo lacag ku jirta xisaab ugu jirta shakhsi kale si uu uga bixiyo lacag Cashuur bixiyaha, ama
- d) Kahaysto awood shaqsi kale inuu cashuur bixiyaha lacag siiyo,
- e) In uu lacagtaas u dhiibo agaasimaha taariikhda lagu sheegay ogeysiiska, illaa iyo qadarka cashuureed ee taagan.

(2) Taariikhda lagu cayimay ogaysiiska ku xusan qodobkan (1) Waa in aanay noqon wakhti ka horeeya

taariikhda lacagta bixinteeddu ay noqotay mid ku taagan cashuur bixiyaha, ama lagaga sii hayo magaca cashuur bixiyaha;

(3) Isla marka ogeysiiskaas la gaadhsiiyey si waafaqsan farqadan (1), agaasimaha waxaa waajib ah in uu ugeeyo nuqul ogeysiiska ah cashuur bixiyaha,

(4) Marka shakhsi loo geeyey ogeysiiska si waafaqsan faqradda (1), hadii uu fulin kari waayo ama hogaansami waayo sida ogeysiiska loogu sheegay sababo la xidhiidha iyadoo aanay jirin cid uu lacag ku leeyahay , ama uu u haysa cashurbixiyaha, shakhsigaasi waxa ku waajib ah, sida uga dhakhsaha badan ee suurto gal ah markasta oo ka horaysa wakhtiga lacag bixinta lagu sheegay ogeysiiska, waa in uu ku soo wargeliyaa agaasimaha isagoo sheegaya sababaha keenay in uu hogaansami kari waayo amarkaas;

(5) Marka loo keenay agaasimaha wargelinta si waafaqsan farqada (4), agaasimahu waxa u banaana tahay, ogeysiis qoran inuu- (a) in uu aqbali karaa ogeysiiska iyo in uu tirtiro ama wax ka bedelo ogeysiiskii uu ku bixiyay sida ku xusan farqada (1); ama (b) uu Diido ogeysiiska;

(6) Haddiishaqsiga ku qanci waayey goanka agaasimaha eek u xusan faqradda (5) wuxuu kaga gudbi karaa goankaas iskun a hortaagi karaa oo kaliya habka diidmada iyo racfaanka qaybtan:

(7) Shakhsiga sameynaya bixinta si waafaqsan ogaysiiska lagu sheegay farqadan **(1)** waxa loo Qaadanayaa shaqsi ku matalayay awood bixiyaha cashurbixiyaha iyo dhamaan ashkhaasta kale ee ay khuseyso ee halkan waxay damaanad qaad ugu noqonaysaa bixintaas dhamaan dacwadaha madaniga ah iyo ciqaabta iy dhamaan hababka kale ee sharciga ah ee aan ka hor imanayn qodobada sharci kasta oo jira, qandaraas, ama heshiis.

(8) Qadarkasta oo taagan sida ku xusan qodobkan waxa loo qaadanayaa ujeedo kasta oo xeerkan lagu sheegay in ay tahay cashuur taagan.

**Qodobka 11<sup>aad</sup>**  
**Waajib ku ururin Cashuur**



(1) Agaasimahu wuxuu *ku soo qaadi* karaa cashuur kasta oo laga baaqsaday bixinteedda hab khasab ku ururin ah oo uu kaga qaadanayo hantidda guurtada ah ee shaqsi cashuurt bixin waayay cashurtii ku waajibtay ee lagu xusay qodobkan looguna yeedhay (shakhsi Cashuuri ku waajibtay); isagoo isticmaalaya amar qoraaal oo uu ugu sheegayo qofka in hantidiisa sharciga la waafajinayo, goobta ay hantidaasi taal, iyo qaanta cashuureed ee hawlgalkani la xidhiidho, iyadoo loo baahan karo sarkaal police in uu goob jog ahaado marka la fulinayo Cashuur si khasab loo qaadayo .

(2) Ujeedooyinka oo ah Waajib khasab ku ururinta ee ku xusan farqadan laad, agaasimuhu wuxuu, wakhti kasta, gali karaa guri kasta ama dhismo kasta oo lagu sheegay amarka lagu ogaaladay talaabooyinka sharciga khasab ku ururinta Cashuurta.

3) Hantidda lagu fulinayo qaabka khasabka ah ee ku xusan qodobkan oo ay ka reeban tahay badeecadaha baabi'ikara/xumaankara waxa lagu hayn doonaa toban mudo (10) cisho ah oo lagu hayn doono goobta dhismaha amarka khasabka ah lagu fuliyay ama meel kasta oo ay Agaasimaha la noqoto inay ku haboon tahay kharashkana waxa bixinaya qofka cashuurta lagu leeyahay

(4) Haddii qofka cashuurta lagu leeyahay bixin waaayo cashuurta lagu leeyahay, iyo kharashka hantida khasab ku fulinta ah waxa uu:-

(a) Haddii alaabtu tahay alaab xumaanaysa, inta lagu gudda jiro muddada waa in agaasimuhu tixgalin macquul ah siiyo isagoo eegaya xaaladda alaabta, ama

(b) Xaalad kasta oo kale, toban cisho ka dib marka khasab ku fulinta alaabta lagu soo rogay, hantida amarka khasabta loo hayay waxa lagu iibin karaa xaraash loo bandhigayo naado dadweynaha ama qaab kale ee agaasimahu uu tilmaamo.

(5) Lacagta ka soo baxada xaraashka lagu sheegay faqradda (4) waxaa laga jari doonaa khidmada xaraashaha ama iibiyaha oo ay la socoto khabashkii qaadidda iyo haynta hantida la xaraashay, ka dibna waxa laga jarayaa cashuurtii lagu lahaa, intaas ka dib haddii ay dhacdo in ay wax ka soo hadhaan waxa la siin doonaa shaqsigii lahaa hantida.

(6) Farqadani ka ka hor joogsan mayso agaasimaha in uu hore ugu sii socdo xaraashka lagu xusay farqada (4) ee ku taxaluqa hadhaaga lagu yeesho haddii lacagta ka soo baxday aanay ku filayn in ay wada daboosho Cashuurtii lagu lahaa iyo kharashaadkii lagu galay intii la waday amarka khasab ku fulinta.

(7) Dhamaan kharashaadkii uu galay agaasimahu ee la xidhiidha khasab ku fulintan waxa uu agaasimuhu ka soo ceshan karaa qofka cashuurta lagu leeyay, waxana la dabaqayaa si waafaqsan xeerkan ee khuseeya ururinta iyo dib usoo cesashada kharashaadka khasab ku fulintu waxa uu la mid yahay si lamid ah khasabku ururinta cashuurta ee Xeerkani.

(8) Wasiirku ka dib marka uu helo ansixinta mashruuc sharci ee Golaha Wakiillada ka soo baxay, waxuu mudo saddex bilood gudahood ah ku soo saarayaa Xeer-nidaamiyaha qeexaya habka xaraashka hantida ee lagu sheegay qodobkani.

### **Qodobka 12<sup>aad</sup>**

### **Ka soo celinta cashuurta Wakiilada dadka aan dalka daganeyn**

(1) Agaasimuhu waxa uu ogaysiis qoraal ah kaga dalban karaa, shaqsi kasta oo gacanta ku haya hanti, oo ay ku

jirto lacag, uu iska leeyahay cashuur bixiye aan deegaan ahayni, oo ay ahayd ka bixiyo cashuurta isaga oo metalaya shaqsi aan deegaan ahayn ilaa iyo qiimaha suuqa ee hantidaas, laakiin aan ka badnayn qadarka cashuur ahaan lagu leeyahay

**(2)** Kabtanka diyaarad kasta ama markab kasta oo u leeyahay ama uu soo kiraystay (chartered) shaqsi aan deganayn dalka waxa loo qaadanayaa inuu leeyahay Markabkaas ama Diyaaradaas marka loo eego ujeedooyinka qodobkan..


**(3)** Xadiga Cashuureed ee ay tahay in laga bixiyo dakhliga duuduuban ee uu leeyahay wadaag e aan degaan ahayni sida ku xusan Qodobkan 116 aad in lagu qiimeeyo magaca Wadaaga haas ama wadaag kasta oo deegaan ah oo ku jira Wadaagaas iyadoo lagu soo ceshanayo hantida wadaaga aan degaan hayn ama wadaagaha deggan dalka naf ahaantiisa ee la wadaaga ka aan degaanka ahayn. .

**(4)** Xadiga Cashuureed ee ay tahay in laga bixiyo dakhliga duuduuban ee uu leeyahay wadaag e aan degaan ahayni haddii uu faaiido ku helayo hawlgalka shaqo ee k u xusan ee Qodobka 121 iyo 122 aad waa in lagu soo qiimeeyay magaca AMAANO-HAYE, iyadoo lagaga ceshanayo hantida uu amaanada u hayo ama amaano hayaha Shakhsi ahaan.

**(5)** Qofka samaynaya lacag bixin waafaqsan ogaysiiska ku sheegan farqadaha laad, 3aad iyo 4aad waxa loo qaadanayaa inuu ku metalayo awoodsiinta cashuur bixiye iyo dhamaan shakhsiyaadka ay khusayso iyadoo halkan uga noqonaysaa damaanad in uu bixiyo bixinta dacwad kasta oo madani ah ama ciqaab, iyo dhamaan hababka kale ee sharciga ah ama hababka kale ee aan caadiga ahayn waa haddii aanay ka hor imanaynin qodobo ka soo hor jeeda xeerkasta oo qoran ama qandaraas ama heshiis.

**(6)** Qadarka ay tahay in la bixiyo sida xusan qodobkan waxaa loo qaadanayaa sida xeerkani u jideeyay in ay tahay cashuur ay taagan tahay bixinteedu.

**Qodobka 13<sup>aad</sup>**  
**Waajibaadka Gudoomaha**



(1) Gudoomuhu waa inuu qoraal ahaan ku ogaysiiyaa Agaasimaha 14-cisho gudahood in loo magacaabay gudoome ama uu yahay gacan ku hayaha hanti taala Somaliland

(2) Agaasimuhu wuxuu qoraal ahaan ku ogaysiinayaa gudoome (receiver) qadar kasta oo ay ula ku haboon in cashuur laga bixiyo ama laga bixin doono ama noqon doonta mid uu ka bixiyo shaqsiga hantidiisa uu gacanta ku hayo gudoomuhu.

(3) Gudoomuhu ma kala qaybin karo hanti kasta oo Somaliland taala oo uu u hayo jagadiisa ka Gudoome ahaan ilaa inta uu qoraal ogolaansho ah ka helayo agaasimaha.

(4) Gudoome waa:-

(a) Waa inuu ka saaraa dakhliga iibka hantida qadarka agaasimuhu ku cayimay Farqada (2) ama qadar ka yar siday ugu xigto ee uu ogolaaday agaasimuhu iyo

(b) Wuxuu masuul ka yahay ilaa qadar loo dhigayo cashuurta qofka hantida leh iyo


(c) Inuu bixin karo dayn kasta oo ka mudan cashuurta lagu sheegay ee ku xusan qodobkani ee aan ka hor imanaynin farqadkasta ka mid ah qodobkani.

(5) Gudoome isagaa Qof ahaan masuul ka ah ilaa inta qadar loo baahan yahay ee dhinaca loo saarayo ee ku xusan farqadan (4) ee ah cahuurta ku xusan farqadan (2) waa haddii, ilaa xad gudoomuhu ku guul daraysto ku dhaqanka looga baahanyahay sida uu dhigayo qodobkan

6) Qodobkan, gudoomaha Waxa ku jira qof kasta oo si la xidhiidha hanti Somaliland Taala ah.



- (a) Xaraashe shirkadeed
- (b) Gudoomaha ay maxkamdi magacawday ama maxkamad kasta.
- (c) Amaana haye cid musalaftay
- (d) Gacan ku haye rahan
- (e) Dhaxal qaybiye dhul la dhaxlayo
- (f) Qofkasta oo kale oo fulinaya ganacsi shaqsi lixaad la'



### **Qodobka 14<sup>aad</sup>**

#### **Damaanada Hantida ee Cashuur aan la bixin**

(1) Marka shaqsi leh dhulka ama dhismaha ku yaala gudaha Somaliland uu ku guul daraysto inuu bixiyo cashuurtii ku waajibtay, agaasimuhu wuxuu qoraal ahaan ogaysiin karaa, isagoo ku war galinaya qofkaas in dhulkaas iyo dhismahaasi yihiin damaanad ahaan looga Rahmanayo Cashuurtii lagu sheegay Ogaysiiska qiimaynta.


(2) Hadii qof loo geeyay ogaysiiska si waafaqsan qodobkan uu ku guul daraysto inuu bixiyo gabi ahaanba qadarka ama xadiga lagu cayimay ogaysiiska mudo 30-cisho gudahood ah, oo ka bilaabmaysa maalintii loo keenay ogaysiiska ku yaala farqadan laad, agaasimuhu wuxuu diiwaan galin ku xaqiijinayaa si lacag la'aan ah ama uu xisaabinayaa dhulkaas ama dhismahaas iyo halka diiwaan galintaas ay tahay mid Rahmad hore ka taalay ama lagu dalacay, si damaanad ahaan xadigii cashuureed ee la gudi waayay ama la bixin waayay.

(3) Marka la Gudoomay Gabi ahaanba qadar cashuureed rahan ahaanta looga qaaday sida xusan Farqadan 2aad, Agaasimuhu, waxa uu si lacag la'aan ah u tirtirayaa rahan ama wixii ajuuro ah.

### **Qodobka 15<sup>aad</sup>**

#### **Qaanta Cashuureed ee Gubatay**

1) Qaanta gubatay ee lagaga lahaa cashuurta, ciqaabaha iyo ganaaxyada cashuur bixinta lala daahay waxa tiraya agaasimaha haddii ay xaaladani yimaadaan



(a) Dhamaadka mudadii sharci ahaan loo qabtay ururinta cashuurtaas

(b) In Si kama danbays ah loo joojiyo sharciga waajibinaya cashuurta iyadoo la cuskanayo sababo lagu sheegay xeerkan ama xeerarka kale ee cashuuraha ee ka soo fulay golaha sharci dejinta.

(2) Xaalad kasta oo kale, Agaasimuhu wuu ku tiri karo qaanta cashuureed si waafaqsan habka lagu sheegay Xeer-nidaamiyaha Xeerka.

### **QAYBTA 3 DANBIYADA IYO CIQAABAHA**

#### **Qodobka 16<sup>aad</sup>**

#### **Ganaaxyada lacageed ee bixin la'aanta cashuurta wakhtigeeda**

1. Qofka ku guul daraysta-

(a) Inuu bixiyo cashuur kasta oo ay ku jirto cashuurta la qadimay;

(b) Inuu bixiyo Cashuur kasta oo Ciqaabeed; ama

(c) In Agaasinka lagu bixiyo cashuur kasta oo qof laga jaray ama waajibku ku ahayd in uu qof kale ka sii hayo taariikh ama ka hor markay bislaatay in la bixiyo cashuurtaas waxaana lagu mudan doonaa bixin La'aanta Cashuurta ganaax lacageed oo ah 2% oo ku dhacaya qadarka guud ee Cashuurta la bixin waayay bil walba laga bilaabo maalinta ay ahayd in la bixiyo ilaa inta laga bixinayo

2. Ganaaxa lacageed ee Cashuurta la bixin waayay waqtigeedii ee qofku bixiyay sida ku xusan farqadan laad, waa loo celin doonaa qofkaas, ilaa hadka cashuurtaas la ganaaxay la ogaaday in aanay ahayn mid gaadhay xiligii lagu mutaysanay ganaaxa lacageed ama la bixinayay.

3. Marka sabab macquul ah lagu muujiyo qoraal ahaan oo uu qofka mutaystay inuu bixiyo Dulsaarka, wasiirku wuu ka dul qaadi doonaa, isagoo raacaya talada agaasimaha, gabi ahaanba ama qayb, dul-saar kasta oo la saaray iyadoo la raacayo qodobkan
4. Dul-saarka lagaceed ee ka dhashay la daahida bixinta cashuurta ee la xidhiidha ku guul-daraysiga u hogaansanaanta qodobka 148 aad 4. waa mid uu shakhsi ahaan u qaadi doono wakiilka cashuur ka jaraha iyadoo qaybna aan dib loogu celin doonin qofka Gudoomay bixinta, taas oo cashuur ay ahayd in laga jaro iyadoo la raacayo qodobkan 10- cutubka 2aad ee xeerkan, kaas oo ka shaqaynaya cashuurta la jarayo.
5. Tilmaamaha xeerkan ee la xidhiidha ururinta iyo soo celinta cashuurta ee lagu dabaqay ganaaxa ka dhashay cashuurta la daahay si waafaqsan qodobkan waxay imanayaa ganaaxu haddii cashuurtaas bislaatay.

#### **Qodobka 17<sup>aad</sup>**

#### **Keenid la'aanta Xisaab Celinta wakhtigeedii**

1. Qofka ku guul daraysta inuu keeno xisaab celin ama dukumenti kale shan iyo toban casho gudahood oo xeerkan looga baahan yahay waxaa lagu xukumayaa dambi wuxuuna mudan yahay in la ganaaxo dambi fudud oo an ka badnayn 15 (currency points).
2. Haddii qof lagu xukumay dambiga ku xusan farqada (1) uu ku guuldaraysto inuu xisaab celin keeno ama dukumenti dambigu la xidhiidho wakhtiga maxkamaddu cayintay gudaheeda, qofku wuxuu galayaa dambi wuxuuna mutaysanayaa dambi fudud oo aan ka badnay 20 (currency points).

#### **Qodobka 18<sup>aad</sup>**

#### **Ku guul daraysiga in loo Hogaansamo tilmaamaha cashuur soo celinta**

1. Qof kasta oo ku guul daraysta inuu u hogaansamo –
  - (a) Ogaysiis kasta oo la soo saaray si waafaqsan qodobkan 10aad;
  - (b) Shuruudaha ku yaala qodobkan 13aad wuxuu galay danbi, wuxuuna ku mutaysanayaa in lagu xukumoo ganaax aan ka badnayn 25 (currency points),
2. Marka qofka lagu xukumay danbi ku yaala farqada (1) (a), Maxkamadu waa in ay amartaa qofka la xukumay inuu agaasinka ku bixiyo qadarkii uu ku guul daraystay oo ay dheer tahay ganaaxa lagu soo rogay.
3. Qofka ku war galiya agaasimaha qoraal ahaan isagoo raacaya qodobkan 10aad, (4) waxa loo tix-galinayaa inuu raacay ogaysiis kasta oo loo geeyay qofkaas si waafaqsan qodobkan 10aad (1) ilaa uu agaasimuhu u geeyo qofka ogaysiis si waafaqsan qodobkan 10aad (5) kaas oo nasakhaya ama burinaya ogaysiiskii loo geeyay ee waafaqsanaa qodobkan 10aad (1) ama uu diidayo ogaysiiska qofka si waafaqsan qodobkan 10aad (4).

### **Qodobka 19aad**

#### **Ku guul daraysiga in la hanto xog haboon**

Qofka ku guul daraysta inuu hanto Xog Haboon si waafaqsan xeerkan, wuxuu gelayaa denbi oo uu ku mutaysan karo xukun-


- a) Marka Ku guul daraysigu uu ahaa badheedh, ganaax aan ka yarayn 15 buundo Lacageed ama xadhig aan mudadiisu ka yarayn hal sano; ama
- b) Xaalad kasta oo kale ganaax aan ka yarayn 25 buundo Lacageed

### **Qodobka 20aad**

#### **Isticmaalid La'aanta Namabarka Tix-raaca Cashuureed**

Qofka isagoo og ama taxadir daro u isticmaala number tix-raac cashuureed oo been ah, oo Ay ka mid tahay lambar aqoonsi cashuur bixiye kale lagu xisaab celiyay

ama dukumenti ku qoran ama loo isticmaalo ujeedooyinka xeerkan, wuxuu galayaa dambi wuxuuna mudanayaa xukun ganaax oo aan ka yarayn 20(currency point) ama xadhig mudadiisu aanu ka badnayn hal sano ama labadoodaba



### **Qodobka 21aad**

#### **Samaynta Cadaymo beer abuur ama marni habaabin ah**

1. Qofka isagoo:-
  - b. Sameeya qoraal been ah ama marin habaabin oo khuseeya shay gaar ah, kuna hagaajiya Sarkaal ka tirsan masuuliyiinta Dakhliga ee Somaliland; ama
  - c. Wax ka reeba qoraal u sameeyay sarkaal ka tirsan masuuliyiinta dakhliga Somaliland, waxay laaantii cadayntu ku noqonayso mid ku marin habawsan xaalad gaar ah, wuxuu ku galayaa dambi wuxuuna ku mutaysanayaa xadhig.
    - (i) Haddii cadaynta ama wax ka tagidaas la sameeyo iyadoo la ogyahay ama aan laga taxadirin, waa in la saaraa ganaax aan ka yarayn 25 buundo lacageed ama xadhig mudadiisu aanay ka yarayn hal sano, ama labadaba;ama
    - (ii) Xaalad kasta oo kale, Ganaax aan ka badnayn 25 currency point.
2. Qofka la eedeeyay difaac bay u tahay inuu cadeeyo inuu Isagu aanu ogayn iyo in aanu awoodeen inuu si macquul ah u saadaaliyo in qoraalka lagu eedaynayaa uu ahaa mid been ah ama marin habaabin.
3. Tixraaca qodobkan ee cadaynta loo sameeyay sarkaalka maamulka Dakhliga Somaliland wuxuu tixraac u yahay cadaynta loo qoray sarkaalkaas oo lagu matalayo hawl fulinta shaqadiisa ama shaqadeeda sida xeerkani dhigayo waxana ka mida cadaynta la sameeyay:-
  - a. Codsii ahaan, Shahaado, Baaq, cadaynta, wargalin, xisaab celin, diidmo,ama Dukumanti kale oo la sameeyay, la diyaariyay, la bixiyay, la buuxiyay ama la qaybiyay si xeerkan waafaqsan.

- b. Warbixin kasta oo ay waajib ahayd dhiibisteedu si xeerkan waafaqsan
- c. Dukuman loo dhiibay sarkaalka ka tirsan masuuliyiinta dakhliga Somaliland oo aan ahayn kuwa ku sheegan xeerkan.
- d. Jawaab Su'aal uu waydiiyay qofka sarkaalka ka tirsan masuuliyiinta dakhliga Somaliland ama
- e. qof kale oo ogaa ama si macquul ah u saadaalin karayay in qoraalku uu ahaa mid wax u kordhinaysay sarkaalka masuuliyiinta dakhliga Somaliland.

### **Qodobka 22<sup>aad</sup>**

#### **Hor istaagid Sarkaal ka Tirsan Masuuliyiinta**

Qofka hor istaaga sarkaalka masuuliyiinta dakhliga Somaliland inuu guto waajibaadkiisa ku sheegan xeerkan wuxuu galay danbi waxaanu mutaysanayaa ganaax aan ka badnayn 25 currency point.

### **Qodobka 23<sup>aad</sup>**

#### **Caawinta ama Gacansiinta**

Qofkasta oo caawiya ama gacan siiya qof kale si uu danbi u galo, iyadoo la raacayo xeerkan ama kala taliya, ama ku qalqaaliya qof kale inuu danbigaa galo, wuxuu galayaa danbi waxaanu ku mudanayaa in la saaro ganaax aan ka badnayn 25 buundo lacageed ama xadhig mudadiisu aanay ka badnayn hal sano, ama labadaba.

### **Qodobka 24<sup>aad</sup>**

#### **Danbiyada Ka Dhashay Ama Xidhiidhka La Leh Saraakiil Iyo Dadka Loo adeegsado in fuliyo tusmooyinka xeerkan ganaaxiisa**

1. Sarkaal Kasta oo ka tirsan masuuliyiinta cashuuraha Somaliland ama qof kasta oo loo adeegsado inuu fuliyo tusmooyinka xeerkan oo:-
  - (a) si toos ah ama si dadban u waydiista, ama uga qaata kharash ama abaal marin waxay doontaba ha ahaatee oo la xidhiidha hawl kasta oo uu

leeyahay sarkaalku, ha ahaato lacag ama wax kale, balan qaad ama damaanad bixinta lacagtaasa ama abaal marinta oo an ahayn kuwa sarkaalku xaqqa u leeyay inuu helo.

- (b) La gala ama hadal laaan la gaadha heshiis uu ku samaynayo ama uu ku hor istaagayo in la qabto, ama la ogolaado, la qariyo ama la ismoogaysiiyo fal kasta, ama shay kasta, taas oo dakhliga cashuuraha lagu musuqmaasuqayo, ama laga yaabo in lagu musuqo, taas oo ka soo horjeeda qodobada xeerkan ama inuu sarkaalku uu si hufan u fuliyo waajibkiisa.

Wuxuu galay danbi, waxaanu mutaysanayaa in la saaro ganaax aan ka yarayn 25 buundo Lacageed ama xadhig aan mudadiisu ka yarayn 3-bilood.

## 2. Qof kasta oo:-

(a) Si dadban ama si toos ah u siiya, ama ugu bandhiga bixin, ama abaal gud sarkaalku waxay doonto ha noqotee, haday tahay xatooyo xoolo dadwayne ama ha noqoto balan qaad kasta ama damaanad qaad bixintaa aynu soo sheegnay ama abaal gudkaa, taas oo aan ahayn tii uu sarkaalku sharci ahaan xaqa ugu lahaa inuu helo; ama

(b) Waydiisasho ama gelid heshiis oo lala galo sarkaalku kasta si loogu qal qaaliyo sarkaalka inuu sameeyo ama uu ka laabto gacmaha, ogolaado, qariyo ama indhaha ka qarsado, fal kasta, ama wax kasta taas oo dakhli cashuureed lagu musuqayo ama ka soo horjeeda qodobada xeerkan ama inuu si haboon sarkaalku u fuliyo waajibkiisa; Wuxuu galay danbi waxaanu mutaysanayaa in la saaro ganaax aan ka yarayn 45 buundo lacageed ama xadhig 3-bilood ah.

3. Iyadoo la raacayo farqada laad, sarkaalka ama qofka ka shaqaynaya fulinta xeerkan ee gala falalka lagu sheegay farqadan laad (a) ama (b), kaas oo si

mutadawacnimo ah ugu keena warbixin la xidhiidha falkaas Agaasimaha waa in:-

(a) Wuxuu ahaan doonaa mid laga laaabtay eeda; iyo

(b) Wuxuuna gudoomi doonaa 20% ganaaxi la saaray qofka lagu xukumay iyadoo la fulinayo farqadan laad.

4. Sida ku xusan farqada 2aad, qofka galay danbiga lagu sheegay farqdan 2aad (a) ama (b) kaas oo iskii uga warbixiya Agaasimaha fal la xidhiidha arintaas, waa in

(a) Lagala noqdaa dacwadda lagu eedeeyay,

(b) Wuxuu mutaysanayaa cashuur ilaa inta ay isku afgarten sarkaalka danbigu la xidhiidhay

5. Sarkaalka lagu xukumay danbiga farqada laad ku xusan, waxa loo raacinayaa ciqaab lagu soo rogayo iyadoo la raacayo qodobkan, waxaanu mutaysanayaa inuu bixiyo faraqa u dhaxeeya cashuurta taagan iyo cashuurta ay ahayd inuu bixiyo qofkaas ku shegan faqrada (4) (b) iyadoo qadarka Xadiga taagan ee qodobkan loo qaadan doonaa cashuur lagu leeyahay sarkaalka, iyadoo la dabaqayo Qodobka 8aad.

### **Qodobka 25<sup>aad</sup>**

### **Dambiyada Shirkadaha**

1. Marka dambiga ay gasho shirkadi qof kasta oo markaas la galay danbiga –

(a) Ha ahaado Sarkaal Magacaaban, Agaasime, Maareeye Guud, Xog-haye, ama sarkaal la mid ah oo kale oo Shirkadaah, ama

(b) Ku Simayay ama ku shaqaynayay awood la mid ah isagoon waxba u dhimin qaanta shirkadda, loo arko inuu dambi galay

2. Farqada laad laguma dabaqi karo haddii:-



(a) Marka danbiga la galay iyada oo aan loo qastayn (si badheedh ah loo samayn) ama aan la ogayn iyo,

(b) Qofku uu sameeyay wax kasta oo awoodiisa ah sidii uu uga hor tagi lahaa inuu danbigaasi dhaco ama la galo, aanu taas sameeyay isagoo og, asalka shaqadiisa iyo xaaladaha oo dhan.

### **Qodobka 26<sup>aad</sup>**

#### **Saraakiisha Maxkamada horteeda ku matali kara/hadli kara Magaca Agaasimaha**

Iyadoo aan laga tageyn hadii sharci kale tilmaamayo, sarkaal kasta oo sifo sharci ah oo qoran uu agaasimuhu ugu ogolaaday inuu maxkamada horteeda kaga hadlo magaca Agaasimaha dacwad kasta oo uu agaasimuhu qayb ka yahay, xeer-ilaaliyaha guudna tilmaanteeda leeyahay oo sarkaalku samaynayo eedayn kasta oo danbi oo waafaqsan xeerkan iyo ujeedooyinkiisa, wuxuu yeelanayaa dhamaan awoodaha xeer ilaaliye dawli ah oo la magacaabay iyadoo la raacayo shuruucda Somaliland.

### **Qodobka 27<sup>aad</sup>**

#### **Israacsiinta Dambiyada**

1. Hadii uu qof galo danbi lagu sheegay xeerkan oo aan ahayn,ndanbiyadda lagu sheegay Qodobkan 24aad, Agaasimuhu ka hor inta aanu bilaabin fadhiga maxkamadu wuu isu huwin karaa dambiyada, isagoo amraya qofka inuu bixiyo qadar lacageed oo uu u cayimay agaasimuhu oo aan ka badnayn qadarka ganaaxa lagu faray dambiga.
2. Agaasimuhu wuu karaa inuu isu huwiyo danbi lagu sheegay qodobkan, hadii qofka ay khusaysaa uu qoraal ahaan ku qirto in qofkaasi galay danbigaas.
3. Hadii uu agaasimuhu isu huwiyo danbiga ku sheegan qodobkan, amarka ku xusan Farqada 1): –

(a) Wuxuu noqon doonaa qoraal kaas oo muujinaya danbiga la galay, lacagta la bixiyay xadigeeda iyo wakhtiga la bixiyay, iyadoo lagu

xidhi doono warqada codsiga ee lagu sheegay qodobkan Farqadiisa 2aad.

(b) Waxana loo gayn doonaa qofkii galay danbiga.

(c) Waa kama danbays, kamana furna Rafeaan,

(d) Waxa fulinteedu ay la mid tahay, qaraar ka soo baxay maxkamadd kasta oo sheegaya bixinta Qadarka lagu sheegay amarka.

4. Hadii Agaasimuhu isu huwiyo danbi lagu sheegay qodobkan, qofka ay khusayso laguma qaadi karo danbigaa ama cashuurtaa ciqaabta ah.

### **Qodobka 28<sup>aad</sup>**

#### **Goobta Dacwada lagu qaadayo**

1. Qof kasta oo lagu eedeeyay inuu galay danbiga ku sheegan xeerkan talaabo sharci ah ayaa laga qaadayaa ama kiisbaa lagu qaadayaa, iyadoo lagu ciqaabi doono goob kasta oo Somaliland ah oo qofku ugu xidhan yahay danbigaas, haddii dambiga lagu galay meeshaas iyada ah, iyo dambiga oo ay ujeeddu noqoto mid ay ka dhalanayso dacwad oogista, dacwad qaadista ama ciqaabta dambiga waxa loo qaadanayaa in lagu galay meeshaas.
2. Farqada (1) maaha mid ka mancinaysa eedaynta, dacwada oogista iyo ciqaabta qofka meel kasta in lagu oogi karo, la isku dayi karo taas, laguna ciqaabi marin karo oo aan ahayn qodobkan.

### **Qodobka 29<sup>aad</sup>**

#### **Cashuur la saaray oo la bixinayo iyada oo ay jirto dacwad oogis**

Qadarka Cashuur kastaa ama ganaaxa lacageed lagu mutaystay bixinta cashuurta ka daahday ee lagu bixinayo xeerkan laguma yarayn karo oo kaliya xukunka ama ciqaabta qofka ay tahay inuu ku bixiyo dambiga sida uu dhigayo qodobkani ama dambiyada la israaciyay ee Qodobka 27aad.

**QAYBTA 4**  
**GANAAXA CASHUURTA**  
**Qodobka 30<sup>aad</sup>**  
**Ganaaxa Cashuureed Haddii Xisaab Celin la keeni**  
**waayo**



Qofka ku guul daraysta inuu xisaab celin keeno wakhtigii xeerkani mudeeyay gudaheeda wuxuu mutaysanayaa inuu bixiyo Cashuur Ciqaabeed ah, laba (2%) boqolkiiba cashuurta la bixinayo ee sanadkaas ku waajibaysa ee laga doonayay ama hal buundo lacageed bishiiba, hadba tii badan ee muddada xisaab celintu taagan tahay.

**Qodobka 31<sup>aad</sup>**  
**Ganaax la xidhiidha kaydinta Qoraalada**

Qofka si badheedh ah ugu guul daraysta inuu hanto qoraal sanadeedyo kayd-san, si waafaqsan sida qodobkan looga baahan yahay, wuxuu mutaysanayaa inuu bixiyo cashuur ciqaabeed leg ama ku laban laabmaysa qadarka cashuureed ee qofkaasi ay ahayd inuu bixiyo sanadkaas.

**Qodobka 32<sup>aad</sup>**  
**Ganaax la Xidhiidha Qoraalo Beer Abuur ah ama**  
**Marin Habaabin ah**

1. Haddii uu qof si kas ah ama taxadir daro ah:-

(a) Uu u sameeyo qoraal been abuur ah ama marin habaabin ah nuxur ahaan una geeyo

2. Qodobkan 21aad Farqadiisa 3aad ayaa lagu dhaqayaa marka la ogaado in qof sameeyay qoraal been ah una geeyay saraakiisha masuuliyiinta cashuuraha Somaliland.

**Qodobka 33<sup>aad</sup>**  
**Hoos u Dhigid Ganaaxa Cashuurta la qadimo ee**  
**Qiyaasta ah**

1. Cashuur Qadime kasta oo qiyaasta laga qaadayo dakhligiisa dib loogu noqday ama la qiyaasay sanad dakhliyeedka sida ku cad qodobkan 140 haddii ay ka

yar tahay boqolkiiba 90% (sagaashan)d akhliga dhabta ah ee la cashuurayo ee lagu qiimeeyay sanadkaas, wuxuu mutaysanayaa ganaax cashuureed oo la mid ah 20% (boqolkiiba labaatan) oo ah farqiga u dhexeeya cashuurti qiyaasta ahay ee cashuur bixiyaha iyo 90% cashuurta dhabta ah ee saran dakhli sanadeedkaas.

2. Cashuur-Qadime kaas oo qiyaasta ama qiyaasta dib loogu noqday ee iibka Guud (gross turnover) ee sanad dakhliyeedkaasi sida ku cad Qodobkan 140 uu ka yar yahay boqolkiiba sagaashan 90% iibka guud ee sanadkaasi wuxuu mutaysanayaa ganaax cashuureed oo la mid ah 20 (boqolkiiba labaatan), ee faraqa u dhexeeya cashuurtii la xisaabiyay ee la xidhiidhay qiimaynta cashuur bixiyahaas, sidii dib laysula eegay, ee iibka guud iyo cashuurtadakhliga dhabta ah ee qiimeynta cashuur bixiyaha ee sanad dakhliyeedka.
3. Qodobkan laguma dabaqi karo cashuur bixiye ku jira hawlo ganacsiga oo xagg beeraha ah.

**Qodobka 34<sup>aad</sup>**  
**Soo Celinta Ganaax**

1. Qaanta ganaaxa waxaa loo xisaabinayaa si gaar ah, iyadoo loo eegayo qodob kasta oo ay khusayso.
2. Iyadoo loo eegayo Farqada (3), soo rogista cashuur ganaax waxay la socotaa ajuuro bixin lala daahay oo lagu saaray qodobka 16aad iyo ciqaab kasta oo lagu saaray xukun.
3. Ganaax Cashuureed laguma soo rogi karo qofna, iyadoo la marayo Qodobka (31) ama (32) hadii uu qofka lagu xukumay denbi ku sheegan Qodobka 19aad ama 21aad, mid walba goonidiisa fal ama ka baaqasho isku mida..
4. Hadii ganaaxa Cashuureed ee ku xusan Qodobada 31aad iyo 32aad la bixiyay, isla markaana Agaasimuhu soo saaro eed ama oogo dacwadamidkasta goonidiisa ugu xusan Qodobada 19aad ama 21aad, oo la xidhiidha denbi ama waajib gudasho la'aan isku mid ah, Agaasimuhu waa inuu celiyo qadarka cashuur ciqaabeed ee uu

bixiyay iyo cashuur ciqaabeeda aanay ahay inuu bixiyo ilaa lala noqdo eeda.

5. Cashuur ciqaabeeyada uu qiimeeyay Agaasimuhu ee ku xusan ama ku jirta Qodobada 30aad, 31aad, 32aad iyo 33aad waxa loo qaadanayaa dhamaantood qiimayn ahaan, sida xeerkani sheegayo.
6. Marka sababo caqli gal ah uu qoraal ahaan ugu soo gudbiyo wasiirka qofka mutaystay inuu bixiyo cashuur ciqaabeed, wasiirku isagoo la tashanaya agaasimaha wuxuu la noqon doonaa gabi ahaanba ama qayb ahaan ka mid ah cashuur ciqaabeedii ay ahayd in la bixiyo.

## **QAYBTA 5 MAAMULKA**

### **Qodobka 35<sup>aad</sup>**

#### **Tirsiga Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha**

1. Iyadoo looga jeedo aqoonsiga cashuur bixiyayaasha, agaasimuhu wuxuu soo saari karaa, tiro (No) lagu ogaan doono tirsiga aqoonsiga lagu astayn doono cashuur bixiye kasta.
2. Agaasimuhu wuu ka dalbi karaa cashuur bixiye kasta hadii uu u baahdo inuu tuso tirsiga aqoonsiga cashuureed xisaab celin kasta, la ogaysiinayo ama qoraal kale loo isticmaalayo oo ujeedada xeerkan ah.


### **Qodobka 36<sup>aad</sup>**

#### **Igmasho**

Agaasimuhu wuu u igman karaa sarkaal kasta oo ka tirsan masuuliyiinta cashuuraha Somaliland, Hawl kasta, awood kasta ama fulin shaqo oo uu leeyahay ama dusha ka saaran agaasimaha si waafaqsan xeerkan oo an ka ahayn awoodda isku ururinta dambiyada ee ku xusan qodobka 27aad iyo awooda igmashada ku tilmaaman qodobkan.

### **Qodobka 37<sup>aad</sup>**

**Dhowrsanaanta Xogaha Xisaab Celinta**  
**Cashuuraha**



1. Xisaab celinta cashuur bixiyaha iyo xogta ay xanbaarsan taha iyo warbixin kasta oo laga helay cashuur bixiyaha ama ku saabsan cashuur bixiyaha inta lagu guda jiro cashuur qaadista baadhitaanku socdo, daba galka lagu hayo ama xoog ku fulintu socoto waa qarsoodi Sarkaal, wakiil ama shaqaale ka tirsan maamulk dakhliga cashuuraha Somaaliland looma ogola inay bixiyaan xog sired oo lagu gudoomay heer dawli ah.
2. Warbixin khusaysa cashuur bixiye waa la bandhigi karaa, marka la helo raali ahaanshaha cashuur bixiyaha oo qoraal ah. Iyadoon la helin ogolaanshaha cashuur bixiyaha oo qoraal ah, sarkaal, wakiil, ama hawl wadeenada, hayadda cashuuraha ee Somaliland (ama masuul hore, wakiil ama hawl wadeen) way shaacin karaan ama u soo bandhigi karaan oo kaliy xogta dhawrsoon:-
  - a) Wakiilo kale ama shaqaalaha ee masuuliyiinta cashuuraha iyadoo lagu gudajiro ujeedaduna tahay inay fuliyaan waajibkoodi shaqo ee rasmiga ahaa.
  - b) Wakaaladaha sharci fulinta, iyadoo ujeedadu tahay in lagu oogo ku xadgudub cashuureed qof galay ama denbiyo.
  - c) Maxkamadda, dacwadaha lagu saarayo cashuur bixiyaha qqanta cashuureed ee lagu leeyahay, masuuliyad ku xadgudub cashuureed ama dambiyo ama arin dambi culus ah.
  - d) Masuuliyiinta cashuuraha ee wadan Shisheeye oo si waafaqsan heshiisyada caalamiga ah.
  - e) Masuuliyiinta maaliyada ee jamhuuriyada Somaliland ee ay muhiim tahayinay maamulaan miisaaniyada.
  - f) Masuuliyiinta goobaha cashuur qaadista (Kastamaddu) iyagoo ujeedadoodu tahay inay ku maamulaan Kastamadda xeerkan, iyo sidoo kale masuuliyiinta xaqa u leh inay u maamulaan cashuuraha sida xeerkani dhigayo, iyadoo loo dan leeyahay nidaaminta cashuurta.

3. Cidii hesha warbixinta lagu sheegay Farqada (2) Waa in ay ilaalisaa sirta khusays warbixintaas, marka laga reebo ugu yaraan wixii daruuri noqda si loo gaadho, ujeeddada la ogol yahay in la bandhigo.
4. Marka laga reebo warbixinaha la helay ee qodobkan xaaladaha reeban ee (2), qofka hela warbixin ay bandhigideeda lagu nidaamiyay qodobkan, ma bandhigi karo warbixintaas, waa inuu dukumantiga warbixintaas xambaarsan u celiyaa Agaasimaha.
5. Qof kasta oo bandhiga warbixin dhawrsoon isagoo jabinaya qodobkan, waa danbiile galay Denbi, iyadoo hadii la xukumo uu mutaysan doono ganaax gaadhsiisan 50 buundo lacageed iyo xadhig ay muddadiisu dhan tahay 1-sanno ama labaddaba.

### **Qodobka 38<sup>aad</sup>**

#### **Xisaabaadka iyo Keydinta Qoraalada**

1. Agaasimuhu hadaanu qaab ka duwan u ogolaan, cashuur bixiyuhu waa in uu ku Lahaadaa Somaliland gudaheeda, Qasnadaha qoraalada (records) taas oo loga baahanayo inuu ku fasiro xogta xisaab celinta uu ka bixinayo ama dokumenti kasta oo kale oo la keenayo sida waafaqsan xeerkan ama lagu heli karo xaqiiqada saxda ah ee cashuurta cashuur bixiyuhu bixinayo.
2. Agaasimuhu ma ogolaan karo, cabasho kasta oo wax ka dhimis ku salaysan, hadii cashuur bixiyuhu awoodi waayo cudur daar la'aan inuu keeno xaashi lacag qabasho ama kayd qoraal ee wax isdhaafsiga ama inuu ka keeno cadayn la xidhiidha xaaladaha kor u qaadaya damaca wax dhimista.
3. Qasnada qoraalada ama cadaymaha lagu sheegay qodobkan waa in ay ku ekaadaan 5-sano gudahood, ka dib dhamaadka sanadka dakhliga ee xasuus qoraalku ama cadayntu la xidhiidho.

### **Qodobka 39<sup>aad</sup>**

**Galaangal u yeelashada Diiwaanada, Xusuus  
Kaydinta iyo Kombiyuutarada**

1. Si loo fuliyo qodobada xeerkan Agaasimaha, ama Sarkaal kastaa oo Agaasimuhu awood qoraal siiyay:
  - a) Waxa ay xaq u leeyihiin wakhti kasta iyagoon wax ogaysiis ah bixin inay galaangal buuxa oo madax banana u yeelan karaan Dhisme, Goob, Diiwaano, xusuus dhawro iyo Kaambuyuutar.
  - b) Inay samaysan karaan minguurin ama nuqulo diiwaano kasta, xusuus dhawro iyo xog ku jirta Kayd kaambuyuutar oo galaangal loo yeeshay si waafaqsan faqradan xarafka (a) ee Qodobkan.
  - c) Way qabsan karaan buug ama dhigaal kasta oo la noqda agaasimaha ama sarkaalka uu agaasimuhu u ogolaaday, inuu cadaymo nuxur ahaan muhiim u ah ogaanshaha cashuurta uu mutaystay qofku, dul-saarka, ganaaxa ama ciqaabta ku cad ee lagu sheegay xeerkan.
  - d) Wuu haysan karaa buug, qoraal ama dhigaal kasta, mudo ama wakhti kasta ee ay lagama maarmaanka tahay in lagu ogaado ama lagu cadayn karo, qaanta cashuuree ee qof lagu leeyahay, ama dacwad kasta oo lagu sheegay xeerkan;
  - e) Marka nuqul daabacan ama cajalad Kaambuyuutar ay ku kaydsan tahay Xogtu, la diido in la bixiyo, way u bannaan tahay inuu gacanta ku dhigo iyo inuu Kaambuyuutarkaa la wareego ilaa inta ay lagama maarmaanka tahay in laga sawirto ama lagala bixi karo wixii Macluumaad ah ee looga baahnaa.
2. Sarkaalna kuma kici karo awoodaha lagu sheegay farqada laad, hadaanu ogolaansho qoraal ah ka haysan Agaasimaha, isla markaana aanu salkaal ku tusin ogolaanshaha cida ku sugan dhismaha ama goobta lagu fulinayo hawshaas.



3. Cida ku jirta dhismaha ama goobta awooda lagu fulinayo, si waafaqsan farqada laad, waa in ay bixisaa agabka lagama maarmaanka ah iyo gacansiinta si loo gaadho isla markaana uu si hufan ugu guto waajibkiisa.
4. Qofka buugaagtiisa, qoraalkiisa iyo kaambuyuutarkiisi lala wareegay ee gacanta lagaga dhigay si waafaqsan farqada laad, wuu iska hubin karaa isagoo ka samaysanaya nuqulo sawir ah, ama tixraac inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee xafiisku ku jiro baadhitaanka, sida uu agaasimuhu gooyo.
5. Dhamaan dhigaaladda, buugaagta, kaambuyuutaradda lala wareegay ee gacanta lagu hayo si waafaqsan farqada laad, waxa waajib ah inuu saxeexo agaasimuhu ama sarkaalka uu u ogolaaday hawshaasi, iyadoo agaasimuhu u soo celin doono cidii lahayd.
6. Hadii dhigaalada, buugaagta iyo kaambuyuutada lagu sheegay farqada laad ay lumaan ama la burburiyo inta uu gacanta ku hayo agaasimuhu waxa ku waajib ah inuu u mag-dhabo cashuur bixiyaha khasaaraha wixii luma ama burbura.
7. Qodobkani wuxuu leedahay saamayn ka soo horjeeda isku maamulka sharciga ee la xidhiidha, tixgelinta ama danta guud ee la xidhiidha soo saarista ama sidii loo heli lahaa dokomanti ama dhigaal.
8. Marka la eego Qodobkan (Ku Jire) la xidhiidha dhisme ama goob macnaheedu waa mulkiilaha, maamulaha ama qof kasta oo kale oo masuul ka ah dhismahaa ama goobtaa.

### **Qodobka 40<sup>aad</sup>**

#### **Ogaysiiska soo Gudbinta Xogta ama cadaynta**

1. Agaasimuhu qoraal ahaan wuu ka dalban karaa qof kasta, ama dayn cashuureed ha lagu lahaado ama yaan lagu lahaanbe:-
  - a) Inuu soo bandhigo, inta lagu gudo jiro mudada lagu sheegay ogaysiiska, warbixin kasta oo lagaga dalbaday Ogaysiiska; ama

- b) Inuu ka soo qayb galo goobta iyo goorta lagu sheegay ogaysiiska ujeedadiisu tahay in uu dhaariyo agaasimuhu ama sarkaalka uu igmaday, arin khusaysa xaalado cashuureed ee qofkaa ama qof kasta oo kale iyo ujeedooyin uu agaasimuhu ama sarkaalka uu igmaday ay uga baahdaan qofkaas, Ee khuseysa si ay u baadhaan inuu soo saaro buug, dhigaal ama kaambuyuutar, lagu kaydiyay xogo kuwaas oo gacanta qofkaas ku jira.
2. Hadii ogaysiisku waajibinayo soo saarista buugaag, dhigaalo ama xogo lagu kaydiyay kaambuyuutar, loo qeexay si caqli gal ah oo la hubo.
  3. Ogaysiiska lagu soo saaray qodobkan waa in loo geeyaa, ama iyadoo la raacayo tilmaamaha agaasimaha, nuqul saxeezan, gacanta looga dhiiba qofka uu ku socdo, ama loo dhigo goobtii ganacsi ee ugu danbaysay qofkaas caadiyan ama lagu yaqaanay, iyo shahaaddada adeega ee uu saxeexay qofkaas loo geynayo ogaysiisku, waxay cadayn u tahay ama u noqonaysaa xaqiiqada lagu soo sheegay halkan.
  4. Hadii ogaysiiska aan loo gayn shakhsi ahaan qofkii uu ku socday ama khuseeyay, gayntaasi waa in uu markhaati ka noqdaa xubin ka tirsan, Guddida dalgamada dawlada hoose.
  5. Qodobkani waxay saamayn aan la jaan qaadi karayn ku leedahay, isku maamul kasta oo sharci oo la xidhiidha dhawrsanaan ama danta guud, ee la xidhiidha soo saarista ama helista dhigaal.

#### **Qodobka 41<sup>aad</sup>**

#### **Buugaagta iyo Xusuus Kaydinta aan ahayn luuqada Somaliga**

Hadii wax bug ah, xusuus qoraalo ama xog kayd kaambuyuutar eek u xusan Qodobada 38, 39, ama 40 lagu kaydiyay macluumaad aan ahayn luqada Soomaliga agaasimuhu qoraal ahaan wuu ka dalban karaa qofka gacanta ku haya, buugta dhigaalka, ama xogta kambuyuutarka ku kaydsan inuu bixiyo kharashka loo Turjumayo Soomaalii iyadoo la kaashanayo turjubaan uu agaasimuhu ansixiyay.

## QAYBTA 6 QAABABKA IYO OGAYSIISYADA



### Qodobka 42<sup>aad</sup>

#### Qaababka iyo Ogaysiyada Xaqiiqada Dokumentiga

1. Foomamka, ogaysiisyada, xisaab celinta, cadaaymaha, shaxda iyo dukumtiga kale ee lagu waajibiyay xeerkan, waxay noqon karaan qaab agaasimuhu u gartay maamul wanaagga xeerkan ku soo saarista dokumentigaas daabacaadda rasmiga ee dawladda Soomaaliland maaha mid loo baahan yahay.
2. Agaasimuhu waa in uu ka dhigaa, dukumantiyada lagu sheegay farqada laad kuwa dadweynuhu ka heli karaan xafiiska cashuuraha iyo goobaha kale, qaab fariimeed oo email ah, oo ah hadba sida agaasimuhu go'aamiyo.
3. Ogaysiiska ama qoraalada kale ee la bixiyay, la gaadhsiiyay ama uu siiyay agaasimuhu si xeerkan waafaqsan, waa xaqiiqo ku filan, hadii magaca ama xilka agaasimaha ama sarkaalka loo idmaday ku daabacanyahay, ku shaabadaysan yahay ama ku qoran yahay ogaysiiska ama dokumentiga.

### Qodobka 43<sup>aad</sup>

#### Gaadhsiinta Ogaysiisyada iyo Dukumantiyada kale

Hadii aan si kale loogu sheegin xeerkan, ogaysiis ama dhukumanti uu waajibiyay ama uu amray xeerkani in la gaadhsiiyo:-

- a) Qofka ah Ruux deegaan ah ee aan wakiil ahayn, waxa loo tix-galin karaa, inay ku filan tahay gaadhsiiintu: -
  - I. Si shakhsi ah in loo gaadhsiiyo qofka.
  - II. Ama loo dhigay qofkaas halkii ugu danbaysay ee lagu yaqaanay, xafiis, ama meel goob ganacsi ah oo ku taal Somaliland iyada oo gaadhsiiintaa ay goob joog u ahaan doonaan xubin gudida degmada dawlada hoose ee ama

- III. Ama loogu diri doono nidaamka boosta, ee xafiiska, ama goobta ganacsi/shaqo, ama halkii caadi ahaan qofkaas markii ugu danbaysay ciwaan ama meel laga helo u ahayd Somaliland gudaheeda; ama
- b) Qof kasta oo kale waa loo qaadan karaa in si haboon loo gaadhsiiyay hadii: –
- I. Shakhsi ahaan loo gaadhsiiyay sarkaalka uu magacawday qofkaasi
  - II. La dhigay xafiiska diiwaan gashan ee qofka ama ciwaankiisa si loo gaadhsiiyo ogaysiisyada xeerkan ku sheegan; ama
  - III. loogu diro hanaanka boosta ee xafiiskaasi ama goobta ganacsi ee qofkaasi oo ku taal gudaha Somaliland.

#### **Qodobka 44<sup>aad</sup>**

#### **Dokumentiga lagu shaqeeyo (practice notice)**

Si loo helo maamul aan isbebedel lahayn oo hirgaliya xeerkan iyo ku dhaqankiisa iyo in hogaamin lagu siiyo cashuur bixiyaha iyo saraakiisha masuuliyiinta cashuuraha ee Somaliland, agaasimuhu wuxuu soo saari karaa hagayaal ogeysiis si Agaasimuhu ku fulinayo ujeedada Xeerka.


#### **Qodobka 45<sup>aad</sup>**

#### **Xukuno Gaar ah**

1. Ka dib markuu codsi qoraal ah cashuur bixiyuhu agaasimaha kaga dalbado, wuu u soo saarayaa cashuur bixiyaha, xukun gaar ah, oo ku salaysan halka uu agaasimuhu ka taagan yahay marka cashuur ay noqoto dhaqan galinta ama dabaqaada xeerkan, ee la xidhiidha dalabka macaamilaadka ama bixiyuhu ku sugan yahay.
2. Hadii uu cashuur bixiyuhu uu sameeyay u bandhigis buuxda oo run ah, noociyada dabiiciga ah ee macaamilaadka la xidhiidha xukunkan iyo macaamilka lagu sameeyay dhamaan waxyaabaha kala duwan ee la xidhiidha codsiga cashuur bixiyaha, xukunku waainuu lagu dhaqaa, agaasimaha iyadoo

loo eegayo codsiyada, macaamilaadka inay jireen wakhtiga xukunka la soo saaray.

3. Hadii aanay is waafaqsanayn dokumentiga shaqada iyo xukunada gaarka ahi, waxaa muhiimada la siin doonaa, qodobada ku tilmaaman xukunka gaarka ah.



## **QAYBTA 7**

### **CASHUUR KA DAYNIYO CASHUUR KA DHUUMASHO**

#### **Qodobka 46<sup>aad</sup>** **Cashuur ka dayn**


1. Hadii uu agaasimuhu uu u arko in qayb ama gabi ahaanba cashuurtii uu xeerkani ku waajibiyay aanu cashuur bixiye si haboon isaga gudi karayn, sababahan awgood:-
  - a) Tix-galinta duruufo qalafsan ama
  - b) Suurta galnimo la'aanta, marxalado adag ama ka soo xeraynta cashuurta oo kharash badani ku baxay Agaasimuhu wuxuu kiiska cashuur bixiyahaas u wareejinayaa wasiirka.
2. Hadii uu wasiirku ku qanco xaalada cashuur bixiyaha, isla markaana garawsado in aanu cashuur bixiyuhu isaga gudi karayn xaalada cashuureed ee ku waajibtay, wasiirku wuu ka dhaafi karaa qayb ama badh ka mid ah, amaba gabi ahaan cashuurta ku waajibtay.

#### **Qodobka 47<sup>aad</sup>**

#### **Macaamilaadka dhexmarta Wada-jirayaasha**

1. Macaamilaad kasta oo dhex mara cashuur bixiyayaal, kuwaas oo ah wada jirayaal ama leh xidhiidh shaqo, agaasimuhu wuu u qaybin karaa ama u kala astaynayaa, ama u kala soocayaa, dakhli, hoos u dhacyo, ama qaamaha lagu leeyahay oo ay lagama maarmaan noqotay inay muuqato dakhliga cashuurta ku waajibtay ee cashuur bixiyaha, taas oo cashuur bixiyuhu ka kasbaday macaamiil dhow.
2. Agaasimuhu wuu dheeli tiri karaa dakhliga ka imanaya arimo khuseeya is dhaafsi ama ruqsada hanti la taaban karo ee dhex marta wada jirayaal.

3. Marka la samaynayo dheeli tirka lagu sheegay xeer hoosaadyada 1aad ama 2aad agaasimuhu waa inu cadyeeyaa isha dakhli iyo noociyada kharash bixinta ama khasaaraha ee la xidhiidha dakhli ama raasumaal ama si kale ku yimaadda.



### **Qodobka 48<sup>aad</sup>**

#### **Soo Celinta Dakhli am ka Jaristaanada**

Iyadoo loo jeedo in la cadeeyo waajibaad cashuureed oo ku sheegan xeerkan, agaasimuhu

- a) Wuu Ku soo celin karaa dabeecadiisi macaamalaadka ama shay ka mid ah macaamalaadka oo hore heshiis loogu galay iyadoo cashuur ka carar la yahay.
- b) Wuu iska diidi karaa macaamil kasta oo aan lahayn saamayn dhaqaale oo mihiim ah.

### **QAYBTA 8**

#### **WAXYALAHA KALA DUWAN**

### **Qodobka 49<sup>aad</sup>**

#### **Qadarka lagu sheegay lacagta Somaliland Shillin**

1. Nooca lacageed ee lagu sheegay Xeerkan waa Somaliland Shilling, iyadoo diiwaanada Xisaabta Cashuuraha lagu qorayo Somaliland Shilling hadana way banan tahey in lagu bixiyo Cashuurta lacago kale sida Dollar.
2. Hadii Cashuur lagu bixinayo dollar ahaan lacagta Cashuurta ee lagu leeyahay dollarka lagu dhufanayaa inta sarifka lacagtu suuqa ka marayo maalintaas waxaana sarifka jaangoynaya Bangiga Dhexe.

### **Qodobka 50<sup>aad</sup>**

#### **Qasnada Dhexe**

Hadii aan si kale loogu sheegin sharci, dhamaan dakhliga cashuuraha waa in loo tix-galiyaa dakhliga guud ee jamhuuriyada Somaliland, waana in lagu shubaa

qasnada dhexe iyada oo lagu habayn doono xeer siday dawladdu ugu isticmaali lahay ujeedooyinkeeda guud.



### **Qodobka 51<sup>aad</sup>**

#### **Xeer Nidaamiye**

1. Wasiirku wuxuu samaynayaa xeer-nidaamiye si qaab hufan loogu meel mariyo ujeedada xeerkan, waxaanu soo saarayaa xeer nidaamiye heer wasiir ah.
2. Iyadoon waxba loo dhimayn, dhaqan galka Farqada (1), xeer nidaamiyaha loo Sameeyo si waafaqsan farqadaas waxa dhici karta:-
  - a) an qodobo daryeelaya ama garab galaya nooc ahaan socodsiinta xeerkan; ama
  - b) Sheegaya Ciqaabaha waajib gudasho la'aanta ama tilmaamaya ciqaabta ka dhalan karta jabinta nidaam, taas oo aan ka badnayn 25 Buundo lacageed ama xadhig mudadiisu dhan tahay 6-bilood ama labadaba, iyadoo lagu xukumi doono xaaladaha qofka caadaystay, denbiga, ganaax dheeraad ah oo aan ka badnayn 5 Currency Point, maalintiiba inta denbigu socday.

### **Qodobka 52<sup>aad</sup>**

#### **Wax Ka Badalka Shaxda Iyo Xadiga Lacageed**

Wasiirku ka dib marka uu helo ansixinta Baarlamaanka wuxuu si sharci ah wax ka badali karaa;-

- a) Qadar kasta oo lacageed oo lagu qeexay, xeerkan ama
- b) Jaantuska

### **Qodobka 53<sup>aad</sup>**

#### **Muddada Kale Guurka**

1. Xeerka la nasakhay dabaqaadiisa ama ku dhaqankiisu wuu sii soconayaa, ilaa iyo sanad dakhliyeedka ka horeeya, dhaqan galka xeerkan.
2. Dhamaan balan qaadyadii lagu galay xeerka la nasakhay iyo waxyaabihii ka dhalanayayba waa qaar

- sii jiraya ilaa wakhtiga xeerkani uu si buuxda u dhaqan galayo, waxaana loogu dhaqmayaa si buuxda.
3. Heshiis kasta oo dhex mara dawlada Somaliland iyo dawlad shisheeye, oo ah in si wada jir ah looga jaro cashuurta, taakulooyinka ee lagu sheegay ama ku astaysan xeerka la nasakhay ama ka badalay, kaas oo dhaqan galkiisu jiri doono xitaa marka uu xeerka badalay dhaqan galka noqdo.
  4. Foomamka iyo wixii qoraal lagu isticmaalay xeerka la nasakhay wuu sii socon doonaa isticmaalkoodu si waafaqsan xeerkan, iyo dhamaan tixraacyada qaababkaas iyo dhukumantiyadaasi waxay ahaan doonaan kuwo la jaan qaadaya tusmooyinka ku haboon, xeerka la nasakhay waxaa loo qaadanayaa in lagu xuso tusmooyinka u dhigma ee xeerkan.
  5. Tixraacyada lagu samaynayo xeerkan, dakhli sanadeedkii hore waxa ku jira hadii nuxurku waajibiyo, xigashada dakhli sanadeed lagu sheegay, xeerkii la nasakhay.
  6. Qodobka 78aad faqradiisa 4aad iyo faqradiisa (B) ee xeerkan ayaa lagu dabaqayaa hantida qiima dhacaysa, ee uu haysto cashuur bixiye inta aan xeerkani dhaqan gal noqon. Xisaabta qiima dhacana waa in laga jaraa qiimaha hantidu ku fadhido.
  7. Haddaba qadarka hoos u dhac ee la ogol yahay si waafaqsan Qodobada 80aad iyo 81aad ee la xidhiidha kharashka lagu galay bilaabidda, ama lagu hantiyay hantida la taaban karo ee la helay xeerkan ka hor, way dhaqan galaysaa waana in lagu xisaabiyo loona qaato in qaybahani ay markasta ahaayeen ku lagu dhaqmo ama la dabaqo.
  8. Iyadoo la tixraacayo Qodobkan 112aad si loo yareeyo kharashaadkii la galay sanadkii hore, khasaaraha ama deyn gudidd la'aanta waxa ku jira, tixraaca kharashka, khasaaraha, ama deyn guddid la'aanta hoos loogu dhigay xeerka la nasakhay.

**Qodobka 54<sup>aad</sup>**  
**Xeerka La Nasakhay**



Shuruucda lagu xusay **Qodobkan 2aad ee Erey bixinta** Xeerk la nasakhey waa Xeerka Cashuuraha Toosan L /No: 89/96, Xeerka Cashuurta Gadida ee L/NO: 84/96, & dhamaan Xeernidaamiyeyaashoodii loo soo saarey.

## **CUTUBKA 2: CASHUURAHA DAKHLIGA**

### **QAYBTA 1**

## **WAAJIBINTA CASHUURTA IYO TACRIIFADAHA**

### **Qodobka 55aad**

### **Cashuurta Dakhliga ee la waajibiyay**

(1) Iyadoo Loo Marayo si xeerkan waafaqsan, cashuurta loo yaqaano cashuurta dakhliga waa in laga qaadaa sanad kasta dakhliga, iyada oo halkan lagu soo rogayo qof kasta oo leh ama haysta dakhli cashuuri ku waajibtay sanad dakhliyeedkaas.

(2) Iyadoo loo marayo Farqada 4aad iyo 5aad cashuur dakhliyeedka ay tahay inuu cashuur bixiyuhu bixiyo sanad dakhliyeedka, waxa lagu xisaabinayaa iyadoo lagu dabaqayo tacriifooyinka khuseeya cashuurta ee loo gooyay dakhliga la cashuuro ee cashuur bixiyaha sanad dakhliyeedkiisa wixii cashuur ahaan soo baxa waxa laga jarayaa cashuurtii uu sanadkaas qadimay.

(3) Hadii cashuur bixiyaha loo ogolaado in ka badan (1), amaah cashuureed, ee sanad dakhliyeedkaas, Deynta, waxa lagu dabaqaya arimahan soo socda:-

- (a) Amaah cashuureed Shisheeye oo la ogol yahay, Sida ku xusan Qodobkan 127 aad; ka dibna
- (b) Deynta Cashuureed ee la ogol yahay ee ku xusan Qodobkan 139 aad faqradeeda 8aad ka dibna
- (c) Deynta cashuureed ee la ogol yahay sida ku xusan Qodobka 151 aad faqradiisa 5aad.

(4) Haddii wadarta dakhliga ee cashuur bixiyaha ee sanadka dakhligu ka kooban yahay gaar ahaan, dakhli shaqaale oo ka yimid loo shaqeeye kaliya oo cashuurtii haya sida uu waajibinayo Qodobka 143, cashuurta dakhliga ee uu bixinayo cashuur bixiyuhu sanad dakhliyeedka waa qadarka la mid ka ah isu gaynta qadarada ee ay waajibka tahay in cashuur ahaan looga hayo dakhligaas sida wafaqsan Qodobka 143aad.

(5) Iyadoo loo raacayo Farqada 7aad haddii wadarta dakhliga guud ee cashuur bixiyaha dalka degan ee hawlaha ganaci ee uu ka wadaa sanadkii ka kasbado wax ka yar (50) milyan shilin sanad dakhliyeedka, ,cashuur dakhliyeedka ku waajibtay cashuur bixiyahas waxa lagu qeexi doonaa si waafaqsan shaxda sadexaad ee xeerkan, hadii aanu cashuur bixiyuhu dooran, isagoo qoraalku soo ogaysiinaya Agaasimaha in lagu dabaqo farqadan 2aad ee qodobkan, iyo:-

- (a) Cashuurtu waa inay ahaataa kama danbays laga qaadayo dakhliga ganacsiga cashuur bixiyaha
- (b) malaha ka jaritaano loo ogol yahay, sida ku cad xeerkan kharashaadka iyo khasaaraha la galay si loo soo saaro, dakhli ganacsi,
- (c) (c) ma jirto amaah cashuureed oo la ogol yahay sida ku cad xeerkani, waa in loo isticmaalo si loogu yareeyo cashuurta ay waajibka tahay inuu ka bixiyo cashuur bixiyuhu dakhiga ganacsi, ee sanadka hadaanu ku xusanayn shaxda sadexad ee xeerkan.

(6) Waa in loo geeyaa agaasimaha wakhtiga ay ku haboon tahay ama munaasibka ku tahay, ee xisaab celinta dakhli sanadeedka ay la xidhiidho ee cashuur bixiyaha

(7) sida ku xusan Farqada 5aad, laguma dabaqi karo cashuur bixiye deggan dalka kaas oo ku hawlan ganacsiga caafimaad, ilko sifayn, farsamayaqaanada dhismaha, Injineerada, Xisaabiyayaasha, Sharciyaqaanada, ama cid kastoo ku hawlan adeeg

xirfadeed iyo kuwa adeeg madadaalo, adeeg bulsho ama adeegyada dhismaha.



### **Qodobka 56<sup>aad</sup>**

#### **Cashuurta lagu soo rogay kirada**

(1) Iyadoo loo marayo si waafaqsan xeerkan, cashuurbaa la waajibinayaa sanad Dakhliyeedka kasta waxana la saarayaa qof kasta oo leh ama hela dakhli kiro sanad dakhliyeedka.

(2) Cashuurta dadku bixinayaan sida waafaqsan qodobkan ee sanad dakhliyeedka waxa lagu xisaabinayaa iyada lagu dabaqayo tacriifada la xidhiidha ee cashuurta dakhliga kirada ee ku goan Qodobka 57 (2) oo la saarayo dakhliga qofku helo sanadkii

(3) Cashuurta lagu soo rogay qofka ee waafaqsan qodobkan waa ka gooni cashuurta la soo rogay ee waafaqsan qodobka 55 iyo:-

(a) kirada uu helo shakhsigu waa inaan lagu darin dakhliga guud ee qofka ee la cashuurayo sanad dakhliyeed kasta, si waafaqsan xeerkan.

(a) Kharashaadka iyo khasaaraha uu galo qofku si uu kirada u helo waa in laga jaraa sida waafaqsan xeerkan sanad dakhliyeed kasta, sida lagu xusay oo kaliya qodobka 73 (1) (b).

(b) Cashuurta uu bixinayo qofka degan dalka sida qodobkani qabo lagama jar karo deyn kasta oo cashuureed oo loo ogolaada qofkaas, si xeerkan waafaqsan.

(4) Sida Qodobkani tilmaamayo, Sanad dakhliyeed waa mudo 12-bilood ah oo ku dhamaata December 31-keeda

### **Qodobka 57<sup>aad</sup>**

#### **Tacriifada Cashuurta Dadka kali kalida ah**

(1) Dakhliga la cashuurayo oo aan ka ahayn ka shaqaalaha ee sanad dakhliyeed qofka tacriifadiisa

cashuurtu waa 10% oo cashuurta dakhliga ah (Income tax).

(2)Dakhliga kirada ee qofka ee sanad dakhliyeedka tacriifada lagu cashuurayaa waa 10% oo cashuurta dakhliga ah (Income tax).



### **Qodobka 58<sup>aad</sup>**

#### **Tacriifada Cashuurta Dakhliyeedka Shirkadaha**

Dakhliga la cashuurayo ee shirkadaha sanad dakhliyeedka tacriifada cashuurta dakhligu waa 10%.

### **Qodobka 59<sup>aad</sup>**

#### **Tacriifada Cashuureed ee laga Qaadayo Amaano-hayn iyo Sanduuqa Hawlgabka**

1. Iyadoo loo marayo Farqadaha (2) iyo (3) ee Qodobkan tacriifada cashuurta dakhliga ee amaannadu waa 10% dakhliga la cashuurayo ee amaannada sanad dakhliyeedka
2. Hantida amaannada ah ee cashuur bixiye ka dhintay kaas oo ahaa qof degan dalka cashuurbaa ku waajibtay dakhliga amaannada ee cashuurtu ku waajibtay tacriifada cashuurtuna waa 10% dakhliga amaannada oo ah cashuurta dakhliga (Income tax) ee;-

(a) Dakhliga sanadka dhimashadu dhacday (Cashuur bixiyuhu dhintey) iyo

(b) Sanad dakhliyeedka soo socda

3. Amaano hayaha qofka aan awoodda lahayn, amaannadaas waxa ku waajibay cashuur Tacriifadeedu tahay 10% cashuurta dakhliga ee amaannada la cashuurayo sanad dakhliyeedka.

4. Cashuurt dakhliyeedka sanduuqa hawl gabka ee sanad dakhliyeed waxa laga qaadayaa tacriifo cashuureed oo dhan boqolkiiba 10%.

**QAYBTA 2**  
**DADKA DALKA DAGAN IYO DADKA AAN DAGANAYN**



**Qodobka 60<sup>aad</sup>**  
**Dadka Dalka Degan**

(1) Iyadoo loo eegayo Farqadaha (2) iyo (3) qof dalka deggan sanad dakhliyeedka, haddii qofkaasi:-

- a) Uu ku leeyahay guri rasmi ah Somaliland
- b) Uu ku sugan yahay Somaliland-
  - I. Muddo,ama muddooyin ay wadartoodu isku noqonayso 183 maalmood,ama wax ka badan ee muddo kasta oo 12 bilood oo ka bilaabanta ama ku dhamaata inta lagu jiro sanad dakhliyeedka
  - II. inta lagu jiro sanad dakhliyeedka iyo labada sanad dakhliyeed kasta ee ka danbeeya midkoodkiiba muddo cel celis ahaan 122 maalmood ah,
- c) Uu yahay shaqaale ama sarkaal dawladda somaliland u badashay qurbaha inta lagu jiray sanad dakhliyeed,

(2) qof kasta oo ah shakhsi degan sida lagu sheegay Farqada (1) sanad dakhliyeedkaas qodobkani u yaqaan “sanad dakhliyeedka lagu jiro”, laakiin aan ahayn shakhsi degan dalka sanadka dakhliyeedkii ka horeeyay waxaa loo tixgalinayaa shakhsi degan dalka sanad dakhliyaadkaas lagu jiro muddado ka bilaabanyasa oo kaliya markii uu yimid shakhsigaasi Somaliland.

(3) Shakhsiga ah shakhsi degan dalka sanad dakhliyeedka lagu jiro laakiin shakhsi degaan Ah noqon doonin sanad dakhliyeedka ku xiga waxaa loo tixgalinayaa sida qof degan sanad dakhliyeedkaas lagu jiro muddaduna tahay mid ku eg oo kaliya maalinta ugu danbeysa joogist shakhsigaasi.

**Qodobka 61<sup>aad</sup>**  
**Shirkad Degan**

Shirkadi waa shirkad degan dalka sanad dakhliyeedka haddii:-



- a) ay ku shirkoobeen ama ay ku asaasmeen si waafaqsan shuruucda Somaliland.
- b) ay maamulkeeda iyo gacan ku haynteedaba laga fuliyo Somaliland wakhti kasta oo kamida sanad dakhliyeed.
- c) Ka wada hawsheeda ugu badan Somaliland inta lagu jiro sanad dakhliyeed.

**Qodobka 62<sup>aad</sup>**  
**Amaano Hayn Degaan ah**

Amaano hayn waa amaano hayn degan sanad dakhliyeedkaas haddii:-

- a) Amaano haynta lagu aasaasay Somaliland
- b) Wakhti kasta oo kamida inta lagu jiro sanad dakhliyeedkaas, amaano hayaha amaano haynta uu yahay shakhsi degan dalka, ama.
- c) ay amaano haynta maamulkeeda iyo gacan ku haynteedaba laga fuliyo Somaliland wakhti kasta oo kamida sanad dakhliyeed.

**Qodobka 63<sup>aad</sup>**  
**Iskaashi Ganacsi Degan**

Iskaashi Ganacsi waa wadaag degan dalka sanad dakhliyeedkaas haddii wakhti kasta oo ka mida sanadkaas qofka iskaashiga ganacsi ku jiraa uu ahaa qof deggan dalka.

**Qodobka 64<sup>aad</sup>**  
**Dhigaalka Hawlgabka Deegaanka ah**

Sanduuq hawlgab ee ka jira dalka gudahiisa sanad dakhliyeedkaas haddii:-

- (a) Lagu abaabulay si waafaqsan shuruucda Somaliland,
- (b) uu yahay mabda'eeda ugu wayn ee ay ku hawl gashaa uu yahay sidii loo siin lahaa dheed hawlgab ashakhsi degan;dalka ama
- (c) ay maamulkeeda iyo gacan ku haynteedaba laga fuliyo Somaliland wakhti kasta oo ka mida sanad dakhliyeed.

**Qodobka 65<sup>aad</sup>**  
**Qof aan Deganeyn Dalka**

1. Iyadoo loo eegayo Farqada (2), qofku maaha qof degan dalka sanad dakhliyeedkaas haddii qofkaasi uu yahay qof aan deganayn dalka sanadkaas.
2. Haddii Qodobka 70 (2) ama (3) lagu dabaqayo shakhsigu wuxuu noqonayaa mid aan deganeyn inta lagu jiro Muddada qaybta ka ah sanad dakhliyeedka kaas oo uu ahaa qof aan deganeyn dalka.

**QAYBTA 3**  
**DAKHLIGA LA CASHUURAYO**

**Qodobka 66<sup>aad</sup>**  
**Dakhliga la cashuurayo**

Iyadoo la raacayo Qodobka 67<sup>aad</sup> iyo 68<sup>aad</sup> dakhli sanadeedka qofka ee ay cashuuri ku waajibtay waa wadarta dakhliga ee qofkaas sanadkiiba oo laga reebay wadarta jaritaanada xeerkanii ogol yahay sanadka.

**Qodobka 67<sup>aad</sup>**  
**Dakhliga Cashuurayo ee ka dhasha Ganacsiga**  
**Caymiska**

1. Dakhliga cashuuri ku waajibtay ee sanad dakhliyeed qof oo ka dhalanaya hawl gal Ganacsi oo caymis xili gaaban ah waxa lagu go'aaminayaa si waafaqsan shaxda afraad ee xeerkan.
2. Haddii qofka Farqada (1) lagu dhaqayo uu ka helo dakhli cashuuri ku waajibtay oo aan ahayn dakhli ka soo baxay hawlgal ganacsi muddo gaaban oo ganacsi caymis ah sanad dakhliyeed, dakhliga la cashuurayo

ee lagu xadiday Farqada (1) waxaa lagu darayayaa dakhliga kale iyadoo loo jeedo in la ogaado wadarta dakhliga qofka ee la cashuurayo ee sanad dakhliyeedkaas.

3. Qodobkan :-

- a) Ganacsi caymis waxaa looga jeeddaa ganacsiga ama arrimo xidhiidh la leh balan qaadka mas'uuliyadda caymiska nafta dadka ama in si fiican loo magdhabo khasaaraha caynsan oo ay ka mid tahy in la xambaaro guddidda dhacdooyinka ka imaan kara xaalado cayiman.
- b) Ganacsiga caymiska nolosha-waxa looga jeeddaa marxaladahan soo socda mid kood-


I. Gudoonka iyo xil qaadidda heshiis caymis ee nafta dadka ah iyo heshiis si haftan loo gudayo ee nafta dadka

II. Gudoonka iyo xil qaadidda heshiis caymis oo qofka laga cayminayo dhib soo gaadha naftiisa ama dhimasho kaga timaadda shil uu galay ama cudur awgeed inuu u hawl gabo oo heshiis lagu muujinayo soconaya muddo aan ka yarayn shan sano (5) ama wakhti aan xadidnayn aminaanu ku muujin caymiyuhu muddo aan dhamaanayn intaanay shanta sano dhamaan ka hor laga bilaabo dhaqan galka ama waxa lagu muujinayaa inaanay dhamaad lahayn ka hor mudadaasi intaanay dhamaan, mudadaasi oo xaalado gaar ah oo kaliya lagu cayimay heshiiska ama

(iii) Gudoonka xil qaadidda heshiis caymis ha lagu dhaqan galiyo heshiis caymis, caddayn maalgalin, cadayn deeqeed ama si kale ha loo dhaqan galiyo, halkaasoo baddelkeeda loo caymiyaha lagu siinayo lacag caymis mar iyo laba jeer, qadar ama qadaro taxana ah oo lasiin doono loo caymiyaha, heshiiskaasi waa inaanu ku dhicin faqrad (i) ama (ii) gudihiiisa ee faqradan iyo



- (C) caymiska ganacsiga mudada gaaban waxa loola jeedaa ganacsi caymis oo kasta kaas oo aan ahayn ganacsi caymis nafeed..



**Qodobka 68aad**  
**Wadarta Dakhliga**

1. Iyadoo la raacayo xeerkan, wadarta dakhliga ee sanad dakhliyeedka qofka waa wadarta dakhliyadan:-
  - a) Dakhli ganacsi
  - b) Dakhli shaqaalanimo ;iyo
  - c) Dakhli hantiyeed; oo sanad gudahiisa soo gashay qofkaas, oo aan ahayn dakhliga cashuurta laga dhaafay.
2. Ujeedda Farqada (1):-
  - a) Wadarta Dakhliga ee qof degan dalka wuxuu ka kooban yahay dakhliga ka soo galay Dhamaan ilo juquraafi ama degaan
  - b) Wadarta Dakhliga ee qof aan deganayn dalka wuxuu ka kooban yahay kaliya dakhliga laga helo ilo gudaha Somaliland ah.
3. Haddii aanu xeerkani si kale u sheegin qaybta 5 ee cutubkan, taas oo ka shaqeynaysa mabadiida xisaabaha cashuurta waxayna xaqiijinaysaa goort la helayo qadarka ujeedada xeerkani.

**Qodobka 69aad**  
**Dakhli Ganaacsi**

(1) Dakhli ganacsi waxa loola jeedaa dakhli kasta oo qof ka soo gala hawlga ganacsi Waxayna ka kooban yihiin qadaradan soo socda ha ahaado dakhli hawlga ama dakhli raasamaal:-

- (a) Qadarka dheef kasta sida lagu asteeyay qaybta 6 ee cutubkan taas oo la xidhiidha dheefta laga helo iyo khasaaraha lagu galo wareejinta hanti ama qaan ganacsi oo la guday ha ahaado dakhligaasi mid ka yimid dakhli caadiya oo hawlga ama xisaab hantiyeed.

(b) Qadar kasta oo uu ku helay qof abaal marin lagu siiyay aqbalaadda xadidaadda lagu soo Roga awooda qofkaas ee uu ganacsi ku wadi lahaa.

(c) Wadarta dakhliga qof ka helay badeeco ganacsi oo uu iibiyay.

(d) Qadar kasta oo ka mida dakhliga ganacsi ee qof ee lagu sheegay qodobkasta oo Kale ee xeerkan ah.

(e) Qiimaha hadyad kasta uu qof ka helo inta lagu jiro ama ay sabab u tahay xidhiidh ganacsi oo hore, mid hadda jira ,ama la rejeynayo

(f) Ajuradda iyo abaalgud qof ka helo dayn ganacsi oo soo xerootay,ama qofka ku hawlan ganacsiga bangi ama lacag amaahin;iyo

(g) Kirada uu helay qof kaasoo ganacsigiisu uu gabi ahaanba ama badanaaba uu Yahay kirayn.

(2) Qadarka ka mida dakhliga ganasi ee ku xusan Farqada (1) (g) wuxuu ahaanayaa sifihiisa kiro marka loo jeedo qodob kasta oo xeerkan ah oo xusaya dakhligaas.

(3) Haddii natiijo ahaan ruqsad kasta oo uu bixiyay ama xal dhexe lala gaadho qofka daynta ku leh cashuur bixiyaha inta lagu guda jiro xaaladda musalafnimada, oo uu cashuur bixiyuhu wax dheefa ka helo tirtirka daynta ganacsi Qodobka 89 (3) ayaa lagu dhaqayaa badelkeeda dheefta ka midka ah dakhliga ganacsi ee cashuur bixiyaha sida ku xusan Farqada (1).

(4) Qodobkan,"Hanti ganacsi" ka mid maaha badeeco ganacsi ama hanti qiima dhacaysa.

**Qodobka 70<sup>aad</sup>**  
**Dakhliga Shaqada**

1. Qodobankan, dakhliga shaqada waxa loola jeeddaa dakhli kasta oo Shaqaale ka soo gala shaqo waxana

ka mida qadarada soo socdaa, ha lahaadaan dakhli ama raasamaal:-

- a) Xuquuq maalmeed, mushahar, lacagta fasaxa loo qaato fasaxa la lacageeyo, lacagta wakhtiga shaqada ee dheeraadka ah, ajuurooyin, lacagta faa'iido wadaag ah, xuquuq shaqo ka tagis, abaal marin, jid mar, madadaalo, isticmaalka biyaha& laydhka, qiimaha nolosha, kirada guryaha kharashka caafimaadka, ama gunooyinka kale.
- b) Qiimaha dheef kasta oo la hibeeyay
- c) Qadarka kasta ama magdhow uu bixiyo loo shaqeeye si loogu magdhabo kharashaad uu galay shaqaale, oo aan ahayn kharashka uu ku galay shaqaale isagoo u adeegaya ujeedooyinka ganacsi ee haboon ee loo shaqeeyaha.
- d) Qadar kasta oo lagu helo xuquuq heshiis shaqo oo wakhtigiisii dhamaaday ha lagu muujiyo ama yaan lagu muujinin heshiiska xuquuda noocaas ah ama lagu helo si kale oo ah qadar u dhigma heshiiska shaqo.
- e) Qadar kasta oo uu bixiyey loo shaqeeye cashuurta laga cafiyey oo si caymis ahaana loogu caymiyo nolosha shaqaale, caymiska oo ah danta shaqaalaha ama mid kasta oo ka mida ku tiirsanehiisa/ku tiirsan shaqaalahaas.
- f) Qadar kasta oo lagu helo xaaladda shaqada ama isbedel kasta oo ku yimaadda xaaladiisa ama xaaladeeda shaqo oo heshiiska shaqadu dhigayo.
- g) Qadarka ay ku qiimaysan yihiin saamiyadda loo soo saaray shaqaale iyadoo ladabaqayo nidaamka lagu hanto saamiyada shaqaalaha marka lasoo saarayaa haddii ay ka bato bixintooda, haddiiba ay jirtay, oo laga siiyey shaqalaha saamiyada oo ay ku jirto qadar kasta oo la siiyey si loogu hibeeyo xaq ama la dooransiiyo helid saami;
- h) Qadarka faaido kasta oo uu ka helayo qof shaqaale ahi wareejinta xaq ama doorashaddain uu guddoomo saami iyadoo la marayo nidaamka saami siinta shaqalaha.

2. Iyadoo ay jirto Farqada (1),Dakhliga shaqo ee shaqaale kuma jiraan-

a) Kharashka uu ku galay loo shaqeeyey dhaqdhaqaaq kasta oo uu kaga baxay ama ku So galay Somaliland isagoo magacaabaya ama shaqo gabagabaynaya, haddii shaqaalaha-



I. Laga soo shaqaaleeyey ama laga keenay dibada Somaliland;

II. Ujeedada kaliya ee uu u joogay Somaliland ay ahayd in uu adeego loo shaqeeyaha;

III. Aanu ahayn muwaadin reer Somaliland ah;

b) Cawad celin ama celin kasta ee kharashaadka caafimaad ee shaqaalaha;

c) Haddii Laga reebo marka Farqada (1) (e) la dabaqay, qadar kasta oo lagu Bixiyo ajuuro caymis ee nolosha shaqaalaha iyadoo taasi tahay danta shaqaalaha ama mid kasta oo kamida ku tiirsaneyaashiisa;

d) Gunno kasta oo loo siiyo, oo aan ka badnayn kharashka dhabta ah amaba laga yaabo in la galo ama gudid kharashaad qofka shaqaalaha ahi ku galo:-

I. Deganaanta meel la dagayo iyo sahay safar,

II. Cuntada iyo nafiska inta uu safarka ku jiro, Inta uu ku guda jiro gudashada waajibka shaqo.

c) Qiimaha cuntada ama cabitaan kasta oo uu loo shaqeeyuhu ku siiyo shaqaalaha goobta shaqada taasoo oo loogu danayayo kaliya shaqala wakhtiga buuxa shaqeeya.


d) Faaido kasta oo ugu deeqay loo shaqeeyuhu shaqaalaha bil gudaheed,haddii qiimo wadareedka faaiidada uu siiyey loo shaqeyuhu shaqaalaha bishaas uu ka yar yahay toban kun oo shilin;ama

e) Qaadhaan kasta ama wax la mida oo uu ku bixiyey loo shaqeeyuhu sanduuqa hawl gabka,taas oo faaido u ah shaqalaha ama cid kasta oo kamida ku tiirsane/ku tiirsanhiisa.

3. Sida qodobkani u jeedo, qiimo kasta oo faaido waxaa lagu goynayaa si waafaqsan shaxda lixaad ee xeerkan.
4. Haddii qiimaha Farqada (1)(d) lagu dabaqo oo loo shaqeeyuhu bixiyo muddo toban ah ama ka badan qadar ka mida dakhliga shaqada xisaabteedu waxay noqonaysaa sidan soo socota: Ax75 boqolkiiba Marka **A** ay tahay wadarta qadarka uu helay shaqaale taas oo Farqada (1) (d) lagu dabaqay.
5. Iyada oo loo jeedo Farqada (2) Agaasimaha Shirkaddu waa shaqaale wakhti buux kaliya ah, haddii agaasimuhu:-
  - (a) Looga baahdo in uu galiyo ugu badnaan ama gabi ahaanba wakhtigiisa ama wakhtigeedda adeega shirkadda maamul ahaan ama farsamo ahaan;
  - (b) Aanu lahayn dulsaar ka badan boqolkiiba shan ee mulkiyadda asalka ah ee shirkadda;
6. Iyadoo looga danleeyahay qodobkan, qadar ama faaido lagu helay si la xidhiidha shaqo, haddii ay:-
  - (a) Uu bixiyey loo shaqeeye ama cid saddexaad oo uu qorsheeyay loo shaqeeyuhu ama welkiisu ;
  - (b) La siiyey shaqaale ama wehelka shaqaalaha;
  - (c) Loo siiyey marka loo eego shaqo hore, mid hadda ah ama shaqo laga rajo qabo.
7. Qadar lacageed oo ka baxsan dakhliga shaqada ee shaqaalaha sida ku dhigan Farqada (2) ama (4) waana dakhliga shaqaale oo ka reeban.
8. Qodobkan:-
  - a) “Habka saami qaadashdashaqaalaha” Waxa loola jeedaa heshiis ama isku duba rid taas oo:-
    - (i) Shirkad lagu waajib yeelay in ay u soo saarto saamiyo shaqaalaha shirkadda ama shirkad la jirta; ama
    - (ii) Shirkad lagu waajib yeelay in ay u soo saarto saamiyo amaano-hayaha amaano-haynta iyadoo heshiiska amaano hayntu uu ku waajibinayey

amaanohayaha in uu ku wareejiyo saamiyo shaqaalaha shirkadda ama weheliyaha shirkadda iyo

(b)Kharashka dawadda- oo ay ku jirto ajuro kasta ama qadar kasta oo lagu bixiyey caymis caafimaad.



**Qodobka 71<sup>aad</sup>**  
**Dakhliga Hantida**

(1) Dakhli hanti waxa loola jeeddaa-

- a) Faai'ido qaybsi kasta,,lacagaha haftada lagu helo, dakhliga khayraadka dabiiciga ah,kirooyinka, sadooyinka (royalties) iyo dakhli kasta oo kale oo qof uu ka helo bixinta, isticmaalka ama ka faaidaysiga hanti qof kale.
- b) Qiimaha hadyad kasta oo ka soo gashay qof si la xidhiidha, bixinta, isticmaalka ama ka faa'ideysiga hantida;
- c) Wadarta digaalo kasta oo loo sameeyay sanduuqa hawl gabka inta lagu guda jiro sanad dakhliyeedka oo uu sameeyay loo shaqeeye cashuurta ka reeban;
- d) Dakhli kasta oo kale oo soo gala qof;

Laakiin kuma jiraan qadar kasta oo ka yimaadda ganacsi, shaqo ama dakhliga cashuurta ka reeban;

(2)Qadar ka mida dakhliga hantida ee lagu sheegay Farqada

(1) (a) sifeheeday ahaanayaan oo ah Faaiido qaybsi, lacagaha haftada lagu helo, dakhliga khayraadka dabiiciga kirooyinka ama fadhiisin (royalties) ee leh ujeedooyin kasta oo xeerkani u tixraacay dakhli ahaan.

**QAYBTA 4**  
**DAKHLI AAN LA CASHUURAYN IYO KA JARITAANADA**

**Qodobka 72<sup>aad</sup>**  
**Dakhli aan la cashuayn**

Qadaradan soo socda lama cashuurayo:-

- a) Dakhliga hayado diiwaan gashan.

- b) Dakhliga urur kasta ama qof ku leh dhowrsanaan si waafaqsan sharciga Somaliland ee dhowrsanaan diblomaasiyiinta ilaa iyo xadka uu dingeey nidaamku iyo amarada lagu soo saaray si waafaqsanaanta.
- c) Dakhliga shaqaale ee rasmiga ah ee uu qof ka helay shaqo dawliya oo dawlad shisheeye siisey-
- I. Uu qofku u yahay qof aan deganayn ama uu yahay qof degan kaliya ay sabab u tahay in uu qabto adeegaas.
  - II. Dakhligiisana ay waajib tahay in laga bixiyo maalka dawliga ah ee Wadanka.
  - III. Dakhligiisuna uu yahay uu yahay mid ay cashuurayso dawladaasi;
- d) Habeen dhax kasta oo laga bixiyo meel ka baxsan Somaliland; oo la siiyo qof ka Shaqeeya Somaliland oo ergo shisheeya ah.
- e) Dakhliga masuuliyiinta dawladaaha hoose.
- f) Dakhliga ururada laga reebay, oo aan ahayn-
- I. Dakhli hanti, kuma jirto kirada ay helaan ururada laga reebay cashuurta ee la xidhiidha Hantida ma guurtada ah iyadoo kiradaas uu ugu isticmaalayo mulkiiluhu si gaara ah Hawlaha ururkaas ee lagu sheegay qeexitaanka **“ururada laga reebay”** ee Qodobka 2aad; ama
  - II. Dakhliga ganacsi ee aan la xidhiidhin shaqada aasaaska u ah salka jiritaanka ururka ;
- g) deeq kasta oo wax barasho, taas oo agaasimuhu ku qancay in loo sameeyey si niyad san si loogu suuro galiyo ama looga caawiyo cida gudoontay in ay wax ka barato hayad waxbarasho ama cilmi baadhiseed oo la aqoon san yahay.
- h) Qadar kasta oo lagu keenay qaab nafaqo ama kharashaad ku yimid amar garsoor ama heshiis furiin oo qoran.
- i) Qiimaha hanti kasta oo lagu helay hadyad ahaan, dardaaran, ikhtiraac ama dhaxal oo Aanu ku jirin dakhli ganacsi, shaqaale, ama hanti
- j) Faa'id kasta oo raasamaal oo aanuu ku jirin dakhli ganacsi.

- k) Dakhli shaqo oo uu qof ka helay ilaa xadka lagu bixiyay heshiis cawimaad Farsamo, kaas oo:-
- I. Shakhsigu uu yahay midaan deganeyn dalka ama u jooga kaliya si uu u guto waajibka ku dhigan heshiiska, iyo
  - II. Wasiirka oo qoraal ahaan ku waafaqay heshiiska tusmooyinka cashuurta.
- l) Dakhli ilo Shisheeye uu ka helay-
- I. Deganaanshaha Somaliland wakhti gaaban.
  - II. Qofka, kaas oo faqradda (c)ama (k) dhigeysa;ama
  - III. Xubin qaraabadda soke ee qofka lagu xusay faqradda (i) ama (ii)
- m) Hawl gab:-
- n) Lacagta marqudha uu siiyo sanduuq hawl-gabku ee degan dalka xubin sanduuqa ka mida ama ku tiirsanaha xubin sanduuqa ka mida.
- o) Dakhliga caymiska nafta ee uu bixiyo qofka ku hawla caymiska gaacsiga nafta.
- p) Dakhliga shaqaalenimo ee qofka u shaqeeya ciidamada qalabka sida ee Somaliland, ciidamada bileyska Somaliland, ciidamada asluubta Somaliland, oo aan ahayn qof u shaqeysta qaab rayid;
- q) Dakhliga dawlada jamhuuriyadda Somaliland iyo dawlada wadan kasta oo kale.
- r) Dakhliga bangiga dhexe ee Somaliland.
- s) Dakhliga maalgashiga hab wadajir ilaa xadka dakhligu yahay mid loo qaybiyey ka qaybqaateyaasha maalgashiga habka wadajira.

### **Qodobka 73<sup>aad</sup>**

### **Kharashaadka Dakhliga ka yimi**

1. Iyadoo la raacayo xeerkan, ulla jeeddada ah in la xaqiijiyo dakhliga la cashuurayo ee qofka sanad dakhliyeedka waa in ay jirto qadar laga goynayo:-
  - a) Dhamaan kharashaadka iyo khasaaraha uu galay qof inta lagu jiray sanad dakhliyeed, illa inta kharashka ama khasaaraha ay ahaayeen qaar lagu



galay soo saaridda dakhligaas oo ka mida wadarta dakhliga.

- b) Sida lagu gooyay Qaybta 5 ee khusaysa faaiidada iyo khasaaraha, khasaaraha lagu galo inta hantida ee qof galo inta lagu guda jiro sanad dakhliyeedka, ha ahaato ama yay ahaanin hantidaasi mid ku jirta xisaabaadka dakhliga caadiga ah ama Dakhliga raasamaalka ah.

2. Haddii aanu xeerku si kale u dhigin, lama ogola in la gooyo:-

- a) Kharash kasta ama khasaare uu galy qof illa iyo inta ay yihiin kuwa leh nooc gaara ama arrimaha gudaha qoyska la xidhiidha.
- b) Iyadoo la raacayo Farqada (1), kharash kasta ama khasaare kasta oo leh nooc raasamaal, ama qadarka kasta oo ka mida inta ay joogto hantidaasi.
- c) Kharash kasta ama khasaare kuwaso ku soo noqonaya qaab caymis, heshiis ama magdhaw.
- d) Cashuur dakhli oo lagu bixinayo dawladda Somaliland ama wadan Shisheeye.
- e) Dakhli kasta oo la galiyay sanduuqa Qasnada ama qaab uun loo raasamaaleeyey.
- f) Qiimaha hadyad la siiyey si toosa ama si dadban shakhsi haddii hadyaddu aanay ki jirin wadarta dakhliga; ee qofka
- g) Guno kasta oo lagu siiyo qofka shaqaalaha ah kharash u celin ama dayn ka bixin la xidhiidha gurayaynta shaqaalaha iyo kharash kasta oo kale oo shaqaalaha lagu siiyo guriyaynta.
- h) Ganaax kasta ama ciqaab la mid oo la siiyo dawladda kasta ama qayb hoosaad siyaasadeed ee dawladda, marka la jabiyo sharci kasta ama xeer-hoosaad.
- i) Ku deeqid ama bixin la mida oo la siiyey sanduuqa hawl gabka oo uu bixiyey shaqaale, haday faaido u tahay shaqaale ama faaido qof kale.
- j) Abaal gud ama bixin la mida oo la siiyey shakhsi ku hawlan ganacsiga caymiska nolosha shakhsiga abaalgudka bixiyey ama nolosha qof kale.

- k) Qadarka hawlgab loo siiyey qof kasta; ama
- l) Masruuf kasta ama gunno lagu bixiyey si waafawsan amar maxkamadeed ama heshiis furriin oo qoran.
3. Qodobkan, kharash kasta oo leh qaab gaara ama qaab qoys oo uu qof galay, waxaa ku Waxa ka mida:-
- a) Kharashka lagu galay si loo xanaaneeyo qof iyo goyska qofkaas ama kuwa la degan.
  - b) Kharashka shaqo tagidda.
  - c) Kharashka dirayska shaqada oo aan ahayn dharka la xidho marka shaqada laga baxo; iyo
  - d) Kharashka waxbarashada qofka taasoo wax xidhiidha aan la lahayn meheradda qofka, iyo kharashka waxbarasho ee lagu gaadhayo in lagu helo heer jaamicadeed (degree) ha khuseeyo ama yuu khusaynin meheradda qofka.
4. Haddii aanu xeerkani si kale u dhigin, qaybta 5 taas oo xidhiidh la leh hab xisaabeedka cashuurta, waxa lagu fuliyaa si loo goamiyo marka kharashka iyo khasaaraha xeerkani ujeedo la galay.
5. Sida ku jirta Qodobkani, “Hanti ganacsi” ka mid maaha badeecadda ganacsigu ama hantida qiima dhacaysa.

### **Qodobka 74aad**

#### **Kharashaadka Cuntada, Cabitaanka iyo Maaweelada**

Kharashaadka qofku ku bixiyo cunto, cabitaan iyo maawelo oo u ku soo saarayo dakhli ka mida wadarta dakhliga guud waxa loo aqoonsanayaa kharash waana la jarayaa, laakiin waa haddii kaliya oo:-

- a) Qiimaha cuntada, cabitaanka ama madadaaladda ay ka mid yihiin dakhliga shaqada ee shaqaalaha sida ku xusan Qodobka 70aad (1)(b) ama ka baxsan dakhliga shaqada sida ku xusan Qodobka 70aad (2)(d) ama (e) ama
- b) Ganacsiga qofka waxa ka mida bixita cunno, cabitaan ama kharash mawelo iyadoo qofka la siiyey cuntada, cabitaanka iyo kharashka

maaweelada ay u tahay kharash ka baxsan inta uu ku shaqeeyo.

**Qodobka 75<sup>aad</sup>**  
**Daynta laga quustay**



1. Iyadoo la raacayo Farqada (2), qofka waxa loo ogol yahay in laga jaro dakhligiisa oo xisaabta laga saaro daynta soo xeroon wayday ee laga quustay sanad dakhliyeedka.
2. Si loo jaro daynta laga quustay waxa la ogolaan karaa oo kaliya:-
  - a) Haddii qadarka daynta ee la sheeganayaa ka mid yahay wadarta dakhliga guud ee qofka sanad dakhliyeed kasta ama
  - b) Haddii qadarka daynta ee la sheeganaya la xidhiidho lacag amaahasho inta lagu guda jiro hawlaha caadiga ee ganacsiga ee ay fuliyaan hayadaha maaliyaddu ee lagu soo saarayo dakhli ka mida wadarta guud ee dakhliga.
3. Qodobkan:-
  - a) Deyn gubatay, waxa loola jeeddaa-
    - I. Dayn la sheeganayo oo qofkuna qaaday talaabo kasta oo ku daba galayo siduu u soo Xerayn lahaa dayntaas taas oo qofku ka dib si macquul ah u rumaystay inaanay suurtoobayn ama aanay dayntu ku soo xeroonayn.
    - II. Markay la xidhiidhinayo hay'ad maaliyadeed, deyn marka loo eego ku talagal khasaare oo markay dhab noqoto aanay jirin wax lagu daboolo
  - b) Dayn la sheeganayo macnaheedu waxa weeyi xaqa loo leeyay in qofkii dib loogasiyo lacagihii dhigaalka ee la dhigtay hayadaha Maaliyadda, ama dayn maqan la helo, iyo wixii la mida.

**Qodobka 76<sup>aad</sup>**

**Kharashaadka la xidhiidha Lacagaha aan wali  
la bixin**

Iyadoo la raacayo xeerkan, qofka lacagi ku maqan tahay waxa loo ogol yahay in loo jaro xuquuqdiisa markuu gudayo lacagahaas oo ay ka mid tahay khidmadda adeegga, komishanka, qadimaadda iyo ganaaxa dib u dhaca gudidda inta lagu guda jiro sanad dakhliyeedka la xidhiidha xuquuqda lacagaha maqan taasoo qofku u galay inuu ku soo saaro dakhli ka mida wadarta guud ee dakhliga.

**Qodobka 77<sup>aad</sup>  
Dayactirka iyo Qalabka Fudud ee Raasamaalka**

1. Qofka waa loo ogol-yahay in laga jaro kharashka uu ku galay dayactirka hantida uu haysto ama isticmaalayo sanad dakhliyeedka taasoo uu ku soo saarayo dakhli ka mida dakhliga guud.
2. Qofka waa loo ogolyahay in laga jaro kharash uu ku galay inuu ku hanto hanti qiima dhacaysa qiima ka hooseeya (50 currency points).
3. Farqada (2) kaliya waxa lagu dabaqayaa, hantida qiima dhacaysa, haddii hantidu caadi ahaan ay iskeed u shaqaynayso oo aanay kaligeed ka mid ahayn in iswadata.

**Qodobka 78<sup>aad</sup>  
Qiima Dhaca Hantida**

1. Qofka waa loo ogolyahay, in kharash ahaan loo jaro qadarka qiima dhaca ee hantidiisa, qiimo dhacaysa oo aan ahayn hantida ku xusan Qodobka 77<sup>aad</sup> (2) lagu dabaqay inta lagu guda jiro sanad dakhliyeedka sida waafaqsan qodobkan.
2. Hantidda qiima dhacaysa waxaa loo kala qaybinayaa, afar heer sida ku dhigan qaybta 1aad ee shaxda (5) shanaad ee xeerkan, oo ay la socoto taciifada qiima dhaca ee ku munaasibka ah derejo kasta sida lagu cayimay qaybtaas.
3. Hantidda qiima dhacaysa ee qofka, waa in la isku leexiyaa hantida isku midka ah, qiima dhaca laga

jarayo hantida isku midka ee is raacsan xisaabintooda waxa la raacayaa qaacidadan soo socota;- **AxB**. Haddii:-

**A=Waa qiimaha la dajiyay ee hantida wada socota dhamaadka sanad dakhliyeedka iyo B= Waa tacriifada qiima dhaca ee ku haboon hantida intii israacsanba.**

4. Qiimaha dajisan ee hantida israacsan dhamaadka sanad dakhliyeedku waa wadarta;-
  - a) *Qiimaha dajisan ee hantida* israacsan dhamaadka sanad dakhliyeedkii hore marka la jaray ka dib kharashka la aqoonsaday sida waafaqsa Farqada (3) sanadkaas.
  - b) Qiimaha ay joogtay Hantidu oo la isku daray israacsanaanta inta lagu jiro sanad Dakhliyeedka oo laga jaray qiimaha hantida israacsan, qiimaha laga helay hantida la iibiyay oo aan ka hoosayni eber ee sanad dakhliyeedka lagu jiro
5. Haddii qadarka lacageed ee laga helay hantida laga iibiyay hantida israacsani inta lagu jiro sanad dakhliyeedka ay ka badato qiimaha u dajisan hantidaas israacsan dhamaadka san dakhliyeedka iyada oo aan la danaynaynin qadarkaas, dheeraadka waxa lagu darayaa dakhliga ganacsiga qofka ee sanadkaasi.
6. Haddii qiimaha dajisan ee hantida israacsani dhamaadka sanad dakhliyeedka, marka jaritaanada ku xusan Farqada (3) la jaro ay ka yaraato Shan (currency poinyt), waa laga jarayaa qadarka qiimahaas dajisan.
7. Haddii dhamaan hantida nooc ahaanta israacsan la khaarijiyo ka hor intaanu dhama Sanad dakhliyeedku, kharashka qiima dhaca waa la ogol yahay in laga reebo hadhaaga qiimaha diiwaanka ee hantidaas nooc ahaanta israacsan dhamaadka sanadka.
8. Haddii qofku uu galo, kharashaad aan la goynayn, in ka badan hal sanad oo Dakhliyeed ah, oo ku lug leh, hanti qiima dhacaysa, qodobkan ayaa lagu

dabaqayaa, iyado Lo qaadanayo, in karashkaas la galay sanad dakhliyeedyo kala duwan, taas oo la hantiyayo hanti gooni ah oo ka mid inta nooc ahaanta israacsan.

9. Qiimaha ay joogto hantida qiima dhacaysaa waxa lagu daray qiimaha hantida noo ahaanta Israacsan sanad dakhliyeedka adeegsiga hantidaas la bilaabay.
10. Marka hantidda qiima dhaaysa qayb ahaan oo kaliya la isticmaalo, sanad dakhliyeed si lo soo saaro dakhli, ka mid wadarta dakhliga, qiima dhaca lagu ogol yaha qodobkan ee la xidhiidha hantidaas si saami quman ayaa loo dhimi doonaa.
11. Iyadoo loo jeedo Farqada 4aad, (b) qiimaha uu joogay gaadiidka dhulku oo aan ahayn gaadiid ganacsi, maaha inuu ka bato qadarka ku dhigan qaybta labaad e shaxda shanada (5aad).
12. Marka gaadiidka dhulka ee lagu sheegay Farqada 4aad (b) uu yahay mid lag Xadiday Farqada 11aad, qofkaas waxaa loo tixgalinayaa inuu haysto labo hantiyood:-
  - a) Hanti qiima dhacaysa oo ah, gadiid dhul oo qiimaha uu joogay uu la mid yahay Qadark ay dhigayso qaybta 2aad ee shaxda 5aad ee xeerkan; iyo
  - b) Hanti ganacsi oo aan ahayn mid qiima dhacaysa, oo qiimaha ay joogtay uu la mid yahay, faraqa u dhexeeya kii ay joogtay iyadoo aan loo eegin Farqada 11aad ee qodobkan, oo loo tixraaco “qiimaha dhabta ah ee u joogo” iyo qadarka ku yaala qaybta 2aad ee shaxda 5aad ee xeerkan.
13. Haddii gaadiidka dhulka, ee Farqada 12aad lagu dabaqay la khaarjiyo, qofka, Waxa loo tixgalinayaa inuu khaarjiyay, mid kasta oo ka mid ah hantidaas lagu cayimay Farqadaas, qiimaha uu ka helay hantida uu kkaarjiyay waxa loo kala qaybshay labada qaybood ee hantida, oo ku salaysan saamiga qiimaha ay joogtay mid kastaa, sida lagu tilmaamay Farqadaas ee qiimaha dhabta ah ee hantidaasi joogto.

14. Marka la xisaabinayo qadar kasta oo faa'iido ama khasaare ee ka yimadda hantida la khaarriiyay oo lagu sheegay Farqada 12aad, (b) qiimaha ay joogto hantidu ee ah sida lagu gooyay ee waafaqsan faqradaas, waxa dhimaya qiima dhaca taas oo qofka u ogol:-

- a) Ay ahayd qiima dhacaysa oo ah gaadiid dhul.
- b) Ay hantidu ahayd hantida kaliya ee ku jirtay hantida nooc ahaan israacsan..

15. Qodobkan, gaadiid ganacsi waxa loola jeedaa:-

- a) Gaadiid dhul oo loogu talagalay inuu qaado xamuul (Rar) ka badan tan badhkii, ama waxa ka badan 13-qof oo rakaab ah.
- b) Gaadiid loo isticmaalo u kala gooshidda (Transportation) ama gaadhi loo kireeyo Ganacsi ahaan.

### **Qodobka 79<sup>aad</sup>**

#### **Lacagta la jarayo Bilowga**

1. Qofka adeegasada hanti la soo xushay marka ugu horaysa inta lagu guda jiro sanad dakhliyeedka waxa banana in wax loo jaro sanadkaas qadar leeg;-
  - a) Haddii hantida loo adeegsanayo meel ka baxsan agagaarka ku qoran qaybta 4aad ee shaxda shanaad ee xeerkan, ay ahayd 75% qiimaha ay joogtay hantidaasi markii la adeegsaday ama.
  - b) Xaalad kasta oo kale ay ahayd 50% qiimaha ay hantidu joogtay wakhtigii la galiyay adeega.
2. Qiimaha ay joogto hantidu ee Farqada 1aad lagu dabaqay waxa laga jarayaa qadarka jaritaanka lagu ogolaaday Farqadaas oo looga jeedo Qodobka 78aad (4) (b).
3. Qodobkan: "Shayga ah hantida la xushay" waxa loola jeeda warshad ama mashiino gabi ahaanba loo isticmaalayo in lagu soo saarayo dakhli ka mida dakhliga guud laakiin aanay ku jirin:-
  - a) Gaadiidka xamuulka iyo kuwa dad qaadka.
  - b) Agabka nooca caadi ahaan loo isticmaalo hawlaha guryaha. ama
  - c) Qalabka guryaha iyo xafiisyada, ee rakiban ama aan rakibnayn

4. Qofka adeegsi galiya dhisme cusub, markii ugu horaysay inta lagu jiro sanad dakhliyeed, waxa la ogol yahay in wax loo jaro sanadkaas qadar la mid ah 20% ee qiimaha uu joogay dhismahaasi markii la hawl galay.
5. Qiimaha uu joogo, dhismaha warshada ee Farqada 4aad, lagu dabaqay waxa laga jari karaa qadarka jaritaanka lagu ogolaaday Farqadaas ee ujeedada Qodobka 80aad
6. Haddii uu qof galo, kharash raasamaal isagoo balaadhinaya dhismo warshadeed oo jiray, qodobkan ayaa lagu dabaqayaa, sidii iyadoo kharashkaas lagu galay dhidmaha uu ahaa kharash raasumaal oo la galayay dhisme ka gaar ah kaas.
7. Iyadoo loo eegayo Farqada 4aad iyo 6aad, dhisme warshadeed oo cusub ama Balaadhinta mid hore oo jiray waxa loola jeeda; dhisme uu dhismihiisu bilaabmay, sanad dakhliyeedkasta ee waqtigaas khuseeya.
8. Qodobkan, dhisme warshadeed kuma jiro ama laguma darayo, dhisme ganacsi oo la Ansixiyay.

**Qodobka 80<sup>aad</sup>**  
**Dhismayaal Warshadeed**

1. Iyadoo la raacayo qodobkan haddii uu qof ku galo, kharash raasumaal sanad dakhliyeed kasta dhisme ah dhisma warshadeed oo dhismahaasna isticmaalayo qofkaasi inta lagu jiro sanad dakhliyeedka si u soo saaro dakhli ka mida wadarta guud ee dakhliga, waxa loo ogolaanayaa qofkaas in la jaro qiima dhaca dhismaha ee sanad dakhliyeedka iyada oo lagu xisaabinayo sida waafaqsan formuladan (**A x B x C/ D**)

Haddii – **A**=Tacriifada Qiima dhaca ee dhismahaas ee munaasibka ku ah lagu sar-gooyay qaybta 3aad ee shaxda 5aad ee xeerkan, **B**= kharashraasumaaloo lagu galay dhisme, **C**= tiradda maalmaha sanad dakhliyeedkaa ee la isticmaalayay hantida ama in la isticmaalo diyaarka u ahayd si loogu soo saaro



dakhli ka mida wadarta guud ee dakhliga, halka **D=** Tiradda maalmaha sanad dakhliyeed.

2. Iyadoo loo eegayo Farqada 3aad, haddii dhisme warshadeed qayb ahaan u isticmaalo qof inta lagu jiro sanad dakhliyeedka, isagoo u isticmaalaya, arrimo la cayimay, qadarka qiime dhaca ee la ogol yahay jaritaankooda si waafaqsan Farqada 1aad, waa in loo jaraa si saami quman.
3. Haddii dhisma warshadeed uu qayb ahaan kaliya isticmaalay qofku inta lagu jiray sanad dakhliyeedka, isagoo u isticmaalayay arrimaha la cayimay, isla markaana kharashka raasumaalka lagu dhisay qaybtaas uu ka mid yahay dhismahaas si loogu isticmaalo arrimo kale taasoo oo aan ka badnayn 10% wadarta kharashka raasumaalka ee lagu galay dhisidda dhismahaasi gabi ahaantii dhismahaasi wuxuu noqon doonaa mid loogu dhaqmaa dhaqmaadkii la cayimay Haddii qof ku galo kharash raasumaal isagoo hagaajinaya dhisme warshadeed sanad dakhliyeedka, waxa lagu dabaqayaa qodobkan waxana laga soo qaadayaa inuu ahaa kharash raasumaal oo sanadkaas lagu galay dhisidda dhisme warshadeed oo gooni ah.
4. Haddii qof ku galo kharash raasumaal isagoo hagaajinaya dhisme warshadeed sanad dakhliyeedka, waxa lagu dabaqayaa qodobkan waxana laga soo qaadayaa inuu ahaa kharash raasumaal oo sanadkaas lagu galay dhisidda dhisme warshadeed oo gooni ah.
5. Haddii dhisme warshadeed uu iibsado qof waxaa loo qaadanaayaa inuu qofkaasi galay Kharashkii raasumaal ee kii dhisay galay.
6. Qadarka jaritaan ee lagu ogolaaday qodobkan kama badan karo, xadiga qayb ahaan la dhimayo, waana inuu u dhigmaa kharashaadka la galay dhamaadka sanadkaas.

7. Haddii dhisme warshadeed uu khaarjiyo qofku inta lagu jiro sanad dakhliyeedka, qiimaha asalka ee uu dhismuhu ku fadhiyo sida xeerkani dhigayo waxa laga jarayaa jaritaanada loo ogol yahay qofka ee xeerkani dhigayo ee khuseeya dhismaha.
8. Haddii dhisme warshadeed la iibsado ama la sii iibiyo iyadoo uu la socdo dhulku, qiimaha dhulku wuxuu noqonaya faqiga u dhaxeeya lacagta lagu iibiyay iyo qiimaha dhismaha warshadda sida lagu qeexay Farqada (7).
9. Haddii Farqada 4aad la dabaqo, qiimaha qofka gudoomay ee khaarjinta dhismaha warshadeed waa in si macquul ah loogu qaybiyaa dhismayaasha warshadeed ee kala goonida ah ee kala cayiman sida uu qorayo Farqadaasi.

10. Qodobkan:-

a) Kharash raasumaal ka mid maaha.

(i) Kharashka lagu galay si loo helo hanti qiima dhacaysa oo lagu rakibay dhisme warshadeed

(ii) Ama kharash lagu galay helista xuquuq kasta ama dhul.


b) Isticmaalada tilmaaman, waxa loola jeeda isticmaalka lagu cadeeyay qaybta qeexitaanka dhisme warshadeed ee qodobka 2aad iyo

c) Hdhaaga Kharashka waxaa weeyi kharashka raasumaalka ee lagu galay dhisidda dhisma warshadeed oo laga jaray jaritaanada la ogol yahay oo dhan ee xeerkani dhigayo waa haddii dhismaha loo isticmaalay oo kaliya goor walb isticmaalka tilmaaman ee qoran ilaa intii dhismaha laga dhameeyay.

**Qodobka 81<sup>aad</sup>**  
**Qiimaha lagu bilaabay**

Qofka gala kharash isagoo bilaabaya ganacsi si uu u soo saaro, dakhli i ka mid wadarta dakhliga guud, ama

bilaaba inuu u bandhigo dadweynaha alaab ganacsi oo bilow ah, waa in loo ogolaadaa in laga dhimo qadar la mid ah 25% ee xadiga kharashka sanad dakhliyeedkaas la galay iyo sadexda sanadood ee xiga, sanad dakhliyeedka, kaas oo uu sameeyay qofkaasi.



**Qodobka 82<sup>aad</sup>**  
**Qiimaha Hanti aan Muuqan**

1. Qofka kharash ku gala helista hanti la taaban karo, oo jiritaankeedu leeyahay faa'iido la hubo, waa loo ogol yahay in wax laga jaro inta lagu jiro dakhli sanadeed kasta, oo hantidaas jirto oo faa'iidna leh, taas oo qofku uu gabi ahaanba isticmaalayo si uu soo saaro dakhli ka mid wadarta dakhliga guud, qadarka la jarayo waxa lagu xisaabinayaa si waafaqsan qacidadan soo socota  
**A/B** Hadii:-

**A=Waa kharashka la galay**

**B=Cimriga hantida oo sanado buuxa ah**

2. Haddii hantida la taaban karo uu khaarijiyo qof inta lagu gudo jiro sanad dakhliyeedka, qiimaha hantidaasi joogtay waxa laga dhimayaa jaritaanada loog ogolaaday qofka qodobkan ee la xidhiidha hantida.

**Qodobka 83<sup>aad</sup>**  
**Kharashka Cilmi baadhista Sayniska**

1. Qofka waa loo ogol yahay in laga jaro kharashaadka uu ku galay cilmi baadhis Saynis inta lagu jiray sanad dakhliyeedka uu hawsha ganacsiga waday, dakhligaas ka imanaya oo ka mida wadarta dakhliga guud.
2. Qodobkan:-
  - a) Cilmi baadhis saynis macnaheedu waa hawl gal kasta ee dhinacyada syniska dabiici ama aan dabiici aheyn oo lagu hormarinayo aqoonta dadka.
  - b) Kharashka cilmi baadhis saynis ee la xidhiidha qofka hawl ganacsi ahaan u wada, macnaheedu waa kharashka cilmi baadhis saynis oo uu sameeyay qof isagoo uga dan leh Inuu horumariyo ganacsigiisa qofka, waxa ku jira gacan ka gaysi

kasta oo uu sameeyay, mac-had cilmi baadhis saynis, oo loo isticmaalay si loo sameeyo cilmi baadhis iyadoo looga dan leeyahay in la horumariyo ganacsi qof, laakiin ka mid maaha

- I. Kharashaadka lagu galay si loo helo hanti qiimo dhici karta ama hanti aan la taaban karin
  - II. kharashaadka lagu galay helitaanka dhul ama dhisme.
  - III. Kharashaadka lagu galay iyadoo loo dan leeyahay, in la hubiyo jiritaanka , goobta, baaxadeeda iyo tayada khayraad dabiici ah
- c) Mac-had cilmi baadhis saynis waa urur, Mac-had, kuliyad ama jaamacad sameeya cilmi baadhis synis.

### **Qodobka 84<sup>aad</sup>**

#### **Kharashka Tababarka**

1. Loo shaqeeyaha waxa loo ogol yahay in laga jaro Kharashaadka uu ku galay tababarada ama waxbarashada sare ee heerka jaamicadeed inta lagu guda jiro sanad dakhliyeed, wax aan badanayn isugayntooda shan sano ee muwaadinka ama qofka rasmi u deggan dalka JSL oo aan ahayn weheliyaha loo shaqeeyaha, oo loo shaqeeyuhu ku shaqaaleeyay hawsha ganacsi, dakhliga ka imaanaya oo ka mida wadarta guud ee dakhliga.
2. Sida uu dhigayo Qodobkani, degaaanka rasmiga ah macnaheedu waa qof kasta oo Somaliland ku sugnaa muddo ama wakhtiyo isugu gayn gaadhaya 2-sanadood iyo wixii ka badan.

### **Qodobka 85<sup>aad</sup>**

#### **Caawimooyinka Sama-fal**

1. Qofka waa loo ogol yahay in wax laga jaro hadyad uu siiyay urur inta lagu jiro, sanad dakhliyeedka oo si waafaqsan qeexitaanka ururada cashuurta ka reeban.
2. Iyadoo loo eegayo Farqada laad qiimaha hanti hadyaddu, waa mida yare ee;-
  - a) Qiimaha hantida markii hadyadda la bixinayay.
  - b) Inta uu ka bixiyay qofku hantidaas hadyadda ah.

3. qadarka jaritaanka ee lagu ogol yahay si waafaqsan Farqada 1aad ee sanad Dakhliyeedkaasi waa in aanu ka badan 5% ee dakhliga cashuurta la saarayo ee qofkaas oo la xisaabiyay ka hor intaan qorshaha lagu darsan qadarka la jarayo ee waafaqsan qodobkan.

### Qodobka 86<sup>aad</sup>

#### Beeraha

1. Kharashaad uu qof ku galay inuu ku helo beeris, waxay ku jira, hantida nooc ahaan israacsan ee qaybta 4aad ee ku xusan Qodobka 78aad ee sanad dakhliyeedka, kaas oo ah sanadka kharashka iyo qiima dhacaba la galay.
2. Iyadoo la raacayo Farqada 3aad qofka ku hawlan ganacsiga, qodaal bustaan ah Somaliland gudaheeda si uu u soo saaro dakhli ka mida wadarta guud ee dakhliga oo ku galay kharash raasumaal
  - a) si uu u helo ama u aasaaso qodaal bustaan beereed.
  - b) ama uu u dhiso guri cagaaran (Green House).Waxa loo ogol yahay jaritaan, qadarkeedu la mid yahay 20% oo xadiga kharashaadka sanad dakhliyeedkaas oo ahaa qaar lagu galay, lana galiyay 4-sanad dakhliyeed ee soo socda taas oo beerista iyo guriga cagaaranba loo isticmaalayoganacsi beereed bustaan ahoo qofkaas ku hawlan yahay.
3. Kharashaadka nooca raasamaalka ee lagu galay ku aasaasidda qodaal ah bustaan beereed waxa ka mida kharashka lagu galay banaynta iyo biyo saarista dhulka.
4. Qodobkan:-
  - a) **“Qodaal”** waxa looga jeedaa goob shaqo iyo hanti dhismayaal ma guurto ah oo lagama maarmaan u ah habsami u socodka beerta ama sagaro (Beer gacmeed kooban) waraabka abuurka ama qodista,

biyaha iyo korontada la galiyay beerta inta weegaarka beertu yahay iyo hawl galadda kale ee daruuriga u ah si loo soo saaro dakhli ka mida wadarta dakhliga guud, laakiin aanay ku jirin:

- I. guryaha beerta
  - II. hantida qiima dhacaysa.
- b) Bustaan beereed waxa ka mida:-
- I. Beerista, shiniyaynta, haramaynta, baaqbaaqa iyo waxyaabaha la midka ah
  - II. Beerista iyo baaq baaqa, fangaha (Fungi)
5. Ku Shiniyaynta iyo haramaynta cimiliiyinka oo aan ahay carada, si dabiicay ah ama hab Aan dabiici ahay.

### **Qodobka 87<sup>aad</sup>**

#### **Kharashka Macdan Sahminta**

Qofka ku hawlan hawl macdan sahamin ah si uu u soo saaro dakhli ka mida wadarta dakhliga guud waxaa loo ogol yahay jaritaan kharash kasta oo nooc raasamaal ah oo lagu galo baadhitaanka helitaanka iyo tijaabinta ama in lagu guulaysto gaadhista kayd macdaneed Somaaliland gudaheeda.

### **Qodobka 88<sup>aad</sup>**

#### **Qaybinta jaritaanada**

1. Dhimista la xidhiidha soo saarista hal nooc oo dakhli waxa si suura gal ah loogu qaybin doonaa noocyada dakhli ee ay la xidhiidhaan.
2. Haddii qofku uu helo, wax ka badan hal nooc dakhli, jaritaanka loogu ogolaaday qodobka 86 aad waa in hab tacriifaysan loogu qaybiyaa qayb kasta oo dakhli.

### **Qodobka 89<sup>aad</sup>**

#### **Soo Xawilaad Khasaare**

1. Iyadoo la raacayo qodobkan, haddii sanad dakhliyeed qadarka dakhli ee ka mida wadarta dakhliga guud ee cashuur bixiye, kharashka laga jarayo ee loo ogol yahay uu ka badato, inta dheeraadka ah oo xeerkan ku xuso “khasaaraha la qiimeeyay”, waxa loo xawilayaa iyada laga jarayo dakhliga la cashuurayo ee

cashuur bixiyaha ee la go'aamiyo sanad dakhliyeedka xige.

2. Haddii, sanad dakhliyeed isugaynta dakhliga cashuur bixiyahu ka helo beerasho isagoo kali ah ay ka badato kharashaadka cashuur bixiyaha loo ogol yahay in loo jaro oo la xidhiidha soo saarista dakhli, qadarka dheeraadka ah ee xeerkan ku xuso "Khasaare Beereed ee la Qiimeeyay" laga jari mayo dakhli kasta oo kale oo cashuur bixiyuhu leeyahay ee sanad dakhliyeedka, laakiin waxa loo xawilayaa oo laga jarayaa dakhli beereedka la cashuurayo ee cashuur bixiyaha ee la go'aamiyay sanadka xiga.
3. Qadarka Qiimayn khasaare kasta ee cashuur bixiye oo la xawilay si waafaqsan qodobkan waxa dhimaya dheef kasta oo cashuur bixiyaha uga timaadda ruqsad ay siiyeen ama heshiis meel dhexe uu la gaadho kuwa daynta bixiya inta lagu jiro xaalad musalafnimo, haddii qaanta cashuur bixiyaha ee dayn bixiyayaashaas meesha laga saaro ama la dhimo, waxsa shardi in qaamahaasi ay ahaayeen kuwa lagu soo saarayay dakhli ka mida wadarta guud ee dakhliga.
4. Haddii uu cashuur bixiyuhu uu galay in ka badan hal nooc oo khasaare ah, dhimista ku sheegan Farqada 3aad, waxa lagu dabaqayaa tacriifada nooc kasta oo khasaare.
5. Farqada 1aad waxa si gaar ah loogu dabiqli doonaa dakhliga laga helo ilo Somaliland ah iyo dakhliyada ilo Shisheeye
6. Qodobkan:-
  - a) Dakhli beereed oo la cashuurayo, waxa loola jeeda wadarta dakhli beereed ee cashuur bixiyaha sanad dakhliyeed oo laga dhimay jaritaano kasta oo lagu ogolaaday xeerkan sanadkaas oo la xidhiidha soo saarista dakhligaas iyo.
  - b) Dakhli beereed waxaa looga jeedaa dakhli ganacsi oo laga helay hawl gal beereed oo la sameeyay.

**QAYBTA 5**  
**NIDAAMKA XISAABINTA CASHUURAHA**  
**Qodobka 90<sup>aad</sup>**

## **Sanad Dakhliyeedka la badalay**

1. Cashuur bixiyuhu wuxu qoraal ku codsan karaa inuu isticmaalo sanad dakhliyeedka cashuur bixiyahaasi uu ku badashay oo muddadiisu dhan tahay 12-bilood oo aan ahayn sanad dakhliyeedkii caadiga ahaa iyadoo uu Agaasimuhu isagoo raacaya farqada 3aad qoraal ku ogaysiinaya, ansixinta codsigaas.
2. **c**ashuur bixiyaha loo ogolaaday si waafaqsan Farqada 1aa inuu isticmaalo sanad dakhliyeedka loo badalay wuxu ku codsan karaa qoraal ahaan in loo badalo sanad dakhliyeedkii caadiga ahaa inuu isticmaalo ama sanad dakhliyeed kale oo badal ah iyadoo Agaasimuhu, raacaya Farqada 3aad uu qoraal ku ogaysiinayaa ansixinta codsiga.
3. Agaasimuhu wuu ansixinayaa codsiyada kaliya si waafaqsan Farqada 1aad iyo 2aad haddii uu cashuur bixiyuhu muujiyo baahi qasbaysa, inuu isticmaalo sanad dakhliyeedka badalka ah ama inuu cashuur bixiyuhu badalo sanad dakhliyeed iyadoo ansixin kasta loo raaci doono shuruudaha uu Agaasimuhu ku sababaynayo.
4. Agaasimuhu wuxuu cashuur bixiyaha qoraal ku ogaysiin karaa inuu kala noqday ogolaashihii uu u siiyay isticmaalka sanad dakhliyeedka badalan ee loogu ogolaaday Farqada (1) ama (2).
5. Ogaysiiska uu agaasimuhu gaadhsiiyay si waafaqsan Farqada 1aad wuxu dhaqan galayaa, wakhtiga lagu cayimay ogaysiiska, ogaysiiska waafaqsan Farqada (2) ama (4) wuxuu dhaqan galayaa dhamaadka sanad dakhliyeedka badalan ee cashuur bixiyah ee ogaysiiska la gaadhsiiyay
6. Haddii sanad dakhliyeedka cashuur bixiyaha uu is badalo iyadoo ay sabab u tahay, Farqada 1aad, 2aad ama 4aad muddada u dhaxaysa, sanadkii ugu danbeeyay Oo sanad dakhliyeed buuxa ah ee ka horeeyay isbadalka iyo taariikhdiisii sanad dakhliyeedka la badalay uu bilaabmay waxaa loo tixgalinayaa sanad dakhliyeed ka gaar ah oo lagu magacaabi doono sanad dakhliyeedka kala guur ah.



7. Xeerkan, iyada oo la tixraacayo sanad dakhliyeed caadi oo gaar ah wuxuu ka mid yahay sanad dakhliyeed badelan ama sanad dakhliyeed kala guur ah oo ku xidhan inta lagu jiro sanad dakhliyeed caadi ah.
8. Cashuur bixiyaha ku qanci waayay go'aanka agaasimaha sida waafaqsan Farqada (1),(2) ama (4) wuu ishortaagi karaa oo kaliya go'aanka la diidan yahayracfaan baana laga qaadan karaa falkan.
9. Qodobkan "Sanad dakhliyeedka caadiga" waxa loola jeedaa muddada ku siman 12 bilood oo ku dhamaata 31 Diisamber.

**Qodobka 91<sup>aad</sup>**  
**Habka Xisaabeed**

1. Hab xisaabeedka cashuur bixiyuhu waa inuu waafaqaa, Habka Guud ee Xisaabaadka ee la isla ogol yahay.
2. Iyadoo la raacayo Farqada laad, haddii aanu Agaasimuhu si kale u farin, xaalad gaar ah awgeed, cashuur bixiyuhu wuxuu ku xisaabtami karaa isagoo ujeedo bixin cashuureed leh hab dayn bixin ama aan ahayn ee naqad qaadasho ah.
3. Cashuur bixiyuhu wuxuu qoraal ahaan ku codsan karaa, in wax laga badalo hab xisaabaadka, iyadoo Agaasimuhuna ogaysiis qoraal ah ku ansixinayo codsigaas lakiin waa haddii lagu qanco oo kaliya in isbadelku lagama maarmaan u yahay si cad u muujinta dakhliga cashuur bixiyaha.
4. Cashuur bixiyaha ku qanci waaya go'aanka qodobkan, wuu ishortaagi karaa oo kaliya go'aanka, la diiday racfaan baana la qadanayaa falkan.
5. Haddii hab xisaabeedka cashuur bixiyaha la badalo, waa in la isku toosiyaa dakhliga, jaritaanada, ama daymaha ama waxyaabihii kale ee sanad dakhliyeedka ee ku xiga isbedelka, si aan waxba looga tagin iyo inaan shayna hal mar wax ka badan la xisaabin.

**Qodobka 92<sup>aad</sup>**  
**Hab Xisaabaad ku salaysan naqadka ee Cashuur**  
**Bixiyaha**

Waa cashuur bixiyaha hab xisaabaadkiisa uu cashuurta ku bixiyaa yahay habka xisaabeed naqadka ah oo dakhligiisa iyo kharash bixintiisuba naqad yihiin.



**Qodobka 93<sup>aad</sup>**  
**Hab Xisaabaadka Xidhiidhsan ee Urursan ee**  
**Cashuur Bixiyaha**

1. Waa cashuur bixiyaha ay xisaabtiisa cashuur bixineed ku salaysan tahay xisaab urusan:-
  - a) Ka helayo dakhliga u maqan ee uu helayo cashuur bixiyuhu iyo
  - b) Galay kharash uu iska bixin karayo cashuur bixiyuhu
2. Iyadoo la raacayo xeerkan qadarku waa daynta maqan ee u heli doono Cashuur bixiyuhu marka ay u sugnaato inuu gudoomo, xitaa haddii wakhtiga la gudayo xaqa dib loo dhigo ama dayn gudiddu noqoto qayb qaybo.
3. Iyadoo la raacayo xeerkan, qadarka waxa loo tixgalinay lacag uu cashuur bixiyuhu bixin doono marka xaaladaha qaanta lagu go'aaminayo oo dhami dhacaan, markaasna qaantu inta ay tahay lagu xaqiijin karo saxnaan macquul ah laakiin ka hor laguma hawl gali karo dhaqaale ahaan wax la xidhiidh qadarka la gaadhay.
4. Iyadoo loo jeedo Farqada 3aad, gudasho dhaqaale waxay dhacdaysaa:-
  - a) Marka laga hadlayo helitaanka adeeg ama hanti wakhtiga adeega ama hantida la bixiyay,
  - b) *Marka laga hadlayo* Isticmaalka hantida, wakhtiga hantida la isticmaalay ama
  - c) Xaalad kasta oo kale, wakhtiga cashuur bixiyuhu uu iska wada guday dhamaanba dayntii.

**Qodobka 94<sup>aad</sup>**  
**Qadimaadyo Kharash**

Haddii jaritaano loo ogolaado in laga jaro kharashaad lagu sii galay adeeg la fidiyay ama dheefo kale oo gaadhaya wax ka bada(13) bilood, jaritaanadaas la

ogolaaday waxay saami quman ku noqonayaan sanadaha dakhliga ee la xidhiidha adeegaas ama dheeftaasi.

**Qodobka 95<sup>aad</sup>**  
**Xaq Sheegasho**



1. Cashuur bixiyaha, hab xisaabeedkiisa cashuur bixintu ku salaysan tahay naqadka waa inay ka mid noqotaa dakhliga guud kuwaas oo ah qadarka la helay ama la sheeganayo in laga jaro, qadarka la bixiyay iyada oo taasi jirto ayaa hadana cashuur bixiyuhu sharci ahaan aanu xaq u lahayn inuu gudoomo lacag ama aanay dusha uga saarnayn inuu bixiyo lacag, wa Haddii cashuur bixiyuhu dalbanayo inu sharci ahaan xaq u leeyahay inuu lacag Dayn ah gudoomo ama sharci ahaan waajib ku tahay inuu bixiy lacag dayn ah.
2. Haddii Farqada laad lagu dhaqmayo isu gaynta dakhliga cashuuri ku waajibtay ee Cashuur bixiyah Waxa lagu toosinayaa ama lagu dheeli tirayaa sanad dakhliyeedka ee Cashuur bixiyuhu lacag celinta ku sameeyay lacagta la helay ama ta mar hore laga soo Ceshaday lacag hore loo bixiyay.
3. Cashuur bixiyaha xisaabaadtiis cashuur bixintu ay ku salaysan tahay xisaab urursan waxa ka mida wadarta guud ee dakhliga, qadarka daynta soo xeroon doonta ama dalbashada ka jaritaanada lacagaha la bixin doono iyada oo taasi jirto ayaa hadana cashuur bixiyuhu aanu xaq u lahayn inuu gudoomo qadar lacageed ama dalbado in wax laga jaro lacag uu bixin doono, waa haddii cashuur bixiyuhu dalbanayo in uu sharci ahaan xaq u leeyahay inuu qadarka lacageed gudoomo ama dusha ka saran tahay inuu bixiyo.
4. Haddii Farqada 3aad la dabaqo, xisaabinta dakhliga la cashuurayo ee cashuur bixiyaha waxa lagu toosin doonaa sanad dakhliyeedka ee cashuur bixiyuhu joojiyay xaq sheegashada ah inuu gudoomo qadar lacageed ama joojiyo dalbashada xaqa oo loogu leeyahay inuu lacag bixiyo.

## **Qodobka 96<sup>aad</sup>**

### **Qandaraasyada Muddada dheer**

1. Xaaladaha xisaab urursan ee cashuur, bixiyaha, dakhliga iyo jaritaanada la xidhiidha Qandaraasyada muddad dheer waxa loo tixgalin doonaa boqolayda laga dhameeyay Qadaraaska sanad dakhliyeedka.
2. Boqolayda la dhamaystiray ee qadaraaska waxaa lagu goynayaa isbar bar dhigga kharashka lagugalay qandaraaska intaanu dhamaan sanad dakhliyeedku iyo qiyaasta inta lagu gali doono Qadaraaskaas ee loo gooyay bilawga qandaraaska.
3. Haddii uu dhamaado qandaraaska muddada dheri sanad dakhliyeedka oo la xaqiijiyo in Qandaraaskaas lagu khasaaray, agaasimuhu wuxuu fasaxayaa in loo celiyo khasaaraha sanad dakhliyadii ka horeeyay waxana laga jarayaa intii hore loogu daray wadarta dakhliga guud ee muddada qandaraaska sida waafaqsan Farqada (1) ee sanadahaas labilaabmay sanadka kana horeeya sanadka qandaraasku dhamaaday .
4. Qodobkan:-
  - a) Khasaaraha Sanadka Dhamaadkiisa ee la xidhiidha qandaraaska muddada dheer, wuxuu imanayaa marka la helo xaaladahan soo socda
    - I. Faaiidada la qiyaasay ee laga heli karo qandaraaska marka loo jeedo Farqada (1) uuka bato faaiidada dhabta ah ah oo ay ka mida khasaare ka yimaadda qandaraaska iyo
    - II. Farqiga u dhexeya faaiidada qiyaasta ah iyo faaiidada dhabta ah haddii uu ka bato inta lagu daraya dakhliga guud sida ku xusan Farqada (1) ee sanad dakhliyeedka qandaraasku dhamaaday iyo qadarka dheeraadka ah ee ku xusan Farqada (4) (a) (ii) uu yahay qadarka ugu dambeeya ee khasaaraha sanadka.
  - b) Qandaraaska muddada Dheer waxa loola jeedaa qandaraas wax soo saar, wax rakibid, ama dhisme ama wax ka dhaxeeya iyaga, hawlgalka

la xidhiidha adeega, oo aan sanad dakhliyeed gudihii lagu dhamayn Karin hawsha qandraaska, Sanadkaas oo ah ka qandraasku bilaabmay. oo aan ahayn qandraas la qiyaasay in lagu dhameeyo lix bilood gudahood (6) ka bilaabmaysa marka hawsha qandraaska la bilaabay,

### **Qodobka 97<sup>aad</sup>**

#### **Xaq Sheegasho**

1. Cashuur bixiyaha waxa looga ogol yahay in jaritaan looga sameeyo qiimaha badeecaddaganacsiga la khaarijiyay sanad dakhliyeedka.
2. Qiimaha ay ku fadhido badeecadda ganacsigu ee la khaarijiyay sanad dakhliyeedka waxa lagu xaqiijinayaa iyadoo la isku darayo qiimaha badeecadda la hayo sanadka bilawgiisa qiimaha badeecadda la soo iibsaday sanadka oo laga jaray qiim badeecadda hadhaaga ah sanadka dhamaadkiisa.
3. Qiimaha badeecadda sanad dakhliyeedka bilawgiisa la hayaa waxa weeyi
  - a) Qiimaha lagu xidhay badeecadda ganacsiga dhamaadka sanad dakhliyeedkii hore.
  - b) Haddii cashuur bixiyuhu ganacsiga bilaabo inta lagu jiro sanad dakhliyeedka, qiimaha suuqa ee ay joogtay badeecadda ganacsigu marka hawsha ganacsiga la bilaabay weeyi qiimuhuu haddi xitaa la soo iibiyay ka hor intaan hawsha la bilaabin
4. Qiimaha badeecadda ee sanadka dhamaadkiisa waxa weeyi hadba tii yar qiimaha ay ku fadhido ama qiimaha suuqa ee ay badeecaddu markaas joogto ee sanad dakhliyeedka dhamaadkiisa.
5. Cashuur bixiyaha hab xisaabeedkiisa uu cashuurta ku bixiyaa tahay habka naqadka wuxuu qiimaha badeecaddu ku fadhido u raacayaa (Habka aasaaska Qiimaha iyo Habka Midaynta Qiimaha waa mar kharashkii lagu soo iibiyay oo kaliya iyo mar kharashaadkii ilaa goobta lagu iibinayaa ku jiro. Cashuur bixiyaha hab xisaabaadkiisa uu cashuurta

ku bixiyaa tahay hab xisaabaadka urusan wuxuu ku xisaabiayaa qiimaha badeecadda ganacsiga wixii kharash ku baxay ilaa goobta ganacsiga.

6. Haddii shay gaar ah oo badeecadda ganacsiga ka mida la aqoonsan waayo, hab xisaabeedka badeecadaas ganacsigu wuxuu noqonayaa habka ah ta la soo hor iibsadaybaa hor baxaysa ama habka ku qiimaynta isku celceliska, lakiin hadba habka la doorto ee qiimayntu waxa lagu badali karaa oo kaliya ogolaasho qoran oo agaasimuhu bixiyo.

7. Qodobkan

- a) **Habka Midaynta qiimaha:-** waxa loola jeedaa marka la raaco nidaamka guud ee xisaabaadkay ee la isku waafaqsan yahay qiimaha badeecadda ganacsiga inay ka kooban tahay qiimaha alaabta caydhiin, Qiimahafarsamo yaqaanada badeecadda iyo wixii kharashaad ah ee kale
- b) **Habka celceliska Qiimaha:** - waxa loola jeedaa marka la raaco nidaamka guud ee xisaabaadka ee la isla ogol yahay in qiimaynta badeecadda ganacsigu ku salaysan tahay isku celcelis qiimaha badeecada la hayo.
- c) **Qiimaha shaqaalaha tooska ah:-** waxa loola jeedaa Qiimaha farsamo yaqaanada badeecadda soo saara
- d) **Qiimaha tooska ah ee alaabta:** - waxa loola jeedaa Qiimaha badeecadda caydhiin ee badeecadda ganacsiga laga sameeyo.
- e) **Qiimaha kor-socodka warshada costs”** waxa loola jeedaa wadarta kharashka wax soo saarka aanay ku jirin kharashka farsamo yaqaanada iyo badeecada caydhiin.
- f) **Habka iibka badeecada hore** waxa loola jeedaa marka la raaco nidaamka xisaabaadka guud ee la isla ogol yahay in qiimaynta qiimaha badeecadda ganacsigu inay ku salaysan tahay aragtida ah in badeecadda ganacsi la khaarijiyo hadba tii la soo hor iibsaday.
- g) **Habka Qiimaha Asaaska:** waxa loola jeedaa marka la raaco nidaamka guud ee xisaabaadka

la isku waafaqsan yahay in qiimaha badeecadda ganacsigu ay tahay isku darka qiimaha badeecadda caydhiin. Kharashka farsamo yaqaanada iyo kharashka jootada aan ahayn ee wax soo saarka iyo

- h) **Habka Qiimaha kor-socodka warshada isbadbadalaya** waxa loola jeedaa kharashka wax soo saarka oo si toos ah iskula badala xadiga wax soo saarka.

### Qodobka 98<sup>aad</sup>

### Faa'iidada iyo Khasaaraha Daynta Lacagaha Shisheeye


1. Faa'iidooyinka daynta lacagta Shisheeye waxay ka mid tahay wadarta dakhliga guud khasaaraha daynta Shisheeyena waxa lagu jarayaa oo kaliya si waafaqsan xeerkan.
2. Faa'iidada daynta Shisheeye ee uu cashuur bixiyuhu kasbaday sanad dakhliyeedka wuxuu ka mid yahay dakhliga ganacsiga ee cashuur bixiyaha sanadkaasi
3. Iyada oo la raacayo Farqada (4) iyo (6) khasaaraha daynta Shisheeye ee uu cashuur bixiyuhu galo inta lagu jiro sanad dakhliyeedka waxa loo ogol yahay cashuur bixiyaha in loo jaro sanadkaasi.
4. Jaritaan loogama ogola cashuur bixiyaha khasaaraha daynta Shisheeye ee uu galo cashuur bixiyuhu ilaa uu qoraal ku ogaysiinayo agaasimaha jiritaanka daynta ee keentay khasaaraha marka cashuur bixiyaha laga doonayo inuu xisaab celinta dakhliga keeno ee sanad dakhliyeedkaasi ee daytu timid ama mar kale hadba sida agaasimuhu fasaxo.
5. Farqada(4)lagu dabaqi mayo hayad maaliyadeed,
6. Haddii:-
  - a) Cashuur bixiyaha uu ku galo khasaare wax isdhaafsi dayn Shisheeye
  - b) Cashuur bixiye ama oof kale ka kasbado faaiido wax isdhaafsi kale ee dayn Shisheeye ah iyo
  - c) Midkood:-
    - I. wax is dhaafsigu uu keenay khasaaruhu lama galin doono,

7. Iyadoo la raacayo Farqada (9) , cashuur bixiyuhu wuxuu kasbanayaa faaiido Shisheeye haddii
- Cashuur bixiyuhu dayn qabe yahay, qadarka shilimaadka ee daynta Shisheeye ee uu cashuur bixiyuhu galay haddii ay ka badan tahay qadarka shilimaadka loo bahan yahay in lagu gudo daynta
  - Hadii cashuur bixiyuhu uu daymaysan yahay qadarka shilimaadka ah ee daynta Shisheeye ee uu leeyahay cashuur bixiyuhu ay ka badan tahay qadarka shilimaadka ah/ ee la siiyay cashuur bixiyahasi loogu gudo xaqiisa.
8. Iyada oo la raacayo Farqada (9) cashuur bixiye waxa uu galayaa khasaare dayn lacag Shisheeye haddii:-
- Cashuur bixiyuhu, yahay dayn qabe .qadrka shilimaadka ee uu ku galay daynta Shisheeye haddii ay ka yartay qadarka shilimaadka looga baahan yahay inuu daynta ku gudo ama
  - Cashuur bixiyuhu yahay loo daysane, qadarka shilimaadka ee daynta Shisheeye loogu daymaysan yahay ay ka badato qadarka Somaliland shillin ee loo siiyay in dayntiisa loogu gudo.
9. Xaqiijinta haddii cashuur bixiye ka kasbaday faaiido daynta Shisheeye iyo inuu khasaare ku galay, xisaabtan baa lala galayaa cashuur bixiyaha iyada oo la raacayo qandraaska difaac ee uu galay ee la xidhiidha daynta.
10. Daynta Shisheeye faaiidaa laga kasbanayaa ama khasaaraa lagu galayaa sanad dakhliyeedka ee daynta lagu qancay.
11. Qodobkan:-
- Daynta Shisheeye waxa loola jeedaa dayn ganacsi oo u badan lacag Shisheeye.
  - QANDARASKA DIFAACA waxa loola jeedaa qandraas cashuur bixiyuhu ku galo isagoo u dan leh inuu meesha ka saaro ama yareeyo khatarta lidiga ku ah natiijada maaliyadda taas oo u keeni



karta cashuur bixiyaha qandraas sarifkeeda lacageed isbad badalaya.

kale oo



## **QAYBTA 6**

### **FAA'IDADA IYO KHASAARAHA LA KHAARAJIYAAYO**

#### **Qodobka 99<sup>aad</sup>**

#### **Dabaqaada Qaybta 6aad**

Qaybtan waxaa loo isticmaalayaa sargooynta qadarka faaiido ama khasaare kasta oo ka imanaya khaarijinta hantidawaa haddii faaiidadu ka mid noqonayso wadarta dakhliga guud ama khasaaraha laga jarayo sida waafaqsan qodobkan.

#### **Qodobka 100<sup>aad</sup>**

#### **Faa'iidada iyo Khasaaraha Hanti la Khaarajiyay**

1. Qadarka faaiido ee ka imaanaysa hantida la khaarijiyay waa inta dheeraadka ka ah wixii laga helay khaarijintu ee ay dheertahay qiimaha ay ku fadhido hantidaasi marka la khaarijiyay.
2. Qadarka khasaaraha ka imaanaya khaarijinta hantidu waa inta qiimaha ay ku fadhidaa ka badan tahay wixii lagu khaarijiyay marka hantidaasi la khaarijinayay.

#### **Qodobka 101<sup>aad</sup>**

#### **Khaarajin/Bedelaad**

1. Cashuur bixiyaha waxa loo aqoonsanayaa inuu hanta khaarijiyay marka hantidaasi
  - (a) La iibiyo, la badasho, la celiyo, ama uu qaybiyo cashuur bixiyuhu
  - (b) Uu wareejiyo cashuur bixiyuhu si hadyad ahaana
  - (c) U baabiyo ama ka lunto
2. Khaarijinta hantida waxaa ka mida khaarijinta qayb ka nida hantida
3. Haddii agaasimuhu ku qanco in cashuur bixiyuhu
  - (a) Hantidii ka badalo habka isticmaal cashuuri ku waajibto una badaklo hab isticmaal aanay cashuuri ku waajbinama

- (b) Hantidii u hantida u badalo hab isticmaal aanay cashuuri ku waajibin una badalo hab cashuuri ku waajibto. Cashuur bixiyaha waxa loo aqoonsanayaa inuu khariijiyay hantida marka isbedelka loogu sameeyay qadar leeg qiimaha suuqa ee hantida markaasiisla markaabana waxa loo baahanayaa qiimaha ay ku fadhido oo leeg qiimahaas la midka ah
4. Qofka aan hore u daganayn dalka ee noqda qof dalka daggan waxa loo aqoonsanayaa inuu helay dhamaan hantida oo aan ahayn hantida la cashuurayo oo uu leeyahay qofku marka uu dagayay dalka iyagoo markaas ku qiimaysan qiimaha ay ka joogaan suuqa.
  5. Qofka marka hore dalka daganaa oo guura waxa loo aqoonsanayaa inuu hantidiisii oo dhan khaariijiyay oo aan ka ahayn kuwa la cashuurayo oo uu qofku iska lahaa markuu guurayay iyagoo ku qiimaysan qiimaha ay markaas ka joogaan suuqa.
  6. Haddii Farqada (5) si kale u dabaqin
    - (a) Inuu ujeedo mutaqbalka inuu dib u hanto mansabkiisii daganaasha dalka
    - (b) Inuu agaasimaha u keeno damaanad ku filan oo uu kaga qancayo qaan cashuureed oo kasta oo si kale uga soo bixi karta si waafaqsan Farqada (5) Agaasimuhu wuxuu qofka qoraal ugaga dayn karaa dabaqaadda Farqada (5)
  7. Qodobkan Hantida la cashuurayo waxa loola jeedaa hantida khaarijinteeda ay faaiido ka imaanayso oo ka mid noqonaya wadarta dakhliga guud ama ka imanayo khasaare la jarayo ha ahaado qof daggan dalka ama uu ahaanin.

**Qodobka 102<sup>aad</sup>**  
**Qiimaha uu u fadhiyo**

1. Iyada oo la raacayo qodobkan, qodobkani wuxuu aasaasayaa qiimaha ay ku fadhido hantidu oo ujeedada xeerkan ah.
2. Qiimaha ay ugu fadhido hantida u soo iibsaday, u soo saaray, ama u dhisay cashuur bixiyuhu waa qadarka uu ka bixiyay ama galiyay hantidaas, oo ay ku jirto kharashaadkaraacsan ee raasumaaliga ah ee la galay si loo helo handidaas, waxana ka mida inta ay ka

joogto suuqa marka la hantiyay oo ah wixii laga bixiyay.

3. Iyada oo la raacayo Farqada (4), qiimaha ay ku fadhido hantida lagu hantiyay wax isdhaafsi durugsan ama hore waa qiimaha ay suuqa ka joogto markii la hantiyay.
4. Qiimaha ay ku fadhido hantida lagu hantiyay wax isdhaafsiga lagu fasiray Qodobka 103 (2) waa qadarka la bixiyay ee uu u arko Farqadaasi ee uu helayo qofka hantida iska khaarijinaya.
5. Haddii qayb ka mida hantida la khaarijiyo, qiimaha ay ku fadhido hantidu waxa loo qaybinayaa qaybta la khaarijiyay iyo qaybta hadhay si waafaqsan qiimaha suuqa ee ay kala joogeen markii hantida la hantiyay.
6. Haddii aan si kale xeerkan loogu dhigin, kharashka lagu galo badalaadda ama wanaajinta hantida ee aan waxba laga jarin waxa lagu darayaa qiimaha ay ku fadhido hantidu
7. Haddii hantiyidda hantida ee cashuur bixiyahu ay u taagan tahay kasbashada qadar ka mida wadarta guud ee dakhliga, qiimaha ay ku fadhido hantidu waa qadark ka mida wadarta dakhliga guud oo lagu daray qadar kasta oo cashuur biuxiyuhu ka bixiyay hantida.
8. Haddii helitaanka hantida ay u taagan tahay kasbashada qadar aanay cashuuri ku waajibin, qiimaha ay hantidu ku fadhidaa waa qadarka aanay cashuuri ku waajibin oo lagu daray qadar kasta oo cashuur bixiyuhu ka bixiyo hantida.

### **Qodobka 103<sup>aad</sup>**

#### **Xeerarka Gaarka u ah Lacagaha la gudoomo**

1. Lacagaha laga gudoomo hanti khaarijinta waxa ka mida qiimaha suuqa ee maalinta khaarajinta wixii laga helo.
2. Haddii hantida laga iibiyo qofka shirkadda la ah ama mar hore la isdhaafsaday oo aan ka ahay hantida laga dhintay ee loo wareejinayo ammaano haye ama dhaxle, qofka hantida khaarijinaya, waxa lagu xusaya

qodobkan “khaarijiye”, waxa loo arki doonaa inuu gudoomay lacaag leeg hadba tii badan ee;

(a) Qiimaha ay ugu fadhido khaarijiyaha marka uu khaarijinayo.

(b) Qiimaha macquulka ah ee ay hantidu suuqa ka joogto marka la khaarijinayo.

3. Haddii laba hantiyood ama ka badan isku mar lawada khaarijinayo oo lacagta mid kasta laga bixiyay aan la cayimin, wadarta lacagta la gudoomay waxa loo qaybinayaa hantida la khaarijiyay iyada oo la raacayo saamigeeda mid kasta ay ku leedahay qiimaha suuqa marka la wareejinayay.
4. Haddii qayb ka mida hantida la khaarijiyo, lacagta la helo waxa loo qaybinayaa qaybta hantida ee la khaarijiyay iyo qaybta hadhay si waafaqsan qiimaheeda suuqa ee ay qayb kasta joogto marka hantida la hantiyay.

### **Qodobka 104<sup>aad</sup>**

#### **Aqoonsi la'aanta Faa'idada iyo Khasaaraha**

1. Wax faaiido iyo khasaare ah lagu xisaabtami mayo marka la goaaminayo dakhliga la cashuurayo ee la xidhiidha
  - (a) Markay hanta isku wareejinayaan qoyska isqabaa
  - (b) Markay hanti isku wareejinayaan kuwa hore isku qabay oo qayb ka furniinka ama heshiiska in si dhab ah loo kala durko
  - (c) Iyadoon loo kasin la khaarijiyo hanti oo wixii laga helo dib loo galiyo hanti la nooc ah sanad gudihiin laga bilaabo maalintii la khaarijiy hantida
  - (d) U wareejinta hantida ammaana hayaha ama dhaxlaha marka laga dhinto.
2. Haddii wax faaiida ah ama khasaare ah aan lagu xisaabtamayn oo ah sida ay ku imaanayso Farqada (1)(a), (b), ama (d), hantida la wareejiyay waxa loo arkayaa inuu helay la wareegahu, ammaana hayahu ama dhaxlahu hanti la sifa ah oo waxa laga bixiyayna leeg yahay qiimaha hantidu wareejiyaha

ugu fadhido ama qofka dhintay marka hantida la wareejinayay.

3. Qiimaha ay joogto hantida lagu badalay ee lagu sifeeyay Farqada (c) waxa weeyi qiimaha ay ku fadhido hantida lagu badalay oo lagu daray qadar kasta oo cashuur bixiyuhu ka bixiyay ku badalidda hantida waa haddii ay ka badato qadarka laga helay hantida khaarijinteeda aan loo kasin.

### **QAYBTA 7**

## **XEERARKA KALA DUWAN OO LAGU GO'AAMINAYO DAKHLIGA LA CASHUURAYO**

### **Qodobka 105<sup>aad</sup>**

#### **Dakhli la Wadaago**

1. Dakhliga ama jaritaanada la xidhiidha hantida la wadaago waxa loo qaybinayaa wadaagayaasha dantu ugu jirto hantida.
2. Haddii danta wadaagayaashu ku leeyihiin hantida ay wadaagaan aan la kala saari Karin, danta wadaagayaashu ku kala leeyihiin hantida ay wadaagaan waxay noqonaysaa is leeg.

### **Qodobka 106<sup>aad</sup>**

#### **Qiimeyn**

1. Marka loo jeedo xeerkan lana raaco Qodobka 70 (1) (b) qiimaha dheefta ee shay waa qiimaha macquulka ee suuqa maalinta dheefta logu xisaabtamayo ujeedo cashuureed.
2. Qiimaha macquulka ee suuqa ee dheefta waxa lagu xaqiijinayaa iyada oo aan loo eegin wax xanibaad ah wareejinta ama dhab ahaan aan si kale loogu badali Karin naqad.

### **Qodobka 107<sup>aad</sup>**

#### **Sarifka Lacagaha (Currency Exchange)**

1. Dakhliga la cashuurayo ee xeerkan waxa lagu xisaabinayaa shilin Somaaliland.

2. Haddi qadarka lagu xisaabtamay sida xeerkani yahay lacag aan ahay shilin Somaliland, qadarkaas waxa loo rogayaa shilin Somaliland iyada oo lagu sarifayo tacriifada rasmiga ee Banka Dhexe ee Somaaliland oo markaa lagu dabaqayo lacagaha, waa marka qadarka lacageed la helo, kharash ahaan loo galo ama si kale loogu xisaabtamo iyada Ujeedo Cashuureed ay tahay.
3. Iyada oo marka hore ay jirto ogolaasho qoran oo agaasimuhu bixiyay, cashuur bixiyuhu wuxuu isticmaali karaa tacriifo isku celcelis ah inta lagu jiro sanad dakhliyeedka, ama diiwaanadiisa xisaabtu waxay noqon karaan lacag aan ahayn shilin Somaaliland.

### **Qodobka 108<sup>aad</sup>**

#### **Wax Bixinta Dadban iyo Dheefaha**

Dakhliga qofka waxaa ka mida:-

- a) Wax bixin si toos ah qofka wax u tarta iyo
- b) Wax bixin qofka lagula heshiiyo siduu doonayo oo noqon lahayd dakhliga qofka haddii wax bixinta si toos ah loo siiyo qofka.

### **Qodobka 109<sup>aad</sup>**

#### **Maalgalin Kirooyinka**

1. Haddii kireeyuhu hanta ka kireeyo kiraystaha iyada oo la raacayo heshiiska kirada, marka loo jeedo xeerkan:-
  - (a) Kiraystahaa loo aqoonsan doonaa mulkiilaha hantida.
  - (b) Kireeyahaa loo aqoonsan doonaa inuu dayn u fidiyay kiraystaha markaa soo ajuurada la bixinayo, faaiido wadaagga khidmadaha iyo raasumaalkaba ee la siinayo kireeyaha ay leeg tahay qadar u dhigma kirada uu bixinayo kiraystuhu
2. Wax bixinta aan ka ahayn raasumaalka la soo celinayo waxa loo tixgalinayaa inay yihiin kharashyo la jarayo oo uu galay kiraystuhu iyo dakhli uu kasbaday kireeyuhu.
3. Kirada hantidu waa maalgalin kiro haddii;-

- a) Heshiiska muddada kiradu uu ka badan yahay bolkiiba todobaatan iyo shan (75%) cimriga hantida la kireeyay.
  - b) Kiraystuhu uu dooran kara inuu ku iibsado hantida qime go'an marka uu dhamaado heshiiska kiradu.
  - c) Hadhaaga qiimaha hantida ee qiyaasta u ah mulkiilaha marka uu dhamaado heshiiska kiradu haddii uu ka yaraado (25%) qiimaha macquulka ah ee ay suuqa ka jootay bilawga heshiiska
4. Iyada oo loo jeedo Farqada (3) heshiiska kiradu waxa ka mida xiliga dheeraadka ah ee kirada ee ah doorashada in la cusboonaysiiyo.

### **Qodobka 110<sup>aad</sup>**

#### **Daladaha u bahoobay sida gaarka ah (Exclusion of doctrine of mutuality)**

1. Kambaniga wada hawlaha xubnaha urur dan gaara leh, urur ganacsi, ama daladda shirkadaha caymiska, waxa loola dhaqmayaa marka ay xeerkan noqoto inuu yahay hawlaha ganacsi ee cashuurtu ku waajibtay ka fulinaya.
2. Dakhliga ganacsiga ee shirkadda Farqada (1) lagu dabaqay waxa ka mida ajuurada ka mid noqoshada iyo qaadhaanka ay bixiyaan xubnuhu.
3. Haddi shirkadda ku xusan Farqada (1) ay ugu horaynba adeegeedu yahay inay u fidiso alaab ama adeeg xubnaha, jaritaanada sababta u ah u keenitaanka xubnaha alaabta iyo adeegga waxa laga ogolaan karaa oo kaliya ilaa heer wadarta dakhli laga kasbaday xubnaha, wixii dheeraad ahna waxa loo xawilayaa iyada oo laga jarayo dakhliga sanadka xiga
4. Qodobkan "Xubnaha urur gaar ah" waxa loola jeedaa urur gaar ah ama wax la mida, wixii hantiya oo dhan ee ururku leeyahay ama amaana ah waxa loo hayaa xubnaha ururka.ama wixii la mida.

### **Qodobka 111<sup>aad</sup>**

#### **Helitaanka Magdhowga**

Magdhawga la bixinayo ee qof helayo waxay leedahay sifaha wixii la magdhaba yahay.



**Qodobka 112<sup>aad</sup>**  
**Dib u helis Kharashaadka (recouped Expenditure)**

1. Haddii kharash, khasare, ama dayn laga quustay mar hore dib uu u helo cashuur bixiye, qadarkaa dib loo helay waxa loo aqoonsan doonaa dakhli uu cashuur bixiyuhu kasbaday sanad dakhliyeedkaas la helay waxayna yeelan doontaa sifaha dakhli jaritaano la xidhiidho.
2. Iyada oo loo jeedo Farqada (1) waxbaa laga jari doonaa dib u helidda arrinhore u dhacday taas oo aan waafaqsanayna aasaaska jaritaanada.

**QAYBTA 8**  
**DADKA LA QIIMAYNAYO**  
**Qodobka 113<sup>aad</sup>**

**Cashuurta Dadka Kali kalida ah**

1. Dakhliga la cashuurayo ee cashuur bixiy kasta gaar ahaantiisa si gooni ayaa loo go'aaminayaa.
2. Haddii cashuur bixiyeisku dayo inuu qof kale la qaybsado dakhli, agaasimaha ayaa toosin kara dakhliga la cashuurayo ee cashuur bixiyaha iyo qofka kale si uu meesha uga saaro hoos u dhac kasta oo cashuur bixinta kaga timaadda qaybinta dakhliga.
3. Cashuur bixiye waxa loo qaadanayaa inuu isku dayay inuu qaybiyo dakhliga haddii;-
  - a) Cashuur bixiyuhu si toos ah ama dadban ugu wareejiyo ka ganacsiga ku weheliya, ama
  - b) Cashuur bixiye ku wareejiyo hanti, ay ka mid tahay lacago, si toos ama aan toos ahayn qofka weheliya arrinta ka imaanaysana ay tahay in weheliyuhu ka helo dakhli hantidaasi. Iyo sababta ama sababaha loo wareejinayaana ay tahay in hoos loo dhigo cashuurta laga bixinayo dakhliga wareejiyaha ama la wareegaha.



4. Ka gun gaadhidda haddii cashuur bixiye doonayo inuu qaybiyo dakhli, agaasimaha ka baaran dagaya qiimaha, haddii uu jiro, ee uu weheliyuhu ka bixiyay wareejinta.

**Qodobka 114<sup>aad</sup>**

**Mabaadii'da cashuureed ee Shirkadaha Wadaagaha**

1. Dakhliga iyo khasaaraha ka imaanaya hawsha ay waddo shirkadda wadaaga ahi waxa loo cashuurayaa sida waafaqsan xeerkan.
2. Qoraalka iyo qoraal la'aanta rasmiga ee heshiiska shirkadda wadaaga ah maaha go'aan adag oo xaqiijinaya inuu jiro iyo in kale xidhiidhka ka dhexeeya dadka shirkoobay.
3. Shirkadda wadaaga waxa dusha ka saran inay soo gudbiso xisaab celinta shirkadda sida waafaqsan Qodobka 135, laakiin ma xabaari doonto inay bixiso cashuurta ku waajibaysa dakhligaas.
4. Doorasho kasta, la socodsiin ama cadaymaha loo baahan yahay in la keeno ee la xidhiidha hawlaha shirkadda waxa keenaya shirkadda.
5. Haddii guud ahaan aan si kale loogu baahan, hantida shirkadda waxa loola dhaqmi doonaa inay shirkaddu leedahay ee aanay lahayn dadka shirkada ku ah.

**Qodobka 115<sup>aad</sup>**

**Xisaabinta dakhliga ama khasaaraha ee shirkadda wadaaga ah**

1. Dakhliga shirkadda wadaaga ee sanad dakhliyeedku waa:-
  - a) *Wadarta* dakhliga ee shirkadda wadaag ee sanadkaas oo loo xisaabiyey sidii iyadoo shirkadda wadaagu tahay cashuur bixiye dalka deggan.
  - b) Isu gaynta qadarka la ogol yahay in loo jaro kharash si xeerkan waafaqan iyo khasaaraha ay gashay shirkadda wadaagu markii la soo saarayey

dakhligaas oo, aan ahayn goynta lagu ogol yahay Qodobka 89.

2. Khasaaraha shirkadda wadaaga wuxuu dhaca sanad dakhliyeed haddii qadarka ku Xusan Farqada (1) (b) uu ka badan yahay qadarka ku xusan farqada (1) (a) ee sanadkaas, iyo qadarkaas dheer waa qadarka khasaaraha.
4. Haddii shirkadda wadaagu tahay mid aan deganayn dalka sanad dakhliyeedkaas, qodobka 129aad ayaa lagu dhaqayaa xisaabinta dakhliga wadaaga ama khasaaraha wadaaga ee sanadkaas.

### **Qodobka 116<sup>aad</sup>**

#### **Cashuuridda kuwa wadaagayaasha ah**

1. Wadarta dakhliga guud ee wadaage degan dalka ee sanad dakhliyeedka waxaa ka mida saamiyadd wadaageyaasha ee shirkadda wadaaga sanad dakhliyeedkaas.
2. Wadarta dakhliga guud ee wadaage aan deganayn dalka ee sanad dakhliyeedka waxaa ka mida saamiyadda wadaageyaasha shirkadda wadaaga ah ee ka yimid illo Somaliland ah.
3. La wadaage degan dalka waa loo ogol yahay in wax laga jaro saamigiisa sanad dakhliyeedka haddii shirkadda wadaaga Khasaare soo gaadho sanadkaas.
4. La wadaagaha aan deganayn dalka waa loo ogol yahay in wax laga jaro sanad dakhliyeedka saamigiisa ee khasaaraha wadaaga, laakiin waxay ku siman tahay oo kaliya hawlgalka keenay khasaarah taasoo dakhliga shirkadda wadaaga ah kor u qaadi lahay haddii dakhligu ka imaan lahaa illo Somaliland ah waa haddii kharaare aan la galin.
5. Dakhliga laga kasbaday ,ama kharashka lagu galay shirkadda wadaagga ah sifahooday ahaanayaa ilo dagaan ahaan iyo nooca dakhliga iyo kharashka ama khasaaraha ee ku yimaadda gacmaha la wadaagaha waxa loo arki doonaa in shirkadda si sugan la isugu gudbinayo haddii aanu agaasimuhu si kale u dhigin.

6. Iyadoo la raacayo Farqada (7), saamiga la wadaagaha ee dakhliga wadaaga ama Khasaarahu wuxu la mid yahay boqolkiiba inta uu ku leeyahay dakhliga shirkadda oo ah Sida uu dhigayo heshiiska shirkaddu.
7. Haddii ku tala galka dakhliga ee heshiiska shirkaddu aanu ka turjumaynin inta wadaagayaashu ka gaystaan hawlaha shirkadda wadaaga saamiga la wadaage ku leeyahay dakhliga iyo khasaaraha shirkadda waa inay leeg tahay boqolayda uu ku leeyahay raasumaalka shirkadda.

**Qodobka 117<sup>aad</sup>**

**Asaasidda, dib u Hawlgalinta, ama Kale dirid**  
**Shirkadda wadaaga**

1. Siinta hanti uu leeyahay la wadaage shirkadda wadaaga waxaa loo tix galinayaa sidii hanti uu Lacag kaga iibsaday oo kale la wadaaguhu shirkadda wadaaga oo leeg-
  - a) Qiimaha ay ku joogto hantidaasi la wadaagaha wakhtigii uu bixinayay, hantida haddii Shuruudahani la helo-
    - I. Hantiddu ay ahayd hanti ganacsi oo la wadaaguhu leeyahay isla ka hor wareejinta lagu wareejiyay shirkadda
    - II. La wadaagaha iyo shirkadda wadaaguba ay ahaayeen qaar dalka degan wakhtiga bixinta. hantida.
    - III. La wadaaguhu inta uu ku leeyahay rasumalka wadaagga ka dib wareejinta hantidu ay tahay boqolkiiba shan iyo labaatan ama wax ka badan;
    - IV. Doorashada loo doortay faqraddan in la dabaqo waxa wada jir u samaynaya Wadaagayaasha.
    - V. Danta ugu jirta la wadaaha shirkadda wadaagga ku wareejinta hantidu waa inay leeg tahay qiimaha ay hantidu markaa ka joogto suuqa marka uu bixiyay ama
  - b) Xaalad kasta oo kale, qiimaha suuqa hantidaasi ka joto wakhtigii la bixiyay.

2. Haddii Farqada (1) (a) la dabaqo, hantiddu waxay ku lahaaneysaa sifaheeda gacanta shirkadda, sidi ay ugu lahayd gacanta la wadaagaha.
3. Haddii uu isbadal ku yimaado hawl galinta shirkadda wadaaga ama wadaagu burburo, wadaagii hore ayaa loo tix galinayaa inuu khaarriyay hantidii shirkadda oo dhan kuna wareejiyay dib u hawl galinta shirkadda ama wadaagayaasha haddii ay burburto iyada oo lagu iibinayo lacag dhan:-
  - a) Qiimaha hantidu ay ku joogtay shirkadii wadaga ee hore, marka isbelka lagu sameeyay hawl Galkeeda, waa hadii la helo shuruudahan oo dhan
    - I. Shirkadii wadaga ee hore iyo midka dib loo hawl galiyay ay ahaayeen shirkado wadaag ah oo dalka degan Wakhtigii Isbedelku dhacay;
    - II. Boqolkiiba shan iyo labaatan ama wax kabadan oo raasamaalka shirkadda wadaaga ah ee dib loo hawl galiyay waa inay laba iyo toban bilood ka hor intaan isbedlka lagu samaynin ay leeyhiin wadaagayaashii shirkaddii hore:-
    - III. Doorashada faqraddan in la dabaqo waxaa si wadajir ah u sameyay wadaagayaasha shirkadda wadaaga ee dib loo hawl galiyay
  - b) Mar kasta, qiimaha suuqa ee hantidu joogto wakhtiga dib loo hawl galiyay ama La baabiiyay, hadba xaaladdu siday tahay.
4. Haddii Farqada (3) (a) la dabaqo, hantiddu waxay ku ahaanaysaa sifaheedii gacmaha shirkadda dib loo hawl galiyay sida ay sifaheedii ugu ahayd.
5. Doorashaa loo sameeyey si waafaqsan qodobkan xisaab celinta dakhliga ee shirkadda wadaagga sanad dakhliyeedka hantida la siiyay ama dib u hawl galinta shirkadda la sameeyay.

### **Qodobka 118<sup>aad</sup>**

### **Qiimaha ay ku fadhido danta la wadaaguhu**

1. Danaha la wadaagaha ugu jirta shirkadda wadaaga ah waxa loo aqoonsanayaa hanti ganaasi ujeeddo kasta oo xeerkan ah.
2. Iyadoo la racaayo Farqada (3) iyo (4), qiimaha ay ku joogto la wadaagaha danta ugu jirta shirkadda wadaaggu waa:-
  - a) Marka ay dantu tahay hanti la siiyo shirkadda oo ay ku jirto lacagi, qadar kasta oo lacageed oo la bixiyay oo lagu daray-
    - I. Qiimaha ay joogaty hantida uu siiyey la wadaaguhu shirkadda wadaaga, haddii Qodobka 117 (1)(a) lagu dabaqayo; ama
    - II. Qiimaha suuqa hanti kasta ee uu siiyey la wadaage shirkadda wadaaga, haddii Qodobka 117 (1)(b) lagu dhaqayo, ama
  - b) Xaalad kasta oo kale ,qiimaha laga bixiyey danta.
3. Qiimah ay joogto danta la wadaaguhu ku leeyahay shirkadda wadaagga ee lagu gooyey si waafaqsan Farqada (2) waxa lagu kordhinayaa qadarka ay tahay saamiga la wadaagaha sanad dakhliyeedka iyo sanad dakhliyeedyadii hore oo ah:-
  - (a) Dakhliga shirkadda wadaagga ah iyo
  - (b) Dakhliga shirkadda wadaagga ah ee cashuur dhaafka leh sida waafaqsan xeerkan
4. Qiimaha ay ugu fadhido dantu la wadaagaha shirkadda wadaagga ee lagu gooyay Farqada (2) waxa laga dhimay, laakiin aan ka hoosaynin eber. Siismada shirkadda iyo inta ay tahay saamiga la wadaagaha sanad dakhliyeedka iyo sanad dakhliyeedyadii ka horeeyay, ee khasaaraha iyo kharashka shirkadda ee aan jaritaanka lahayn marka la xisaabinayo dakhliga la cashuurayo iyo iyada oo aan si haboon loo galin xisaabta raasumaalka.

### **Qodobka 119<sup>aad</sup>**

### **Mabaadiida cashuurta ee amaano-haynta**

1. Iyadoo la raacayo Farqada 5, dakhliga amaano-hayn waxa lagu cashuuraya laba Mid uun amaane-hayaha ama dhaxlayaasha hantida amaano, sida lagu sheega xeerkan.

2. Si gaaraa loo xisaainayaa dakhliga amaano ee cashuurto ku waajibtay ee amaanooyinka kala gaarka ah iyada oo aan loo eegayn in amaana hayahoodu mid yahay in kale.
3. Dakhliga laga helay , kharashka ama khasaaraha lagu galay amaano hayn sifahooday ahaanayaan oo il dagaan ah iyo nooca dakhliga, kharashks ama khasaaraha ee ku sugan gacanta dhaxlaha.
4. waxaa looga baahan yahay in xisaab celinteeda dakhliga la keeno sida waafaqsan Qodobka 135.
5. Amaanada qofka hore u deganaa ama dhaxlaha amaanada xaqa u leh:-
  - a) Looma tix galinayo sidii haayad ka gaara amaano hayaha hore u deganaa ama dhaxlaha xaqa u leh mid walba goonidiisa
  - b) Dakhliga amaano-hayntaas waxa cashuurteedda laga qaadayaa amaano hayaha hore u deganaa ama dhaxlaha xaqa u leh , hantida amaadanada waxa loo aqoonsan doonaa inuu leeyahay amaana hayuhu ama dhaxluhu waa haba siday xaaladdu tahay.
6. Amaano-haynta amaanada qofka hawlgabka ah waxa laga cashuurayaa dakhliga amaanada cashuurto ku waajibtay.
7. Amaano-hayeyaash wada jirkooda iyo kala gooni ahaantoodaba waxa saran qaanta cashuureed ee la xidhiidha dakhliga amaanada cashuurto ku waajibtay taasoo hantida amaanadu aanay ku filnayn cashuur gudidda.
8. Haddii uu amaano-hayhu ka bixiyey cahuur dakhliga amaano ee cashuuri ku waajibtay sida waafaqsan Qodobada 120 ama 121 oo ah inaan dakhligaas oo ku jira gacanta dhaxlaha mar kale aan la cashuurayn.

**Qodobka 120<sup>aad</sup>**  
**Cashuurta amaano-hayaha iyo**  
**kafaa'iidaiystayasha**

1. Qadar kasta oo uu helay amaano –haye isla markaas ama dheefta mustaqbalka ee dhaxal kala xaqiijiyay, oo aan ahayn ka qofka hawlgabka ah, ee xaqa loo siiyay

qadarka noocaas ah waxaa loo tixgalinayaa inuu kasbaday dhaxluhu sida loola jeedo xeerkan.

2. Haddii dhaxluhu helo xaqa loo siiyay qadar kasta ee ku xusan Farqada (1) oo ka imaanaysa hawsha u hayo amaana hayaha sida taxadaka leh loogu dhiibay amaana ee ku qoran qoraalka rasmiga ee amaano haynta, qadarka noocaas ah waxa loo tixgalin doonaa inuu helay amaana hayuhu isla markaaba dheefta dhaxlaha.
3. Si loogu dabaqo **faqrdda** (2) dhaxlaha sanad dakhliyeedka, amaano-hayta waa in loo wadaa si caqli ah oo taxadar ah ilaa dhamaadka bisha labaad ee sanad dakhliyeedka ka dib.
4. Haddii faqrada (1) ama (2) la dabaqo dhaxlaha waxa loo tixgalinayaa inuu kasbaday qadarka marka qadarka uu helay amaana hayuhu.  
Haddii qadar kasta oo lagu dhaqayo faqrada (1) ay ka mid tahay wadarta dakhliga guud ee dhaxlaha sanad dakhliyeedka, dhaxlaha waxa loo ogolaanayaa in wax loo jaro kharashaad ama khasaare uu galo sanadkaas sida waafaqsan xeerkan.
5. Amaanada amaano haye daggan dalka sanad dakhliyeedka waxa dusha ka saran cashuurta dakhliga amaanaada cashuurtu ku waajibto ee amaanaada sanadkaas.
6. Amaanada amaano-haye aan deganayn dalka sanad dakhliyeedka waxa dusha ka saran qadarka amaanaada ee cashuurtu ku waajibtay sanadkaas amaano ee dakhliga amaanaadu ka imaanayo il Somaliland ah.
7. Qodobkan waxaa lala akhliyayaa Qodobka 121aad.

**Qodobka 121<sup>aad</sup>**  
**Cashuurta Hantida Qofka Dhintay**

1. Qadar kasta oo uu ka kasbado amaane hayaha fuliya hantida la dhaxlayo ee qofka geeriyooday, waxa loo tixgalin doonaa inuu helay dhaxlaha hantidaasi marka ay xeerkan noqoto, waana marka ilaa heer uu ku ganco agaasimuhu in qadarkaas la helay isla

markaas ama la dheefsado mar dambe oo la xaqiijiyay dhaxle kasta oo qofka geeriyooday ah.

2. Haddii qadar kasta oo faqradda (1) lagu dabaqay ay ka mid tahay wadarta dakhliga guud ee dhaxlaha sanad dakhliyeedka, dhaxlaha waxa loo ogolaanayaa in wax looga jaro sida waafaqsan qodobkan kharash kasta ama khasaare kasta oo uu galo sanadkaas amaano hayuhu si dakhligaas loo soo saaro.
3. Amaano hayaha hantida laga dhaxlayo qofka geeriyooday ee ah amaano haye dalka deggan sanad dakhliyeedka waxa dusha ka saran inta badan dakhliga amaanaada hantida la dhaxlayo ee cashuurta ku waajibtay ee sanadkaas.
4. Amaano hayaha hantida la dhaxlayo ee qofka geeriyooday ee aan deganayn dalka sanad dakhliyeedka waxa dusha ka saran inta badan dakhliga amaanaada cashuurta ku waajibtay ee sanadkaas laga helo ilo Somaliland ah.
5. Amaano hayaha hantida la dhaxlayo ee qofka geeriyooday waxa uu xil ka saran yahay qanta cashuureed ee qofka geeriyooday ee sanad dakhliyeed kasta soo ifbixi kara ka hor sanad dakhliyeedka cashuur bixiyuhu geeriyooday.

### **Qodobka 122<sup>aad</sup>**

#### **Mabaadii'da Cashuureedee Shirkadaha**

1. Shirkadda waxa dusha ka saran cashuur ka gooni ah saamilayda.
2. Iyadoo la raacayo faqradda (3) faaii'do qaybsiga la siiyo shirka taasoo aan cashuur dhaaf lahayn ee ay ka hesho shirkad deggan dalka waa laga daynayaa cashuurta haddii badan codka awoodeed ee shirkadda faa'iido qaybiska aynu bixinay.
3. Faqradda (2) laguma dabaqayo faaiido qaybiska la siiyo hay'ad maaliyadeed sababta oo ah lahaanshaheeda saamiyada lala soo noqon karo ee shirkadda bixinaysa faaiido qaybiska.

### **Qodobka 123<sup>aad</sup>**

#### **Badelaadda gacan ku haynta shirkaddaha**



Haddi sanad dakhliyeedka inta lagu jiro, isbedel ka dhaco 50% ah ama ka badan lahaanshaha asalka ee shirkadda, marka loo eego lahaansheeda sanad ka hor, shirkadda looma ogola inay jarto khasaaraha la qiimeeyay sanad dakhliyeedka ama sanadaha ku xiga ilaa shirkaddu, muddo laba sano ah kadib ama ilaa inta khasaaraha la qiimeeyay uu meesha ka baxayo haddi ay taasi dhacdo laba sano gudahood isbelka ka dib :-

- (a) Isla hawshii ganacsigu socoto isbedelka ka dib sidii ay u socotay isbedelka ka hor
- (b) Aan la galin ganacsi cusub ama maalgalin cusub isbedelka ka dib haddii ujedada ugu muhimsan ee shirkaddu ama dhaxluha leh shirkaddu yahay inuu ka faaiidaysto khasaaraha la qiimeeyay si hoos loogu dhigo cashuurta laga bixinayo dakhliga ka soo baxaya ganacsiga ama maalgashiga cusub.

**Qodobka 124aad**  
**Ku Badalasho**

1. Haddii qof dalka dagani oo faqradan lagu xusayo Wareejiye uu wareejiyo hanta ganacsi, ha lagu lahaado qaan ama yaan lagu ; lahaanin oo aan ka, badnayn inta ay ku fadhido hantidu isagoo ku wareejinayaa shirka daggan dalka oo aan ahayn mid cashuur dhaaf leh, oo faqradan lagu xusayo la wareege, iyada oo wareejiyuhu kaga baddalanayo shirkadda saami uu ku helayo 50% ama ka badan oo dan ah marka ay noqoto codka awoodda ee shirkadda la wareegaha ah isla marka wareejintu dhacdo
  - a) Wareejinta loo aqoonsan mayo hanti uu khaarijiyay wareejiyuhu waxase loo aqoonsanayaa hanti ganacsi oo uu hantiyay la wareeguhu
  - b) Qiimaha ay hantidu ugu fadhido la wareegaha waxay leeg tahay inta ay wareejiyaha ugu fadhido hantidu xiliga wareejintu dhacday iyo
  - c) Inta ay ugu fadhido wareejiyaha saamiga uu helay ee uu hantida ku badashay waxay

leekaanaysaa qiimaha ay hantidu ugu fadhiday ee uu wareejiyay oo laga jaray wixii qan ah ee u qaatay wareejiyuhu ee la xidhiidhay hantida

2. Haddii qayb ka mida shirkadda daggan dalka dayn loo xaraashayo, faqradan waxa lagu xusayaa Shirkad Dayn Lo Xaraashayo, hantida ganacsigaha waxa loo wareejinayaa saamiilaha ah shirkad dalka deggan oo aan cashuur dhaaf lahayn, faqradan waxa lagu xusayaa Shirkadda La Wareegaha ah iyo isla markaa ka hor wareejinta waa in shirkadda la wareegtay ay leedahay 50% ama ka badan danta codka awoodda ee shirkadda daynta loo xaraashayo.
  - a) Wareejinta loo aqoonsan mayo hanti uu khaarijiyay shirkadda daynta loo xaraashayaa, laakiin waxa loo aqoonsanayaa hanti ganacsi oo uu hantay shirkadda la wareegaha ahi
  - b) Inta ay hantidu ugu fadhido la wareegaha waxay leekaanaysaa inta ay ugu fadhiday shirkadda la xaraashayo xiliga wareejinta hantidu dhacday.
  - c) Wareejinta hantidu maaha faaiido qaybsi iyo
  - d) Wax khasaare iyo faaiida ah la xisaabin mayo tirtirka saamiyada la wareegaha ee shirkadda la xaraashayo.
3. Haddii shirkad dalka deggan ama shirkaddo dhawr ah oo dalka deggan loo habeeyo iyada oo aan isbedel wayn lagu samaynin mulkiyada asalka ah ama gacan ku haynta shirkadda ama shirkadaha agaasimuhu wuxuu yeeli karaa.
  - a) Inuu u ogolaado shirkad kasta oo dalka deggan oo ku lug leh dib u habaynta loo aqoonsado dib u habaynta inaanay muujinayn hanta ganacsi oo la khaarijiyay ama la xaqiiqsado dayn kasta oo ganacsi hadba siday xaaladdu tahay, iyo
  - b) In la sugo qiimaha ay ku fadhido hanti ganacsi oo kasta oo la hayo, ama dayn ganacsi oo uu balan qaaday shirkadda dalka deggani dib u habaynta ka dib si loo muujiyo xaqiiqada ah in khaarijin hantiyeed iyo xaqiiqsasho dayneedba loo aqoonsaday inay dheceen.

**QAYBTA 9**  
**HABKA CASHUURAADKA CAALAMIGA**

**Qodobka 125<sup>aad</sup>**  
**Illaha Dakhliga**



Dakhlibaa laga kasbanayaa illo Somaliland ah ilaa heer ay ka yihiin

- a) In laga kasbado iibin alaabo
  - I. Marka ay tahay alaab la farsameeyay, beer ahaan u baxay ama macdan ahaan uu u soo saaray ka iibinayaa, alaabtaas waa la farsameeyay, waa la beerama macdan ahaan baa looga soo saaray Somaaliland.
  - II. Marka ay tahay alaabo uu soo iibsaday ka wax iibinayaa, heshiiska iibintuna ka dhacay Somaliland, meel kastaba alaabtaas ha la geeyo
- b) Uu ka kasbado qofka dalka daggani hawl ganacsi oo uu wado isagoo leh mulkiyadda ama kiraysashada gaadiid dhul, markab ama diyaarad meel kasta oo gaadiidkaas dhulku, markakaasi ama diyaaradaasi ka shaqayso.
- c) Laga kasbado shaqo kasta oo laga qabto ama adeeg laga bixiyo Somaliland gudaheeda.
- d) Lagu kasbado shaqo kasta oo la qabto ama adeeg la fidiyo oo ah qandraas lala galo Dawladda Somaaliland, meel kastaba shaqada ha laga qabtee ama adeegyada ha lagu fidiyee.
- e) Qof shakhsiya oo dalka deggani ka kasbado shaqo kasta oo la qabto ama adeegyo la fidiyo, sida waddidda gadiidka dhulka, sarkaal ama xubin ka mida cutubka gaadiid kasta oo dhuleed, markab ama dayuurad, meel kasta gaadiidkaas dhulku , markabku ama dayuuraddu ha ka shaqeeyo
- f) Kiro laga kasbado hanti ma guurta ah oo ku taal Somaliland
- g) Laga kasbado khaarijinta danta ku jirta hantida maguurtada ee ku taal Somaliland ama khaarijinta saamiga shirkadda, hantida oo ka

- kooban si toos ama dadban oo u badan dan ama dano lagu leeyahay hantida maguurta, waa haddii dantu ama saamigu yihiin hanti ganacsi.
- h) Laga kasbado khaarijinta hanti maguurta ah, oo aan ahayn alaabo, hantidaas oo heshiiskeeda lagu sameeyay Somaaliland oo ah in la qabiyo hantidaas, meel kasta alaabtaas ha la geeyo.
- i) Qadar:-
- I. Ka mida dakhliga ganacsiga ee cashuur bixiyaha sida ku xusan Qodobks 78 (5) ee la xidhiidha khaarijinta hantida qiima dhacaysa ee lagaga dhaqmay Somaliland
  - II. Waxa loo tixgalinayaa dakhli sida ku xusan Qodobka 111, haddii la ogolaado in kharashaadka, khasaaraha ama daynta laga quustay ee la galay la jaro si dakhli looga soo saaro isha dakhli ee Somaaliland ku taalla
- j) Abaal Marinada ka soo baxaya isticmaalka, xaqa loo siiyay isticmaalka ee Somaaliland gudaheeda
- k) Ogolaashaha xuquuq gaar ah, Naqshad, calaamad ganacsi oo khaas ah, xuquuqda daabacaadda, qaab dhismeed, naqshad midabaysan, khidad, formula, hannan, ama hanti kasta ama xuquuq la nooc ah.
- l) Sawir kasta oo fim dhaqaaqaya ah
- m) Fiidyaw kasta ama shay maqal ah, filim ha ku duubnaado, cajalad ha ahaado ama wax yaabo kale oo meel dhexaad ah oo loo isticmaalo xidhiidhinta telefishanka ama war baahinta idaacadada
- n) Cod kasta oo la duubay waxyaabo la taaban karo oo xayaysiis ah oo ku xidhan shayga ku xusan Farqada hoosaadyada(L)(M) iyo
- o) Hanti kasta oo guurta ah oo la taaban karo oo:-
- I. Ka imaanaysa soo dajinta ama hawlaha soo dajinta, Aqoonta sayniska, farsamada, warshadaha, ama ganacsiga ama warbixinta loo isticmaalo Somaliland gudaheeda.
  - II. Ka imaanaysa isticmaalka, ama xuquuqda isticmaalka, ama hanashada ama xuquuqda

hanashada, Somaaliland gudaheeda vidiyo kasta waxyaabo maqal ah oo uu gubiyo dayax gacmeedku, kaybalada ama (optic fibre), ama farsamo casri ah oo la mida ah oo loo isticmaalo xidhiidhinta tvga ama war baahinta idaacadda

- III. Kasoo baxaysa u samaynta ama u fidinta hawl loogu gargaarayo waxyaabaha ku xusan faqrad hoosaadka (i) iyo (ii)
  - IV. Ka imanaya gabi ahaan ama qayb ahaan ka hakashada Somaliland gudaheeda waxyaaba la xidhiidha ee ku xusan faqrad hoosaadka (i), (ii), (iii) ama (iv) ee faqradan
  - V. Ka imaanaya khaarijinta aqoonta warshadaha ama hantida kale ee aqooneed ee lagu isticmaalo Somaaliland
- p) Ajuuro, faaiido wadaag ama khidmado la mid ah oo la xidhiidha daynt gudidda .
- I. Dayn guddidda waxa damaanad u ah hanti maguurta ah oo ku taal Somaliland, ama hanti guurta ah oo lagaga dhaqmo Somaliland.
  - II. Dayn bixiyaha oo ah qof dalka deggan.
  - III. Amaahashada oo la xidhiidha ganacsi laga wado Somaliland,
- q) Faaiido qaybsi ama ajuuro agaasime oo ay bixiso shirkad dalka deggan.
- r) Hawlgab ma lacg hafto ah
- I. Hawlgab ama hafto ay bixiso Dawladda Somaliland ama qof dalka deggan.
  - II. Hawlgab ama hafto lagu bixiyo shaqo laga qabtay ama adeeg laga fuliyay Somaliland.
- s) Lacag laga bixiyo khayraadka dabiiciga oo ah khayraadka dabiiciga ee laga qaato Somaaliland.
- t) Faaiidada laga kasbado dayn lacag Shisheeye ah oo la xidhiidha dayn ganacsi o ka imaanaysa hawsha ganacsi ee laga wado Somaliland.
- u) Qaadhaanka lagu bixiyo sanduuqa hawlgabka ee uu sameeyay loo shaqeeye cashuur dhaaf leh oo ah shaqaale ka shaqeeya Somaliland
- v) Khidmad maarayn oo uu bixiyo qof dalka deggan.

- w) Cashuuri kaga waajibto Somaluliland marka la raaco heshiis caalami ah ama
- x) Lala xidhiidhiyo hawl kasta oo ka socota Somaliland, oo ay kamid tahay hawl laga fuliyo laan Somaaliland ku taal.



### **Qodobka 126<sup>aad</sup>**

#### **Dakhliga Shaqada shisheeye**

- (1) Isha dakhli ee shaqada shishayaa ee uu kasbado qof dalka deggan wuu ka daysan yahay cashuurta haddii qofkaasi ku bixiyo meel shisheeya ah cashuurta dakhliga oo ah ta ku waajibtay dakhligaas,
- (2) Qofka dalka deggan waxa loo tixgalinayaa inuu cashuurta dakhliga ku bixiyay meel shisheeya ah taasoo ah ta ku waajibtay dakhliga isha Shisheeye haddii cashuurta uu jaray loo shaqeeyuhu lagu bixiyo maamulka dakhliga ee dal shisheeye.

### **Qodobka 127<sup>aad</sup>**

#### **Cashuur celin Shisheeye**


- (1) Cashuur bixiye deggan dalku wuxuu xaq u leeyahay lacag celin, oo qodobkan loogu xusay “cashuur Shisheeye oo la celinayo”, ee cashuurta dakhliga Shisheeye ee uu ka bixiyay cashuur bixiye isha dkhli ee Shisheeye oo ka mida wadarta dakhliga guud ee cashuur bixiyaha.
- (2) Qadarka cashuurta loo celinayo cashuur bixiyaha ee sanad dakhliyeedka kama badan Karto cashuurta dakhliga ee Somaliland ka bixinayo cashuur bixiyuhu isha dakhli ee Shisheeye Ee sanadkaas., oo lagu dabaqay xisaabinta dakhliga cashuur bixiyaha ee saafiga isku celceliska tacriifada cashuurta dakhliga ee Somaaliland ee sanadkaas.
3. Xisaabinta cashuurta Shisheeye ee uu leeyahay cashuur bixiyuhu sanad dakhliyeed waxaloo sameynayaa si ka gaara dakhliga ganacsi ee ka soo baxa il Shisheeye iyo dakhliga kale ee uu ka helay

cashuur bixiyahu il dakhli Shisheeye inta lagu gudda jiray sanadkaas.

4. Cashuur Dakhli shisheeye oo ay bixisey:-
  - a) *Shirkad* wadaaga waxaa loo tixgalinayaa sidi iyadoo ay bixiyeen wadaageyaashu;
  - b) Lagu aamine waxa loo tixgalinayaa sidi iyadoo ay bixiyeen dhaxlayaashu waa haddii dakhliga cashuurta Shisheeye laga bixinayey uu yahay mid ay ku jirto dakhligawadarta guud ee dhaxlaha sida waafaqsan xeerkan.
  - c) Dhaxlaha waxa loo tix galinayaa inuu ka bixiyey lagu amaane(trustee) waa haddiidakhliga laga bixyey cashuur Shisheeye loona cashuuray si xeerkan waafaqsan,
5. Ujeeddada qodobkan:-
  - a) Celceliska tacriifada cashuurta dakhliga Somaliland ee la xidhiidha sanad dakhliyeedka cashuur bixiyaha ,waxa loola jeeddaa boqoleydda cashuurta dakhli ee Somaliland,ka hor intaan celinta cashuurta Shisheeye,la yeelan ee cashuur bixiyaha sanadka iyo marka ay noqoto cashuur bixiye labadaba leh dakhli il ganacsi oo shisheeye iyo dakhliyo kale oo laga helay ilo Shisheeye, isku celceliska tacriifada cashuurta waxa loo xisaabinayaa si kala soocan ee labada qaybood ee dakhliga;ah.
  - b) Cashuurta dakhli Shisheeye” waxa ku jira cashuurta laga hayo ee Shisheeye,laakiinkuma jirto cashuur Shisheeye oo loogu talo galay in kor loogu qaado heerka cashuureed ee dakhliga si lo dhimo hab cahuureedka wadanka uu degan yahay.
  - c) Isha Dakhli ee Saafiga ah ee Shisheeye waxa loola jeeddaa isku darka isha dakhli Shisheeyeee ka mida wadarta dakhliga guud ee cashuur bixiyaha oo laga jaro wixii jaritaano aah eeloo ogolaado cashuur bixiyaha sida waafaqsan qodobka taasoo
    - I. Si gaara ula xidhiidha kasbashada dakhliga il Shisheeye.
    - II. Soo jeedinta agaasimaha, waa in si ku tala gal ah loola xidhiidhiyaa dakhliga il Shisheeye.

## Qodobka 128<sup>aad</sup>

### Hab Cashuureedka faaidooyinka laamaha



- (1) Cashuurbaa lagu waajibiyay sanad dakhliyeed kasta waxana la saarayaa shirkadd kasta oo aan deganeyn dalka oo hawl ganacsi ka fulisa Somaliland iyadoo u adeegsanaysa laamaha ganacsiga kuwaas oo soo xereeya dakhligooda ee sanad dakhliyeedka.
- (2) Tacriifada cashuurta ku haboon shirkadda aan deganayn waa 10% dakhliga cashuurta ku waajibtay
- (3) Dakhliga laanta ganacsigu soo xerayso sanad dakhliyeedka waxa loo xisaabinayaa si waafaqsan formulada soo socota:-  
**A + (B - C) - D** Haddii-

**A= Isu-geynta qiimaha ay ku fadhido hantididu, qaamaha saafiga, ee laanta ganacsiga bilawga sanad dakhliyeedka.**

**B= faaidada saafiga ee laanta sanad dakhliyeedkaas oo lagu xisaabiyey si waafaqsan mabaadiida la isku raacsan yahay ee xisaabaadka.**

**C= cashuur bixinta Somaliland ee dakhliga ay ku waajibto ee laanta ganacsiga sanad dakhliyeedkaasi**

**D= isku gaynta qiimaha ay hantidu ku fadhido, qaamaha saafiga ee laanta ganacsiga dhamaadka sanad dakhliyeedka.**

- 4) Xisaabinta dakhliga laanta ganacsiga ee la xeraynayo, qiimaha ay hantidu ku fadhido sanad dakhliyeedka dhamadkiisa waa qiimaha ay hantidu ku fadhido bilawga sanad dakhliyeedka xiga.
- 5) Cashuurta lagu saaray si waafaqsan xerkan waxay dheeraad ku tahay cashuur kasta oo lagu saaray xerkan ee dakhliga cashuurta ku waajibtay ee laanta sida waafaqsan qodobka 56aad laakiin waa hadii aan



si kale logu dhigin ujeedooyinka xeerkan oo dhan si cashuur ahaana oo saran dakhliga la cashuurayo.



**Qodobka 129<sup>aad</sup>**  
**Cashuurta Kharashaadka Caalamiga ah**

- 1) Iyadoo loo eegayo xeerkan, cashuurta waxaa lagu soo rogay, qof kasta oo aan Deganayn dalka, oo ka hela saami faaido, dakhliga faaiido qaybsiga khayraadka la soo saaro, kiro, dakhliga khayraadka, khidmadda maaraynta oo kasoo baxa ilo Somaaliland ah.
- 2) Tacriifada Cashuureed ee la saarayo lacagaha uu helo qofka aan Somaliland deganayn, waa 10%, ee ka dhasha wadarta saami faaiido, royalty, kiro, dakhliga khayraadka dabiiciga, khidmada maaraynta ee uu kasbado qofka aan dalka deganay.
- 3) Inkasta oo Qodobka 125aad (1) uu sidiisa yahay ayaa hadana faaiido qaybsiga uu kasbado qofka aan daganayn dalku loo tixgalinayaa oo kaliya dakhli uu ka kasbaday Somaliland marka ay tahay ujeeddada qodobkan oo ah ilaa heer faaiido qaybiska laga bixiyo faaiidooyinlaga helay Somaaliland.
- 4) Iyadoo loo jeedo faqrada 3aad, haddii shirkad degan ay faa'iido ka hesho illo gudaha iyo dibadda Somaliland ah, waxaa shirkadaa loo tixgalinayaa inay saamiga faaiido ay ka bixisay marka hore faaiidooyinka ay ka heshay Somaaliland.
- (4) Faqrada 1aad, laguma dabaqayo, qadarka ku baxa hawl galada laan aan deganayn Somaliland, iyadoo qadarkaasi uu yahay mid lagu fuliyay hawl galada ku xusan Qodobka 68aad.

**Qodobka 130<sup>aad</sup>**  
**Cashuurta la Saaro Lacagaha ay helaan Madadaalayaal**  
**ama ciyaartoy aan dalka deganayn**

- 1) Iyadoo la raacayo xeerkan, cashuurbaa la saarayaa madadaaliye kasta oo aan deganayn, ciyaartoy, fanaaniin, muusishanka, ama koox kasta oo madadaalo oo aan deganayn dalka, ama shakhsiyaad ciyaar yahano ah, oo ka helay dakhli bandhig ay ku qabteen Somaliland.

- 2) Cashuurta uu bixinayo qofka aan deganayn dalka, si qodobkan waafaqsan waa 10% qadarka guud ee:
  - a) Ajuurada uu ka helay, madadaaliyaha dadku oo aan deganayn dalka, ama dad ciyaar yahano ah; amaDakhliga laga helay, masraxiyad, muusik, ama koox faneed oo kale oo aanDeganayn dalka, ama ciyaar yahano
- 3) Cashuurbaa lagu saarayaa qodokan koox kasta iyada oo aan loo eegin in masraxiyadda ay leeyihiin xisaabteeda xubno ka mida kooxda ama kooxda oo dhan.
- 4) Xubin kasta oo kooxda ka mida si wada jir ah ama kala gooni ah ayay u bixinayaan cashuurta uu qodobkani ku jideeyay iyo iyada oo la raacayo Qodobka 133 (c) wayna bixinayaa cashuurta ku bislaatay intaanay ka tagin Somaaliland.

#### **Qodobka 131<sup>aad</sup>**

#### **Cashuurta Lacagaha ay helaan Qandraaslayaasha iyo Xirfadlayaashu aan dalka degenayn**

- (1) Marka loo eego qodobkan cashuurbaa la saarayaa qof kasta oo aan dalka deganayn oo dakhli ka kasbada adeeg qandraas oo Somaaliland ah
- (2) Cashuurta uu bixinayo qofka aan dalka deganayn sida qodobkani xusayo waa 10% qadarka guud ee lagu bixinayo qofka aan dalka deganayn oo uu ku qaadanayo adeeg qandraas oo Somaaliland ah.
- (3) Faqradda (1) laguma dabaqayo royaltiga ama khidmada maaraynta ee cashuurta lagu saaray Qodobka 129aad.
- (4) Qodobkan Adeegga Qandraaska Somaaliland waxa loola jeedaa qadraas, aan ahayn qandraas shaqo oo ah:-
  - a) Ujeedada ugu muhimsan ee qandraasku waa fulinta adeegyo oo dakhli ka soo saaraya illo Somaliland ah iyo
  - b) Alaab kasta oo lagu baahi tiray waxay xoojinaysaa oo kaliya ujeedada.

#### **Qodobka 132<sup>aad</sup>**

## **Cashuurta kuwa aan deganayn dalka ee fidiya adeegga gaadiidka iyo isgaadhsiinta**

- (1) Marka loo eego xeerkan waxa cashuur la saarayaa qof kasta oo aan dalka deganayn oo wada hawl ganacsi oo markab wadid, kiraysi gaadiid, ama pilot oo dakhli ka hela rakaab fuushan oo uu qaado, xamuul ama boost laga saaro Somaliland ama wadaha gaadiidka dhulka oo dakhli ka hela qaadidda xamuulka ama boost oo laga saaray Somaliland.
- (2) Cashuurta uu bixinayo qof aan dalka deganayn sida ku xusan faqradda (1) waa 10% qadarka guud ee uu qofku ka helay qaadidda waxana loo aqoonsanayaa ujeedooyinka xeerkan oo dhan inay tahay cashuur ku waajibtay dakhliga.
- (3) Faqradda (1) laguma dabaqayo dakhli kasta oo laga helo qaadidda rakaabka fuushan ama xamuulka iyo boostada la saaray, waa marka ay tahay oo kaliya isku wareejin gaadiid.
- (4) Haddii qofka aan dalka deganayn hawsha ganacsi ee uu wadaa tahay fariin gudbin isgaadhsiineed. Oo si nooc walba ah dakhliga cashuurta ku waajibtay ee uu qofku ka helay fariin gudbintaasi uu ku gudbinayo qalab Somaaliland yaalla, fariinta asalkeedu ha ka timaado Somaaliland ama yay ka imaanine, cashuurta ku waajibtay waa 5% qadarka guud ee laga helay fariin gudbintaas.

### **Qodobka 133<sup>aad</sup>**

#### **Qodobada Guud ee Lagu Saaray Cashuurta**

Cashuuraha lagu saaray qofka aan dalka deganayn eek u xusan qodpba 129aad, 130aad, 131aad iyo 132aad waxay dhamaystir u yihiin dakhliga cashuurta la saaray, iyo.

- a) Inaanu dakhligaas ka mid ahayn wadart dakhliga guud ee qofka aan dalka deganayn ee dakhliga helay.
- b) Looma ogola in la jaro wax kharash ah ama khasaare ah oo uu galay qofka aan dalka deganayn ee uu ku helayo dakhli iyo

- c) Qaanta qofka aan deganayn dalka waa lagu qancayaa haddii cashuurta uu bixinayo laga Reebo laguna bixiyo agaasinka dakhli ururinta sida waafaqsan qodobka 148aad.



**Qodobka 134<sup>aad</sup>**  
**Heshiisyada Caalamiga ah**

- (1) Heshiis caalami ihi haddii u dhexmaro Dawladda Somaliland iyo Dawlad Shisheeye ama dawladdo shesheeye wuxuu u shaqayn doonaa sidii iyadoo xeerkani xambaarsan yahay heshiiskaasi caalamiga ah.
- (2) Ilaa heer waxyaabaha ku dajisan heshiiska caalamiga ee Somaaliland qaybta ka tahay haddii aanay wada shaqayn Karin waxyaabaha ku dajisan xeerkan, waxa la raacayaa waxyaabaha ku dajisan heshiiska caalamiga oo ka qaalib noqonayaa waxyaabaha ku dajisan xeerkan, marka laga yimaado faqradda (5) ee qodobkan iyo Qodobada 47aad iyo 48aad oo ku tacaluqa cashuur ka fogaasho
- (3) Haddii heshiiska caalamigu tilmaamayo in ay jirto in la isku kaalmaysto wax isdhaafsi siman oo xagga ururinta cashuuraadka ah oo markaasna agaasinka dakhli ururintu codsi ka helo dhigiisa dal kale oo heshiiskaas waafaqsan oo ah in cashuur laga soo qaado qof Somaliland deggan qadar cashuur ah oo ku bisil qofkaas marka loo eego xeerka cashuurta dakhliga ee dalkaas, agaasinka dakhli ururintu wuxuu qoraal ku ogaysiinayaa qofkaasi inuu soo bixiyo qadarkaasj cashuureed ee lagu leeyahay isla taariikhda lagu cayimay ogaysiiska si loogu gudbiyo xafiiskii cashuurtaas lahaa ee soo codsaday.
- (4) Haddii qofku ku guul daraysto inuu u hogaansamo ogaysiiskaas ku xusan faqradda (3) qadarkaas suaashu ka taagan tahay dibaa loo soo xerayn karaa si loogu gudbiyo maamulkii iska lahaa ee dalka kale, sidii iyadoo cashuurtaasi qofku ku bixinayo xeerkan.

- (5) Haddii heshiiska caalamigu tilmaamo in dakhliga laga helay il Somaliland ah ay ka daysan tahay cashuurta Somaliland ama uu mudan yahay in laga dhimo tacriifada cashuurta Somaaliland, faaiidada cashuur dhaafkaas ama dhimistaas uma sugnaanin qofna kaasoo, sida ujeedada heshiisku tahay ah mid deggan, meel kale ooqandraas kula heshiisay waa haddii 50% ama ka badan ee mulkiyada asalka ee qofkaasi uu hayo qof ama dad aan deganayn meeshaas kale ee qandraasatay oo ujeedada heshiiska ah.

## **QAYBTA 10**

### **HABKA LA XIDHIIDHA CASHUURTA DAKHLIGA**

#### **Qodobka 135<sup>aad</sup>** **Galaynta xisaab celinta**

1. Marka la raaco qodobkan, cashuur bixiye kasta waa inuu keenaa xisaab celinta dakhligiis ee sanad dakhliyeedka wax aan ka badnayn afar bilood oo ka dambaysa dhamaadka sanadka.
2. Xisaab celinta dakhliguwaxay ahaanaysaa qaabka uu tusmeeyay Agaasinka Dakhligu waxa lagu muujinayaa xogta loo baahan yahay, waxana lagu soo gudbinayaa nidaamka uu tusmeeyay Agaasimuhu.
3. Iyada oo a raacayo faqradda (4) xisaab celinta dakhliga waxa saxiixaya cashuur bixiyaha waxana ka mida cadaynta in xisaab celintu sax tahay oo ay dhamaystiran tahay.
4. Haddii cashuur bixiyuhu sharci ahaan hawlgab yahay, xisaab celinta cashuur bixiyaha waxa saxiixaya iyada oo wadata cadayntii ahayd inay sax tahay oo ay dhamaystiran tahay ,wakiilka shaciga ah ee cashuur bixiyaha.
5. Cashuur bixiyaha wata ganacsi waa inuu soo raaciyaa xisaab celinta dakhliga la soo gudbinayo cadayn muujinaysa dakhliga iyo kharashka hawsha ganacsi iyo cadayn muujinaysa hantida iyo qaanta.
6. Qofka oo aan ahay shaqaalaha cashuur bixiyaha, isagu oo ajuuru ku shaqaynaya, diyaariya ama gacan ku siiya diyaarinta xisaab celinta dakhliga, ama xisaab

xidhka, ama dokumenti kasta oo kale oo lala soo gudbiyo xisaab celinta waa inuu saxiixaa xisaab celinta isagoo cadaynaya inuu hubiyay diiwaanada xisaabta iyo wixii kale ee dokumenti ah ee khuseeya ee uu leeyahay cashuur bixiyuhu, isagoo adegsanaya aqoontiisa qofnimo ee ugu wanaagsan, Xisaab celinta iyo dokumentiguba waa inay si sax ah u muujiyaan xisaabaadka iyo hanaankooda la xidhiidha.

7. Haddii qofku diido inuu saxiixo cadayntaas ku xusan faqradda (6) qofku waa inuu u soo gudbiyaa cashuur bixiyaha cadayn qoran oo sababaynaysa diidmada, cashuur bixiyuhu waa inuu cadayntaas diidmada soo raaciyaa xisaab celinta dakhliga.
8. Haddii inta lagu jiro sanad dakhliyeedka:-
  - a) Cashuur-bixiye dhinto
  - b) Cashuur-bixiyuhu kaco, albaabada loo laabo hawsha ganacsi ama uu galo xaraash si loo Gudo qaan.
  - c) Cashuur-bixiye uu Somaliland ka guuro muddo aan cayinnayn ama Agaasimuhu u si kale u arko in xaaladu ku habboon.
  - d) Agaasimuhu wuxuu ogaysiis qoran kaga dalban karaa cashuur bixiyaha ama amaano hayaha hadba xaaladu siday tahay, in la keeno wakhtiga ku cayiman ogaysiiska, xisaab celinta dakhliga cashuur bixiyaha muddo aan ka yarayn (12) bilood.
9. Marka uu cashuur-bixiyuhu ku guul-darraysto inuu keeno xisaab celinta Dakhliga sida uu waajibiyey qodobkani, Agaasimuhu ogeysiis qoran wuu ugu magacaabi karaa qof diyaariya soona gudbiya xisaab celinta, xisaab celintaa la keenayna waxa loo qaadan doonaa, si kasta oo loogu jeedo xeerkan, inay tahay xisaab celintatii qofka markii ugu horaysay looga baahnaa in uu xisaab celin keeno.
10. Haddii Agaasimuhu aanu ku qancin xisaab celinta dakhliga, Agaasimuhu isaga oo qoraal ogeysiis ah kaga dalbaya, qofka soo gudbiyay xisaab celinta inuu soo buuxiyo ama uu soo dhamaystiro xisaab celinta si intan ka faahfaahsan.

11. Haddaanu Agaasimuhu ogaysiis qoran aanu ku codsan, xisaab celin lama soo gubin karaan dadkani sida xeerkani dhigayo sanad dakhliyeedka -
- Qofka aan degganayn dalka haddii Qodobka 55 (4) ama Qodobka 133 (c) labadoodaba lagu dabaqo dakhliyada oo dhan ee uu ka helay illo Somaaliland qofkaasi sanad dakhliyeedka . .
  - Qofka deggan ee lagu dabbaqayo Qodobka 55aad (4) ama (5)
12. Cashuur-bixiyayaha looga baahan yahay inuu keeno xisaab celinta dakhliga sida uu farayo Qodobkani, qoraal buuna kaga codsan karaa agaasimaha in loo kordhiyo wakhtiga la keenayo xisaab celinta.
13. Codsiga lagu sheegay farqadda 12aad, waa in la sameeyo wakhtiga ay taagan tahay Keenidda xisaab celintu.
14. Haddii codsiga loo sameeyey si waafaqsan farqadda 12-aad iyadoo uu Agaasimuhuna ku qancayo inaan cashuur-bixiyuhu awood u lahayn inuu keeno xisaab celintaas wakhtigeeda sababta oo ah, maqnaansho uu Somaliland ka maqan yahay, Xanuun, ama sabab kale oo lagu qanci karo, Agaasimuhu wuxu awood u leeyahay inuu qoraal ahaan ku wargeliyo, inuu u dammaanad-qaado Cashuurbixiyaha muddo-kordhinta wakhtigii lagu keenayay xisaab celinta ilaa muddo aan ka badnayn (90) maalmood.
15. Qofka ay qancin weydo go'aanka ku sheegan farqadda 14aad, waxa kaliya ee u furan inuu go'aanka ku gacan-saydho si waafaqsan habka is-hortaag iyo Racfaan ee Xeerkan ku sheegan.
16. Dammaanadda muddo-kordhinta si waafaqsan qodobkan waxba Kama beddalayso muddada ay bislaatay bixinta cashuurta ku sheegan Qodobka 7aad.

### **Qodobka 136<sup>aad</sup>**

### **War celinta xogta Ganacsiga**

- Qof kasta oo Ganacsi ka wada Somaliland, isla markaana ka bixiya kharash Dakhliga ka soo gala il-dhaqaale oo Somaliland ah, ha ahaado dakhli adeeg,

oo aan ahayn Dakhli shaqo, Ajuuro, maarayn royaltiy, ama Dakhli kale oo uu cayimay agaasimuhu, waa in warbixin laga keenaa, Qodobkan waxa loogu xusay (keenidda xogta Ganacsi) iyada oo loogu keenayo agaasimaha 60 cisho gudohood, ka dib dhammaadka sannad-dakhliyeedka oo kharashkaas dakhli soo saar la sameeyay.

2. Ka soo Warbixinta Xogta Ganacsi waa in loo sameeyaa qaabka uu cayimay Agaasimuhu, waana in lagu muujiyaa xogta loo baahan yahay.
3. Iyada oo la raacayo farqadda koobaad (1), laguma dabbaqayo waxa kasta oo dakhli lagu bixiyay oo ay ku waajibto IL cashuur laga reebayo sida waafaqsan Qaybta 11aad ee cutubkan.

### **Qodobka 137<sup>aad</sup>**

#### **Xaqiijin**

1. Iyada oo la raacayo Qodobka 138aad, Agaasimuhu wuxuu xaqiijinayaa dakhliga cashuurta ku waajibtay ee cashuur bixiyaha oo ku salaysan xisaab celinta dakhliga ee cashuur bixiyaha iyo xog kasta oo kale oo sugan iyo cashuurta waajibtay sanad dakhliyeed, in la xaqiijiyo dakhligaas waxay ku siman taha Shan (5) sano gudahood laga bilaabo maalintii xisaab celinta la keenay.
2. Agaasimuhu wuxuu karaa, sida waafaqsan go'aan qaadashadiisa ugu fiican, inuu xaqiijin ku sameeyo dakhliga la cashuurayo ee cashuur bixiyaha iyo cashuurta ku waajibtay sanad Haddi:-
  - a) Cashuur bixiyeka baaqsado inuu keeno xisaab celinta sanad dakhliyeedka ama
  - b) Agaasimuhu ku qanci waayo xisaab celinta dakhliga sanad dakhliyeedka ee cashuur bixiyuhu soo gudbiyay.
3. Haddii agaasimuhu xaqiijin ku sameeyo sida waafaqsan faqradda (2) (b) agaasimuhu waa inuu raaciya cadayn sababaysan oo ah sababta uu agaasimuhu ugu qanci waayay xisaab celinta.
4. Xaalaaha lagu cayimay Qodobka 135aad (8) baahida loo qabo xisaab celinta dakhliga baddelkeeda



agaasimuhu wuxuu karaa, iyadoo la raacayo goaan qaadasha ugu fiican ee agaasimaha, inuu xaqiijin ku sameeyo dakhliga cashuurta ku waajibtay iyo cashuurta uu bixinayo cashuur bixiyuhu sanad dakhliyeedka.

5. Agaasimuhu wax qiimayn ah kuma samaynayo sanad dakhliyeedka qof kasta oo ku sagan hawlaha Qodobka 135aad (11) oo aan looga baahnayn keenidda xisaab celinta dakhliga ee sanadka
6. Haddii Xaqiijin la sameeyo sida waafaqsan qodobkan, agaasimuhu wuxuu cashuur bixiyaha u gaynayaa ogaysiiska qiimaynta uu ku muujinayo:-
  - a) Qadarka dakhliga ee cashuurta ku waajibtay ee cashuur bixiyaha
  - b) Qadarka cashuurta ah ee la bixinayo
  - c) Qadarka cashuurta ee hore loo bixiyay haddii ay jirto
  - d) Wakhtiga, meesha, iyo habka loo marayo diidmada qiimaynta
7. Haddii cashuur bixiye keenay xisaab celintii dakhliga ee sanadka,agaasimaha waxa loo arki doonaa inuu sameeyay xaqiijinta dakhliga la cashuurayo ee cashuur bixiyaha iyo cashuurta uu ka bixinayo dakhligaasi sanadkaas ee ah qadarka mid walba xisaab celintu keeda ku muujisay
8. Haddii faqradda (7) la dabaqo xisaab celinta cashuur bixiyaha waxa loo tixgalin doonaa ogaysiis qiimayn ah oo uu gaadhsiiyay cashuur bixiyaha agaasimuhu maalinta xisaab celinta la keenay ama taariikhda dhabta ah ee xisaab celinta la keenay, hadba ta dambaysa.
9. Inkasta oo faqradda (7) sideeda tahay hadana agaasimuhu wuxuu u samayn karaa qiimayn cashuur bixiyaha xaalad kasta oo agaasimuhu u arko inay tahay lagama maarmaa
10. Haddii agaasimuhu soo dalaco qiimayn sida waafaqsan faqradda (9), wuxuu raacinayaa agaasimuhu cadayn uu ku sababaynayo sababta uu ugu arkay inay tahay lagama maarmaan inuu sameeyo qiimayntaas.

11. Qodobkan waxa lagu dabaqayaa oo kaliya cashuur bixiyayaasha lagu cayimay ogaysiiska ee uu ugu daabacay agaasimuhu Daabacaadda Rasmiga ee Dawladda Somaaliland cashuur bixiyahaan oo Qodobkan lagu dabaqaayo dakhliyeedka.
12. Marka la raaco Farqada (13) iyo (14), agaasimuhu wuxuu awoodaa (3) saddex sano gudahood ka dib gaadhsiinta ogaysiiska qiimaynta inuu sameeyo qiimayn dheeraad ah oo wax lagaga baddalayo qiimayntii hore loo sameeyay.
13. Haddii baahida qiimaynta dheeraadka ahi ku timaaddo sabab isdaba marin ah, wax dambi culus keenaya ama ulakac oo ka timid cashuur bixiyaha ama qof magaciisa ku hadlaya ama xog cusub oo la helay oo la xidhiidha cashuur la bixinayo sanad dakhliyeed kasta, agaasimuhu wuxuu u samayn karaa qiimayn cusub oo dheeraad ah sanad dakhliyeedkaasi.
14. Agaasimuhu uma samayn karo qiimayn dheeraad ah oo uu wax kaga baddalayo qiimayn khusaysa qadar hore loo qiimeeyay sanad dakhliyeedka hawshiisa lagu jiro, oo la xidhiidha qadar hore wax looga badalay ama loo dhimay si waafaqsan amar maxkamadeed, ilaa uu amarkasi ku yqimaaddo wax isdaba marin, xumaan qeexan ama ulakac mooyaane.
15. Qiimaynta dheeraadka ah waxa loo tixgalin doonaa si kastaba qiimayn waafaqsan xeerkan
16. Isla marka si macquul ah loo qaban karo ka dib dhamaadka wakhtiga xisaab celinta lagu keenayo sanad dakhliyeedka ee waafaqsan xeerkan, agaasimuhu waa inuu soo saar liis taxane ahoo ah cashuur bixiyayaasha dakhligooda la qiimeeyay ee la xidhiidha sanadkaasi oo lagu xusayo qodobkan liiska dakhligooda la qiimeeyaywaana inuu liiskaasi xambaarsan yahay:-
- Magaca iyo meesha loogu hagaagayo ee cashuur bixiyaha.
  - Qadarka cashuurta ku waajibtay ee qiimaynta lagu sameeyay iyo
  - Qadarka cashuurta ee la bixinayo

17. Eedayn kasta, ha ahaato madani ama yay ahaanin, sida xeerkani qabo, dokumentiga u muuqda inuu yahay mid laga soo minguuriyay liiska qiimaynta ee uu ansixiyay agaasimuhu wuxuu noqonayaa nuqulka dhabta ah ee qoraal galinta liiska khusaysa, waxayna cadyn ku filan u noqonaysaa waxyaabaha lagu dhax muujiyay.

18. Maha Wax ogaysiis qiimayn ah, awood siin, ama dokumenti kale oo u muuqda in la sameeyay, la bixiyay ama lagu fuliyay si waafaqsan xeerkan.

a) Waa la diidadayaa ama waxa loo arkayaa wax aan ansax ahayn ama wax ka Madhan qaabkii loo doonayay.

b) Waxa saamaynaya sabab khalad dhacay, cillad ama wax ka tagid oo meesha ku Jirta;

Haddii ay tahay nuxurka iyo natiijadu mid waafaqsan xeerkan iyo qofka dakhligiisa la qiimeeyay ama la doonayo in dakhligiisa la qiimeeyo amaba dokumentigu saameeyay, waa lagu cayimayaa sida waafaqsan ujeedada guud.

19. Haddii agaasimuhu ku qanco in amarka uu sameeyay ama dokumentiga u bixiyay agaasimuhu uu xambaarsan yahay khalad si qeexan looga arki karo qoraalada Qasnada iyo inuu khalaadkaasi yahy mid aanan ku lug lahayn muran ka dhax jira turjumaadda xeerka ama xaqiiqada arinka, agaasimhu wuxuu awoodaa isagoo ujeedadiisu tahay inuu saxo khaladka, inuu wax ka baddalo amarka ama dokumentiga wakhti kasta oo ka horeeya dhamaadka laba sano laga bilaabo maalint la sameeyay ama la bixiyay amarka ama dokumentiga.

### **Qodobka 138<sup>aad</sup>**

### **Diidmada iyo Racfaanka**

1. Cashuur biyaha aan ku qancin qiimaynta dakhligu diidmuu ka keeni karaa qiimayntaasi Isagoo u soo gudbinaya diidmadaasi agaasimaha kuna keenaaya 30 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta ogysiiska qiimaynta loo geeyay.

2. Diidmada qiimayntu waxay ahaanaysaa qoraal wana inay si cad u muujinaysaa waxa lagu sababeeyay.
3. Agaasimuhu wuxuu awoodaa isagoo raacaya codsiga qoran ee cashuur bixiyaha, inuu u dheereeyo wakhtiga lagu keenayo diidmada iyada oo agaasimuhu ku qanacsan yahay in dib u dhaca keenitaanka diidmadu ay sabab u tahay maqnaashihiisa Somaliland uu ka maqan yahay, xanuun awgeed ama sabab kale oo macquul ah
4. Haddii agaasimuhu diido inuu siiyo wakhti kordhin sida waafaqsan faqrada (3), cashuur bixiyuhu wuxuu waydiisan karaa Gudida Dacwadaha ku xusan cutubka 6 ee xeerkan inay dib u eegto go'aanka 45 (afartan iyo shan) maalmood gudahood ka dib ogaysiiska goaanka la soo gaadhsiiy
5. Marka diidmada laga fiirsado ka dib, agaasimuhu wuxuu karaa inuu tixgaliyo diidmada gabi ahaa ama qayb ahaan, sababtaas darteedna wax ka bedel ku sameeyo, qiimaynta ama inuu ku gacan saydho diidmadaas, goaanka agasimahana waxa lagu xusi doonaa inuu yahay goaan diidmo
6. Isla marka ay wax qabasho leedahay ee uu goaanka diidmado dhaco, agaasimuhu wuxuu gaadhsiinayaa cashuur bixiyaha ogaysiiska goaanka.
7. Haddii goaanka diidmada aanu agaasimuhu gaadhin sagaashan (90) maalmood gudahood, ka dib markuu cashuur bixiyuhu diidmada u keenay agaasimaha, cashuur bixiyuhu wuxuu yeeli karaa isagoo agaasimaha qoraal ku ogaysiinaya, inuu u qaato in agaasimuhu goamiyay diidmada ka dib markuu aqbalay.
8. Haddii cashuur bixiyuhu yeelo sida ku xusan faqradda (7) waxa loo arki doonaa in cashuur bixiyaha la gaadhsiiyay goaanka diidmada maalinta goankiisa loo geeyay agaasimaha.
9. Cashuur bixiyaha ku qanci waaya goaanka diidmada wuxuu ka codsan karaa Gudida Dacwadaha cashuuraha ee lagu aasaasay si waafaqsan cutubka 6 aadee xeerkan

10. Cashuur bixiyaha ku qanci waaya goaanka Gudida Dacwadaha cashuuraha wuxuu racfaan u gaysan karaa Maxkamadda Gobolka muddo (30) sodon maalmood gudahood markii loo keenay ka dib go'aanka diidmada.
11. Qofka racfaan u keensada Maxkamadda gobolka, shan maalmood oo maalmaha shaqadaah gudahood wuxuu u keenayaa agaasimaha nuqulka racfaanka
12. Racfaanka Maxkamadda Gobolka loo geeyay sida waafaqsan faqradda (10) waxa loogu gayn karaa oo kaliya arrin suaal sharci ka taagan tahay codsiga racfaankuna waa inuu muujiyaa su'aasha ama su'aalaha xeer ee ka taagan racfaanka.
13. Dhinaca wata dacwadda hor taalla maxkamadda gobolka ee ku qanci waayay goaanka maxkamadda gobolka iyada oo arrintu maxkamadda sare ku egtahay, ayuu ka codsan karaa maxkamadda sare inay dib u eegto goaankaas
14. Diidma kasta oo la diido qiimaynta, racfaan kasta oo laga qaato goaanka diidmada oo loo qaato maxkamadda Gobolka, dib u eegis kasta oo ay ku samayso Gudiga Dacwadaha cashuuruhu goaanka diidmada, ama racfaan kasta oo looga qaato goaanka maxkamadda Gobolka ama Gudiga Dacwadaha cashuuraha oo la xidhiidha goaanka diidmada, waajibku wuxuu saaran yahay cashuur bixiyaha inuu xaqiijiyo ixtimaalka ilaa heerka qiimaynta agaasimuhu ay ka badbadis tahay ama ay khaldan tahay.

### **Qodobka 139<sup>aad</sup>**

#### **Bixinta cashuurta la hore marshey**

1. Qofka ka hela ama rajeynaya inuu dakhli helo inta lagu jiro sanad dakhliyeed taas oo aan ahayn ama aan ahaan doonin mid isheeda dakhli aan laga sii qabanin cashuur sida waafaqsan Qodobka 143 ama mid cashuuri ku waajibtay sida waafaqsan farqada (5) wuxuu mudan yahay inuu sii bixiyo cashuur bixin aan rasmi ahayn sida waafaqsan qodobkan.
2. Cashuur bixiyaha sii hor mariya cashuur bixin, oo aan qof kaliya ahayn waa inuu Horumariska cashuur

bixineed u ku bixiyaa laba qaybood ka hor ama isla maalinta ugu dambaysa bisha lixaad iyo bisha laba iyo tobnaad ee sanad dakhliyeedka, oo ku lug leh qaanta cashuurta dakhliga ee cashuur bixiyaha ee sanadkaasi.

3. Iyadoo loo jeeddo faqradda (2), qadarka la sii dhiibay ee cashuurta hore-mariska qayb kasta ee sanad dakhliyeedkaas waxa loo xisaabinayaa si waafaqsan qaacidadda:-

**(50% x A) – B**


Haddii:- **A** = Qiyaasta casuureed ee cashuur bixiyuhu ku bixinayo horumariska cashuureed ee sanad dakhliyeedka, **B** = Waa qadarka cashuur kasta oo la hayo sida waafaqsan xeerkan, ka hor maalinta ay taagan tahay in la bixiyo qaybta cashuurta, taasoo uu ka bixinayo cashuur qadar kasta oo dakhli oo uu helay cashuur bixiyuhu sanad dakhliyeedka oo ka mid ah wadarta dakhli ee cashuur bixiyaha sanadkaasi..

4. Cashuur bixiyaha shaqsiga ah waxa ku waajib ah in ay cashuurt hore-marin ah ku bixiyo afar qaybood, ka hor ama maalinta ugu dambaysa bisha sadexaad, lixaad, sagaalaad iyo laba iyo tobnaad ee sanad dakhliyeedka oo ku lug leh qaanta cashuur bixiyaha ee cashuurta dakhliga ku waajibaysa sanadkaasi.
5. Iyadoo ujeedadu tahay sida ku xusan faqradda (4), qadarka ah qayb kasta oo horemarin ah ee sanad dakhliyeedka waxaa lagu xisaabin doonaa si waafaqsan qaacidadan- -

**(25% x A) – B**

Marka:- **A= Cashuurta la qiimeeyey ee saran dhiibaha cashuur hore maris sanad dakhliyeedkaas,** **B** = Waa qadarka cashuur kasta oo la sii guddoomay si xeerkan waafaqsan,ka hor muddadii ay bislaanaysay bixinta qaybaha deebaajiga saran qadar kasta oo uu helay sanadkaasi inta lagu jiray sanad

dakhliyeed, kaas oo lagu dari doono dakhli duuban ee sanad kaasi



6. Ka dib qoraalka codsiyeedka cashuur bixiyaha, agaasimuhu haddii sabab macquul ah laala yimaado, wuu kordhin karaa wakhtiga ay ahayd in lagu guddo qaybaha cashuurta hore-mariska ah ama aqbali karaa bixinta qaybo isleeg ama kale badan.
7. Qaybaha cashuurta hore -mariska ah, markay bislaatay bixinteeddu, waa qaan u bislaatay dawladda Somaliland, **Agaasimuhu waxa uu Tilmaamaha xeerkan ayuu u raacayaaururinta iyo soo xaraynta cashuurta aan rasmiga ahayn.**
8. Qayb kasta oo hour-mariska cashuurta ah waa in la galiyaa xisaabta cashuurta Dakhliga la qiimeeyay ee cashuur bixiyaha sanad dakhliyeedka ee qaybaha cashuur bixintu khusayso.
9. Haddii isugeynta qaybaha la galiyey Xisaabtu sida waafarsan farqada(8) ay ka badato Cashuurta Dakhliga Cashuur Bixiyaha ee la qiimeeyey sanadkaasi, dheeraadka waxaa maaraynaya Agaasimaha sida waafaqsan Qodobka 141aad (3)
10. Cashuur bixiyaha wax qadima qaybta cashuurtaas ee uu bixiyey waa loo celinayaa haddii aanu ahayn ka waafqsan faqrada 9aad.
11. Sida uu dhigayo Qodobkani” Cashuur Bixin Odoros ah’ macnaheedeedu wuxuu ku yaala Qodobka 140aad.

### **Qodobka 140<sup>aad</sup>**

#### **Cashuurta Odoroska ah ee la bixinayo**

1. Cashuurta Odoroska ah ee la bixanayo ee Cashuur Bixiyaha Cashuurta qadima ee sanad dakhliyeedku waa:-
  - a) Marka ay noqoto Cashur Bixiyaha Qodobka 55aad (5) lagu dabakhay qadarka lagu gooyay shaxda sadexaad ee xeerka sanadkaas cashuurta laga bixinayo Dakhliga guud ee Cashuur bixiyaha, cashuurtiisa la odorosay sanadkaas, sida waafaqsan faqrada 2aad.

- b) xaalad kasta oo kale qadarka la xisaabiyay iyadoo lagu xisaabinayo tacriifada cashuurta ee shaqaysa sanadkaas, oo la saarayo qadarka uu odorosay cashuur bixiyuhu inay tahay dakhliga cashuurta ku waajibtay ee cashuur bixiyaha sanadkaas sida waafaqsan faqradda 3aad
2. Cashuur qadime kasta oo Qodobka 55 (5) lagu dabaqay, waa inuu soo gudbiyaa odoroska wadarta dakhligiisa guud sanad dakhliyeed kasta waana inay la socota odoroska dakhliga sanadka cadaynta wadarta dakhliga guud ee dhabta ah ee cashuur bixiyaha ee sanad dakhliyeedkii ka horeeyay.
  3. Cashuur qadime kasta oo aan ahayn midka lagu dabaqayo Qodobka 55 (5) waa inuu soo Gudbiyaa odoroska dakhliga la casuurayo ee uu heli doono cashuur bixiyuhu sanad dakhliyeedka oo ku lug leh cashuurta aan rasmiga ahayn oo uu bixinayo ama laga yaabo inuu bixiyo cashuur bixiyuhu.
  4. Odoroska cashuur qadime si waafaqsan, faqrada (2) ama (3), waa inay noqoto qaabka uu u cayimay agaasimuhu iyadoo loo gayn doono agaasinka wakhtiga ay bislaatay in la bixiyo qaybta ugu.
  5. Odoroska cashuur qadimaha ee ku xusan faqradda (2) ama (3) dhaqan galkiisu wuxuu ahaanayaa sanad dakhliyeedka oo dhan hadaanu cashuur bixiyuhu u soo gudbinin qadimaadda agaasinka mooyaane, ku noqoshada odoroska waxa lagu xisaabinayaa oo kaliya cashuurta ah ee uu bixinayo cashuur bixiyuhu ka dib maalinta dib ugu noqoshada odoroska loo keeno agaasinka.
  6. Hadii uu cashuur bixiyaha cashuurta qadimaa ku guul daraysatay inuu keeno wadarta dakhliga guud ama dakhliga la casuurayo sida laga doonayo ee ku xusan faqradda (2) ama (3), odoroskaas cashuur bixiyaha ee sanad dakhliyeedka waxay ahaan doontaa taa uu agaasimuhu qiyaasay oo odoros ah.


**Qodobka 141<sup>aad</sup>**  
**Lacag Celinta**



1. Cashuur bixiyuhu wuu ka codsan karaa Agaasimaha Cashuur celin, taas oo la xidhiidha, sanad dakhliyeed kasta, oo qofku cashuuta uu bixiyay tahay mid laga reebay, qaybo cashuur bixineed, ama si kale uu u bixiyay oo ka badan cashuurtii lagu qiimeeyay ee ku bislaatay ee ahayd inuu bixiyo, sanadka.
2. Codsii lacag celinta cashuureed ee ku xusan qodobkan qoraal baa loogu gaynayaa agaasimaha Shan sano gudahood laga bilaabo hadba tii dabaysa oqran, shan sano ka dib wakhtiga:-
  - a) Maalintiiuu Gaadhsiiyay Agaasimuhu ogaysiiska qiimaynta, ee sanad dkhliyeedka codsiga lacag celintu la xidhiidho.
  - b) Taariikhda cashuurta la bixiyay.
3. Haddii Agaasimuhu ku qanco in cashuur siyaado ah la bixiyay, waa in uu :-
  - a) Wuxuu ka Goynayaa siyaadada cashuur kasta oo ku bislaata cashuur bixiyaha.
  - b) Haddii waliba dheeraad sii hadho oo ay dhacdo, wuxuu ku gudayaa qaan kasta oo ku taagan cashuur bixiyaha oo uu ku bixinayo cashuuraad kale oo aan lagu muransanayn ama wuxuu ku bixinayo qadimaad cashuureed inta lagu jiro sanad dakhliyeedka ee cashuur celinta la samaynayo, iyo
  - c) loo celiyo inta u hadhay cashuur bixiyaha haday jirto.
4. Haddii Agaasimaha looga baahdo inuu qof u celiyo qadar cashuureed oo dheeraad ah oo ku imaanaysa :-
  - a) Codsii lacag celineed oo loo keenay agaasimaha si waafaqsan xeerkan, ama
  - b) Goaan Gudida Dacwadaha Cashuurahaama maxkamad caadiya ee ku xusan Qodobka 138aad Agaasimuhu waa inuu celiyaa,ajuurada lacag celinta dambe oo dhan 2% bil kastaba laga bilaabo maalinta qofku codsiga lacag celinta keenay ilaa maalinta ugu dambaysa ee lacagcelinta la samaynayo..
5. Agaasimuhu waa inuu 30-cisho gudahood, go'aanka uu ka gaadhaay codsiga lacag Celinta si waafaqsan

faqrada (1) gaadh siiyaa qofka soo codsaday lacag celintaqoraal, uu ku ogaysiinayo go'aanka.

6. Qofka ku qanci waayay go'aanka lagu sheegay faqrada (4) (a) ee qodobkan waxa kaliya ee uu ku diidi karaa go'aankaas, isagoo raacaya habka ishor taag iyo Abiilka ee ku sheegan Qodobka 138aad.



### **Qodobka 142<sup>aad</sup>**

#### **Xisaab Celinta Cashuureed ee Kiradda**

1. Qofka la saaray cashuur waafaqsan qodobka shanaad, waa inuu keenaa xisaab celinta dakhliga kirada sanad dakhliyeed kasta ugu dambayn bisha afraad ka dib sanad dakhliyeed kaasi.
2. Qodobka 135aad ilaa 141aad ayaa lagu dabaqayaa, wax ka badal kasta oo lagu sameeyo cashuurta lagu soo rogay Qodobka 56aad.
3. Si looga fogaado shaki, Agaasimuhu waxa uu cayimayaa qaabka xisaab celinta dakhliga kirada ee waafaqsan xeerkan

### **QAYBTA 11**

#### **CASHUUR KA REEBID IL DAKHLI**

### **Qodobka 143<sup>aad</sup>**

#### **Cashuurta ay Reebayaan Loo Shaqeeyayaashu**

1. Loo shaqeeye kasta waa inuu ka reebaa cashuurta dakhliga kasabka shaqo ee uu siiyo shaqaalihiiisa sida uu farayo xeer nidaamiyaha lagu sameeyay Qodobka 51aad.
2. Waajibaadka loo shaqeeyaha ah inuu cashuurta ka reebo shaqaalihiiisa sida waafaqsan faqrada (1) hoos looma dhigayo ama meeshana lagama saarayo sababta oo ah loo shaqeeyuhu xaq buu u leeyahay ama haddii si kale loo dhigo waa waajib saran inuu ka soo jaro oo uu ka reebo qadar cashuur ah lacag kasta oo uu shaqo la qabtay ku bixinayo.
3. Waajibaadka loo shaqeeyaha inuu cashuur reebo sida waafaqsan faqradda (1) waa la fulinayaa in kasta oo ay jirto in xeer kasta oo kale sheegayo in dakhliga

shaqada ee shaqaaluhu aan la dhimayn ama aanay ahayn wax cashuur loo qabsan karo.

**QAYBTA 11**  
**CASHUUR KA REEBID IL DAKHLI**  
**Qodobka 144<sup>aad</sup>**  
**Bixinta saami Qaybsiga Faa'idada Ee**  
**Saamilayda Daggan Dalka**



1. Shirkadda deggan dalka ee siisa saami faaiido qaybsi saamilay deggan dalka waa inay cashuurta ku waajibtay ka reebtaa wadarta la bixinayo kana reeba tacriifada dhan 10%oo wadartaasi.
2. Qodobkan laguma fulinayo haddii dakhliga qofka shakhsiga ahi ka daysan yahay cashuurta marka uu ku jiro gacanta saamiilaha.

**Qodobka 145<sup>aad</sup>**  
**Bixinta Kharashka Alaabta Iyo Adeegga**

1. **Haddii** Dawladda Somaaliland, Hayad dawladeed, Dawladda dagaanku, Shirkad kasta oo ay gacanta ku hayso Dawladda Somaaliland ama cid kasta oo loo xil saaray oo uu ogaysiiya Wasiirku, oo qodobkan lagu xusayo wax bixiye oo uu biyo qadar ka badan hal million shillin isagoo ku siinayo qof kasta oo Somaaliland jooga,
  - a) Haqab tirka alabbo ama shayyaal nooc kast oo ay ahaadaan.
  - b) Haqab tirka nooc kasta oo adeega kharash bixiyuhu waa inuu cashuurta ka reebaa wadarta lacagta la bixinayo laguna reeba tacriifo dhan 6% lana gudoonsiiyaa qofka cashuurta laga reebay xaashida lacag Qabashada guud cahuur ka reebidda qodobkan waxa waajibinaya Qodobka 151aad.
2. **Haddii:-**
  - a) Haqabtirku yahay mid si kala gooni ah loogu keeno alaabo ama adeeg loogu fidiyo oo haqabtir kastabaa yahay hal million oo shilin ama ka yar iyo

b) Waxaa macquul ahaan lahayd in alaabtaas, ama waxyaabahaas kala goonida loo keenay ama adeegyadaas loo fidiyay loo samayn lahaa hal haqabtir oo ka badan hal millionshilin.

3. Qodobkan looma raacayo kuwan:-

- a. Haqab-tirka Warshadaha iyo Mishiinada
- b. Haqab-tirka daaweynta dadka iyo xoolaha
- c. Haqab-tirka Alaabta Waxbarashadad
- d. Haqab-tire:-

I. Ka cashuur dhaafka leh sida waafaqsan xeerkan ama

II. Ka Agaasimuhu ku qanco inuu si joogto ah ugu hogaansan yahay wajibaadka la saaray haqab-tiraha sida waafaqsan xeerkan.

### **Qodobka 146aad**

#### **Bixinta kharashaadka caalamiga ah**

1. Qofka kasta oo kharash bixiya noociisu ku xusan yahay Qodobka 129aad ama 130aad waa inuu ka reebaa Cashuurta saran kharashkaas, sida uu xusayo qodobka khuseeya.
2. Xayaysiye kasta, ama Wakiil, ama qof la mid ah:-
  - a) Xuquuq Hawleed ama xuquuq shaqo oo la siiyey qof aan dalka daganayn oo ah Maaweeliye,ama Ciyaartow ama
  - b) Qofka masuulka ka ah Ururinta Dakhliga guud ee hawl qabadka Masraxiyada, Muusig, ama kooxo kale oo aan dalka dagaynayn oo madadaaliyaal ah ama Ciyaartow ah, waa inuu ka reebaa cashuurta ku waajibtay Xuquuqda shaqo ama dakhliyadaas.
3. Cid kasta oo Cashuur dhaaf haysataa wuu ka reeban yahay in loo raaco Qodobkan kor ku xusan.

### **Qodobka 147aad**

#### **Reebitaanka Cashuurtu Waa Dhamaystir**

Hadii cashuurta lagu reebo si waafasan Qodobka 144aad ee kharashka lagu bixiyo faaiida qaybiska lama siiyo qof deggan dalka:-

- (a) Cashuur reebiddu waa dhamaystir.
- (b) Qaan cashuureed oo danbe la saari mayo cashuur bixiyaha oo ku lug leh Dakhliga cashuurta la xidhiidho.
- (c) Dakhliga lagu dari mayo dalh iyo kale oo cashuur bixiyuhu leeyahay ujeedaduna tahay xaqiijinta Dakhliga la cashuurayp
- (d) Waxba loo jari mayo kharash iyo khasaare loo galay in lagu soo saaro dakhli.
- (e) Lacagcelin cashuureed la samayn mayo.

### **Qodobka 148<sup>aad</sup>**

#### **Bixinta Cashuur ta la Reebay**

1. Wakiilka cashuurta reebay waa inuu agaasinka ku xereeyaa cashuurta uu reebay ama uu reebi doono sida qaybtan ku xusan Shan iyo Tobn maalmood 15 gudahood ka dib dhamaadka bisha uu bixiyay kharashka casuurta ku waajibtay.
2. Tilmaamaha xeerkan ee la xidhiidha ururinta iyo dib u soo xeraynta cashuurta waxa lagu fulinayaa qadar kasta oo waafaqsan qaybtan sidii iyadoo cashuur ah.

### **Qodobka 149<sup>aad</sup>**

#### **Ku guul Daraysiga in Cashuurta la Reebo**

1. Wakiilka cashuurta reeban haddii u ku guul daraysto inuu cashuur reebo sida waafaqsan xeerkan, isaga naf ahaantiisay saran tahay inuu ku bixiyo agaasinka qadarka cashuurta ee aan la reebin, laakiin wakiilka cashuurta reebaa wuxuu xaq u leeyahay inuu dib uga qaato qadarkaas qofka lacagta la siiyay ee cashuurta lagu leeyahay.
2. Tilmaamaha xeerkan ee la xidhiidha ururinta dib u soo xeraynta cashuurta waxa lagu fulinayaa qaanta lagu saaray faqrada (1) sidii iyadoo cashuur ah.

### **Qodobka 150<sup>aad</sup>**

#### **Keydinta qoraalada wax laga bixiyay iyo Cashuurta Laga Reebo**

1. Wakiilka cashuurta reebaa waa inuu hayaa, xafidaa una diyaariyaa kormeer uu ku sameeyo agaasimuhu, kayd xasuuseed oo muujinaya iyada oo ay la xidhiidho sanad dakhliyeed kasta:-
  - (a) Bixinta loo sameeyay qaataha
  - (b) Bixinta Cashuurta la reebay
2. Qasnadaha xusuuseed ee lagu xusay faqradda (1) waa inuu xafidaa wakiilka cashuurta reebaa muddo dhan (5) Shan sanad oo sanad dakhliyeedyo ah ka dib dhamaadka sanad dakhliyeed uu la xidhiidho qasnadaha xasuustu.
3. Wakiilka reeba cashuurta waa inuu siiyaa qofka kharashka la siinayo cadaynuujinaysa cashuurta lagu yeeshay oo lagu bayaaminayo lacagaha la siiyay qadarkooda iyo cashuurta laga reebay sanad dakhliyeedka.
4. Qofka lacagaha qaatay waxa looga baahan yahay inuu xisaab celin dakhli keeno ay ku lifaaqan yihiin cadaymo wixii la siiyay sanad dakhliyeedkaasi xisaab celinteda la keenay.
5. Agaasimuhu wuxuu ka codsan karaa wakiilka cashuurta la reebay inuu u ogolado hantidhawr hubiya kaydkiisa xusuus dhawrka si uu ansixiyo saxnaanta cadaynta cashuurta lagu yeeshay.

### **Qodobka 151<sup>aad</sup>**

#### **Hab dhaqanka iyo mudnaanta cashuurta la reebo**

1. Wakiilka cashuurta reebaa cashuurta uu reebo ee waafaqsan qodobkan:-
  - a) Uu amaano u hayo wakiilka cashuurta reebaa oo ay leedahay Dawladda Somaaliland.
  - b) Aan waxba loo qabsan Karin marka ay noqoto daynta ama qaanta cashuurta la reebay oo la soo xerayn waayay Iyo marka ay arrintu noqdo in wakiilka cashuurta reeba hantidiisa dayn lagu yeeshay loo xaraasho ama kaco, cashuurta uu reebay ee uu hayay sida xeerkan xusayo qayb ka noqon mayso hantida daynta, ama musalafnimada loo xaraashayo, ama la wareejinayo, agaasinka

dakhli ururintuna waa ka leh qaybta ugu horaysa marka hantidaas la qaybinayo.

2. Qadar kasta oo wakiilka cashuurta reeba looga baahan yahay sida xeerkani xusayo inuu ka reebo kharashka uu bixinayo:-
  - a) Waa ta ugu horaysa ee la saarayo kharashka
  - b) Cashuur reebiddu way ka mudan tahay jaritaan kasta oo kale oo wakiilka cashuurta reebaa looga baahan yahay inuusameeyo ooku imaanaysaamar maxkamadeed ama xeer kasta oo kale.
3. Qadarka cashuurta laga reebay ee ku xusan qaybtan waxa loola dhaqmayaa dakhli uu helay qofka bixinayaa marka cashuurta laga reebayo.
4. Wakiilka cashuurta ku reebay sida ku xusan qaybtan oo qadarkaa uu reebayna u xawila agaasinka dakhliga waxa loola dhaqmayaa inuu bixiyay qadarka uu cashuurta ka reebay oo uu siiyay qofka cashuurta laga reebay ujeedaduna tahay inay meesha ka baxdo sheegasho kasta oo ka timaadda qofkaas kharasha la siinayo.
5. Cashuurta laga reebay kharashka la bixinayo sida ku xusan qaybtan waxa loo qaadan doonaa inuu bixiyay qofka kharashka la siiyay marka laga reebo cashuurta dhamaystirka ah, cashuurta ururiyaa waa inuu ka reebaa cashuurta guud ahaan qofka sanad dakhligiisa lagu qiimeeyay, sababta oo ah waa qayb qiimaynta laga bixiyay.

### **CUTUBKA 3 CASHUURTA BADEECADAHA IYO TA ADEEGAYADA**

#### **QYABTA I CASHUURTA BADEECADAHA**

##### **Qodobka 152<sup>aad</sup> Cashuurta Lagu waajibiyay Badeecadaha**

1. Cashuurtani waxay ku waajibtay:
  - a) Badeecad kasta oo cashuurtani ku waajibto, sida ku cad Qodobka 153aad ee uu leeyahay Wershadle diiwaangashani, iyo

- b) Badeecad kasta oo la soo dejiyay cashuurtanina ku waajibtay, sida ku cad Qodabka 154 aad.
2. Tacriifada Cashuurta badeecadaha wershaduhu soo-saaraan waa 5% (boqolkiiba Shan) oo ah qiimaha badeecada cashuur galka ah, marka laga reebo alaab la dhoofinayo, taasi oo tacriifta cashuurta tahay.
  3. Tacriifada cashuurta ku waajibtay badeecadda la soo dejiyey waa 5% oo ku dhacaya qiimaha badeecada la soo dejiyey.
  4. Cashuurta la bixinayo ee badeecadkasta oo cashuur galka ah waxa bixinaya Wershadlaha diiwaangashani waxa uu u gudbinayaa bixinteda Agaasimaha, ama waxa bixinaya soo dejiyaha; hadii aanu soo-dejiyuhu ahayn soo-saare diwaan-gashan, soo dejintana u isicmaalaya in lagu so saaro badeecada uu soo saarayo wershadlaha Diiwaangashan.
  5. Cashuurta waajibka ku ah wershadlaha soo-saara badeecadaha cashuur galka ah, waxa ay waajibaysaa Lana bixinayaa marka la keeno ama ay iib-gasho badeecadaha la soo saaray xisaabcelinta badeecadaasna ay mudadeedii taagan tahay.
  6. Cashuurta ku waajibtay soo dajiyaha waxay waajibaysaa marka ay timaado goobta (*Marsada*) ay ka soo degtay badeecadaas, isla markaas ururintedana waxaa laga qaadi doonaa Cashuurta kastamada ee ku xusan xeerka kastamada Soomaaliland, ee dhaqan galka ka ah.
  7. Kalmada “dhoofinta badeecadaha” (export of goods) macne ahaan waxay noqonaysaa badeecadkasta oo loo dhoofinayo dalka debadiisa ama loo diyaariyay halka loo dhoofinayo ama lagu isticmaalayo meel ka baxsan gudaha Dalka Somaliland.

**Qodobka 153<sup>aad</sup>**  
**Badeecadaha Cashuur gal ah**

1. Erayga “Badeecadda Cashuur galk ah” (*taxable supply*) waa badeecad kasta (oo aan ahayn kuwa cashuurta laga reebay (exempted) oo ah badeecad uu soo saaray wershadle, kuna farsameeyay gudaha Somaliland loona sameeyay arin xidhiidh la leh ujeedo ganacsi.



2. Erayga “keenida Alaabta “supply of goods” waa:
  - a) Badeecad kasta marka lakala iibsado, lagu doorsady mid kale, ama si kale loo wareejinayo xaqa isticmaalka lahaanshaha badeecada ama
  - b) Badeecad kasta oo looga faa’iidaysto si gaar ahaaneed, xitaa haddii taasi ay tahay mid lagu kasbaday badeecada cashuurta laga reebay, ama
  - c) *Badeecad kasta oo deeq ahaan loo siiyay* isticmaalkeeda ama xaqa isticmaalka badeecad kasta oo kiraysan, ku jirta heshiis iib iyo kiro isugu jira, ama kirada lacagta.
3. Bixinta adeegyada ee la xidhiidha soo-saarista badeecada waxa ay ka mid noqonaysaa badeecadaas.
4. Iyada oo la raacayo farqada (3), hadii keenistu ka kooban tahay badeecada iyo adeeg, Agaasimaha ayaa go’aamin doona isaga oo ku salaynaya si kasta oo macquula ilaa iyo xadka keenida badeecadaas loo qaadan karo keenida badeecada, hadii ay tahay alaab cashuur gal ahsababaha Qodobkan laguma cashuuri karo sida ku cad Qodobk 165aad.
5. Keenida badeecaddu waxa ay ka dhacdaa goobta uu badeecadda ku wareejiyoama uu ku diyaariyay qofka badeecada keenayaa ama, hadii goobta lagu wareejiyay ama lagu diyaariyay ay ku lug yeelato gaadid (rar), goobtu waa halka rarka badeecaddu ay ka bilaabanto.
6. Keenida la sameeyay iyada oo xidhiidh la leh wadida hawl ganacsi uu leeyahay qof hadii keenistaas uu qayb ka yahay, ama ay tahay mid xidhiidh la leh, hawl qabad kasta oo madax banaan ee qofka, wax kasta oo ay ujeedadu tahay ama natijada hawshaasi leedahay.
7. Badeecada cashuurta laga dhaafay waxa ka mid ah kuwan soo socda:-
  - a) Keenida cuntooyinka dadku isticmaalo (marka laga reebo cuntada la kariyay ee loo adeegsan doono cunno ahaan, ama cuno diyaarsan ahaan), keenida Badeecada guud ahaan loo isticmaalayo wax-barasho ahaan, iyo kuwa hay’adaha caawimada ee uu xaqiijiyay Agaasimuhu marka laga reebo badeecada shakhsi ahaan ay u isticmaalaan

xubnaha iyo shaqaalaha hay'adahaasi iyo ururadaasi.

- b) Keenida kombuyuutarada, qaybaha kombuyuutarada iyo barmaamijadooda.
- c) Keenida badeecada loogu tala galay dad tabaalaysan oo ay afooyin dabiici ahi saameeyeen ama gurmada bani aadminimo, ilaa iyo xadka uu Wasiirku ku cayimo ogaysiin waqtiga masiibada ama gurmada;
- d) Keenida alaabta farmasiyada ama qalabka diyaarinta daawooyinka waxa lagu xusi doonaa wareegto uu soo saaray Wasiirku.
- e) Keenida agabka caafimaadka ama qalabka loo isticmaalo ee si gaar ahaan loogu talo galay shakhsiyaadka qaba xanuun ama curyaanimo waxa lagu sheegi doonaa wareegto uu soo saaro Wasiirku.
- f) Keenida Buugaagta qoran (textbooks) ama qalabka kale ee wax lagu barto ee loo qaabeeyay in lagu adeegsado iskuulada ama barmaamijada dadka waaweyn loogu tala galay, waxaana ay ka mid yihiin kuwa wareegtada lagu cadayn doono.
- g) Iyada oo la raacayo Farqada (8), badeecada uu soo saaro wershadle diwaan gashani, ama qof ku jira ganacsi macdan qodiseed ama dhirayn:
  - I. Sida alaabta caydhiin ama walxaha kale ee loo isticmaalo warshadaynta, ama
  - II. Qalabka raasamaaka ah; iyo
  - III. Keenida badeecada qayb ka ah gudbinta ganacsi wax soo saaraya oo ah arin u dhaxaysa wershadle diwaan gashan oo ku socda wershadle diwaan gashan oo kale.
8. Hadii Wershadlaha diiwaangashani, uu keeno badeecad cashuuri ku waajibtay, iyo mid laga reebayba, keenista alaabta caydhiin ee loo adeegsado warshada ama waxyaabaha kale ee la galiyo, ama alaabta raasamaalka ah waxa cashuurta lagaga dhaafay oo kali ah sida ku cad farqada (7) (f) ilaa iyo xadka alaabada caydhiin ama wax galinta kale, ama alaabta raasamaalka ahi ay isticmaalayaan wax soo saare marka la sameynayo alaab la cashuuri karo.

9. Qodobkani, hadii aanay nuxurka si kale u sheegin, macnahoodu waa sidan:

a) Erayga “Isticmaalka Qofka iska leh” waxa uu macnihiisu yahay:

I. Waa marka alaabta looga faa’iidaysanayo si aan ganacsi ahayn, oo uu kujiro isticmaalka qof ay xidhiidh leeyihiin, ama

II. Wareejinta uu sameeyo qof wax soo saara oo uu wareejiyo waxa uu soosaaro iyada oo aanu waxba ka dheefayn.

b) Erayga “badeecad” waxa uu macnaheedu yahay badeecad kasta oo guurto ah lana taaban karo.

c) Erayga “Wershad” waa farsamaynta wax kasta oo la taaban karo ama warshadayn kasta oo bedasha shaygu waxii uu ahaa ama wax ka bedesha nooceeda, ama qaabkeeda ama muuqaalka, waxana ku jira xidh xidhkaalaabooyinka furfuran.

d) Erayga “Wershadle” waxa uu macnahiisu yahay qof kasta oo soo saarabadeecad.

e) Erayga “Agabka Raasamaalka ah” “capital goods” qalab kasta warshadeed ama agabka kale (oo ay ku jiraan wixii alaab badal ah balse aysan ku jirin gawaadhidu) ee si gaara iyo si toosaba loogu adeegsado iyo si toos ah loogu adeegsado warshadaynta.

10. Haddii ganacsi la wareejiyay oo laga wareejiyay hal wax soo saare oo diwaan gashan laguna wareejiyay mid kale iyada oo la raacayo Farqada (7) (f), qofka la wareegay waxa loo tixgalin doonaa wax soo saaraha badeecad kasta oo lagu wareejiyay oo uu soo saaray qofka wareejiyay.

### **Qodobka 154<sup>aad</sup>**

#### **Badeecadaha la soo dejiyo ee cashuur galka ah**

1. (“Badeecadaha la soo dejiyo ee ay cashuurtani ku waajibtay” “taxable import” waa dhamaan badeecadaha dalka ka soo gala debada oo dhan, marka laga reebo kuwa cashuurtan laga dhaafay.
2. Badeecadaha soo gala dalka ee cashuurta laga reebay sidoo kale iyana lagu yeelan maayo wax cashuura ah

keenistooda hadii ay tahay badeecadaas in la keeno gudaha Somaliland.

3. Eragyga “Badeecadaha Lasoo dajiyo” “import of goods” waa alaab kasta oo la keeno gudaha dalka Somaliland.
4. bixinta adeegyada raacsan soo dajinta ama keenida badeecada waxay ka mid noqon doonaan badeecada la soo dajiyay, taas oo ay ku jiraan kharashka khidmada, cabbaynt, noolka (rarka), caymiska, iyo damaanad qaadyada la bixinayo ama sababta loo soo dejiyay (warranty costs payable on, or by reason of the import).
5. Soo dajinta Badeecadu waxay dhacdaa:-
  - a) Badeecadaha ku soo gala dalka iyada oo la raacayo Xeer Tacriifadeed oo wadan shisheeye si dalka Soomaaliland loogu isticmaalo, tariikhda iyo wakhtiga ay soo galaan, ama
  - b) Xaalad kasta oo kalana, taariikhda badeecadaas la keenay Dalka Soomaaliland.

**Qodobka 155<sup>aad</sup>**  
**Waqtiga Keenista**

1. Wakhtiga ay imaanayso alaabtu wuxuu noqonnayaa hadba kii soo horeeya-
  - a) Taariikhda la soo saaro qaansheegta cashuurta alaabtaas, ama
  - b) Taariikhda qaansheegta cashuurta alaabtaas loo baahday in la soo bixiyo sida ku cad Qodobka 160aad.
2. Keenida alaabta qaab ah in alaabta uu adeegsado qofka iska lihi waxa ay dhacdaa taariikhda marka ugu horeysa ee badeecadaas loo keenay cida iska lihi gaarkeeda u isticmaasho mid cashuurta laga dhaafay.
3. Keenida alaabta ee lagu keeno heshiis ah iib iyo kiro wada socda ama kiraynta lacagta waxa ay dhacday bilawga taariikhda heshiiska ama kirada.

**Qodobka 156<sup>aad</sup>**  
**Qimmaha Cashuur Galka ah. (Taxable amount)**

1. Marka laga reebo xaaladaha cutubkani si kale u dhigay, xadiga la cashuurayo ee alaabta cashuuri ku waajibtay, wuxuu noqonayaa qiimaha laga baxsho alaabtaasi.
2. Xadiga cashuuri ku waajibtay ee adeegyada soo socda ee cashuurta ku waajibtay waa qiimaha iibka saxda ah ee uu suuqa joogo adeegaasi:-
  - a) Keenida alaabta cashuuri ku waajibtay ee hoos imanaya heshiis kiro iyo iib is-wata, ama kiraysiga lacagta.
  - b) Alaabooyinka sida gaarka ah looga faa'iidayo, iyo
  - c) Alaabta ama Adeegyada ay cashuuri ku waajibtay ee dad xigto ah ee bilaash lagu siiyo ama laga qaado wax ka yar qiimaha saxda ah suuqa ka joogo adeegaasi.
3. Marka laga reebo, sida uu dhigayso farqada (2), hadii shayga la cashuurayo aan loogu talo-galin hab ganacsi markaa cashuuri ku waajibi mayso.
4. Isugaynta Qiimaha alaabta la cashuurayo waxa ay noqonaa sidan soo socota -
  - a) *Qiimaha* iibka, kharashka caymista iyo noolka (*Rarka*) (CIF Somaliland Port) (Cost, Insurance & Fright) ama Qiimaha guud ee enteriga kastamku ku qiimeeyey badeecadaas.
  - b) Hadii aan ku jirin kharashaadka Adeegyada yar-yar ee kale ee aan ahayn, Qarashka keenista, Dekeda, iyo Caymiska (CIF somaliland Port) ama Qiimaha kastamku u aqoonsado, qiimaha badeecadaas waa sida uu tilmaamayo Qodobka 153aad (4); iyo
  - c) Cashuurta kastamka & takaalifta kasta ee ku waajibaysa alaabtaas la soo dajinayo.
5. Kalmada “Qiime”marka aynu u eegno xidhiidhka ay la leedahay badeecada (supply) Waa isku gaynta Kharashaadka si toosa ama si dadbanba ugu baxay ama loo galayba alaabtaas darteed (qofkas taaba bixiyee), oo ay ku jiraan Cashuuraha Waajiba (duties), Takliifaadka (levies), Ajuurooyinka (fees), iyo Adeegyada (charges) (marka laga yimaado cashuuraha

lagu waajibiyay Qaybtani) iyadoo laga jarayo dhamaan Qiimo dhimiskasta loo sameeyo iyo lacagaha ka qaldama ee loo soo celiyaba, kuwaas oo dhamaanbaraacinayo xisaabtooda markaas. Qiime kasta oo ah nooc ahaan waxa lagu cayimi doonaa qiimaha saxda ay suuqa ka taagan yihiin, isla waqtigaas.

**Qodobka 157<sup>aad</sup>**  
**Dib u sixid iibkii hore**

1. (Qodobkan waxaa lagu dabaqayaa marka:-
  - a) Wax soo saare diwaan gashani ka noqdo iibka alaab cashuuri ku waajibtay,
  - b) Nooca adeeg cashuuri ku waajibtay oo uu soo saaray waxa soo saare diwaan gashani taas oo aad looga duway ama wax looga badalay,
  - c) Wax iska badalaan sababihii hore loogu tixgaliyey qiimaha alaabtaas sidaa awgeedna ay is badasho cashuutii ku waajibaysay,
  - d) Badeecada (ama qayb ka mid ah) taas oo lagu xukumayo adeeg cashuuri ku waajibtay oo uu sameeyay wax soo saare diwaan gashani alaabtii lagu soo celiyo wax soo saaraha, ama
  - e) Uu dhaco khalad xaga xisaabta ah sida lambaro iswaydaartay kaas oo saameyn ku yeesha cashuurtii la bixiyay (tusaale ahaan, meel kaldan oo ay ku dhacdo calaamada jabajabku).
2. Xaaldaha Qodobkani lagu dhaqo cashuurta badeecadana si haboon loogu dalaco marka laga hadlayo keenida alaab uu ku bato cashuurta alaabada ee si rasmi ah uu u xisaab galiyo wax soo saare diwaan gashan ee saameenaya alaabta, qadarka dheeraadka ah waxa loo tixgalin doonaa cashuur badeecadeed oo ku waajiba wax soo saaraha diwaan gashan marka laga hadlayo adeeg cashuuri ku waajibtay oo uu sameeyay wax soo saarahu mudada cashuurta ee dhacdada lagu xusay Farqada (1) ee dhacday, dheeraadkaasina wax soo saaruhu waxa uu ka heli doonaa qofka alaabta iibsaday.

3. Iyada oo loo eegayo farqada (4), xaaladaha Qodobakani ku dabaqmo cashuurta alaabada ee si kama danbaysa uu u xisaab galiyay adeeg bixiye diwaan gashani oo samaynaya alaabtaasi, ay ka badato cashuurta badeecada ee si rasmi ah loogu dalacay marka laga hadlayo adeegaasi, wax soo saaraha diwaan gashan waxa loo ogolaan doonaa dayn ah qadarka dheeraadka ah mudada cashuur bixinta ee arinta/dhacda lagu xusay farqada (1) ay dhacday.
4. Wax deyn ah looma ogola sida ku cad farqada (3) ilaa uu wax soo saaraha diwaan gashani uu dib u baxsho cashuurta qadarka badeecada ee dheeraadka ah oo uu ka qaado macmiilka helay alaabtaasi, dib u bixintu waxa ay noqon kartaa naqad ahaan ama, hadii macmiilku uu leeyahay qadar ku taagan taas oo cashuurta badeecada ay ahayd in la urursho, oo ah dayn lagu leeyahay cashuurta badeecada oo ah qadarka ay tahay in la baxsho, marka laga reebo, hadii qaanta ku taagani, lacag bixinta aan loo qaadan in ay dhacdo ilaa iyo inta loo ogolyahay wax soo saare diwaan gashan. Xaq u lahaanta daynta loo ogolyahay sida farqada (3) oo loo ogolyahay keliya marka la soo gudbiyo cadayn in wax soo saaruhu uu bixiyay lacag dheeraad ah dib u bixinta wax soo saaruhuna ay dheeraad ku tahay macmiilka.

**Qodobka 158<sup>aad</sup>**  
**Diiwaangalinta Warshadlayda (Wax Soo**  
**Saarayaasha)**

1. Iyada oo la raacayo Qaybtani, qof kasta oo wada ganacsi/hawl kastawarshadeed waxa ku waajib ah in uu isdiwaan-geliyo:-
  - a) Sanad kasta dhamaadkiisa mudadaas hadii qofku uu keenay badeecad cashuur galka ah oo qiimaheeda guud gaadhayo ama ka badan yahay Shan million oo Shilings Somaliland ah.
  - b) Bilawga sanad kasta oo cusub hadii wershadlaha laga filayo sababo la garwaaqsan karo in uu samayn karo badeecad qiimaheeduguud gaadhayo

ama ka badan yahay Shan (5) million oo Shilin oo Somaliland ah.

2. Marka la go'aansado in ay qofka waajib tahay in uu is diwaan gasho sida ku cad farqada (1) Agaasimuhu waxa uu ku dari karaa alaabada kale ee cashuur galka ah ee uu sameeyay qof kale oo ay xidhiidh leeyihiin.
3. Marka la go'aaminayo in qofka ay waajib ku tahay, in uu is diwaan gasho sida ku cad farqada (1), Agaasimuhu waxa uu isagu dari karaa badeecadaha iyo adeegyada cashuur galka ah ee qofku uu bixiyo, Qofka ku diwaan gashan sabab la xidhiidha Qodobkan waxa loo tix galin doonaa in uu ku diwaan gashan yahay Qodobka 170aad.
4. Qof kasta oo waajib ka saaran yahay in uu is diwaan gasho sida ku cad Farqada (1) waxa uu ka codsan doonaa Agaasimaha in uu is diwaan gasho muddo ku siman 21 maalmood gudahood oo ka bilaabmasa marka sidaan laga codsado.
5. Qof kasta aan looga baahnayn in uu is diwaan gasho sida ku cad farqada (1) waxa uu ka codsan karaa Agaasimaha in uu is diwaan gasho hadii qofkaasi uu sameeyo ama uu ku talo galo in uu sameeyo badeecada cashuur galka ah isaga oo ku guda jira hawl ganacsi oo wax soo saar, isaga oo ay qabanayaan shuruudaha lagu dajiyay Farqada (7).
6. Agaasimuhu waxa uu diwaan galin doonaa qof kasta oo soo codsaday in la diwaan gasho muddo dhan 21 casho oo ka bilaabmasa marka uu helo codsiga, hadii aanu Agaasimuhu uusan ku qancin in aan qofkaasi looga baahnayn in uu is diwaan gasho.
7. Agaasimuhu maaha in uu diwaan gasho qof kasta marka laga hadlayo codsiga diwaan galin qofku iskii u sameeyay (ikhtiyaari) sida ku cad Farqada (5) hadii xaaladaha soo socdaa ay jiraan:-
  - a) Qofku hadii uusan goob ganacsi ku lahayn Soomaaliland, ama hadii Agaasimuhu uu rumaysan yahay in qofku:
    - I. Uusan lahayn Xisaab Baan;
    - II. Aanu lahayn Raad Reeb Haboon;



III. Aanu soo gudbin doonin si joogto ah oo la isku halayn karo xisaab celinta badeecada cashuurta ku waajibtay.

b) Markasta la samaynayo codsiga ikhtiyaariga ah, Agaasimuhu hadii uu ku dhawaaqo xayiraad ku meel gaadh ah oo ah diwaan galin ikhtiyaari ah sabab la xidhiidha dhinaca maamulka, oo lagu sharxi doono wareegtooyinka.

8. Diwaan galintu waxa ay dhaqan gali doontaa:-

a) Marka laga hadlayo codsiga sida ku xusan farqada (1), bilawga muddo cashuureedka isla markaas ka danbaysa qofka looga baahan yahay in uu is diwaan galiyo.

b) Marka la samaynayo codsiga sida ku cad Farqada (5), bilawga mudada cashuurtu islamarkaas ka dib waqtiga uu qofku codsaday in la diwaan gasho.

9. Qof kasta oo ku guul daraysta in uu sameeyo codsi sida ay farayaan farqada (1) waxa loola dhaqmi doonaa mid la diwaan galiyay bilawga muddo cashuureedka ee ka danbaysa waqtiga qofka looga baahday in la diwaan gasho ama sida kale ee kama danbaysa ee uu Agaasimuhu go'aamiyo.


10. Wershadle kasta oo diwaan gashani waxa uu Agaasimaha qoraal ku ogaysiin doonaa is badal kasta oo ku yimaada magaca (oo uu ku jiro magaca ganacsigu), cinwaanka, and goobta ganacsiga ama nooca ganacsiga ee qofka 21 casho gudahood oo ka bilaabmasa marka is badalku dhaco.

11. Wershadlaha diwaan gashani:-

a) Waxa uu qoraal ahaan kaga codsan doonaa Agaasimaha in la tirtiro diwaan-galinta qofka hadii qofkaasi joojiyay in uu sameeyo keenista badeecada cashuur galka ah, ama

b) Waxa uu qoraal ahaan kaga codsan karaa Agaasimaha in la tirtiro diwaan galinta qofka hadii qiimaha badeecada cashuur galka ah ee qofku ee

mudadii ugu danbaysay ee ahayd 12ka bilood aysan ka badan qadarka lagu dajiyay farqada (1), codsiga lagu sameeyay sida ku cad farqadani waxa la samayn karaa oo kaliya marka uu dhaco laba sanno (2) oo ka bilaabmasa marka diwaan galintu hirgasho.



12. Iyada oo la raacayo farqada (14), hadii Agaasimuhu ku qanco in wax soo saare diwaan gashani uu si haboon u sameeyo codsi sida ku cad Farqada (11) ay joogsato in looga baahdo in uu diwaan gashanaado, Agaasimuhu waxa uu tirtiri doonaa diwaangalinta qofka taas oo saamayn yeelanasa maalintii ugu danbaysay ee mudada cashuurta ee qofku uu joojiyay in looga baahdo in uu diwaan gashanaado ama taariikhda kale ee uu Agaasimuhu Go'aamiyo
13. Iyada oo loo eegayo Farqada (14) hadii Agaasimuhu ku qanco in Wax Soo Saare diwaan gashani uu joojiyay in uu soo saaro alaabo cashuuri ku waajibtay, Agaasimuhu waxa uu tirtiri doonaa diwaan galinta qofka taas oo saamaynteedu bilaabmayso maalinta ugu danbaysa ee uu qofku joojiyay in uu sameeyo alaab cashuuri ku wajibtay ama taariikhda kale ee uu Agaasimuhu go'aamiyo.
14. Agaasimuhu tirtiri mayo diwaan galinta qofka hadii Agaasimuhu qabo sababo macquula oo uu ku rumaysan karo in, waqti kasta oo ka mid ah (12) ka bilood ee ku soo xiga, in uu qofkaasi samayn doono alaabo cashuuri ku waajibtay oo ka dheeraad ah qadarka lagu cayimay farqada (1).
15. Hadii qofka diwaangalintiisa lagu tirtiro sida ku cad Farqadani:-
  - a) Qofkasi waxa loo qaadan doonaa in uu sameeyay alaabo cashuuri ku waajibtay oo ah waxii badeecada (oo ay ku jiraan alaabooyinka caydhiin) oo gacanta ay ku hayaan waqtiga diwaan galinta la tirtiro kuwaas oo uu helay qofka ku jira ganacsiga ee cashuurta laga dhaafay.
  - b) Badeecadaha cashuurta ku waajibtay waxa loo qaadan doonaa kuwaas oo ah kuwa lagu sameeyay inta aan la tirtirin qofka diwaangashan, iyo

- c) Badeecada la cashuuri karaa waxa loo gaadan doonaa kuwo lagu sameeyay qiime la mid ah qiimaha caadiga ah ee suuqa ee badeecadaas.
16. Waajibaadka iyo qaamaha qofka ee Cutubkani (oo ay ku jiraan diwaan galinta soo bandhiga dakhliga cashuurmaya) marka laga hadlayo fal kasta ama ka baaqsi fal kasta oo uu qofku sameeyay waqtigii uu diwaan gashanaa ma saamamayn doonto tirtirida diwaan galinta qofkaas.

### **Qodobka 159<sup>aad</sup>**

### **Qaan-sheegyada Cashuurta Badeecada (Goods tax invoice), Xaashida qaan-bixinta (Credit Notes) iyo Xaashida qaan-qaadashada, (debit Notes).**

1. Wershadle kasta oo diwaan gashani oo samaynaya badeecad cashuur gal ah waxa uu badeecada siin doonaa cida guudomaysa qaansheegta cashuurta ee badeecadaasi. Qaan sheegtaasi waxa la siin doonaa hadba ka u soo horeaya, ee kala ah sidan:-
  - a) Waqtiga lacag bixinta ama qayb ka mid ah la bixinayo;
  - b) Waqtiga Badeecada loo geynayo; ama
  - c) Waqtiga loo dirayo.
2. Qaansheegta cashuurta badeecadu waxa ay ka koobnaan doontaa faahfaahinta soo socota:-
  - a) Kalmadaha “qaansheegta cashuurta badeecada” oo meel muuqata ku taala,
  - b) Magaca, cinwaanka, iyo aqoonsiga cashuur bixiyaha ee ah wershadlaha diwaan-gashan ee soo saaray badeecadaas,
  - c) Tirade taxanaha ah ee u gaarka ah iyo taariikhda qaansheegta cashuurta badeecada la soo saaray.
  - d) Faahfaahinta badeecada loo geeyay (oo ay ku jiraan xadiga ama tirada) iyo taariikhda badeecada loo geeyay, iyo
  - e) Qiimaha guud ee la bixinayo iyo qiimaha badeecooyinka cashuurta lagu dalacay.
3. Meelaha Qodobka 160 lagu dabakho, wershadlaha diwaan gashani ee samaynaya keenista waxa uu siin

doonaa cidda heshay xaashida qaan qaadashada la xidhiidha badeecadaas

4. Cashuur sheegtu waxa ay ka koobnaan doontaa faahfaahintani soo socota:-
  - a) Eryada “cashuur sheeg” (debit note) oo ku taala meel muuqata,
  - b) Magaca, cinwaanka, iyo lambarka aqoonsiga ee cashuur bixiyaha ee wax soo saaraha diwaan gashan ee samaynaya badeecada,
  - c) Lambarka taxanaha ah ee gaarka ah iyo taariikhda cashuur sheegta la soo saaray,
  - d) Faahfaahin kooban oo ka hadlasa duruufaha keenaya soo saarista cashuur sheegta, oo ay ku jiraan warbixinta ku filan in loo aqoonsado badeecadaha cashuurgalka ah ee ay cashuur sheegtu khuseyso, iyo
  - e) Qiimaha badeecada ee lagu xusay qaansheegta cashuurta badeecada ee alaabooyinkaasi, qadarka saxda ah ee qiimahaasi, faraqa labadani qadar, iyo qadarka cashuur badeecadeed ee la xidhiidha faraqa.
5. Xaaladaha Qodobka 161aad lagu dabakhay, Wershadlaha diwaan gashani ee samaynaya keenista badeecada waxa uu bixin doonaa qofka badeecadaas helay qaan sheegta cashuureed ee la xidhiidha badeecadaas.
6. Qaansheegta cashuureed (credit note) waxa ay ka koobnaan doontaa faahfaahintani soo socota:-
  - a) Eryada “Qaansheegta Cashuureed” (credit note) oo ku taala meel muuqata,
  - b) Magaca, cinwaanka, iyo lambarka aqoonsiga cashuur bixiyaha ee Wershadleha diwaan gashan ee samaynaya badeecadaas,
  - c) Lambarta taxanaha ah ee gaarka ah iyo taariikhda ee qaansheegta cashuureed la soo saaray,
  - d) Faahfaahinta kooban oo ka hadlaya duruufaha ee khuseeya soo saarida qaansheegta cashuureed, oo ay la socoto warbixin ku filan in lagu aqoonsado badeecadaha cashuur galka

ah ee ay qaansheegta cashuureed la tacaluqdo, iyo

- e) Qiimaha guud badeecadaasi ee lagu xusay qaansheegta cashuureed ee badeecadaas, qiimaha caadiga ah ee suuqa, iyo faraqa u dhexeeya labadaasi xisaabood, iyo qiimaha cashuuta faraqaas ee badeecadaasi khusaysa.

### **Qodobka 160<sup>aad</sup>**

#### **Xisaabcelinta Badeecada la cashuurayo**

Wershadle kasta oo diwaan gashani waxa uu ku keeni doonaa xisaab celinta badeecada la cashuurayo ee cashuur bixinkasta 21 cisho gudahood ka dib dhamaatka mudada, ha taagnaato ama yay taagnaan wax cashuur ahiye, marka laga reebo in aan wax xisaabeed celin cashuureed ah oo dheeraad ah aan loo baahnayn in la sameeyo soo dejinta cashuur bixinta ee qoran (***Consumption entry form***) foomkainteriga kastamka iyada loola jeedo si waafaqsan Xeerka kastamku, laguna hubinayo in badeecada la cashuuray markii ay soo degtay.

### **Qodobka 161<sup>aad</sup>**

#### **Qabashada iyo La Wareegida Badeecada**

1. Agaasimuhu waxa uu qaban karaa isla markaana iibin karaa badeecadkasta taas oo uu tixgelin doono Agaasimuhu sababaha macquula oo uu ku rumaysan karo in cashuurta badeecada, taas oo ay tahay in la baxinayo marka laga hadlayo badeecada ay cashuuri ku waajibtay ama badeecad la soo dajiyay oo ah badeecada oo aan la bixin ama aan la bixin doonin.
2. Agaasimuhu waxa uu qaban doonaa iibina doonaa gaadhi kasta oo loo adeegsaday in la saaro ama la guro badeecada taas oo ay tahay in la qabto sida ku cad Farqada (1) hadii aan lagu muujin in gaadhigaasi loo adeegsaday iyada oo ay ahayd ogolaansho la'aanta ama ogaansho la'aanta qofka milkiilaha gaadhiga ama shakhsiyaadka kale ee si sharci ah gacanta ugu haya ama uga masuulka ah gaadhiga.

3. Qabashada iyo iibka ee cutubkan hoos yimaada waxa loo raacayaa waajibaadka Qodobkan 14aad ku xusan.

**Qodobka 162<sup>aad</sup>**

**Wada Shaqaynta Maamulka Cashuuraha Gudaha iyo Kastamada**



1. Agaasimuhu, marka uu gudanayo masuuliyadihiisa ku xusan xeerka kastamada, waxa uu ururin doonaa waqtiga soo dajinta waxii cashuur badeecadeed ah ee taagan soo dajinta badeecada, iyada oo lagu maamulayo shuruudo la mid ah cashuuraha kastamada.
2. Marka laga reebo xaaladaha ujeedo ka duwani soo baxdo, qodobada xeerka kastamada ee la xidhiidha soo dajinta, gudbinta, rarista xeeb khuseysa, la bixida badeecada, iyo bixinta iyo ka kabashada tacriifada khaarajiga ah, marka laga soo reebo, wax ka badalka, iyo la qabsiga hadba sida uu Wasiirku uu wareegto ku soo saaro, waxa loo adeegsan doonaa cashuurta badeecada ee laga baxsho soo dajinta badeecada.

**QAYBTA 2**

**CASHUURTA ADEEGYADA**

**Qodobka 163<sup>aad</sup>**

**Qeexitaanka Adeeg Bixiyaha**

Qaybtani, ereyga “**adeeg bixiye diwaan gashan**” waxa uu macnaheedu yahay qof kasta kaas oo diwaan gashan ama looga baahanyahay in la diwaan gasho sida ku cad Qaybtani.

**Qodobka 164<sup>aad</sup>**

**Cashuurta Adeegyada Lagu waajib yeelay**

1. Cashuurta (loo yaqaano “**Cashuurta Adeega**”) waxa lagu soo rogayaa cid kasta oo bixinaya adeegyada la cashuur gal ah oo gudaha somalilanad ee uu adeeg bixiye diwaan gashan.
2. Tacriifta cashuurta adeegyadu waa 5% oo ku dhacaya qiimaha cashuur galka ah ee adeegaas la bixiyay.

3. Cashuurta adeega la bixiyayo waxa uu u xisaabinaya agaasimaha, adeeg bixiyaha diwaan gashani ee fulinaya adeegaas.
4. Iyada aan loo eegayn, sida ku xusan Xeer kasta oo kale, cashuurta adeega ee ay tahay in uu bixiyo adeeg bixiye diwaan gashan sida ku xusan farqada (3) adeeg bixiyaha diwaan gashani waxa uu ka qaadayaa qofka adeeg qaataha ah, marka laga reebo adeeg qaataha cashuurtii lagaga dhaafay heshiishyada caalamiga ah iyo heshiisyada ay Somaliland dhinac ka tahay.
5. Cashuurta adeega ee ay tahay in uu bixiyo adeeg bixiye diwaan gashan marka laga hadlayo bixinta adeega cashuuri ku waajibtay oo la sameeyay mudada cashuurta waxa ay waajib tahay cashuur bixinta adeegaas taariikhda xisaab celinta cashuurta la gaadho.

#### **Qodobka 165<sup>aad</sup>**

#### **Adeegyada Cashuur galka ah (taxable services)**

1. Ereyga “**Adeegyada la Cashuur galka ah**” waxa uu macnaheedu yahay adeeg kasta (*oon ahayn adeeg cashuurta laga dhaafay*) oo xidhiidh la leh wadida hawlaha ganacsi ee qof leeyahay, ee kala ah:-
  - a) Adeegyada korontada;
  - b) Adeegyada Igaadhsiimaha
  - c) Ajuurada Adeegyada qaybinta biyaha ;
  - d) Cuntada , Jiifka iyo adeegyada la xidhiidha ee ay bixiyaan dadka wada hawlaha albeerkooyinka ama adeeg la mid ah, ama cunada ama sharaabka ay bixiyaan dadka wada hawlaha goobaha laga cunteeyo;
  - e) Iibka tigidhada adeegyada gaadiid ee caalamiga ah (hawada, bada, iyo dhulka);
  - f) Adeegyada uu bixiyo wakiil socdaal ama isu dube ride socdaal, oo ay ku jiraan soo saarida tigidhada, iyo
  - g) Adeegyada ciyaaraha ama isu duba ridaha ciyaaraha fudud, oo ay ku jiraan soo saarida tigidhadu.

2. Erayga “bixinta adeeg” waxa uu macnaheedu yahay fulinta adeega ee qof kale loo qabto.
3. Keenida badeecad ee ku lamaan bixinta adeeg cashuuri ku waajibtay, iyo cashuur bixinta ku salaysan sababta Qodobkan laguma cashuuri karo sidoo kale sida ku cad Qodobka 152aad.
4. Iyada oo la raacayo Farqada (3), hadii adeeg bixintu ay tahay adeegyo iyo badeecad la cashuuri karo, Agaasimaha ayaa go’aamin doona isaga oo ku salaynaya si macquula ilaa iyo xadka adeegaasi lagu dhaqi doono oo ah bixinta adeeg la cashuuri karo.

### **Qodobka 166<sup>aad</sup>**

#### **Goobta Adeega *(place of supply)***

1. Iyada oo la raacayo farqada (2), bixinta adeega la cashuuri karo waa adeega ka dhacay goobta ganacsiga ee adeegaasi lagu bixiyay.
2. Bixinta adeegyada isgaadhsiinta iyo korontadu waxa ay ka dhacday goobta adeegyada lagu helay.

### **Qodobka 167<sup>aad</sup>**


#### **Waqtiga Adeega (time of supply)**

1. Bixinta adeega la cashuuri karaa waxa uu dhacayaa sida ay u kala horeeyeen, ee kala ah sidan:-
  - a) Taariikhda qiima sheegta adeega cashuur galka ah la soo saaro, ama
  - b) Taariidkha qiime sheegta adeega cashuur galka loo baahdo in la soo saaro sida ku cad Qodobka 171aad
2. Hadii adeegyada Cashuur galka ah la bixiyay iyada oo uu jiro heshiis ama sharci ogolaanaya lacag bixin mudaysan, adeegyada waxa loo qaadan doonaa in si isku xig-xigta loogu bixiyay qaybo isku daba xiga oo waqtiga uu heshiisku jiro ah ama sida ay go’aaminaan sharcigaasi, adeeg bixin kasta oo ku soo xigtaana waxa ay dhici doontaa taariikhda lacag bixintaasi ama bixinta qayb ka mid ah ay taagantahay ama la helo, kolba kii soo horeeya.



### **Qodobka 168<sup>aad</sup>**

#### **Qiimaha Cashuur galka ah (Taxable Amount)**



1. Marka laga reebo xaladaha si kale loogu xusay Qaybtani, xadiga la cashuuri karo ee bixinta adeeg cashuuri ku waajibtay waxa noqonayaa qiimaha laga bixinayo adeegaasi.
2. Qiimaha cashuur galka ah ee bixinta adeega la cashuuri karo ee ka dhexeeya dad xidhiidh leh oo bilaa lacagta ah ama lacagtu ay ka yartahay qiimaha suuqa caadiga ah ee adeegu waa qiimaha suuq caadiga ah ee bixinta adeegaas.
3. Marka laga reebo sida ku xusan Farqada (2), hadii bixinta adeegyada la cashuuri karo lagu sameeyay iyada oon la rajaynayn wax lacag (qiime) ah in laga bixiyo adeegaasi,
4. Erayga “Qiimaha guud la tixgeliyay” (consideration) marka laga hadlayo bixinta adeegyada waxa uu macnihiisu yahay wadarta guud ee lacag ahaana ama hanti kale ee laga bixiyay ama ay tahay in laga bixiyo adeegyaa loo qabto qof kasta, si toos ah ama si aan toos ahayn, oo ay ku jiraan waxii waajiba, takliifaad ah, ajuuro ah, iyo waxyaabaha lagugu dalacayo (oon ahayn cashuurta lagu soo rogay Qaybtan) taas oo la bixiyay ama in la bixiyo ay tahay, ama sabab ah, adeega, oo laga jaray qiime kasta oo laga dhimay ama dib u bixin ah oo la ogolyahay loona xisaabiyay xiliga adeega la bixinayay.
5. Qiime kasta oo ah noocan aha waxa loo qiimeyn doonaa sicirka suuqa ee waqtiga adeega la bixinayay.

### **Qodobka 169<sup>aad</sup>**

#### **Diwaan Galinta Adeeg Bixiyayaasha**

1. Iyada oo la raacayo Qaybtani, qof kasta oo wada ganacsi oo bixinaya adeegyada cashuur galka ah waxa looga baahan yahay in uu is diwaan-gasho:-
  - a) Marka ay dhamaato sanad kasta hadii mudadaas uu qofku bixiyay adeega cashuur galka ah uu qiimaha guud gaadhayo ama ka badan yahay Shan Milliom oo Somaliland Shillings ah.

- b) Bilawga sanadkasta oo cusub hadii ay jiraan sababo macquula oo lagu filayo bixinta adeegyada cashuur galka ah ee uu sameeyo adeeg bixiyahu waqtigaas uu qiima-hoodu guud gaadhayo ama ka badan yahay Shan millyan oo Shiling Somaliland.
2. Marka go'aan laga gaadhayo in qofka looga baahanyahay in la diwaan gasho sida ku cad Farqada (1), Agaasimuhu waxa uu ku dari doonaa qofka adeegiisa la cashuuri karo ee adeegyada kale la cashuuri karo ee uu sameeyay qof kale kaas oo ah qof xidhiidh la leh.
  3. Marka go'aan laga gaadhayo in qofka ay waajib ku tahay in uu diwaan gasho sida ku cad Farqada (1), Agaasimuhu waxa uu ku dari doonaa qofka adeegiisa la cashuuri karo ee adeegyada qofku bixinayo iyo Badeecadkasta oo la cashuurayo oo uu diyaariyay Qofkaas ku diwaan gashan Qodobkan waxa loo tix galin doonaa qof lagu diwaan galiyay sida ku cad Qodobka 158aad.
  4. Qof kasta oo looga baahanyahay in la diwaan galiyo sida ku xusan farqada (1) waxa ay ka codsan doonaan Agaasimaha diwaan galinta muddo dhan 21 Casho gudahood oo ah maalinta looga baahday.
  5. Agaasimuhu waxa uu diwaan galin doonaa qof kasta oo codsaday in la diwaan gasho muddo dhan 21 cisho gudahood ah ka dib marka uu helo codsiga, hadii aan Agaasimaha aan lagu qancin in qofka aan laga Rabin in la diwaan gasho.
  - 6.
  7. Diwaan galintu waxa ay dhaqan gali doontaa bilawga mudada cashuurta ee ka danbaysa waqtiga qofka looga baahdo in la diwaangasho.
  8. Qof kasta oo ku guul daraysta in uu sameeyo codsi sida looga baahanyahay Farqada (a) waxa loola dhaqmi doonaa in la diwaan galiyo bilawga mudada cashuurta ee ka danbaysa waqtiga qofku looga baahday in la diwaan gasho ama mudada ka danbaysa ee uu Agaasimuhu go'aamiyo.
  9. Adeeg bixiye kasta oo diwaan gashan waxa uu ogaysiin doonaa Agaasimaha qoraal ahaan is badal kasta oo

khuseeya magaca (oo ay ku jiraan magaca ganacsiga), ciwaanka, goobta ganacsiga, ama dabciga ganacsiga ee qofka muddo dhan 21 cisho ee is badalku dhacayo.

10. Adeeg bixiyaha diwaan gashan waxa uu qoraal ahaan ku codsan doonaa Agaasimaha in uu tirtiro diwaan galinta qofka hadii qofka ay ka joogsato in looga baahdo sida ku xusan Farqada (1).
11. Iyada oo la raacayo farqada (12), hadii agaasimahu uu ku qanco in adeeg bixiyaha diwaan gashan kaas oo si dhamays tiran u codsada sida ku cad Farqada (9), ay joogsato in looga baahanyahay in la diwaangasho, Agaasimuhu waxa uu tirtiri doonaa diwaan galinta qofka iyada oo saamayn ku leh maalinta ugu danbaysa ee cashuur bixinta ee qofka ay ka joogstay in looga baahdo in la diwaan gasho ama taariikhda kale ee uu Agaasimuhu go'aamiyo.
12. Iyada oo la raacayo Farqada (12), hadii Agaasimuhu ku qanco in adeeg bixiyaha diwaan gashan uu joojiyay in uu bixiyo adeegyada adeegyada la cashuuri karo, Agaasimuhu waxa uu tirtiri doonaa diwaan galinta qofka iyada oo saamayn ku leh maalintii ugu danbaysay ee waaqtiga cashuur bixinta ee qofka ay ka joogsatay in uu sameeyo adeeg bixino ama taariikhda kale ee Agaasimuhu uu go'aamiyo.
13. Agaasimuhu ma tirtiri doono diwaan galinta adeeg bixiye diwaan gashan hadii Agaasimuhu uu rumasan yahay sababo macquula, waqti kasta oo ka mid ah 12 ka bilood ee ku soo xiga, qofku waxa uu samayn doonaa adeeg bixinaha iyo qadarka dheeraadka ah ee lagu sheegay Farqada (1).
14. Waajibaadka iyo qaamaha ee qofka ku xusan Cutubkan (oo ay ku jiraan samaynta xisaab celinta cashuurta adeegyada) marka laga hadlayo wax kasta oo la qabtay ama laga tegay in la qabto marka qofkii la diwaan galiyay aanay saamayn arintasi tirtiristii diwaan galinta qofka.

**Qodobka 170<sup>aad</sup>**  
**Cashuurta Adeega ee dakadaha**

1. Cashuur dhan US \$ 25.00 ama qadarka u dhigma oo Shiling Soomaaliland ah ayaa lagu soo rogi doonaa rakaabka cirka, dhulka (ee lagu fuliyay gaadiid ganacsi), iyo bada ee ka baxaya Soomaaliland.
2. Cashuurta lagu soo rogay Farqadan waxa masuul ka noqon doona Agaasimaha marka laga gudbayo Kastamada ama marka laga baxayo Soomaaliland waxana ururin doona Wakiilka Dakhliga ee loo Igmaday ee waaxda kastamada.

### **Qodobka 171<sup>aad</sup>**

#### **Qaansheegta Cashuurta Adeega**

1. Qof kasta oo ah cashuur bixiye diwaan gashan oo bixinaya adeegyo la cashuuri karo waxa uu siin doonaa qofka adeeg qaataha ah qaansheegta cashuurta adeega muddo dhan (10) casho oo ah gudashada adeega. Marka laga hadlayo adeegyada taas oo Qodobka 167aad Farqada (2) lagu dhaqo, adeeg bixiyaha waxa uu soo saari doonaa qaansheeg ugu yaraan Shan (5) casho oo ka horeysa taariikhda ay bislaato ama bixinta qayb ka mid ah
2. Marka laga reebo xaaladaha Agaasimuhu si ka duwan amro, qaansheegta cashuur bixiyuhu waxa ay ka koobnaan doontaa faahfaahinta soo socota:-
  - a) Erayada “qaansheegta cashuurta adeega” oo ku qoran meel muuqata oo ku haboon,
  - b) Magaca, cinwaanka, iyo lambarka diwaangalinta ee adeeg bixiyaha diwaan gashan ee bixinaya adeega.
  - c) Tirada taxanaha ah ee qofka iyo taariikhda adeegyada cashuurta la soo saaray;
  - d) Faahfaahina adeega la bixiyay iyo taariikhda adeegyada la bixiyay, iyo
  - e) Qiimaha guud ee adeega iyo cashuurta adeegaas lagu dalacay.

### **Qodobka 172<sup>aad</sup>**

#### **Xisaab Celinta Cashuurta Adeega**

Adeeg bixiye kasta oo diwaan gashan waxa uu keeni doonaa Xisaab celinta cashuurta ee mudo cashuureed

kasta 21 cisho gudahood ka dib marka ay dhamaato mudadaasi, ha la gaadho ama yaan la gaadhin waqtiga Cashuurta adeegaas.



**QAYBTA 3-  
QODOBADA GUUD  
Qodobka 173<sup>aad</sup>**

**Cashuurta Amaano ahaan loo hayo**


- 1) Wershadle kasta oo diwaan gashan ama adeeg bixiyaha diwaan gashan waxa laga doonayaa sida ku cad Cutubka in uu urursho cashuurta adeegyada iyo badeecada iyo in ay bixiyaan cashuurta dawlada ee la doonayo in ay qabtaan wadarta la ururiyay ee amaano haynta ee Dawlada Somaliland.
- 2) Qofka laga reebay cashuur bixinta sida ku cad Qodobka 6aad lagama dhaafin waajibka in uu ururiyo ama bixiyo cashuurta sida ku cad Cutubkani.

**Qodobka 174<sup>aad</sup>**

**Cashuur laga soo celiyay Qofka helaya Adeega  
(Recovery of tax from recipient of a supply)**

1. Hadii wershadle diwaan gashan ama adeeg bixiye diwaan gashan uu talaabo khiyaano ah ama is been fariin oo uu sameeyay qofka qaatay adeegu, oo si qaldan uu ula dhaqmay ah sida adeeg cashuurta laga reebay, Agaasimuhu waxa uu ku soo dalici doonaa qofka helay adeegaas qiimaynta oo ah tirade cashuurta la bixinayo oo ay la socoto ganaax lacageed haddii uu jiro dib u dhac bixinta cashuurta marka laga hadlayo adeegaas cashuurta laga bixinayo.
2. Farqada (1) kama hor istaagayso Agaasimaha in laga celiyo cashuurta iyo bixinta ganaaxa dib u dhaca ee qiimaha cashuurta la bixinayo marka laga hadlayo adeega ka yimid qof diwaan gashan ee samaynaya adeega (ee loo yaqaan adeeg bixiye) “Supplier”iyo:-
  - a) Cashuur kasta oo laga soo ceshay qofka adeega qaatay waa qaan ka soo xareetay dayntii lagu lahaa adeega bixiyaha marka laga hadlayo adeegaas, iyo

- b) Cashuur kasta oo loo ceshay qofka adeeg bixiyaha waa qaan uu ka sii bixiyay dayntii ku lahaa qofka qaatay adeegaas.
3. Adeeg bixiye kasta oo bixiya cashuurta gadida ama ganaaxa dib u dhaca ee lagu xusay Qodobkan waxa u celin doonaa cashuurtaas adeeg qaataha.



**Qodobka 175<sup>aad</sup>**  
**Danbiyada iyo Cigaabaha**

1. Qof kasta oo ku guul daraysta in uu qabto mid ka mid ah arimahan soo socda:-
  - a) In uu codsan waayo isdiwaangelinta sida uu ka waajibiyay cutubkani
  - b) In uu ogaysiiyo Agaasimaha wixii isbdel ah ee ku yimaada duruufaha shaqadiisa sida ku xusay Qodobka 158aad ama 169aad,
  - c) In uu ogaysiiyo Agaasimaha adeeg bixiyahaasi in ay ka joogsatay shaqadii adeegyad ama badeecadaha cashuur galka ah sida ku xusan Qodobka 158aad ama 169aad.

Waxa uu galay danbi madani ah waxa uu mutaysanayaa in uu bixiyo ganaax aan ka badnayn Shan (5) buundo lacageed ama Hadii ku guul daraysigu si badheedh ah ama si ula kac ah, ama xilkasnimo daro buuxda, sababtaas awgeed qofkaasi waxa uu mutaysanayaa danbi ciqaab ah marka lay ku cadaatona waxa uu bixinayaa ganaax aan ka badnayn labaan (20) buundo lacageed ama xadhig mudadiisu aanay ka badnayn shan (5) sanno, ama labadaba.

2. Qof kasta oo ku keeni waaya xisaab celinta looga baahan yahay sida ku xusan Cutubkan waxa loo raacayaa ciqaabaha ku xusan Qodobka 17aad.
3. Hadii wershadle diwaan gashan ama adeeg bixiye diwaan gashan uu galo laba danbi iyo wax ka badan sida ku xusan Qodobkan, Agaasimuhu waxa uu xidhayaa oo xanibayaa (seal) goobta hawsha ganacsigu ka socoto ee la xidhiidha samaynta badeecadaha cashuur galka ah ama bixinta

adeegyada cashuur galka ah, waxay xidhnaanaysaa sidaas ugu badnaan 7 maalmood, taas oo ujeedadu tahay baadhitaan qarsoodiya ee xogta kayd-san cashuur bixiyaha, baadhista xisaabtiisa iyo soo saarista talada ku socota cashuur bixiyaha khuseyso lagaga dalbanyo adeecidda waajibaadka Cashuuraha, iyada oo ku salaysan habraaca uu cashuur bixiyuhu isku hortaagi karo sida ku cad Qodobka 176aad.

### **Qodobka 176<sup>aad</sup>**

### **Habka Cashuur Bixiyahu u caban karo ama ku Rafcaan Qaadan karo (protest and Appeal)**

Hadii cashuur bixiye sameeyo ishortaag ka dhan ah go'aanka Agaasimaha ama go'aan kasta ee kale oo waafaqsan sida ku xusan Cutubkan, cashuur bixiyuhu waxa uu muddo dhan soddon cisho (30) gudahood ka dib marka ay helaan go'aanada Agaasimaha ama go'aansiga u rafcaan qaadashada Maxkamadaha Cashuuraha ee lagu aasaasay sida ku cad Cutubka 6aad ee Xeerkani.

### **Qodobka 177<sup>aad</sup>**

### **Go'aansiga Qiimaha Suuqa ee Caadiga ah**

1. Cutubkani marka la joogo, qiimaha suuqa ee caadiga ah waa qadarka lacageed ee adeeg/badeecad la mid ahi ka joogto suuqa waqtigaas hadii si madax banaan labada qof oo aan xidhiidh/qaraabo lahayni wax u kala iibsadaan.
2. Hadii qiimaha suuqa caadiga adeeg ama badeecad aan la go'aamin karin sida ku cad Farqada (1) ee Qodobkani, suuqa adeega ama badeecada waa qadarka uu go'aamiyay Agaasimuhu isaga oo loo tixgelinaya dhamaan duruufaha arintaas, ayay noqon doontaa qiimaha suuq ee caadiga ah.
3. Erayga "Adeeg La mid ah" marka laga hadlayo adeeg, waxa uu macnahiisu yahay adeeg la mid ah, ama u dhigma, adeega marka hore la xusay marka loo eego astaan ahaan, tayada, tiro ahaan, farsamo ahaan, qalab- ahaan iyo sumcada ahaan ee ay kala mid tahay arintaas laga hadlay.

**Qodobka 178<sup>aad</sup>**  
**Waqtiga Cashuurta**



Ujeedada Qaybtan, marka laga hadlayo waqtiga cashuureed waxa weeye xili bileedka.

**Qodobka 179<sup>aad</sup>**  
**Eray Bixin**

Marka Cutubkani la joogo waxa lagu macnaysayaa kelmadahan sidan soo socota:-

- a) Erayga “Wershadle diwaan gashan” waxa uu macnahiisu yahay qof kasta oo diwaan-gashan ama laga rabo in uu isdiwaan-galiyo sida ku cad Qodobada Cutubkan.
- b) Erayga “Soo Dejiye” waxa uu macnahiisu yahay qof kasta kaas oo, waqtiga la soo dajinayo ah sidan:-
  - i. mulkiilaha badeecada la soo dajiyay;
  - ii. Uu qaado khatarta lumida badeecada la soo dejiyo;
  - iii. wakiilka, ama matalaha qofka soo dajiyaha ah ama mulkiilaha badeecada la soo dajiyay;
  - iv. Ama Uu dhab ahaan uu yahay mid badeecadaas soo dejiyay
  - v. Uu yahay mid ka leh dan faa’iido ugu jirto badeecadaasi waqtiga la soo dajinayo, ama
  - vi. Uu ku hadlayo codka qof kasta oo lagu xusay farqada (i) – (v).

**CUTUBKA 4 CASHUURTA XAKAMAYNTA**

**Qodobka 180<sup>aad</sup>**  
**Dhagaxa iyo Waxyaabaha Laga Sameeyo Asbestos**

Cashuurta macdanta oo tacriifaddeedu tahay 10% ku dhacaya qiimaha shayga ayaa laga qaadi doonaa badeecadaha laga sameeyey macdanta ABSESTOS-ka ah, Ciidda ama Dhagxaanta la soo dejiyey ama laga soo saaray Somaliland gudaheeda.



### **Qodobka 181<sup>aad</sup>**

#### **Buuriga iyo Walxaha laga sameeyo Buuriga**

Cashuur tacriifaddeedu tahay 50% oo ku dhacaysa qiimaha shayga ayaa laga qaadayaa buuriga iyo badeecad kasta oo buuri ku jiro, marka lagu daro sigaarka caadiga ah iyo sigaarka shurugga ah, buuriga sanko laga qaato iyo ka calaashado, haddii uu yahay mid la soo dejiyey ama mid lagu warshadeeyey Somaliland gudaheeda.

### **Qodobka 182<sup>aad</sup>**

#### **Qalabka Qurxinta iyo Cabitaanka aan lahayn Alkahol**

1. Cashuur tacriifteedu tahay 15% oo ku dhacaya qiimaha waxa lagu waajibiyay qalab kasta oo qurxineed ama agabka qurxinta ee la soo dajiyo ama lagu sameeyo Somaliland oo ay ku jiraan cadarada, waxyaabaha suuliga loo isticmaalo, (Toilet preparation) qalabka timaha, qalabka cidiyaha lagu hagaajiyo, iyo cabitaanada aan alkahool lahayn.
2. Iyada aan loo eegayn cashuurta lagu soo rogay farqada (1), badeecada soo socota waa laga reebay cashuurta xakamaynta:-
  - a) Saabuunta;
  - b) Dawada cadayga;
  - c) Waraaqaha loo isticmaalo suuliga; iyo
  - d) Dareeraha jeermiska disha ; (dis-infectents)

### **Qodobka 183<sup>aad</sup>**

#### **Beedacadaha Faakahaysiga**

1. Cahuurtacriifteedu tahay 10% oo ku dhacaya qiimaha waxa lagu waajibiyay dhamaan alaabta faakahaysiga ee la soo dajiyay ama lagu wershedeeyay Soomaaliland, oo ay ku jiraan:-
  - a) Baabuurta faakahaysiga; (luxtury automopile)
  - b) Dahabka;
  - c) Dhagxaanta qaaliga ah, iyo
  - d) Biraha qaaliga ah.

2. jeedada Cutubkani, ereyga “baabuur faakihaysiga ah” waxa uu macnaheedu yahay baabuur gaarka loo isticmaalo oo awooda mishiinka saarani yahay 4,000 cc ama ka badan ama baabuur leh qiime CIF dhan yahay US\$20,000 ama qadarka u dhigma Somaliland Shilin.



**Qodobka 184<sup>aad</sup>**  
**Isgaadhsiinta (telecommunication)**

Cahuur tacriifteedu tahay 5% oo ku dhacaya qiimaha waxa lagu waajibiyay alaabtan soo socota:-


- a) Isugeynta guud ee waqtiga hawada la isticmaalay ee ay iibiyaan shirkadaha isgaadhsiintu ee loo isticmaalo tilifoonada gacanta;
- b) khidmada laga qaado isticmaalka tilifoonada dhulka ee xadhkaha raaca;
- c) khidmada laga qaado tilifoonada debada inaga soo gala.

**Qodobka 185<sup>aad</sup>**  
**Bixinta Cashuurta Xakamaynta**

1. Marka laga reebo, haddii aan xeer si kale u ogolaan, cashuurta xakamaynta ee la saari doono badeecad kasta oo la xakamaynayo ama la soo dejiyay waxa bixin doona wershadlaha ama soo dejiyaha, cashuurtaasina waxa ay waajibi doontaa lana bixinayaa marka badeecada ka soo baxdo wershadda hadii badeecadaasi tahay mid dalka lagu warshadeeyay ama marka ay soo degto haddii ay tahay badeecad la soo dejiyay.
2. Marka laga hadlayo badeecad la xakamaynayo oo la wershadeeyay, erayga “ex factory” macnaheedu waxa weeye waqtiga badeecadu ay ka baxdo goobtii rasmiga ah ee lagu warshadeeyay.
3. Marka laga hadlayo badeecada la xakamaynayo oo la soo dajiyay, erayga “la soo dejiyay (Import)” waxa uu macnahiisu yahay marka ay timaado badeecadu goobta laga dejiyay.

## **Qodobka 186<sup>aad</sup>**

### **Qadarka la Cashuurayo (Taxable Amount)**



1. Qadarka cashuurta xakamaynta ah ee lagu soo rogay qodobada Cutubkan waxa loo xisaabin doonaa qiimaha badeecada la soo dajiyey, ama qiimaha kharshka warshaydaynta badeecada oo lagu dhuftay tacriifada boqolayda ah.
2. Qiimaha caadiga ee lagaga iibiyay macaamiisha waxa lagu go'aamin doonaa iyada oo lagu salaynayo tilmaantan soo socota:-
  - a) qiimaha caadiga ah ee badeecaddu joogto cashuurta xakamaynta ka hor
  - b) marka iibiyuhu uu isku qabo dhamaan kharashka ah, khidmado ah, iyo kharashka la xidhiidha wershedaynta ama soo dajinta iyo iibinta badeecada ilaa iyo xadka marka la keeno goobaha rasmiga ah ee la ogolyahay in lagu hayo badeecadda bixinta cashuurta xakamaynta ka hor;
  - c) Marka qiimaha caadiga ah uu ku salaysan yahay qiimaha ay joogto badeecadu marka ay soo gaadho goobta ay ka soo degtay sida uu dhigayo Xeerka Tacriifaduhu.
  - d) Hadii badeecada la qiimeeynayaa lagu warshadeeyay ama lagu soo dajiyay ay tahay mid leh ikhtiraac xuquuq dhawrsan ama naqshad diwaan gashan ama calaamad ganacsi, qiimaha caadiga ah waxa ku jiri doonaa kharashka isticmaalka xaquuqda ikhtiraacaasi, nashqadaasi ama calaamadaasi ganaci.
3. Erayga “qiimaha cashuurta la bixiyay” ee lagu adeegsaday Qodobkan waxa loo qaadanaayaa qiimaha lagu qeexay Xeerka Kastamada
4. Si loo xaqiijiyo ku dhaqanka waajibaadka uu jideynayo Cutubkani, soo saare kasta oo Somaliland gudaheeda badeecad ku sameeyey, ama soo dejiyo badeecado soo geliyey dalka, waxa uu u gudbin doonaa marka uu Guddoomiyuhu ka dalbado macluumaadka la xidhiidha badeecadaha uu soo dejiyey ama

hawlgallada wax soo saarka, qalabka uu istiimaaley, badeecadda uu soo dejiyey ama soo saaray, iyo iibinta iyo sicirrada badeecadda.



### **Qodobka 187<sup>aad</sup>**

#### **Xisaab Celinta Cashuurta Xakamaynta**

1. Qof kasta oo looga baahan yahay in uu bixiyo cashuurta xakamaynta ee ku xusan Cutubkan waxa uu keeni doonaa xisaab celinta cashuurta ee xili cashuureedka kasta mudo dhan 21 cisho gudahood ka dib marka ay dhamaato mudadaasi, ha ahaato ama yay ahaan cashuur xakameed ku bisil mudadaasi, marka laga reebo cashuurta looga baahan yahay cashuurta xakamaynta ee badeecada la soo dajiyay ee gashay foormka alaabta soo dejinta ee (Consumption Entry) ee lagu bixiyay cashuurtii xamaynta goobtii ay ka soo degtaysida uu dhigayo Xeerka Kastamada.
2. Ujeedada Cutubkani, mudo cashuureedka waxa uu macnaheedu yahay mudo cashuureed waa dhamaadka bil-walba.

### **Qodobka 188<sup>aad</sup>**

#### **Qadarka La Ururiyay ee Amaano Haynta**

Wershadle kasta oo diwaan gashan ama adeeg bixiye diwaan gashan ee looga baahanyahay sida ku cad Qaybtani in uu bixiyo cashuurta waxa loo qaadan doonaa in uu qabto qadarka cashuurta ugu ururiyay uguna hayo amaano ahaan Dawlada Soomaaliland.

### **Qodobka 189<sup>aad</sup>**

#### **Qabashada Alaabta iyo Ishortaaga Qabashada**

1. Marka ay dhacdo warshedle ama soo dajiye oo aan bixin cashuurta xakamaynta ee lagu leeyahay, badeecadaasi waa lala wareegi doonaa waxana loo haynayaa iib, Habraaca qabashada iyo iibka badeecada iyada oo ay sababtu tahay bixin la'aanta cashuurta xakamaynta ee lagu xusay Qodobka 161aad ee qabashada iyo la waregida badeecadaha iyo Habraaca cashuur bixiyahu uu uga cabanayo ama

rafcaan uga qaadanayo waxa uu la mid yahay sida ku xusan Qodobka 176aad ee Cutubka 3aad

2. Agaasimuhu waxa uu qaban karaa iibina karaa badeecad marka uu hayo sababo macquula oo uu ku rumaysto in cashuurta xakamaynta ee ku waajibtay badeecada aan cashuurtii laga bixinin, ama aan la bixin doonin.
3. Agaasimuhu waxa uu qaban doonaa iibina doonaa gaadhi kasta oo lagula dhuuntay badeecad ay ku waajibtay cashuurta xakamaynta waxa ku waajibaysa in loo qabto gaadhigaas sida uu dhigayo Farqada (1) marka laga tago gaadhiga sidaas loo adeegsaday marka cadeeyo mulkiilahiisu aanu ogayn ogolaanshahana aanu bixin ama wakiilkiisu aanu ogayn ogolaanina.
4. Qabashada iyo iibka badeecada waxa loo raaci doonaa Qodobka 14aad ee Xeerkan.

## **CUTUBKA 5 HAYADA DAKHLIGA SOMALILAND**

### **QAYBTA 1 AASAASIDA, AWOODDAHA, SHAQOYINKA HAYADA DAKHLIGA SOMALILAND**

#### **Qodobka 190<sup>aad</sup> Aasaasida Hay'adda Dakhliga Somaliland**

1. Waxa halkan lagu aasaasay hay'ad lagu magacaabo Hayada Dakhliga Somaliland.
2. Hay'addu waxay ahaan doontaa hay'ad iskeed u taagan oo leh jiritaan rasmi ah iyo shaanbad/astan rasmi ah waxana ay lahaan doontaa in ay magaceeda wax ku dacwayso laguna dacweeyo, sida uu dhigayo Xeerkan, waxa ay lacag ka amaahan kartaa, heli kartaa, isticmaali kartaa hantida waxana ay gudan doontaa dhamaan arimaha kale iyada oo ah hay'ad si sharciga waafaqsan.
3. Hay'addu waxay ahaan doontaa wakaalad dawlada ka tirsan oo hoos timaada kormeerka guud ee Wasiirka.

4. Shaanbada xafiiska waxa xaqiijin doona Agaasimaha Guud iyo xoghayaha gudida.
5. Marka uu maqan yahay Agaasimaha Guud, Agaasime kale ayuu isagu u igman karaa socodsiinta hawshaasi oo saxeexi doona qoraalada halkii Agaasimaha Guud, iyo marka xoghayaha gudidu Maqanyahay, Sarkaal kale ayaa sii wadi doona hawshii siina saxeexi doona halkiisii.
6. Qoraal kasta oo loo qaadan doono in uu yahay qoraal sharci oo ay soo saartay hayadu oo ay tahay in lagu dhufto shaanbada laguna xaqiijiyo qaabka lagu xusay Farqada (4) ama (5) waxa loo qaadan doonaa in uu yahay qoraal sharci ah waxana loo qaadan doonaa cadayn sugan oon aan u baahan doonin cadayn dheeraad ah.

**Qodobka 191<sup>aad</sup>**  
**Shaqooyinka Hayada**

Shaqooyinka hayada waxa ka mid ah:-

- a) Waxa ay maamuli doonaan hirgalin doonaan shuruucda ama qodobada loo cayimay ee cashuuraha ee lagu dajiyay Shaxda Todobaad ee Xeerkani, iyo in ay qiimeeyaan, ururiyaan, isla markaana xisaabiyaan dhamaan dakhliyada sharcigani waajibiyay
- b) Waxa ay Wasiirka kala talin doonaan caqabadaha cashuuraha, maamulka cashuuraha iyo qaababka badalaada siyaasada ee la xidhiidha dhamaan cashuuraha lagu xusay Shaxda Todobaad;
- c) Awooda sharci ee boolisku ku badhayaan danbiyada cashuuraha si ku salaysan xeer nidaamiyaha u yaal
- d) Waxa ay gudan doonaan hawlaha kale ee la xidhiidha dakhliga ee uu Wasiirku amro.

**QAYBTA 2**  
**GUIDIDA AGAASINKA IYO SHAQOYINKOODA**  
**Qodobka 191<sup>aad</sup>**  
**Guddida Agaasinka**

1. Madaxwaynaha JSL wuxuu Magacaabaya Guddi agaasimayaal ah oo ah Maamulka Hay'adda Dakhliga, kana kooban xubnahan soo socda:-
  - a) Gudoomiye, oo lagu magacaabi doono marka uu soo jeediyo Wasiirku;
  - b) Wakiil oo ka socda Wasaarada Maaliyada;
  - c) Wakiil oo ka socda Wasaarada Ganacsiga iyo Warshadaha;
  - d) wakiil oo ka socda ururka warshadlayda Soomaaliland; iyo
  - e) Agaasimaha Guud ee Hayada.
2. Marka uu helo Soo jeedinta Wasiirka, Madaxwaynuhu waxa uu magacaabi doonaa laba xubnood oo kale kuwaas oon ahayn saraakiil dawladeed oo ahaan doona xubno dheeraad ah oo ka tirsan gudida agaasinka oo lagu soo xushay aqoonta gaarka ah iyo khibrada ay u leeyihiin arimaha cashuuraha, iyada oo ay shardi tahay in shakhsiyaadkaasi la magacaabay aanay hayn shaqo buuxda iyo mid gaaban toona ama dan gaar ahaaneed oo ka hor imaanasa ama is hor taagasa gudashada shaqadooda ka xubin gudi ahaaneed.
3. Gudidu waxa ay ka masuul ahaan doontaa dhamaan daba galka habsami u socodka dakhliga hayada, go'aaminna doonaan siyaasadaha la xidhiidha shaqaalaynta iyo qandaraas bixinta hayada.
4. Wasiirku waxa uu tilmaamo siin karaa la xidhiidha habsami u socodka hawlaha gudida, guddiduna waa in ay tixgeliyaan ku dhaqankeeda.

### **Qodobka 193<sup>aad</sup>**

#### **Shuruudaha looga baahan yahay Magacaabista**

Xubnaha ka tirsan gudidu, ee aan ahayn xubnaha Wakiillada Wasaaradaha iyo hayadaha, waxa laga dhex magacaabi doonaa shakhsiyaadka u qalma in la magacaabo iyada oo la eegayo aqoonta takhasuskooda iyo khibrada ay u leeyihiin dhanka cashuuraha, ganacsiga, dhaqaalaha, sharciga iyo arimaha kale ee dakhliga ee uu

Wasiirku go'aamiyo ama arimo kale oo khuseeya Dakhliga.

**Qodobka 194<sup>aad</sup>**  
**Muddo Xileedka Gudida**



Xubin kasta oo aan ahayn xubnaha ka Wakiilka ah Wasaaradaha iyo hayadaha waxa ay:-

- a) Hayn doontaa xafiiska mudo xileedka iyo shuruudaha lagu xusay qoraalka magacaabistooda oo ah Sadex sano ah
- b) Hadduu ku haboonaado in dib loo magacaabo mar labaad mudo aan ka badnayn saddex (3) sannoo kale.

**Qodobka 195<sup>aad</sup>**  
**hakinta ama ka eryida**

Madax-wahayaha Jamhuriyada Somaliland waxa uu ka eryi doonaa ama ka hakin doonaa magacaabista shaqo ee xubinimo:-

- a) Xubinta gudan kari wayda hawshii xafiiska ;
- b) Cidda la timaada Anshax darro/ dhaqan xumo Hay'adda Dakhliga ;
- c) xubintu la caddeeyo in uu musalafay ama kacay;
- d) Hadii xubinta lagu xukumay xukun ciqaabeed ciqaabtiisa ay ka badan tahay lix bilood oo xadhig ah;
- e) Hadii xubintu, iyada oon fasax hore ka haysan gudoomiyaha ama iyada oon haysan sabab macquula oo uu ku qanco Wasiirku, uu ka maqnaado lix kulan oo gudidu ay lahaayeen sanad maaliyadeed kasta
- f) Hadii xubini, arin gaar ah, uu ku guul daraysto in uu ku dhaqmo farqadaha qodobka 4aad ee Shaxda Sideedaad ee Xeerkani oo la xidhiidha sheegashada dan; ama
- g) Sababo kale oo ku filan oo lagu qanci karo.

**Qodobka 196<sup>aad</sup>**



## **Shirarka Gudida**

1. Shaxda Sideedaad ee Xeerkani waxa lagu dabaqi doonaa shirarka gudida iyo arimaha kale ee lagu xusay Shaxdaasi Wasiirku waxa uu, qoraal sharci ah, wax kaga badali karaa Shaxdaas.
2. Gudididu waxay kulmi doonaan Sadexdii biloodba halmar ugu yaraan.
3. Gudidu waxa ay la shaqayn doontaa qof kasta oo loo baahdo si uu uga qayb galo doodooda, balse qofkaasi ma lahaan doono xaqa codaynta.

## **QAYBTA 3 AGAASIMAHA GUUD, SARAAKIISHA, IYO SHAQAALAHA**

### **Qodobka 197<sup>aad</sup> Agaasimaha Guud**

- 1) Madaxwaynaha ayaa magacaabaya Agaasimaha Guud iyo K/Xigeenka Hay'adda marka uu helo talo soo jeedinta wasiirka iyo gudidda oo ku salaysan shuruudaha lagu xusay qoraalka magacaabista.
- 2) Agaasimaha Guud waxa uu ahaan doonaa sargaalka fulineed ee ugu sareeya Hayada waxana uu ka masuul ahaan doonaa shaqo maalmeedka hawlgalada hayada, maamulka lacagta, hantida iyo hawlaha guud ee hayadda iyo maamulilida qaabka kormeerka iyo fulinta ee saraakiisha kale iyo shaqaalaha Hayadaas.
- 3) Agaasimaha Guud waxa uu waqtigiisa oo dhamays tiran u huri doonaa waajibaadka xafiiska mana gali karo hawl ganacsi, shaqo, xirfad ama shaqo uu mushahar ka qaato meel kale.
- 4) M/Waynaha JSL ka dib marka uu la tashado Wasiirka iyo gudida, waxa uu shaqada ka eryi karaa Agaasime Guud markay ku cadaato sidani:-
  - a) Marka Agaasimuhu la yimaado Anshax daro /dhaqan xumo;
  - b) marka Agaasimaha Guud uu gudan kari waayo shaqooyinka xafiiskiisa;

c) Sabab kasta oo kale oo macquula.

**Qodobka 198<sup>aad</sup>**  
**Xoghayaha Gudidda**



- 1) Gudidu waxa ay magacaabi doontaa xoghayaha guddida.
- 2) Xoghayntu waxa ay ka masuul ahaan doontaa habaynta/diyaarinta hawlaha shirarka gudida, haynta iyo kaydinta xogaha, go'aanada shirarka gudida iyo masuuliyadaha kale ee ay gudidu u dirtaan.

**Qodobka 199<sup>aad</sup>**  
**Saraakiisha kale iyo Shaqaalaha**

- 1) Iyada oo la raacayo Qodobka 198, gudidu waxa ay soo magacabi doonaan saraakiisha heerkoodu yahay maamule ama ka sareeya, iyada oo u raacaya hadba shuruudaha loo dejiyay magacaabistaas.
- 2) Gudiddu waxa ay ansixin doonaan qodobada iyo shuruudaha dhamaan saraakiisha iyo shaqaalaha looga baahan yahay habsami u socodsiinta shaqooyinka hayada.
- 3) Gudidu waxa ay masuul ka ahaan doonaan anshax marinta iyo daba-galka saraakiisha iyo shaqaalaha.

**Qodobka 200<sup>aad</sup>**  
**ka Dhaafida Masuuliyada Shakhsi**

Qofka shaqaalaha ka ah hayadaas, shakhsi ahaantiisa kama masuul noqon doono garmaqal madani ama ciqaab ah oo la xidhiidha fal kasta ama ka gaabsi fal kasta oo lagu suubiyay niyad samaan la xidhiidha gudashada shaqooyinkiisa ku xusan Xeerkani.

**QAYBTA 4**  
**QODOBADA MAALIYADA**

**Qodobka 201<sup>aad</sup>**  
**Dakhligu Kordhinaya keydka Dakhliga**

Dhamaan dakhliga la ururiyay ama Waajibay in la bixiyo, Maamulku sida ku xusan Xeerkani wuxuu ku shubi

doonaa Sanduuqa/Keydka Dhakhliga, marka laga reebo xaaladaha uu Wasiirku hadba waqti uu ku amro Maamulka qoraal ahaan in ay hayaan saamiga dakhli uu ururisay sida Wasiirku go'aamiyo si uu awood ugu siiyo Maamulka si ay u daboolaan kharashkooda iyada aann lagu faro galin, balse wadarta guud ee la ogolaaday ma ahaan doonto sanad maaliyadeedna, kamana badan karto qadarka uu u qoondeeyay Golaha Wakiiladu Hay'ada sanadkaasi waxana loo tuuri doonaa qadarka la qoondeeyay.

**Qodobka 202<sup>aad</sup>**  
**Maalgalinta Maamulka**

- 1) Lacagta lagu maalgalinayo Maamulka waxa ay ka koobnaan doontaa:-
  - a) Lacagta uu u qoondeeyo Golaha Wakiilada Maamulka;
  - b) b. Amaahda ama deeqaha ay hesho Maamulku ee uu ansixiyo Wasiirku; iyo
  - c) c. Lacag kasta oo kale taas oo, marka uu ansixiyo Wasiirku, oo uu helo ama la siiyo Maamulka si ay hawlaheeda ugu gudato.
- 2) Kharashka Maamulka waxa lagu dalici doonaa Sanduuqa/keydka Dakhliga Guud.

**Qodobka 203<sup>aad</sup>**  
**Oodoroska Dakhli iyo Kharash ee Maamulka**

- 1) Agaasimaha Guud waxa uu muddo aan ka danbayn saddex bilood oo ka horeysa inta aanu dhamaan sanad xisaabeed kastaa, waxa uu diyaarin doonaa una gudbin doona gudida si ay u ansixiyaan, odoroska dakhligooda iyo kharashkooda ee sanadka soo socda waxana uu waqti kasta oo ka horeeya inta uusan dhamaan sanad xisaabeedku waxa uu diyaarin doonaa una gudbin doonaa gudida si ay u ansixiyaan wixii odoros kaabis ah ee sanad maaliyadeedka socda.

- 2) Wax kharash ah lagama gali karo lacagaha hay'ada hadii aan kharashkaasi aanu ka mid ahayn kharashka ay ansixiyeen gudideu ee hoos imaanaya odoroska sanad maaliyadeedka taas oo tahay in la galo kharashama odoroska kaabista ah ee sanadkaasi.

### **Qodobka 204<sup>aad</sup>**

#### **Xisaabaadka, Baadhis iyo Warbixin Sanadeedka**

- 1) Maamulku waxa uu lahaan doonaa xisaabaadka iyo diwaanada macaamilkooda iyo arimaha waxana uu hubin doonaa in dhamaan lacagaha la helay in si hufan loo xisaab galiyay, dhamaan lacag bixinaha laga bixiyo lacagtooda in si saxa loo sameeyay iyo in si cad loo ogolaaday in ilaalin ku filan la hirgaliyo hantidooda iyo daynta ay gasho Maamulka.
- 2) Xisaabaaadka sanadlaha ah ee Maamulka waxa baadhi doona Hanti Dhawraha Guud.
- 3) Agaasimaha Guud waxa uu, saddex biloodka hore ee sanadkasta oo cusub ka dib dhamaadka sanad maaliyadeedkasta, waxa uu gudbin doonaa:-
  - a) M/waynaha JSL , Wasiirka iyo hayada Xisaabceinta sanadlaha ee la xidhiidha sanadkaas, oo ka kooban:-
    - I.Warbixinaha maaliyada;
    - II.Tusmada hawl qabadka iyo warbixin kasta oo kale oo la xidhiidha;
    - III.Warbixin ku saabsan hawl-galada Hayada; iyo
    - IV.Warbixinta kale ee ay guddidu, ka hor ama ka dib marka uu dhamaado waxbixin sanadeedka.
  - b) ee ku socda Hanti-dhawraha Guud:-
    - I. Xisaabaadka Hay'ada ee sanad xisaabeedka; iyo
    - II. Wax bixin sanadeedka lagu xusay farqada (a).
- 1) Hanti-dhawraha Guud waxa uu baadhi doonaa xisaabaadka muddo laba bilood gudahood ah ka dib marka uu ka helo iyaga waxanu u gudbin doonaa aragtidiisa M/Wayanaha JSL, Wasiirka iyo guddida.

- 2) Wasiirku waxa uu sababayn doonaa in nuqulada Warbixinta sanad kasta oo ay weheliyaan nuqulka aragtida ah ee Hanti Dhawraha Guud ee la hor geyn doono Golaha Wakiillada muddo laba (2) bilood gudahood ah ama kulanka Golaha Wakiillada ee ku soo xiga ka dib marka uu helay.

### **Qodobka 205<sup>aad</sup>**

### **Hantidhawrka Gudaha iyo Warbixinada Wakhtiyada ah ee Baadhista**

- 1) Marka lagu daro shaqooyinka kale ee uu u igmaday isaga/iyada guddidu ama Agaasimaha Guud, madaxa waaxda hanta dhawrka gudaha ayaa ka masuul noqon doona baadhista gudaha ee xisaabaadka Maamulka waxanu u gudbin doonaa Agaasimaha Guud warbixin la xidhiidha saddex bilood kasta oo ka mid ah sanad xisaabeedka.
- 2) Agaasimaha Guud waxa uu gudbin doonaa warbixin kasta oo lagu xusay farqada (1) oo loo geeyay guddida si ay u darsaan kulankooda soo socda ee gudida ka dib marka uu isagu ama iyadu ay heshay waxa kale oo uu siin doonaa nuqul warbixinta ka mid ah:-
- a) Wasiirka; iyo
- b) Hanta Dhawraha Guud.

### **QAYBTA 5**

### **QODOBO KALA DUDUWAN**

### **Qodobka 206<sup>aad</sup>**

### **Lahaanshaha Hantida iyo Qaamaha iyo Jiritaanka Heshiisyada iyo Dacwadaha Taagan**

- 1) Dhamaan hantida, marka laga reebo hantida uu Wasiirku go'aamiyo taas oo ka hor inta aanu dhaqan galin Xeerkani ay lahayd dawladu oo ay isticmaalayeen waaxaha kastamada, macaashal macaashka iyo cashuuraha bariga marka la dhaqangelinayo qodobada lagu sheegay Shaxda Todobaad ee Xeerkani, taariikhda uu dhaqan galo Xeerkani, iyada oo aan loo baahnayn cadaymo

dheeraad ah, waxa uu xilkoodu ku wareegayaa hay'adda haddii ay tahay dayn, qaamo, ajurooyin, waajibaad iyo amaanada hantida ma-guurtada ah.

- 2) Marka laga reebo sida lagu soo sheegay Farqada (1) ee la xidhiidha hantida, dhamaan heshiisyada, daymaha, hawl-galada iyo qaamaha Dawlada ee loo aaneeyo waaxda kastamada, macaashal macaashka iyo cashuuraha bariga waxa xilkoodu ku wareegayaa Dawlada waxaana loo fulin doona dawlada ama si ku lid ah.
- 3) Dhamaan wixii dacwad socotay iyo cabashooyinka taagnaa ee khuseeya dakhliga ee shuruucda lagu dajiyay Shaxda Todobaad ay ku dabaqmaan waa la sii wadi doonaa ama waa lagu sii dhaqmi doonaa ama loo adeegsan doona si ku lid ah hay'ada si la mid ah sidii ay u dhaqan gali lahaayeen hadii aan Xeerkani aan la dajin.

### **Qodobka 207<sup>aad</sup>**

#### **Dhismaha iyo Wax ka Badalka Shuruucda Kale**

- 1) marka uu dhaqan galo Xeerkani Ka hor iyo ka dib dhamaan tixraacyada Agaasime kastamada, ama Agaasimaha Cashuuraha Bariga ee ku xusan xeer ama qodob kasta lagu sheegay oo xeer kale sida lagu dajiyay Shaxda Todobaad ee Xeerkani waxa loo tafsiiri doonaa iyada oo la tixraacayo Agaasimaha Guud ee Hay'ada.
- 2) Iyadoo ujeedadu tahey in la waafajiyo xeerkan, Golaha Wakiiladu waxay ansixnayaan oo ay qaraar ku meel marinayaan inay wax ka badalaan xeer kasta ama qoraal sharci marka laga reebo Dastuurka.

### **Qodobka 208<sup>aad</sup>**

#### **Xeer Nidaamiyeyaasha**

Wasiirku ka dib marka uu la tashado hayada , waxa uu soo saari doonaa Xeer- nidaamiyeyaal lagu dhaqan gelin doono Xeerkani

## **CUTUBKA 6**

### **GUDIDA DACWADAHA CASHUURAHA**

**QAYBTA 1**  
**AASAASIDA GUDIDA DACWADAHA CASHUURAHA**



**Qodobka 209<sup>aad</sup>**  
**Aasaasida Gudida Dacwadaha.**

Waxa Xeerkan lagu aasaasayaa **Gudida Dacwadaha Cashuuraha**, waxa ay ka koobnaan doontaa Gudoomiye iyo afar xubnood oo kale oo loo magacaabay si waafaqsan Xeerkan.

**Qodobka 210<sup>aad</sup>**  
**Magacaabida Gudoomiyaha Gudida Dacwadaha.**

- 1) Wasirku isago la tashanaya gudoomiyaha Guddida Cadaalada waxa uu magacaabi doona gudoomiyaha **Gudida Dacwadaha**.
- 2) Qofka loo magacaabayoo gudoomiyaha **Gudida Dacwadaha Cashuuraha** waa in uu ahaadaa mid buuxiyay shuruudaha heerka looga baahan yahay Garsoore Maxkamada Gobol.


**Qodobka 211<sup>aad</sup>**  
**Magacaabida Xubnaha kale ee Gudida Dacwadaha**

Xubnaha kale ee **Gudida Dacwadaha** waxa soo magacaabi doona Wasiirka, iyadoo Xubinaha Gudida **Dacwadaha** ee loo magacaabayoo ay noqon doonto shaqaalayntoodu mid aan joogto ahayn.

**Qodobka 212<sup>aad</sup>**  
**Aqoonta Qofka la Magacaabayoo**

- 1) Qofka xubnimada Gudida Dacwadaha loo magacaabidoona wuxu noqon doona:-
  - a. Qof qiyam akhlaaqeed oo sareeya leh iyo laguna yaqaano hufnaan;
  - b. Aanu hore u gelin denbi la xidhiidha dhanka anshaxa.

- 2) Xubinta ka tirsan **Gudida Dacwadaha** waa in uu aqoon u leeyahay dhanka Cashuuraha, Maaliyada, Xisaabaadka iyo Sharciga.
- 3) Xubnaha ka tirsan **Gudida Dacwadaha** ma noqon doonaan saraakiil ka tirsan Hay'ada Dakhliga ee Somaliland ama Shaqaale Dawladeed.



**Qodobka 213<sup>aad</sup>**  
**Mudada Xileedka Gudidda**

- 1) Mudo xileedka Gudoomiyuhu waxa uu xilka Xafiiska hayn doonaa mudo dhan 3 sanadood, mar labaadna dib ayaa loogu magacaabi karaa.
- 2) Iyada oo la raacayo Xeerkan, xubinta ka tirsan **Gudida Dacwadaha** waxa ay xilka hayn doontaa muddo dhan 3 Sanadood, mar labaadna dib ayaa loogu magacaabi karaa.

**Qodobka 214<sup>aad</sup>**  
**Shuruudaha Magacaabista**


- 1) Iyada oo la raacayo Xeerkani, xubinta ka tirsan **Gudida Dacwadaha** waxa ay shaqada ku wadi doontaa qaab waafaqsan qodobada iyo shuruudaha hore loo sheegay, oo ay ku jiraan qodobada iyo shuruudaha la xidhiidha mushaharka iyo gunooyin.
- 2) Magacaabida garsoore loo magacaabay gudoomiye saamayn kuma yeelan doonto mudada uu xilka ku hayo garsoore ahaan ama darajadiisa, xilkiisa, mushaharkiisa iyo gunadiisa, ama xuquuqaha kale ama dhawrsanaanta uu leeyayay Garsoore ka tirsan Maxkamadaha caadiga ah mudadaas, Hawsha gudoomiyenimadu waxa loo qaadan doonaa in uu ahaan adeege xafiiska ku hayay garsoore ahaan.

**Qodobka 215<sup>aad</sup>**  
**Dhaarta Xafiiska**

Qof kasta oo loo magacaabo xubin ka tirsan tahay **Gudida Dacwadaha**, inta aanu bilaabin shaqada xafiiska, waxa la marin doonaa dhaarta lagu dhaariyo xubnaha garsoorka ee ku qeexan shuruucda Soomaaliland.



**Qodobka 216<sup>aad</sup>**  
**Shaqo ka fadhiisinta Xubnaha**



- 1) Xubinta ka tirsan **Gudida Dacwadaha** waxa ay qoraal iskaga casili karaan xilka Xafiiska iyada oo u gudbinaya Wasiirka.
- 2) Xubinta waxa xilka lagaga qaadi karaa/eryi karaa oo kali ah hadii:-
  - a. Xubinta oo gudan Kari wayda xilkeeda iyada oo ay sababo la xidhiidha jid ahaan iyo caqli ahaan.
  - b. Anshax daro ama akhlaaq xumo;
  - c. Hawl gudasho la'aan;
  - d. Qofka oon waxba haysan ama kacay/musalafay;
- 3) Wasiirku waxa uu xilka ka qaadi doonaa xubin ka mid ah **Gudida Dacwadaha** hadii xilka qaadistiisa ka timaado guddi loo saaray ee ku xusan sida ku cad farqada (5) hadii gudidaasina u soo jeediso Wasiirka in xubinta xilka laga qaado iyada oo cuskanaysa qodobada lagu sheegay farqada (3)
- 4) Hadii uu Wasiirku u arko in xubin ka tirsan **Gudida Dacwadaha** xilka laga qaado, Wasiirku waxa uu magacaabi doonaa guddi ka kooban saddex xubnood oo ah garsoorayaal maxkamadeed oo leh waayo aragnimo sharci ee dhinaca Madaniga iyo ciqaaba, ama waayo aragnimo dhinaca rafcaan ah ama qareenimo ku soo shaqeeyay mudo 10 sanadood oo xidhiidh ah.
- 5) Guddida lagu magacaabay farqada (5) waxa ay arinta su'aalo ka waydiin doonaan uguna warbixin doonaan Wasiirka iyaga oo natiijada ku soo talo bixinaya in xubinta xilka laga qaado ama loo daayo si waa iyada oo la adeegsanayo Qodobkan.
- 6) Hadii xilka qaadista xubinta **Gudida Dacwadaha** guddi ku soo talo bixiso in xilka laga qaado, Wasiirku waxa uu shaqo xakin ku samayn doonaa xubintaas.
- 7) Shaqo Hakinta ku xusan farqada (7) hadii guddidu ay kula taliso Wasiirka in xubinta shaqada laga xakiyo balse aan shaqada laga eryin.

**Qodobka 217<sup>aad</sup>**  
**Sheegida Danta**

Hadii xubin ka mid ah, ama ahaan doona, xubin ka tirsan **Gudida Dacwadaha** oo looga baahan yahay fadhiyada xubintaasina ay dan ka leedahay, xidhiidh la leh ama si kalaba, taas oo ka hor imaanasa habsami u gudashada shaqada xubinta, xubintaasi waxa ay dandaasi u sheegi doontaa dhinacyada garmaqalka, marka laga reebo hadii ay ku qancaan dhamaan dhinacyada garmaqalku, xubintu kama qayb qaadan doonto garmaqalka ama ma lahaan doonto wax awood ah oo xidhiidh la leh dib u eegista ay samayso maxkamadu oo xidhiidh la leh go'aanada cashuuraha ee uu garmaqalku khuseeyo.

## **QAYBTA 2** **MAAMULKA GUDIDA DACWADAHA**


### **Qodobka 218<sup>aad</sup>** **Shaanbada Rasmiga ah**

- 1) **Gudida Dacwadaha** waxa ay lahaan doontaa shaanbad rasmi ah taas oo sharci ahaan la sii faafiyay.
- 2) Shaanbada **Gudida Dacwadaha** waxa lagu dhufan doonaa qoraalada looga baahanyahay hadba sida uu faro gudoomiyuha **Gudigaas Dacwadaha**.

### **Qodobka 219<sup>aad</sup>** **Habaynta Hawlaha Gudidda**

- 1) Iyada oo la raacayo Xeerkani, gudoomiyaha ayaa ka masuul noqon doona hawl socodsiinta in uu hubiyo in si hufan oo nidaamsan in loo gutay hawlaha **Gudida Dacwadaha**.
- 2) Iyado aan la xadidayn hawl-galinta farqada (1), gudoomiyuhu waxa uu tilmaamo ka bixino doonaa:-
  - a) Habaynta hawlaha **Gudida Dacwadaha**;
  - b) Meelaha fadhiyada **Gudida Dacwadaha** ka qabsoomi doonaan;
  - c) Habraaca **Gudida Dacwadaha** guud ahaan; iyo
  - d) Habraaca **Gudida Dacwadaha** meelaha gaarka u ah.


- 3) Waqtiyada iyo goobaha dhagaysiga **Gudida Dacwadaha** waxa go'aamin doona gudoomiyaha iyada oo ay aragtidu tahay in la helo fursad macquula oo rafcaanlayaashu ay ku hor yimaadaan **Gudida Dacwadaha** isla markaana ku haboon kharash ahana yar.



**Qodobka 220<sup>aad</sup>**  
**Qaab-dhismeedka Gudida Dacwadaha**

1. **Gudida Dacwadaha** fadhiiyadoodu Waxa ay ka koobnaan doontaa saddex xubnood:-
2. Marka uu dhagaysigu socdo **Gudida Dacwadaha** horteeda hadii ay **Gudida Dacwadaha** ka koobnaayeen saddex xubnood, waxaa:-
  - a. Hadii gudoomiyuhu uu xubin ka yahay **Gudida Dacwadaha** fadhigaas, isaga ayaa gudoomin doonaa; ama
  - b. Hadii kale sadexda xubnood ayaa iska dhexdooranaya xubinta gudoominta doonta fadhigaas.
3. Hadii fadhiiyada ay ka koobanyihiin saddex xubnood (3), mid ka mid ah xubnahan ay xubinimadiisu ka maqnaato, ka hor fadhiga looga baahanyahay, inta aan arinta fadhigaasi khuseyso aan go'aan laga gaadhin:-
  - a. waxa la dhamaystiri doonaa dhegaysiga **Gudida Dacwadaha**, Hadii dhinacyada fadhiiyadu ay isku raacaan; ama
  - b. Hadii dhinacyadu ay isku raaci waayaan, fadhiiyada dib baa loo dhigi doonaa, ilaa inta xubin kale laga soo buuxin doonta, si dib loogu bilaabo dhegaysiga.
4. Hadii, iyada oo la raacayo farqada (3) (a), **Gudida Dacwadaha** waxa ay ka koobnayd laba (2) xubnood hadiise xubnuhu ay go'aan isku raaci waayaana, gudoomiyaha ayaa magacaabi doonaa xubin kale, si dib loogu bilaabo dhagaysiga fadhiga maxkamadaas.

5. Haddii gar-maqalka ay dib u dhagaysanayso **Gudida Dacwadaha, Gudida Dacwadaha** waxay Uraacayaan, si la mid ah sidii markii hore loo qaaday, oo ay ku jiraan wixii xog ururin ah iyo cadayn kasta oo kale hore la qaaday garmaqalkaasi.



### **QAYBTA 3**

## **DIB U EEGISTA GUDIDA DACWADAHA GO'AANADA CASHUUREED**

### **Qodobka 221<sup>aad</sup>**

### **Dib u eegista Gudida Dacwadaha ee Go'aanada Cashuureed**

- 1) Qof kasta oo ka cabanaya go'aan ku salaysan Xeerka Cashuuraha oo ay riday Hay'ada Cashuuraha Soomaaliland waxa ay codsi dib u eegis ah u gudbinaysaa Gudida Dacwada cashuuraha.
- 2) **Gudida Dacwadaha** waxa ay awood u leedahay in ay dib u eegto go'aan kasta oo cashuureed oo si ku haboon looga soo cawday.
- 3) **Gudida Dacwadaha**, marka ay gudanaso waajibaadkeeda shaqo waxay madax banaan tahay, faragelin iyo tilmaan toona cidna Kama qaadan karto hayada iyo shaqsi toona.

### **Qodobka 223<sup>aad</sup>**


### **Qadimida qayb ka mid ah cashuurta inta aan go'aan laga gaadhin**

- 1) Cashuur bixiyaha keenay is hortaag ku saabsan cashuurta loo qiimeeyay, inta uu taagan yahay qaraarka Kama danbaysta ah ee diidmadu, waxa uu bixin doonaa 30% ah cashuurta la qiimeeyay ama
- 2) sida ay dhigayso farqada (1), hadii badeecad tahay mid baaba'I karta ama xumaan karta , badeecadaasi si degdeg ah ayaa loogu sii daynayaa cashuur bixiyaha ka dib marka uu bixiyo qadar cashuur ah ee lagu

xusay farqada sare, balse Hay'ada Dakhliga ee Soomaaliland waxa la siin doonaa damaanad u dhiganta qadarka cashuureed ee la soo qimeeyay.

**Qodobka 224<sup>aad</sup>**

**Codsiga Dib u eegista Go'aanka Cashuurta**



- 1) Codsiga ku socda Gudida Dacwadaha ee dib u eegista cashuurta waxa uu ahaan doonaa:-
  - a. mid ku qoran foomka rasmiga ah ee loogu talo galay;
  - b. waxa la soo raacinayaa cadayn muujinaysa asbaabta codsiga; iyo
  - c. Waxa lagu keeni doonaa Gudida Dacwadaha soddon cisho gudahood (30) ka dib marka qofka sameynaya codsigu loo geeyo lana siiyo go'aanka qiimaynta Cashuurta .
- 2) **Gudida Dacwadaha** waxa ay ka dib marka codsi qoraal ah loo keeno, waxa mudo kordhin loo samayn doonaa waqtiga la keenayo codsiga **Gudida Dacwadaha** si uu dib ugu eego go'aanka cashuurta.
- 3) codsaduhu waxa uu nuqul arjigiisa ah ugu gudbinayaa hayada Cashuuraha shan (5) cisho gudahood ka dib marka uu keeno codsaduhu qoraalka cabashadiisa **Gudida Dacwadaha**.
- 4) Hadii codsiga dib u eegista uu la xidhiidho go'aan cashuureed oo ah go'aan is hortaag, codsigaasi waxa hadii **Gudida Dacwadaha** aysan si kale amrin, waxa uu ku koobnaan doontaa asbaabta lagu xusay is hortaaga cashuurta ee uu go'anku khuseeyo.
- 5) Codsiga ku socda **Gudida Dacwadaha** ee dib u eegista go'aanka cashuurta aan laga qaadan in lagu sameeyay hadii aan cashuur dib loogu celinayni aysan jirin, hadii ay jirto, marka laga hadlayo codsiga ah in la siiyo.
- 6) Codsiga dib u eegista go'aanka cashuurta waxa lagu samayn doonaa lix bilood gudahood ka dib taariikhda la soo saaray go'aanka cashuurta.

**Qodobka 224<sup>aad</sup>**  
**Keenida Qoraalada Gudida Dacwadaha**


- 1) Iyada oo loo eegayo Qodobkani, muddo aan ka yarayn sodon cisho gudahood ka dib marka ay hesho hayadau nuqulkii cabashada dib u eegista ee loo gudbiyay Maxkamada hayadu waxa ay ku soo gudbinsaa laba (2) nuqul oo ah sidan:-
  - a) Ogaysiinta go'aanka Cashuurta;
  - b) Qoraal sheegaya sababaha go'aanka Cashuurta; iyo
  - c) Go'aan kasta ama qoraal kast oo uu hayso hayada Cashuuraha oo lloga baahan karo dib u eegista go'aanka ee maxkamada.
- 2) Hadii **Gudida Dacwadaha** aragtideedu noqoto in uu jiro:
  - a) Faahfaahinta qoraalo kale; ama
  - b) Qoraalada kale ee ay ku jiraan qayb qoraalo ah, oo khuseeya go'aanka dib u eegista ee **Gudida Dacwadaha**. maxkamadu waxa ay u diraysaa hayada qoraal codsi ah, ay ku waydiinayso in ay u soo gudbiso qoraalada kale ay uga u baahan tahay.
- 3) Qodobkani kuma yeelan doono wax saamayn ah iyada oon loo eegayn sharci kasta oo la xidhiidha mudnaanta ama danta guud ee ku saabsan soo bandhigida qoraalada.

**Qodobka 225<sup>aad</sup>**  
**Masuuliyada Cadaynta**

Garmaqalka **Gudida Dacwadaha** horteeda ee dib u eegista go'aanka cashuuraha, dacwoodaha ayaa laga rabaa masuuliyada cadaynta ee:-

- a. Hadii go'aanka cashuurta uu khuseeyo go'aan uu yahay go'aan is hortaag ah oo khuseeya qiimayn, qiimayntuna ay tahay mid dheeraada; ama
- b. Xaalad kasta oo kale, oo go'aanka cashuueed aan lagu samaynin ama loo sameeyo si ka duwan.

**Qodobka 226<sup>aad</sup>**  
**Dib u egista Gudida Dacwadaha**



- 1) Marka ay dib-eegis ku samaynayo go'aanka cashuurta, **Gudida Dacwadaha** waxa ay adeegsanaysaa dhamaan awoodaha iyo go'aan-qaadashada waxa ay wada tashi iyo doodka yeelanayaa kushaynta qodobka ay hayadu u cuskatay go;ankeeda Cashuureed, sidaasna waxay ku soo saari doontaa go'aan qoraal ah:-
  - a) Iyada oo ayidaysa go'aanka ay dib u eegtay
  - b) Waxay wax ka badelaysa go'aanka ay dib u eegtay, ama
  - (c) ay ku laalayso go'aanka ay dib u eegtay; oo ah laba midkood
    - I. samaynaysa go'aan lagu badalayo go'aankii ay dib u laashay; ama
    - II. ay dib ugu celinayso Hayaddii go;aankii ay dib u laashay, iyadoo raacinaysa tixgelino ama tilmaamo kasta oo maxkamadu u aragto sax
- 2) **Gudida Dacwadaha** waxa ay bixin doontaa qoraal asbaabta ay ku salaysay go'aankeeda, oo ay ku jiraan wax yaabaha uga soo baxay su'aalaha ay xaqiiqsatay ah iyo tixraaca cadaymaha ama waxyaabaha kale uga soo baxay arintssa.
- 3) Go'aanka maxkamada ee dib u eegista waxa loo geyn doonaa sida ugu dhakhso badan ee ay ku suurto gasho ka dib marka dhegaysiga dacwada la dhamaystiro, **Gudida Dacwadaha** waxa loo geyn doonaa nuqul go'aankeeda ka mid ah, oo ay ku jiraan asbaabta go'aanka, lagu gaadhay oo ay u kala gudbin doonto dhinacyada .
- 4) Iyada oo la raacayo farqada (5), go'aanka **Gudida Dacwadaha** waxa uu dhaqan gali doonaa ka dib marka go'aanku soo baxo ama taariikhda kale ee ay ku asteeyso **Gudida Dacwadaha** go'aankeeda.


- 5) hadii Go'aanka cashuurta ee ay maxkamadu yahay mid wax ka badel lagu sameeyey, yahay mid go'aanka cusub oo ay samaysay **Gudida Dacwadaha**, wixii aan ahayn codsiga dib ee lagu badalayo go'aanka cashuurta ee dib loo eegayo, ee dhamaan ahdaafta oon ahayn ujeedo ah in codsi loo sameeyo **Gudida Dacwadaha** dib loogu eegayo ama keenida rafcaan ka dhan ah go'aanka, kaas oo loo qaadan doono in uu yahay go'aan uu soo saaray go'aan qaatuhu iyo, hadii **Gudida Dacwadaha** aysan sidaas si ka duwan amrin, saamayn ku leh iyo taariikhda go'aanka dib u eegista uu saamayn yeeshay.
- 6) Go'aanka **Gudida Dacwadaha** waxa uu yeelan doona fulin, si la mid ah go,aanada maxkamada garsoorka ee caadiga ah.
- 7) Iyada oo la raacayo farqada (9) dhamaan go'aanada **Gudida Dacwadaha** iyo dhamaan cadaymaha ay heshay, oo ay ku jiraan qoraal laga soo minguuriyay warbixinta dhegaysiga dacwada waxa ay noqonayaan qoraal umadeed oo u furnaan doona baadhitaanka dadwaynaha.
- 8) Iyada oo la raacayo farqada (9), **Gudida Dacwadaha** waxa ay u ogolaan doontaa in la daabaco go'aamadeeda, oo ay ku jiraan asbaabta, oo ah qaabka iyo habka loogu dajin doono warbaahinta dadwaynaha, loona adeegsan doono, iyo daabacaada la ogolaaday ee maxkamada go,aamisay waxa ay cadayn ka noqonayaan dhamaan **Gudida Dacwadaha** Soomaaliland hortooda iyada oo aan loo baahnaan doonin xaqiijin kale.
- 9) **Gudida Dacwadaha** waxa ay hubin doontaa marka ay sii daynayso, ama ogolaanayso helitaanka macluumaadka sida ku cad farqada (7) ama (8) waxay qaadi doontaa talaabo ay kaga hor tagayso bixinta siro ganacsi ama warbixino kale oo qarsoodi ah.

### Qodobka 227<sup>aad</sup>



## Dhagaysiga

Iyada oo la raacayo Xeerka, dhagaysiga **Gudida Dacwadaha** horteeda waxa ay u furnaan doonaan dadwaynaha hadii aan maxkamadda dhinacyada midkood ka codsanin sidaan, ka dibna maxkamada amar ka soo saarto.




## Qodobka 228<sup>aad</sup>

### Awoodaha Gudidda Dacwadaha

- 1) bilawga garmaqal ka **socota Gudida Dacwadaha** horteeda, **Gudida Dacwadaha** waxa ay:-
  - a. Qaadi doontaa cadayn dhaar ah;
  - b. Sii wadi doonaa iyada oo dhinac ka maqanyahay kaas oo la siiyay ogaysiin macquula oo ku saabsan garmaqalka; iyo
  - c. Waxa ay dib u dhigi doontaa dhagaysiga garmaqalka hadba waqti ilaa waqti
- 2) Marka la dhagaysanayo garmaqal oo **Gudida Dacwadaha** horteeda ah, **Gudida Dacwadaha** waxa ay lahaan doontaa awoodaha Maxkamada Gobolka oo kale si ay ugu yeedho qof si uu hor yimaado:-
  - a) In uu bixiyo cadayn; ama
  - b) In uu keeno buugaag, qoraalo ama ashyaa oo uu leeyahay, hayo ama uu gacanta ugu jirta qofka loo
- 3) Hadii **Gudida Dacwadaha** ay u aragto in aan loo baahnayn gelitaan Kharashyo dheeraad ah ama dib u dhac ama sabab kale oo gaar ah, waxa qaadi doontaa dhaar iyo wax ka waydiiimo toos ah waxayna ka dalban doonta shakhsiyaadka ay la yeelatay wax waydiimaha toos ah in ayka bixiyaa jawaabo run ah oo buuxa.
- 4) **Gudida Dacwadaha** waxa ay lahaan doontaa awood ay ku soo saarto amar ama ku codsato in la baadho markhaati dalka debadiisa jooga.
- 5) **Gudida Dacwadaha** waxay amar ka soo saari kartaa kharashka dacwada hadba dhinaca lagu yeesho

amarkaas waxa uu yeelan doonaa awood fulineed, oo la mid ah go, aanada maxkamadaha Gobolka.



**Qodobka 229<sup>aad</sup>**  
**Hab-Raaca**

1. Garmaqal kasta oo ka hor socda **Gudida Dacwadaha**, habraaca **Gudida Dacwadaha** waxa uu yahay, iyada oo la raacayo Xeerkani, mid ku salaysan awooda maxkamada si madax-banaan.
2. Garamaqalka **Gudida Dacwadaha** horteedu waxa loo fulin doona iyada oo la raacayo qaabka ugu fudud nidaam ahaan iyo farsamo ahaan ee suurta galka ah, **Gudida Dacwadaha** uma dabranaan doonto qodobada maragmuujinta balse waxa ay ogsoonaan doontaa arin kasta oo ah qaabka ay u aragto ee ugu haboon.
3. Garmaqalada **Gudida Dacwadaha** waxa loo fulin doonaa iyada oo la raacayo qodobada lagu dhaqmo iyo hab-raaca ay **Gudida Dacwadaha** soo saari doonto, maxkamadu waxa ay tilmaami doontaa qaabka loo raacayo qodobada nidaamka hab-raaca maxkamada kasta leedahay taasoo ay **Gudida Dacwadaha** ku soo saari doonto tilmaamo iyo habayn.
4. **Gudida Dacwadaha** waxa ay yeelan doontaa kaaliye fuliya hawlaha qoraalada xukunada sharciga ah, diyaarinta, amarada, qaraarada ama ama yeedhmooyinka si la mida maxkamadaha Caadiga ah ee Soomaaliland.

**Qodobka 230<sup>aad</sup>**  
**Wakiilnimada (metelaada) Gudida Dacwadaha**  
**Horteeda**

Xiliga dhegaysiga dacwad ka hor socota **Gudida Dacwadaha** gaarka ee cashuuraha, dacwoodaha ayaa isa soo hortaagi doona shaqsi ahaan maxkamada horteeda ama cida uu isagu soo wakiishay ee metalaya.

**Qodobka 231<sup>aad</sup>**

## Fursadda lagu Soo Gudbinayo Cadaymaha

**Gudida Dacwadaha** waxa ay hubin doontaa in dhinac kasta oo ka mid ah garmaqalka oo maxkamada horteeda la keeno in la siiyo fursad macquula oo uu ku soo bandhigo dacwadiisa, gaar ahaana in ay iska hubiso qoraal kasta oo ay **Gudida Dacwadaha** soo jeediso in ay ka fiirsato marka la gaadhayo go'aanka garmaqalada iyo wixii ka khuseeyana ay ka jawaab celiso.

### Qodobka 232<sup>aad</sup>

#### Joojinta, laalis/xidhis ama Dib ugu Noqoshada Codsiga

- 1) Dacwooduhu markasta oo ogaysiin qoraal ah ku xareeyo **Gudida Dacwadaha** uu ugu sheegayo in uu joojiyay ama dib ula noqday dacwadas markaas maxkamadu waxay tuuraysaa/xidhaysaa galdacwadeedkaas iyadoo aan wax dhegaysi ah ama dib u eegis ah aan ku samaynayn doonin
- 2) Hadii Dacwooduhu ka baaqsado, isaga oo aan lahayn cudur daar macquula, in uu ka soo qaybgal dhagaysiga garmaqalka, **Gudida Dacwadaha** waxa ay laali doontaa ama xidhaysaa codsiga dacwoodaha iyada oo aan dhagaysi iyo dib ugu eegis midna ku samayn.
- 3) Hadii Dacwooduhu ka baaqsado isaga oo haysta waqti macquula in uu codsigiisa sii wato ama ku dhaqmi waayo tilmaanta **Gudida Dacwadaha** ee la xidhiidha codsiga, maxkamadu waxa ay laalaysaa/xidhaysaa codsiga.
- 4) Hadii **Gudida Dacwadaha** ay laasho/xidho codsiga, sida ku cad farqada (2) ama (3), dacwooduhu waxa uu, soddon cisho gudahood ka dib marka uu helo ogaysiinta in codsiga la laalay/la xidhay. waxa uu ka codsan doontaa in uu dib ugu soo celiyo **Gudida Dacwadaha** dacwadiisa, **Gudida Dacwadaha**, hadii ay u aragto mid ku haboon in ay sidaasi yeesho, waxa ay dib usoo celin doontaa codsiga, iyadoo bixin doontaa

tilmaamaha ay ugu muuqato in ay ku haboon yihiin duruufaas.



**Qodobka 233<sup>aad</sup>**

**Awooda Gudidda Dacwadaha haddii Dhinacyadu Gaadhaan Heshiis**

Hadii, mar xalad kasta oo ay socoto garmaqalku, dhinacyada garmaqalku ay qoraal ahaan ku ogolaadaan qodobada go'aanka **Gudida Dacwadaha** ee garmaqalka ama wax xidhiidh la leh qayb ka midah garmaqalka ama arin ka timid garmaqalka **Gudida Dacwadaha** lagu qanciyo in go'aanka qodobadaasi uu yahay awooda **Gudida Dacwadaha, Gudida Dacwadaha** waxa ay:-

- a) Hadii heshiiska la gaadhay go'aan heshiishka intii lagu jiray socodsiinta dacwada Gudida Dacwadaha hortaalay uu khuseeyo qodobada go'aanka maxkamada ee garmaqalka, ayna samayso go'aan waafaqsan qodobadaasi iyada oon la bilaabin dhegaysiga garmaqal ama, hadii dhegaysiga la bilaabay, balse aan la dhamays tirin dhegaysiga garmaqalka; ama
- b) Marka heshiiska la gaadhay uu khuseeyo qayb ka mid ah garmaqalka ama arin ka dhalatay garmaqalka arimaha salka u ah Go'aan-qaadashada garmaqalkaas, waxa uu ku salaysnaan doonaa qodobada heshiiskaas iyada oon laysu dhegaysan doonin qaybta ka soo dhex baxday gal-maqalka iyo heshiishkaas.

**Qodobka 234<sup>aad</sup>**

**Rafcaan Ku socda Maxkamada gobolka go'aanada Gudida Dacwadaha**

- 1) Hadii labada Dhinaca midkood uu helo Xukunka Gudida Dacwadaha horteed yaala, ka dib soddon cisho gudahood oo ka bilaabmaysa marka la ogaysiiyo go'aanka ama mudada kale ee ay cayinto Maxkamada Gobolka gudaheeda waxa uu qoraal rafcaan uu ugu gudbinayaa Maxkamada Gobolka,

isaga oo nuqulka rafcaan qabshada siinaya dhinaca kale ee galmagalka ka hor socday Gudida Dacwadaha.

2. Rafcaanka ku socda maxkamada Gobolka waxa uu ku salaysnaan doonaa su'aalo qodobbo sharci oo kali ah, arjiga rafcaankana ee loo gudbiyay maxkamada Gobolka waxa lagu xusi doonaa su'aal ama Su'aalo sharci kuwaas oo lagu saleeyay rafcaanka la keenayo.
3. Maxkamada Gobolka waxa ay dhagaysan doontaa go'aansana doontaa rafcaanka waxana ay ka soo saari doontaa xukunka ay u aragto in uu ku haboon yahay sababaha go'aan qaadashadeeda, oo noqon kara xukun ay ku ayidayso ama laalayso Go'aanka Gudiga Dacwadaha ama mid ay dib ugu celinayso **Gudida Dacwadaha** si ay dib ugu eegto.

### **Qodobka 235<sup>aad</sup>**

#### **Fulinta iyo hirgalinta go'aanda dibo eegista iyo Rafcaanka**

- 1) Hadii codsi dib u eegis go'aan cashuureed loo geeyo **Gudida Dacwadaha** ama rafcaan ka dhan ah go'aan **Gudida Dacwadaha** ee loo geeyay Maxkamada Gobolka, Hayada dib u eegaysa waxay soo saari kartaa xukun lagu dhaqan gelinayo ama dhamastirka go'aanka Dib u eegista ama rafcaanka, ama qayb ka mid ah xukunkaas, taas oo ah sidaas hayadaha dib u eegayay aqbaleen kuna habboon ujeedooyinka saxda ah waxtarkana u leh dacwada iyo go'aanka codsiga ama rafcaanka.
- 2) Qodobkan “ Hayada Dib U Eegaysa” waxa uu macnaheedu yahay:-
  - a) Marka laga hadlayo dacwadaha dib u eegista waxa looga jeedaa Gudida Dacwadaha, Gudida Dacwadaha, ama
  - b) Marka laga hadlayo rafcaan waxa looga jeedaa Rafcaanka ku socda Maxkamada Gobolka iyo Maxkamada Sare.

## QAYBTA 4

### MAAMULKA GUDIDA DACWADAHHA



#### Qodobka 236<sup>aad</sup>

#### Maaraynta Arrimaha Maamul ee Gudida Dacwadaha

1. Gudoomiyaha ayaa ka masuul ah maaraynta arimaha **Gudida Dacwadaha**
2. Marka laga hadlayo maareynta arimaha maamulka ee **Gudida Dacwadaha** , gudoomiyaha waxa oo kaalmaysan doonaa kaaliye ka tirsan **Gudida Dacwadaha** iyo saraakiisha iyo shaqaalaha lagama maarmaanka u ah in ay si hufan u gutaan hawlaha **Gudida Dacwadaha** .
3. Kaaliyayaasha iyo saraakiisha kale iyo shaqaalaha **Gudida Dacwadaha** waxa soo magacaabi doona **Gudida Dacwadaha**.

#### Qodobka 237<sup>aad</sup>

#### Kaaliyaha Gudidda Dacwadaha

1. Waxa jiri doona kaaliye **Gudida Dacwadaha** kasta kaas oo gudan doona hawlaha diwaan galinta ee **Gudida Dacwadaha**.
2. Qofka loo magacaabi mayo kaaliye hadii aanu ahayn shaqsi buuxuyay shuurudaha looga baahnaa kaaliye heer Maxkamada Gobolka ka tirsan.
3. Kaaliyuhu waxa uu awood u leeyahay in uu qabto dhamaan hawlaha looga baahan yahay ama ku haboon in uu u qabto isagoo caawinaya gudoomiyaha sida ku cad Qodobka 30aad.
4. Gudoomiyuhu waxa uu siin doonaa kaaliyaha awaamiirta ama tilmaamo khuseya fulinta awoodihiisa/heeda ee ku xusan Qaybtani.

## QAYBTA 5

### DANBIYADA IYO CIQAABAHA

### **Qodobka 238<sup>aad</sup>**

#### **Ku imaatin La'aanta Yeedhmooyinka (Samanada)**



Qof kasta oo loo geeyo yeedhmo oo uu kaaliyuhu soo saaray:-

- a) Si uu marag ahaan u hor yimaado **Gudida Dacwadaha** horteeda; ama
- b) In uu soo saaro buug, qoraal ama shay, kaas oo isaga oo aan haysan cudur daar macquula, ku guul daraysta in uu ku dhaqmo yeedhmooyinka, waxa uu galay danbi waxana loo raaci doona Xeerka Habka Ciqaabta.

### **Qodobka 239<sup>aad</sup>**

#### **Qofka Ka Jawaabi Waaya Su'aalaha**

Qof kasta oo marag ahaan u hor yimaada **Gudida Dacwadaha** horteeda, kaas oo isaga oon lahayn cudur daar macquula diida ama ku guul daraysta in uu ka jawaabo su'aal isaga ama iyada Laga codsaday oo uu ka dalbaday xubinta gudoominasa garmaqalku waxa uu galay danbi waxaana loo raaci doona Xeerka Habka Ciqaabta.

### **Qodobka 240<sup>aad</sup>**

#### **Cadaynta Beenta ah ama Marin Habaabinta ah**

Qof kasta oo marka uu marag ahaan u yimaado **Gudida Dacwadaha** horteeda bixiya cadayn ah, aqoontiisa/teeda, been ama marin habaabin waxa uu galay danbi waxana loo raaci doona Xeerka Habka Ciqaabta.

### **Qodobka 241<sup>aad</sup>**

#### **Sharaf Dilka Maxkamada Gaarka ee Cashuuraha**

Qof kasta oo:-

- a) Xubin ku caaya, wax xidhiidh la leh, gudashada:-
- b) Awoodihiisa iyo shaqooyinkiisa xubinimo;

- c) soo dhexgala dhagaysiga **Gudida Dacwadaha**
- d) Khalkhal galiya, ama ka qayb gala abuurida khalkhal meel u dhaw ama ah halka ay **Gudida Dacwadaha** fadhido; ama
- e) Sameeya fal kasta ama shay kaas oo hadii **Gudida Dacwadaha** ay ahayd raad reeb maxkamadeed sharaf dil ku ah maxkamada, waxa galay danbi waxana loo raaci doona Xeerka Habka Ciqaabta.

**QAYBTA 6**  
**QODOBADA MAALIYADA**  
**Qodobka 242<sup>aad</sup>**

**Lacagta la isticmaalo, Xisaabaadka iyo Baadhida**

1. **Gudida Dacwadaha** waxa ay sanadle u soo bandhigi doontaa miisaaniyad ku socota Wasiirka si uu ansixiyo.
2. Lacagta ay **Gudida Dacwadaha** isticmaasho waxa ay ka koobnaan doonaan:-
- a) Lacagta ay u qoondeeyeen Golaha Wakiillada **Gudida Dacwadaha**
- b) Deeqaha ay hesho **Gudida Dacwadaha** ee uu ansixiyo Wasiirku;
- c) Fiiga iyo ganaaxyada ay soo rogto **Gudida Dacwadaha** ee loo heysan doono qoondo caawimeed
- d) Lacag kasta oo kale taas oo, oo u ansixiyo Wasiirku, lagu helo ama lagu suurto galiyo **Gudida Dacwadaha** ujeedo ah in ay gudato shaqooyinkeeda.
3. **Gudida Dacwadaha** waxa ay lahaan doontaa buug xisaabeed oo sax ah, taas oo sanadkiiba hal mar uu baadhi doono Hanti Dhawraha Guud.

**QAYBTA 7**  
**WAXYAABO KALA DUDUWAN**  
**Qodobka 243<sup>aad</sup>**



## **Xasaanada in La Dacweeyo.**

Wax ficil ah, dacwad ah, eedayn ah ama dacwad kasta oo kale laguma soo oogi doono ama laguma bilaabi doonaa shakhsi ahaan qof ah ama ahaan jiray xubin maxkamada ka mid ah oo xidhiidh la leh fal kasta oo uu sameeyay ama ka gaabsaday in uu sameeyo si niyad sami ah isaga oo gudanaya shaqo kasta oo ku xusan Xeerkani.

### **Qodobka 244<sup>aad</sup>**

#### **Igmashada**

- 1) Gudoomiyuhu waxa uu qoraal uu saxeexay, ugu igmaan karaa xubin dhamaan ama qayb ka mid ah shaqooyinkiisa/keeda ee ku xusan Xeerkani, oon ahayn awooda igmasho lafteeda.
- 2) Awooda lagu igmaday sida ku cad Qodobkani marka uu fulinayo qofka igmadaha ahi, dhamaan ujeedooyinka Xeerkani, waxa loo qaadan doonaa in uu fuliyay Gudoomiyuhu.
- 3) Igmasho ayaa la siin doonaa xubin sida ku cad Qodobkani iyada oon loo eegayn in igmasho la siiyay xubin kale, ama igmashooyin la siiyay xubno kale, oo dhaqan gal ku ah Xeerkani.
- 4) Igmashada ku saabsan Qodobkani kama hortagayso adeegsiga awoodeed ee uu sameeyay gudoomiyuhu.

### **Qodobka 245<sup>aad</sup>**


#### **gaadhsiinta ogaysiisyada iyo Qoraalada Kale**

Hababka gaadhsiin ogaysiisyada iyo qoraalada kale ee ku xusan Xeerka Cashuuraha ee loo isticmaalay go'aanka cashuureed ee dib u eegista ku jira ayaa loo adeegsan doonaa iyada oo ay ujeedadu tahay in loo geeyo ogaysiis kasta ama qoraal kasta oo looga baahday ama uu u ogolaaday Xeerkani.

### **Qodobka 246<sup>aad</sup>**

#### **Xeer Nidaamiye**

Wasiirku waxa uu, isaga oo qoraal sharci ah ku soo saaraya, waxa uu samayn doonaa Xeer nidaamiye si hufan loogu hirgasho qodobada iyo ujeedada Xeerkani.



**Qodobka 247<sup>aad</sup>**  
**Ku Meel Gaadh**

Xeerkani waxa lagu dhaqi doonaa go'aanda cashuurada ee lagu sameeyay ka hor inta uusan dhaqan galin Xeerkani.

**Qodobka 248<sup>aad</sup>**  
**Afka Somaliga ayaa Asal ah**

1. Waxa lagama marmaan ah in turjumaada iyo dabakha duba waafaqsan yihiin si waafaqsan Qodobka 6aad ee Dastuurka qaranka, taas oo afka somaliga ah iyo ta ingiriisiga ahiba ee sharcigani laduba yihiin rasmi .

2. haddii wax khilaafa ahi ka dhex yimaado qoraalka ku kala qoran farta soomliga iyo ta ingiriisiga ah waxa la qaadanayaa ta Somaliga.

**Qodobka 249<sup>aad</sup>**  
**Dhaqangalka**

Xeerkani wuxuu dhaqan-galayaa Marka Golaha Wakiiladu Ansixiyo, Madaxweynuhu Saxiixo Faafinta Rasmigana lagu soo saaro.

**JAANTUSKA**

**JAANTUSKA KOOWAAD -**

Hal lacagta point (CURRENCY POINT) waxay la mid \$100 (BOQOL DOOLAR) ama sarif ahaan inta u dhiganta lacagta Shlin Sl.

**JAANTUSKA LABAAD Hay'adaha la cayimay**  
**Qodobka: 71aad**

Baanka Horumarinta Afrika

Sanduuqa Horumarinta Afrika

Sanduuqa Maalgashiga Yurub

Baanka Horumarinta yurub

Midowga Yurub

Ururka Cunada iyo Beeraha

Baanka Caalamiga ah ee Dib-u-dhiska iyo Horumarinta

Ururka Caalamiga ah ee Duulamaadyada Madaniga ah

Isbahaysiga Horumarinta Caalamiga ah

Hayada Maaliyada Caalamiga ah

Ururka Shaqaalaha Caalamiga ah

Ururka Lacagta ee Aduunka

Midawga Isgaadhsiinta ee Caalamiga ah

Hay'adaha Qaramada Midoobay iyo laamaheeda u gaarka ah

**JAANTUSKA SADEEXAAD TACRIIFADA CASHUUR BIXIYAYAASHA GANACSATADA YARYAR**

Qodob 54aad farqada (5)

1. Qadarka Cashuurta dakhliga la-bixinayo sida uu dhigayo Qodobka 54aad farqada (5), ee Cashuur-bixiyaha Waa sidan:

<b>Iibka Duuduuban (Gross Turnover)</b>	<b>Cashuurta (Tax)</b>
Hadii wadarta iibka duuduuban ee cashuur-bixiyaha yahay ka badan yahay Sh SL 5,000,000 balse aanu ka badnayn SI	US\$1,000 ama sarif ahaan Somaliland-Shilin inta u dhiganta ama 1% iibka duuduuban hadba



Sl 50,000,0000 sanadkiiba	tii yar
---------------------------	---------



2. Cashuurta uu bixinayo cashuur bixiyuhu sida ku xusan qodobka 54 (5) . Waxa laga jarayaa

- (a) Qaanta Cashuurta kasta ee lagu ogolaaday sida ku xusan qodobka 150 (5) oo ah cashuurta la sii bixiyay ee khusaysa qadar ka mid ah wadarta dakhliga guud ee uu helay cashuur bixiyaha, ama
- (b) Qaanta Cashuurta kasta ee lagu ogolaaday sida ku xusan qodobka 138 (8) Cashuurta ku meelgaadh ahaan loo sii bixiyay ee khusaysa qadar ka mida wadarta dakhliga guud ee uu helay cashuur bixiyaha

### **JAANTUSKA AFRAAD**

#### **Dakhliga La Cashuuri Karo ee ka Dhalanaya Caymiska Ganacsiga ee Mudada Gaaban**

#### **Qod. 66aad**

1. Dakhliga la cashuuri karo ee qofka deegaanka ahi ee sanadkii ee dakhliga ka imanaya caymiska mudada gaaban ee ganacsiga waxa lagu go'aansan doonaa iyada oo la raacayo qaaciidadan soo socota:

#### **A-B**

Hadii:

**(A)** Ay tahay dakhliga guud ee uu helay qof deegaan ahi ee sanad dakhliyeedka ee lagu Wado mudada caymiska mudada gaaban sida lagu go'aamiyay sida ku cad farqada 2aad; iyo

**(B).** Ay tahay qadarka guud ee in laga jaro la ogolyahay ee sanad dakhliyeedka ee wax soo Saarka dakhliga sida loogu tixraaco **A** sida lagu go'aamiyo farqada 3; iyo

**2.** Dakhliga guud ee uu helay qof deegaan ah ee sanad dakhliyeed oo lagu fuliyay caymis muddo gaaban ah ee ganacsi oo ah:

(a) qadarka dheeraadka ah ee guud, oo ay ku jiraan qiime dheeraadka dib loo cayminayo, oo uu ku jiro qofka dakhliga sameeyay sanad dakhliyeedkaasi ee wadida ganacsiga marka laga hadlayo caymiska khasaare kasta, oon ahayn qiime dheeraadka la soo celiyay ee la caymiyay.

b) Qadarka dakhli kasta oo kale ee uu dhaliyay qof sanad dakhliyeedkaasi ee lagu wado ee lagu wado ganacsigaasi, oo ay ku jiraan kharash kasta ama guno ah oo ay heleen dib u ceymiyayaashu, dakhli kasta oo laga helo maalgalinta lagu hayo si xidhiidh la leh ganacsigaasi iyo dheef kasta oo laga helay iibka hantida ganacsiga; iyo

c) Qadarka kayd kasta oo lagu helay sanadkii hore ee dakhliga sida ku cad farqada 3(d).

**3.** Ka goynta guud ee la ogolyahay sanad dakhliyeedka ee lagu galay in lagu wado caymiska ganacsiga mudada gaaban oo ah isu-geynta:

a) Qadarka sheegashooyinka ee la ogolyahay sanad dakhliyeedka ee lagu wado ganacsiga, ka yar qadar kasta oo la helay ama la heli karo iyada oo la raacayo heshiis kasta oo dib u ceymis, damiin, damaanad, ama wax la damiin dhigtay.

b) Qadarka kharashka wakaaladeed ee la galay sanad dakhliyeedka ee lagu waday ganacsigaasi;

c) Qadarka kharash iyo khasaaraha ee uu galay qof sanad dakhliyeed gudihii ee lagu galay wadida ganacsi kuwaas oo loo ogolyahay in laga jaro iyada oo la raacayo Xeerkan, oon ahayn kharashka ama khasaaraha lagu xusay farrqada (a) iyo (b); iyo

d) Qadarka keydka ah ee khatarka aan laga gaashaaman ee loo tixraaci doono ganacsiga oo ah boqolayda ay samaysay shirkadu dhamaadka sanad dakhliyeedka.

**4.** Hadii, sanad maaliyadeed dakhliga guud, wax yaabaha laga jarayo ee guud ee loo ogolyahay qof ku xusan farqada (3) uu ka bato dakhliga uu helay qof sida lagu go'aansan karo farqada 2aad, qadarka dheeraadka ah lagama jari doono dakhli kasta oo kale oo uu sameeyay qofku sanad dakhliyeedkaasi, balse waxa lagu wadi doonaa lagana jari doonaa in la go'aasado dakhliga la cashuuri karo ee qofka ee ka dhalanaya wadida caymiska mudada ganacsiga mudada gaaban ee sanad maaliyadeedka soo socda.

**5.** Dakhliga la cashuuri karaa ee qofka aan deegaan ahayni ee sanad dakhliyeedka kana dhashay wadida ganacsiga caymis oo ah muddo gaaban waxa lagu go'aamin doonaa iyada oo la raacayo qaaciidadan soo socota:

## **A-B**

### Marka


**A-Waa** dakhliga guud ee uu helay qofka sanad dakhliyeedka ee lagu wado caymiska Ganacsiga mudada gaaban sida lagu go'aansaday sida farqada 6aad; iyo

**B** Waa ka jarida guud ee loo ogolyahay sanad dakhliyeedka ee soo saarida dakhliga ee Lagu xusay A sida lagu go'aamiyay farqada 7aad.

6. Dakhliga guud ee uu helay qof aan deeganayn ee sanad dakhliyeed ee lagu wado caymiska ganacsiga mudada gaaban ee Soomaliland waxa ay tahay:

**(a)** Qadarka qiime dheeraadka guud, oo ay ku jiraan qiime dheeraadka ee dib u caymiska, ee uu helay qof sanad dakhliyeedka ee lagu wado ganacsiga marka laga hadlayo caymiska ee khatar kasta oo Soomaaliland ah,

oon ahayn qiime dheeraadka ee loo celiyay qofka la caymiyay.



**(b)** Qadarka ee dakhli kasta oo kale ee uu helay qof sanad dakhliyeedka ee lagu waday ganacsiga Soomaaliland oo ay ku jiraan:

(I) Khidmad kasta ama kharash loo ogolyahay oo lagu helay dib u caymiska khataraha ee la ogolyahay Soomaaliland;

(ii). Dakhli kasta oo lagu helay maalgashiga ee Qasnada ee loo tixraaci doono ee Ganacsiga laga waday Soomaaliland; iyo

(iii) Wax kasta oo laga helo iibka hantida ee ganacsiga; iyo

**(c)** Qadarka keyd kasta ee laga jaray sanad dakhliyeedkii hore sida ku cad farqada 7(d).

7. Qadarka guud ee laga jarayo sanad dakhliyeedka ee soo saarida dakhliga ee wadida Caymiska ganacsiga ee mudada gaaban ee Soomaaliland ee uu wado qof aan deegaan ahayn waa isugeynta:

(a) Qadarka amaahda ee la ogolaaday sanad dakhliyeedka ee lagu wado hawlaha ganacsigaasi, oo ka yar qadar kasta oo la heli karo ama la helay marka laga hadlayo heshiis kasta oo dib u ceymin ah, damaand ah ama damaanad wax loo dhigay ah.

(b) Qadar kasta oo ah kharash ay wakaaladi gashay oo la galay sanad dakhliyeedka oo lagu

waday ganacsiyadaasi;

(c) Qadarka kharash iyo khasaare ee uu qof galay sanad dakhliyeedkaasi kuwaas oo la ogolaa in la jaro iyada oo la raacayo Xeerkani, oon ahayn kharashaadka ama lagu sheegay farqada (a) iyo (b); iyo

(d)Qadarka wax dib loo gashanayo ah ee khasaaraha aan la rajaynayn ee Soomaaliland Oolootixraaci doono ganacsiyada oo ah boqolayda ay dajisay shirkadu dhamaadka sanad dakhliyeedka



8. Hadii, sanad uun dakhliga guud, ka jarida guud ee loo ogolyahay qof sida ku cad farqada7aad ay ka badato dakhliga ka soo xeroonaya qof sida lagu go'aamiyay farqada 6aad, dheeraadkaaasi lagama saari doono dakhli kasta oo kale oo uu sameeyay qof ee dakhli sanadeedka, balse waxa lagu qaabili doonaa lagana jari doonaa marka la go'aaminayo


**JAANTUSKA SHANAAD**

**TACRIIFADA QIMA DHACA GUUD IYO QIIMA DHACA GAADIIDKA HALKA UU GAADHSIIN YAHAY QODOBADA 77, 78 iyo 79**

I.Tcriifada Qiima Dhaca (Declining Balance) ee qiimo-dhaca Hantida

HEER	HANTIDA AY KA MID TAHAY	TACRIFO
1	Komputerada iyo qalabka xisaabta lagu ururiyo	40%
2	Gaadiidka dhulka, basaska waawayn iyo yaryar oo leh kuraas rakaab ooKa yar 30, xamuul gadiid oo ka yar 7 ton, qalabka dhismaha iyo carro Qaadidda.	35%



3	Basaska waawayn oo leh kuraas rakaab oo badan 30 , xamuul gaadiid oo dhan 7 ton ama badan gaadiidka waawayn ee khaaska ah cagafyada iyo is jiidyada qaada containerada,mashiinada lagu isticmaalo beeraha qalabka hawlaha wax soo saarka	30% 
4	Gadiidka xadiidka, wixii qalabah ee dhaqaaqa, marakiibta iyo doonyaha, tagaga marakiibta jiida, dayuuradaha, qalabka waxtarka gaarka u leh dadka, mashinada iyo qalabka xafiisyada, wixii rakiban qalab kasta oo qiima dhacaya oo aan ka mid ahayn kuwa kale.	20%

**Qaybta II. Heerka ugu saraysa ee qiima dhaca gaadiidka**

Qadarka looga jeedo qodobka 77 (11) waa sh.sl.60,000,000

**Qaybta III. Taciifada qiimaa dhaca toosan (Strait line depreciation) ee dhismaha Warshadaha.**

Tacriifada qiima dhaca loola jeedo qodobka 79 waa 5%

**Qaybta IV. Meelaha la cayimay**

Meelaha la cayimay ee loola jeedo qodobka 78 Hargaysa

**JAANTUSKA LIXAAD- Qiimaynta Gunada**

Qodobka . 69(3)

1. Qiimaynta wax-tarka marka laga hadlayo Qodobka 69 (3) ee Xeerkan waxa lagu go'aansan doonaa iyada oo la raacayo jaantuskani.

2. Marka laga hadlayo jaantuskani, waxtarka uu bixiyay loo shaqeeye ee uu siiyo shaqaale waxa uu macnaheedu yahay waxtarka:

a) Uu bixiyay loo-shaqeeyuhu, ama cid saddexaad oo ku jirta oo hawlo ka dhexeeyaan loo shaqeeye ama la wadaage loo shaqeeyaha;

b) La siiyay qof shaqaale ah ama lawadaagaha qof shaqaale u ah; iyo

c) La siiyo qof shaqaale ah oo hore, hada jooga ama mustaqbalka imaan doona.

3. Hadii loo shaqeeye u u bixiyo waxtar ka kooban isticmaalka, ama helitaanka isticmaalka, gaadhi gabi ahaan ama qayb ahaan iyada oo loo adeegsanayo arimo gaar ah oo qofka shaqaalaha ahi leeyahay, qiimaha waxtarkan waxa loo xisaabin doonaa iyada oo la raacayo qaaciidadan soo socota:

$$(20\%*A*B/C) = D$$

Iyada oo:

**A.** waa qiimaha siciral suuqa gaadhiga joogo marka u horaysa ee la siiyay shaqaalaha in ay si gaar ahaaneed u adeegsado qofka shaqaalaha ahi

**B.** waa tirida maalmaha ee sanad dakhliyeedka ee gaadhigaasi la isticmaalayay ama Uu ahaa mid la heli karo in si gaar ah loo isticmaalo oo ay isticmaalayeen shaqaalahu maalintii oo dhan ama galin maalinta ka mid ah;

**C.** waa tirada maalmaha ee Sanad dakhliyeedka; iyo

**D.** bixin kasta oo loo sameeyay qof shaqaale ah waxtar ahaan

**4.** Hadii waxtarka loo shaqeeyuhu uu siinayo qof shaqaale ah ay ka koobantahay in la siiyo waardiye, dirawal, qof beerta uga shaqeeya ama caawiye kale oo guri, qiimaha waxtarka waxa ay ahaan doontaa isu geynta dakhliga shaqaale ee la siiyay caawiyahaasi guri isaga oo lagu siiyay shaqada uu u hayo qofka shaqaalaha ah, oo hoos loo dhigay bixin kasta oo loo sameeyay qofka shaqaalaha waxtar ahaan.


**5.** Hadii waxtarka uu bixiyay loo shaqeeye oo uu siiyay qof shaqaale ah oo ka kooban tahay bixinta cuno, nusasaace ama maadadaalo, faa'iidada gunada waxa ay noqon doontaa kharash uu galay loo shaqeeyuhu oo lagu bixiyay raashinka, nusasaacaha ama madadaalo, taas oo hoos u dhigtay qiime kasta lagu siiyay qofka shaqaalaha ah cunadiisa, nusasaacahiisa ama maadadaaladiisa.

**6.** Hadii waxtarka uu bixiyay loo shaqeeye oo uu siiyay qof shaqaale ah ay ka koobantahay bixinta adeegyo marka laga hadlayo goobta shaqaalaha ee deegaankiisa, qiimaha gunadu waxa weeye kharashka qofka loo shaqeeyuhu is ay u bixiyaan adeegyo iyada oo hoos u dhigtay qiime kasta oo qofka shaqaalaha ah kaga baxaysay adeegyadaasi.

**7.** Hadii gunada uu bixiyay loo shaqeeye ama shaqaale ay ka koobantahay in uu ka dhafo loo shaqeeyuhu waajib shaqaalaha saarnaa oo ahaa in uu bixiyo ama dib u bixiyo qadar uu leeyahay qof loo shaqeeye ah ama qof kasta oo kale, qiimaha gunadu waxa ay noqon doontaa qadarkaasi laga dhaafay.

**8.** Hadii waxtarka uu bixiyay loo shaqeeye oo la siiyay qof shaqaale ah ay ka kooban tahaywareejinta ama isticmaalka hanti ama siinta adeegyo kale, qiimaha gunadaasi waxa ay noqon doontaa siciral suuqa ee hantidaasi ama adeegyadaasi waqtiga gunada la siiyay,

iyada oo hoos u dhigtay qiime kasta uu ka bixiyay qofka shaqaalaha ah waxtar ahaan



9. Hadii waxtarka uu bixiyay loo shaqeeye ee uu siiyay qof loo shaqeeye ah oo ay ka koobantahay bixinta hoy ama guri, oon ahayn halka uu Qodobka 69 (1)(a) ama (c) uu ku dabaqmo ay faa'iidadu ka yartahay:

a) Siciral suuqa kirada ama guriga oo laga jaray lacag kasta oo la bixiyay oo uu sameeyay qofka loo shaqeeyaha ahi ee waxtarkaasi; ama

b) 15% oo ah dakhliga mushaharka, oo ay ku jirto qadarka lagu xusay farqada (a), oo uu bixiyay loo shaqeeyuhu oo uu siiyo shaqaalaha ee sanad dakhliyeedka ee uu hoygaasi ka bixiyay.

10. Qiimaha waxtarka kasta oo uu bixiyay qofka loo shaqeeyaha ahi oo la siiyay qofka shaqaalaha ah taas oon aanay daboolin farqadaha sare ku xusan oo ah siciral suuqa gunadaasi, waqtiga gunadaasi laga jarayo wax kasta oo qofka shaqaalaha ahi uu ka bixiyo gunadaasi.

11. Farqada 10 naad kuma dabaqanto wax waxtar ah oo si cad loogu sheegay Qodobka 69 (1) (a) ama (c) ilaa iyo (h).

## **JAANTUSKA TODOBAAD-**

### **Xeerarka Cashuuraha ay Ku Maamuli Doonaan Hay'ada Dakhliga Soomaaliland**

#### **Qod. 190**

1. **Xeerka dakhliga Cashuuraha bariga** (Cashuurta dakhliga , Xeerka Cashuurta Xakamaynta, cashuurta badeecadaha iyo adeegyada)
2. Xeerka kastamada
3. Xeerka Cashuuraha Moorka (Stamp Duty tax)
4. Xeerka wada marista iyo nabadgalyada wada marista
5. Xeerka Cashuurta Diiwaan Galinta

6. Dhamaan Dakhliyada cashuuraha iyo kuwa kale ee aan cashuurta ahayn ee Khasnadda Dawladda lagu cayima.



## **JAANTUSKA SIDEEDAAD - Kulanada Hayada Dakhliga Qodobka 195**

### **1. Kulanada Guddida**

1) Gudidu waxa ay kulmi doonaan ugu yaraan bishii hal mar waxana ay ku kulmi doonaan goobaha ee go'ansadaan guddidu.

2) Gudoomiyaha ayaa gudoomin doona kulan kasta oo ay gudidu leedahay marka uu maqan yahayna xubnaha jooga ayaa u magacaabi doona xubin ka mid ah si uu u gudoomiyo kulankaasi.

3) Gudoomiyaha ama, marka uu maqanyahayna, xubin ay soo magacaabeen gudidu si uu u matalo waxanu xiliyada qaarkood ku baaqi doonaa kulan gaar ah marka ay qoraal codsi ah ay keenaan aqlabiyada xubnahu.

(4)ogaysiinta kulanka gudida waxa lagu bixin doonaa qoraal ahaan xubin kasta ugu yaraan Shan cisho oo ka horeeya maalinta kulanka, balse kulan degdeg ah ayaa lagu baaqi doonaa iyad oo la siinayo ogaysin ka yar shan cisho iyada oo ay soo codsanyaan laba ama in ka badan oo xubnood.

### **2. Kooramka**

Iyadoo loo raacayo sida ku xusan farqada 4 (4) (b) ee shaxdan sideedaad, aqlibiyada xubnaha gudida ayuu ku buuxsami doonaa kooramka kulanka guddida.

### **3. Go'aanada Guddida**

1) Dhamaan su'aalaha la keeno kulanada gudida waxa lagu go'aamin doonaa aqlabiyada xubnaha ee xubnaha jooga, hadii ay dhacdo in codadku is leekaadaana, qofka

gudoominayaayaa lahaan doonacodka kala saarida marka loo geeyo codkiisii hore ee caadiga ahaa

2) Gudidu waxa ay go'aanka ku gaadhi karaan iyada oo uusan qabsoomin wax kulan ahi iyada oo waraaqaha khuseeya ay wareejiyaan xubnuhu iyo iyada oo ay cabiraan rayigooda badixubnaha oo qoraal ahaan, balse xubin kastaa waxa ay xaq u lahaan doontaa in ay u baahato in go'aanka la keeno arinka go'aankiisa la doonayaana lagu darso kulanka guddida.

#### **4. Sheegida Danta**

1) Xubinta ka tirsan guddida kaas oo dan toos ah ama mid aan toos ahayn ku leh arinta la go'aanka laga gaadhayo, ama ay u badan tahay in ay guddidu dib u eegaan, sida ugu dhakhsahabadaan kadib marka xaqaa'iqa ina khuseeyaa uu ogaado, waxa uu sheegidoonaa noocadanneed ee kagajirawaxanu u sheegi doonaa guddida.

2) Sheegida daneed ee ku xusan farqada (1), waxaa lagu diwaan galin doonaa dood qoraalka kulanka, xubinta ay khuseysaana kama qayb qaadan doonto hadii guddidu aysan si duwan go'aansan oo arintaasi khuseysa:

- a) Ma joogi doono marka ay guddidu ka doodaso arintaasi;
- b) Kama qayb qaadan doonto go'aanka guddida.

3. Marka go'aan ay gaadhayaan guddidu sida ku xusan farqada (2) oo xidhiidh la leh xubin Dan sheegtay sida sida ku cad farqada (1), xubintaasi danta sheegatay:

- a) Ma joogi doonto marka ay guddidu ka doodaso ayna go'aaminaso;; ama
- b) Ma saamayn doono xubin kasta oo kale kamana qayb qaadan doono marka ay guddidu go'aanka ka gaadhayaan.

4) Marka uu kooramku buuxsami waayo si kulanka loo sii wado, iyada oo ay sababtu tahay xubintaasi laga saaray

kulanka sabab ah dan shakhsiyeed oo ay sheegatay  
awgeed, xubnaha kale ee joogaa:

- a) Kulan kaasi dib ayay u dhigi doonaan darsida  
arintaasi ilaa iyo kooran, aan xubintaasi ku jirin la  
helayo; ama
- b) Waa ay wadi arintana go'aan ayay ka qaadan sidii  
oo uu kooram jiray oo kale



## **1. Dood Qoraalka Kulanada**

1) Guddida waxa ay diwaan galin doonaan dood qoraalka kulanadooda waana la hayn doonaa, dood qoraalka kulan kasta waxa xaqiijin doona guddida kulanka ku xiga waxana saxeexi doona gudoomiyaha kulanka.

2) Gudoomiyaha guddida waxa uu nuqul u gudbin doonaa Wasiirka nuqul ka mid ah doodqoraalka kulanka sida ugu dhakhso badan ka dib marka la xaqiijiyo dood qoraalkaasi.

## **2. Awooda Gaarka ah ee Guddida in ay Habeeyaan Fadhiyadooda**

Iyada oo shaxdani la raacayo, guddidu waxa ay maamuli doonaan fadhiyadooda

### **ALLAA MAHADLEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle.**

**Baashe Maxamed Faarax**

**Xog.Guud ee G/Wakiilada JSL**

**K/SGudoomiyaha Golaha**

**Wakiilada JSL**

JAMHUURIYADDA SOMALILAND  
XAF. MADAXWEYNE KU-XIGEENKA



REPUBLIC OF SOMALILAND  
OFFICE OF THE VICE-PRESIDENT

THE VICE-PRESIDENT

Ref: JSL/MX/WM/XER/04-00262/162016

Date: 16/07/2016

**XEER MADAXWEYNE LR: 0658/072016**

**DHAQAN-GALKA XEERKA KASTAMADA SOMALILAND  
XEER LR. 73/2016**

**MADAXWE-KUXEEGKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

Markuu Arkay: Qodobka 91(1) ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiillada JSL ee Summaddiisu tahay  
GW/G/KF-30/696/2016, kuna taariikháysan 25/06/2016,  
laguna ansixiyay Xeerka Kastamada xeer Lr: 73/2016;

Markuu Arkay: Qodobada 75, 76 iyo 77 (5) aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;

Wuxuu soo saaray

Dhaqan- galka Xeerka Lr: 73/2016 ee Xeerka Kastamada Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Eng. C/raxmaan C/laahi Ismaaciil (Saylici)  
Madaxweyne ku-xigeenka JSL ahna Ku-simaha Madaxweynaha



RL:15  
RECEIVED  
AHS  
19/07/2016



The Republic of Somaliland  
House of Representatives



Jamhuuriyadda Somaliland  
Golaha wakiilada

Head Quarter Hargeisa.

Xarunta Hargeisa

Ref: GW/G/RF-30/696/2016

Date: 25/06/2016

**Ujeedo:- Go'aanka ansixinta Xeerka Kastamada**

**(Xeer Lr.73)**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

**Markuu arkay:-**

Qodobka 14<sup>aad</sup>, 34<sup>aad</sup> (3), 53<sup>aad</sup>, 54<sup>aad</sup>, 55<sup>aad</sup>, 74<sup>aad</sup>, 77<sup>aad</sup> iyo 78<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Aqoonsaday:-**

Waaajibaadka Dastuuriga ah ee kasaaran Golaha wakiilada Xeerarka maaliyada iyo dhamaan arimaha la xidhiidha ee ay ka mid tahay in la helo Xeer si loo fuliyo awoda Golaha ee dabageelka iyo ilaalinta hadntida qaranka.

**Markuu arkay:-**

Baahida loo qabo in la helo Xeer lagu maamulo Kastmada Somaliland iyo nidaamka dhaqdhaqaaqa badeecadda xuduud kastameedka Somaliland soo geleysa.

**Markuu xaqiiqsaday:-**

In Xeerkaa hore ee Kastamada iyo Habraaciisu, Xeer Lr: 91/96, aanu ahayn Xeer dhamaystiran oo xiligan loo adeegsan karo Maamulka Kastamada Somaliland iyo baahida sharciyadeed ee Kastamada dalka.

**Markuu Ogaaday:-**

In Kastamaddu yihiin halbawle dakhli oo qarankani u baahanyahay, inay qayb weyn kayihiin dhawrista amniga Qaranka, inay yihiin marinka lagu hubinaayo wixii la ogolyahay inay wadanka soogalaan iyo wixii aan haboonayn inay soogalaan wadanka.

**Markuu tixgaliyay:-**

Doodihii, aragtiyihii iyo afkaartii qiimaha lahayd ee qaybaha kala duwan ee bulshada sida, Aqoonyahanada, sharciyaqaanada, iyo mudanayaashu ka soo jeediyeen si loo helo xeer ugaar ah Kastamada Somaliland, oo ku dhisan aqoon lagana wada qayb qaatay doodiisa.

Website: [www.somalilandparliament.net](http://www.somalilandparliament.net)

**Markuu u codeyay:-**

Ansxinta Xeerka Kastamada Xeer Lr.73 2016 ee Kalfadhigii 30<sup>aad</sup> fadhigisi 11<sup>aad</sup> taariikhduna Aheyd 09/4/2016 oo ay goob joog ahaayeen(45) Mudane oo ka mida ah mudanayaasha Golaha Wakiilada.

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah (36) oo gacan taag ah ku ogolaaday Xeerka Kastamada Somaliland Xeer Lr. 73/2016 halka afar (4) mudane ka diideen, shan (5) mudanena ka aamuseen, Guddoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

**Allaa Mahad Leh**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**

**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**




**Boashe Maxamed Faarax**

**K/3 Guddoomiyaha Golaha Wakiilada**

# Jamhuuriyada Somaliland

## GOLAHA WAKIILADU



### Markuu arkay:-

Qodobka 14<sup>aad</sup>, 34<sup>aad</sup> (3), 53<sup>aad</sup>,  
54<sup>aad</sup>, 55<sup>aad</sup>, 74<sup>aad</sup>, 77<sup>aad</sup> iyo  
78<sup>aad</sup> ee Dastuurka  
Jamhuuriyada Somaliland.

### Markuu

### Aqoonsaday:-

Waajibaadka Dastuuriga ah ee  
kasaaran Golaha wakiilada  
Xeerarka maaliyada iyo  
dhamaan arimaha la xidhiidha  
ee ay ka mid tahay in la helo  
Xeer si loo fuliyo awoda Golaha  
ee dabagelka iyo ilaalinta  
hadntida qaranka.

### Markuu arkay:-

Baahida loo qabo In la helo  
Xeer lagu maamulo Kastmada  
Somaliland iyo nidaamka  
dhaqdhaqaaqa badeecadda  
xuduud kastameedka  
Somaliland soo geleysa.

### Markuu

### xaqiiqsaday:-

In Xeerkaa hore ee Kastmada  
iyo Habraaciisu, Xeer Ir: 91/96,  
aanu ahayn Xeer dhamaystiran  
oo xiligan loo adeegsan karo  
Maamulka Kastmada  
Somaliland iyo baahida  
sharciyadeed ee Kastmada  
dalka.

### Markuu Ogaaday:-

In Kastamaddu yihiin halbawle

dakhli oo qarankani u baahanyahay, inay qayb weyn kayihiin dhawrista amniga Qaranka, inay yihiin marinka lagu hubinaayo wixii la ogolyahay inay wadanka soogalaan iyo wixii aan haboonayn inay soogalaan wadanka.

**Markuu**

**tixgaliyay:-**

Doodihii, aragtiyihii iyo afkaartii qiimaha lahayd ee qaybaha kala duwan ee bulshada sida, Aqoonyahanada, sharciyaqaanada, iyo mudanayaashu ka soo jeediyeen si loo helo xeer ugaar ah Kastamada Somaliland, oo ku dhisan aqoon lagana wada qayb qaatay doodiisa.

**Wuxuu Soosaaray**

**Xeerka Kastamada Somaliland  
(XEER Lr. 73/2016)**

**QAYBTA 1<sup>aad</sup>**

**QODOBO GUUD**

**Xadka Adeegsiga Xeerka iyo Qeexitaanada  
Aasaasiga ah**

**Qodobka 1<sup>aad</sup>**

**Xadka Adeegsiga Xeerka**

Xeerarka Kastamadu waxa ay ka koobnaan doonaan Xeerkan iyo Wareegtooyinka loogu talo galay in lagu fuliyo. Xeerkani waxa lagu dabaqi doonaa, isaga oon garab mareyn Xeerarka gaarka ah ee lagu dajiyay qaybaha kale ee la xidhiidha ganacsiga ee u dhaxeeya Soomaaliland iyo dalalka kale.

### **Qodobka 2<sup>aad</sup>**

#### **Hirgalinta Xeerarka Kastamada Guud ahaan**

1. Marka laga tago nidaamyada kale ee ku sheegan, mucaahado caalami ah, ama ku dhaqanka caadooyin oo ku xadidan goob ama il dhaqaale ama talaabooyin madax banaan, Xeerarka Kastamada ee Soomaaliland waxaa looga hirgalin doonaa si siman dhammaan xuduudka Kastamada ee Soomaaliland.
2. Qodobo cayiman oo ka mid ah Xeerarka Kastamada ayaa sidoo kale lagu dabaqi doonaa meelo ka baxsan xuduudka kastamada ee Soomaaliland iyada oo la raacayo qaab dhismeedka Xeerarka lagu dhaqo meelo gaar ah ama mucaahadooyinka caalamiga ah.

### **Qodobka 3<sup>aad</sup>**

#### **Xuduuda Kastamada**

Xuduuda kastamada ee Soomaaliland waxa ku jiri doona dhul, xad biyeedka (territorial waters), dhulka bariga ee biyaha goboleed, dhulka hoostiisa, hawada, iyo xeebleyda, iyada oo la raacayo Dastuurka Soomaaliland.

### **Qodobka 4<sup>aad</sup>**

#### **Qeexitaano**

Iyadoo laga duulayo ujeedada Xeerkani, qeexitaanadan soo socda ayaa la dhaqan galin doonaa:-

1. \_**Shakhsi**': waxa uu la macno yahay:-

- a) shakhsi dabiici ah,
- b) shakhsiyada qaanuuniga ah,
- c) Meelaha ay suurto geliyeen xeerar dhaqangal ahi, isku taga shakhsiyaad oo loo aqoonsanyahay in ay leeyihiin awood ay ku qaban karaan fal sharci ah balse aan lahayn maqaamkii shakhsiyad qaanuuni ah.



2. \_**Shakhsiyadka Ku Aasaasan Xeerkan**': waxa ay la macno yihiin:-

- a) marka laga hadlayo shakhsiyad dabiici ah, waxaa loola jeedaa, qof kasta oo caadi ahaan degan halka (Somaliland);
- b) Marka laga hadlayo shakhsiyad qaanuuni ah ama dad isku tegey ah, waxaa loola jeedaa, qof kasta oo Soomaaliland ku leh xafiis diwaangashan, xarumahooda dhexe/guud ama goob ganacsi oo si rasmi ah u jirta.

3. \_**Maamulka Kastamada**': waxaa loola jeeda, maamulka ka masuulka ah in ay fuliyaan Xeerarka kastamada iyo Xeerarka kale ee la xidhiidha Ganacsiga oo ah nidaamka ay Soomaaliland dejisay.

4. \_**Xafiis Kastam**': waxaa loola jeedaa, xafiis kasta, kaas oo dhammaan ama badh ka mid ah nidaamka ay dajiyeen Xeerarka kastamadu lagu dhamaystiro.

5. \_**Xafiis Kastam ee laga soo galo**': waxa loola jeedaa, xafiiska kastam ee ay magacaabeen maamulayaasha kastamadu si waafaqsan Xeerarka kastamada ee Soomaaliland, kaas oo ay badeecadi ka soo degto, badeecadaasna waa in si degdeg ah oo bilaa habsan loosaaraa, iyadoo laga illaalinaayo wixii khatar ku keeni kara badeecadaas.

6. \_**Xafiis kastam oo qaabilsan wixii soo dega**': waxaa loola jeedaa, xafiis kastam oo ay magacaabeen maamulka kastamadu si waafaqsan Xeerarka

kastamada, kaas oo nidaamyada la xidhiidha badeecadda la keeno xuduuda kastamada ee Soomaaliland ee la xidhiidha hab dhaqan ay kastamadu ansixiyeen ama ay adeegsadaan, oo ay ku jiraan illaalinta ugu habboon in lagu fuliyo.

7. **‘Xafiis Kastam oo qaabilsan wixii dhoofa’**: waxa loola jeedaa, xafiis kastam oo ay magacaabeen maamulka kastamadu iyaga oo raacaya Xeerarka kastamada, kaasi oo fulinaaya nidaamyada khuseeya badeecadda ka baxaysa xuduudka kastamada ee Soomaaliland oo ku socota macaamilo kastamadu ay ansixiyeen, oo ay ku jiraan illaalinta ku habboon ee dhanka burburka ee la dhamaystirayo.
8. **‘Xafiis Kastam oo laga baxo’**: waxa loola jeedaa, xafiis Kastam oo ay magacaabeen maamulayaasha kastamadu si waafaqsan Xeerarka kastamada, kaas oo qaabilsan badeecadaha baxaya, badeecadaasi oo ay baadhi doonaan inta aanay ka bixin xuduudka kastamka ee Soomaaliland taas oo lagu dhaqi doono illaalinta kastamada ee la xidhiidha dhamaystirka nidaamyada la xidhiidha bixitaanka, iyo hanaanka dhawritaan ee ugu habboon si looga hortago burbur.
9. **‘Go’aan’**: waxa loola jeedaa, fal kasta oo rasmi ah oo ka soo baxay maamulayaasha kastamada oo la xidhiidha Xeerarka kastamada oo go’aaminaya falal mucayina, falkaasi oo ku leh saamayn sharci hal ama laba in ka badan oo ah shakhsiyaad la taaban karo; ereygani waxa uu saameeyaa, marka waxa kale lagu daro, xog ku dhaqan muddan kaas oo la macno ah Qodobka 12<sup>aad</sup> ee Xeerkan.
10. **‘Marxalad kastameedka’**: waxa loola jeedaa, marxaladaha badeecadda u socota Soomaaliland ama u socoto meel kabaxsan Soomaaliland.
11. **‘Badeecadda u socota Soomaaliland’** waxa uu macnaheedu yahay allaabta:-

- a) Gebi ahaan hoos imaanaysa xuduuda kastamada ee Soomaaliland iyada oo la raacayo shuruudaha lagu xusay **Qodobka 22<sup>aad</sup>**, oon lagu darin badeecada laga soo waarido dalal kale ee aan hoos imaanayn xuduudka kastamada Soomaaliland.
- b) Laga soo waarido dalalka ama dhulalka aan ka mid ahayn xuduuda kastamada Soomaaliland, taas oo loo fasaxay socod bilaasha;
- c) Lagu helay ama lagu soo saaray xuduuda kastamada ee Soomaaliland, oo ah badeecadda lagu xusay farqada labaad oo kali ah ama badeecadda lagu sheegay farqadaha kowaad iyo labaad.
- 12.\_**‘Badeecada aan Soomaaliland lahayn’**: waxa uu macnaheedu yahay, badeecadaha lagu xusay farqada (11<sup>aad</sup>) ee sare. Badeecadda Soomaaliland ay leedahay waxa ay lumin doonaan meeqaamkoodaasi lahaanshaha, marka si rasmi ah looga saaro xuduudka kastamada ee Soomaaliland.
- 13.\_**‘Deynta Kastamada’**: waxa uu macnaheedu yahay, waajibka saaran qof ee ah in uu bixiyo qadar uu ka bixiyo waxa u soo daga (deynta kastamada ee wixii soo dega la saaro) ama cashuurta alaabta dhoofa (deynta kastamada ee wixii la dhoofsho laga qaado), taas oo lagu dabaqo badeecado gaar ah oo ku xusan Xeerkan ama sharci kale oo dhaqan gal ah.
- 14.\_**‘Cashuurta soo Dejinta’**: waxa uu macnaheedu yahay, cashuurta soo dejinta iyo waxa la saaro ee saamaynta ku leh, una dhiganta cashuurta soo dejinta ee la saaro badeecadda soo degta.
- 15.\_**‘Cashuurta Dhoofka’**: waxa uu macnaheedu yahay, cashuurta kastamada iyo waxa la saaro oo leh saamayn u dhiganta cashuurta kastamada ee la bixiyo marka la dhoofinayo badeecadaha.



16. **‘Daynsane’**: waxa uu macnahiisu yahay, qof kasta oo ay waajib ku tahay in uu bixiyo deyn kastam.
17. **‘Kormeerka ay sameeyaan maamulayaasha kastamadu’**: waxa uu macnaheedu yahay, fal kasta oo guud ahaan ay qaadeen maamulayaashu iyada oo ay aragtidu tahay in ay hubiyaan in Xeerarka kastamada iyo haddii ay ku habboon tahayna, qodobada kale ee lagu dhaqo badeecadda ay tahay in ay kastamadu baadhaan la dhaqan galiyey.
18. **‘Maamulida Kastamada’**: waxa loola jeedaa, ficilo cayiman oo ay qabtaan maamulka kastamadu si loo hubiyo in si saxa loo hirgaliyey Xeerarka kastamada iyo Xeerarka kale ee lagu dhaqo soo dejinta, bixida, gudubka, badalka iyo badeecada loogu talo galay in halkan lagu isticmaalo ee dhex maraysa xuduudka kastamada Soomaaliland iyo dalalka kale iyo jiritaanka badeecadda aan u socon Soomaaliland, shaqadaasi waxa ku jiri kara, baadhida badeecadda, hubinta xogta qof sheegtay, jiritaanka iyo ansaxnimada qoraalada electarooniga ah (soft copy) ama qoran (hard copy), hubinta xisaabta la qabanayo iyo diwaanada kale, daba-galka habka daabulka, baadhida bushqadaha, iyo badeecadda kale iyo badeecadda kale ee ay qabtaan shakhsiyaad iyo fulinta su’aalo waydiinta rasmiga ah iyo falalka kale ee la midka ah.
19. **‘Hab dhaqan ama adeegsi ay kastamadu ansixiyeen oo ku saabsan adeegsiga badeecadda’**: waxa uu macnaheedu yahay:-
- a) La macaamilka badeecadda si waafaqsan hab raaca kastamada;
  - b) Dib-u-dhoofinta alaabta ka tagta xuduudka kastamada ee Soomaaliland
  - c) Burburintooda
  - d) Marka la siiyo dawladda;

20. \_**'Habracca Kastamda'**: waxa uu macnahiisu yahay:
- Marka Badeecadda la fasaxo;
  - Alaabta gudubta;
  - Bakhaarada kastamada (customs warehousing);
  - Soo saarida daakhiliga ah (inward processing);
  - Nidaaminta maamulka kastamada (processing under customs control);
  - Ogolaanshaha ku meelgaadhka ah (temporary admission);
  - Soo saarida khaarajiga ah (outward processing);
  - Dhoofin (exportation).
21. \_**'Cadaynta Kastamada'**: waxa uu macnaheedu yahay, qofka oo soo buuxiyay foomka iyo qaabka loo cayimay, isaga oo doonaya in uu alaab mariyo Nidaamka kastamka.
22. \_**'Cadeeye'**: waxa loola jeedaa, qofka magaciisa ku samaynaya cadaynta kastamka ama qofka magaciisa cadaynta kastamka lagu sameeyay.
23. \_**'U soo bandhigida badeecada kastamada'**: waxa uu macnaheedu yahay, ogaysiinta la ogaysiiyo maamulka kastamada, habka loo dejiyay, marka ay timaado badeecadu xafiiska kastam ama meel kasta oo kale oo loogu talo-galay ama ay ansixiyeen maamulka kastamadu.
24. \_**'Sii deynta badeecada'**: waxa uu macnahiisu yahay, falka ay maamulka kastamadu ku suurto galiyaan ujeedada habracca kastamada ee lagu suurto geliyay.
25. \_**'Qofka Heysta Habracca'**: waxa uu macnahiisu yahay, qofka magaciisa cadaynta Kastamka lagu sameeyay ama qofka leh xuquuqaha iyo waajibaadka qofka sare lagu xusay iyada oo la raacayo habracca kastamada lagu wareejiyay.



26. **‘Qofka heysta fasaxa’**: waxa uu macnaahiisu yahay qofka fasaxa la siiyay.
27. **‘Qodobada dhaqangalka ah’**: waxa uu macnahoodu yahay, mid ka mid ah kuwan soo bsooda:
- Xeerarka Dalka udejisey Dawlada Soomaaliland, iyada oo la raacayo Dastuurka JSL Soomaaliland.
  - Qodobada ku xusan heshiis ganacsi oo caalami ah, heshiis ama muwaafaqo ay ansixisay Dawladda JSL Soomaaliland.
28. **‘Khatar’**: waxa loola jeedaa, suurto galnimada inay dhacdo timaado, taas oo xidhiidh la leh soo gelitaanka, bixitaanka, gudbida, wareejinta iyo isticmaalka ugu danbeeya ee badeecadda u kala gooshaysa xuduudka kastamada Soomaaliland iyo dalalka kale iyo in la helo badeecadda dhex maraysa xuduuda kastamada Soomaaliland ee aanay lahayn Soomaaliland, taas oo:-
- Xanibaysa si hufan u adeegsiga Xeerarka dhaqangalka ah, ama
  - Yaraynaysa danaha maaliyadeed ee Soomaaliland, ama
  - Khatar ku ah amaanka Soomaaliland iyo badbaadada, bani’aadamka, xayawaanka ama caafimaadka dhirta, deegaanka ama dadka isticmaalayaasha ah.
29. **‘Maamulka khatarta’**: waxa uu macnaahiisu yahay, aqoonsiga rasmiga ah ee khatarta iyo fulinta dhammaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah in ay hakiyaan in khatar la galo. Waxana ka mid ah ururinta xogta iyo warbixinta, lafo-gurka, iyo qiimaynta khataraha, qaadida tablaabooyinka iyo si joogto ah u dabagalida iyo dib-u-eegida habraaca iyo natiijooyinkiisa/natiijada ka soo baxda, taas oo ku

salaysan illo caalami ah ama wadani ah iyo istaraatiijiyado.

30. **Talaabooyinka Siyaasadeed ee Ganacsi'**: waxa uu macnaheedu yahay, talaabooyinka aan tacrifada ku jirin ee lagu dajiyay iyada oo lagu salaynayo siyaasada ganacsiga ee Soomaaliland, taas oo ah qaabka qodobada dhaqan-galka ah oo lagu maamulo:
- a) Soo dajinta iyo dhoofinta badeecada, sida talaabooyinka daba-galka ama ilaalinta ah;
  - b) Xanibaadaha la tirin karo ama xadidaad, iyo
  - c) Mamnuucaya soo dejinta iyo dhoofinta
31. **'Barxadda Kastamka'**: Waa meel/goob lagu sharciyeey xeerkan, looguna talagalay in Badeecadaha la dhigo si shaqada kastamku uga socoto.
32. **'Lacag Celin'**: waxaa loola jeedaa, lacag celin buuxda ama badh ah bedeecaddii soo degtay ee la cashuuray iyadoo lagu xidhiidhinayo badeecadii dhoofaysay ama la isticmaalay oo ujeedada lagu sharxay Xaalad damaanad qaadka ah oo lacag celineed
33. **'Masuul'**: waa qofka wakhtigan lagu jiro sita masuuliyaddii ama amar bixintii dayuuradda ama markabka.
34. **'Sarkaal-Kastam'**: waa qofka u xilsaaran fulinta hawlaha cashuuraha kastamka la xidhiidha.
35. **'Deked'**: waa meel ku taala xeebta badda ama biyaha dhulka geerkooda, oo loogu talagalay inay maraakiibtu baroosinka dhigaan, kastamkuna sharciyeeyey si looga raro ama looga soo dajiyo badeecadaha. Marka laga hadlayo dayuurad dekedii waxay la macno tahay kastamka degida diyaaradaha.
36. **'Dhimis'**: waa hoos u dhig ama yarayn cashuureed
37. **Lacag-Celin**: macneheedu waxa weeye cashuur qof hore looga qaaday oo dib loogu celinayo.

38. **'Tanaasul'**: Macnahiisu waa fududayn ama kadayn dhamman cashuurtii saxda ahayd
39. **'Badeecadaha la joojiyay'**: macnaheedu waa badeecadaha la soo dajiyay, la dhoofiyay kuwaas oo lajoojiyay iyadoo loo eegayo xaladaha lagu nidaamiyey xeerkan, badeecadahaas la soo dajiyey, la dhoofiyay kuwaas oo joojintoda lagu nidaamiyey si xeerka waafaqsan ama qodobo kasta o la dhaqan galiyay
40. **'Koontarabaan'**: macnihiisu waxa uu yahay badeecad la soo dejiyay ama la dhoofiyay ama laga qaaday xadka barxada kastamka Soomaaliland, iyadoo lagala dhuumanayo si badheedh ah cashuurta iyo sharcigaba, ama wax kasta o aan banaanayn oo uu xeerku joojiyay ama shardi ku xidhay so dajinteeda
41. **'Badeecad aan caadi ahayn'**: waxa ku jira badeecad la cashuuray oo aan lacagtii la shubin, midkastoo ay tahay badeecadaas qaar la cashuuri karo ama aan ahayn, taas o lagu so dajiyay ama lagu dhoofiyay si kasoo horjeeda qodobada sharciga
42. **'Gaadiid Badeed'**: wax kasta oo lagu sheegay gaadiid badeed oo qaadaya ama qaada dad amaba badeecaddo.

## **QODOBADA GUUD EE LA XIDHIIDHA XUQUUQDA IYO WAAJIBAADKA SHAKHSIYAADKA MARKA LOO EEGO XEERARKA KASTAMADA**

### **Qodobka 5<sup>aad</sup> Xaqa Wakiilnimo**

1. Iyada oo la raacayo shuruudaha ku xusan Qodobka 62<sup>aad</sup>, farqadiisa 2<sup>aad</sup>, laguna dhaqayo qodobada loo dajiyay qaabka guud ee Qodobka 186<sup>aad</sup>, qof kastaa waxa uu u magacaabi karaa wakiil macaamilka uu la

leeyahay maamulka kastamada si ay u fuliyaan facaa'ilka iyo hanaanka lagu xusay Xeerarka kastamada.



2. Wakiilkaasi waxa uu:

- a) Ugu dhaqmi doonaa si toos ah xaaladaha wakiilnimo, isaga oo matalaya qof kale, ama
- b) Si aan toos ahayn, xaaladaha qofka wakiilka ahi uu u dhaqmi doono magaciisa balse isaga oo matalaya qof kale;

3. Iyada oo la dhawrayo xaaladaha lagu xusay Qodobka 62<sup>aad</sup>, farqadiisa 2<sup>aad</sup>) b) iyo 3), qof wakiil ahi waa in laga helaa dalka Soomaaliland.

4. Wakiilku waa in uu sheegaa in uu matalayo qofka uu matalayo, waxa uu cayimi doonaa in wakaaladaasi ay tahay mid toos ah ama mid aan toos ahayn waxana lagu xoojin doonaa in lagu matalo wakiilnimada.

5. Qofka ku guul daraysta in uu sheego in uu matalayo magaca ama uu ku hadlayo qof kale ama qofkaasi oo sheegay in uu matalayo qof kale, isaga oon loo awood siin in uu sidaas yeelo waxa loo qaadan doonaa in uu u dhaqmayo magaciisa ama isaga oo wakiil laga yahay.

6. Maamulka kastamadu waxa ay ka dalban karaan qof kasta oo sheegaya in uu wakiil ka yahay qof kale, in uu soo saaro wax cadaymo ah oo awoodiisa hoos yimaada si uu wakiil u noqdo

## **GO'AANADA LA XIDHIIDHA DHAQAN GELINTA XEERARKA KASTAMADA**

**Qodobka 6<sup>aad</sup>**  
**Codsiga Go'aanka**


1. Haddii qof ka codsado maamulka kastamada in ay qaadaan go'aan xidhiidh la leh dhaqan gelinta Xeerarka kastamada, qofkaasi waxa uu u keeni doonaa dhammaan warbixinaha iyo qoraalada ay ka dalbadaan maamulkaasi si ay go'aan u qaataan.
2. Go'aankaasi waa la gaadhi doonaa qofka codsadhaha ahna ogaysiin baa la siin doonaa waqtiga ugu suurto galsan ee ugu horeeya. Haddii codsiga go'aan gaadhiseed lagu sameeyo qoraal ahaan, go'aankaasi waxa lagu samayn doonaa muddada loo cayimay iyada oo la raacayo Xeerarka dhaqan galka ah, lagana bilaabayo maalinta codsigaasi kor ku xusan uu soo gaadhay maamulka kastamada. Go'aankaasi waa in la ogaysiiyaa qofka codsadhaha ah. Si kastaba ha noqotee, mudadaasi waa la kordhin doonaa haddii maamulka kastamadu ay awoodi waayaan in ay ku dhaqmaan xaaladaasi, madaxdaasi waxa ay ogaysiin doonaan qofka codsadhaha ah inta aysan dhammaan muddada sare ku xusani, iyaga oo sheegaya asbaabta u cudurdaaraya in ay muddadaasi kordhiyaan isla markaana xusaya muddo danbe oo dheeri ah, taas oo ay u arkeen mid lagama maarmaan ah si go'aan looga gaadho codsigaasi.
3. Go'aanada qoraal ahaan ku gaadhaan maamulka kastamadu ee diidaya ama dhib u keenaya codsadhaha lagu soo hagaajiyay waxa lagu dajin doonaa asbaabta lagu saleeyay. Waxana ay lahaan doonaan xaqa in looga rafcaan qaato ee ku xusan Qaybta VIIIaad.
4. Qodobka ayaa lagu samayn doonaa erayga koowaad ee **farqada 3aad** si loogu adeegsado si la mid ah go'aanada kale.

#### **Qodobka 7aad**

#### **Muddada Fulinta Go'aanka**

Go'aanada la gaadhay waxa ay noqon doonaan, qaar isla markaaba ay fulin karaan maamulka kastamadu

**Qodobka 8aad**  
**Tirtiridda Go'aanada**



1. Go'aanka cid u danaynaya waa la tirtiri doonaa, haddii lagu soo saaro iyada oo lagu saleeyay warbixin khaldan ama aan dhamayn iyo haddii:
  - a) codsaduhu uu ogaado ama ay macquul ahayd in uu ogaado in warbixintu ay qalad ahayd ama aanay dhamays tirnayn;
  - b) Go'aankaas aan la gaadheen haddii lagu saleeyo warbixin dhamaystiran ama saxa.
2. Cida go'aanka lagu hagaajiyay waa in la ogeysiiyaa in la tirtirey
3. Tirtiriddu waxa ay dhaqangelaysaa taariikhda go'aanka tirtiridda la gaadhay

**Qodobka 9aad**  
**Dhamaystir La'aanta Waajibaad ama Shuruudo**

1. Go'aanka u danaynaya cida ay khuseyso, waa la laali doonaa ama wax baa laga badali doonaa xaaladaha, aan ka ahayn kuwa ku xusan **Qodobka 8aad**, mid ama in ka badan oo shuruudo ah ee lagu dajiyay soo saarista aan la dhamaystirin.
2. Go'aanka qof u danaynaya waa lala noqon doonaa, hadii xaaladaha qofka ay ku socotaa uu ku guulaysan waayo waajib lagu soo rogay iyada oo la raacayo go'aankaasi
3. Qofka go'aanku ku socdo waxa la ogaysiin doonaa la noqoshada ama wax ka badalka.
4. La noqoshada ama wax ka badalka go'aanka waxa uu hirgali doonaa maalinta la ogaysiiyo. Si kastaba ha ahaatee, xaalado gaar ah oo danta qofka go'aanka lagu hagaajiyay si sharci ah uu ka dalbado maamulka kastamadu, waxa la badali doonaa marka la noqoshada ama wax ka badalku uu suurto galo.



**Qodobka 10<sup>aad</sup>**  
**Tirtiridda ku Salaysan Sabab aan Xidhiidh Lalahayn**  
**Xeerka Kastamada**



**Qodobada 8<sup>aad</sup> iyo 9<sup>aad</sup>** waxa ay ahaan doonaan sharci, iyada oon la jabinayn Xeerarka qaranka ee dhigaya in go'aanadu ay yihiin waxba Kama jiraan ama ay noqonayaan waxba Kama jiraan sababo aan wax xidhiidh ah la lahayn Xeerka Kastamada.

**Qodobka 11<sup>aad</sup>**  
**Codsiga Warbixineed**

1. Qof kastaa waxa uu codsan karaa warbixin khuseysa dhaqan galida xeerka kastamada, oo ay isticmaalaan madaxda kastamadu. Codsigaasi waa la diidi karaa haddii aanay la xidhiidhin hawl qabad soo dajin ama dhoofin ah oo si rasmi ah loogu hawlan yahay
2. Warbixintaasi waxa la siin doonaa qofka codsadaha iyada oon wax lacag ah laga qaadin. Si kastaba ha ahaatee, haddii kharash gaar ah ay galaan maamulka kastamadu, taas oo ay gaar ahaan keentay lafo-gurka ama warbixinta khabiirka ee badeecadda, ama soo celinta badeecadda ee qofka codsaday, waxaa laga qaadi doonaa qadarka khuseeya

**Qodobka 12<sup>aad</sup>**  
**Codsiga Ta'riifada Lagu Dhaqmayo iyo Asalka**  
**Warbixinta**

1. Maamulka kastamadu waxa uu soo saari doonaa warbixin ta'riifadeed oo lagu dhaqmayo ama warbixin asal ahaan lagu dhaqmi karo marka qoraal sidaa lagaga codsado.
2. warbixinta ta'riifadeedka lagu dhaqmayaa ama warbixinta asalnimadeeda lagu dhaqmayaa waxa lagu dhaqi doonaa madaxda kastamada, iyada oo ay lid ku tahay qofka warbixinta gacanta ku haya keliya marka

iyada oo loo eegayo kala saarida ta'riifada ama marka go'aan laga gaadhayo asal ahaan halka ay ka soo jeedo badeecaddu. Warbixinta ta'riifada ee dhaqangalka ah ama warbixinta asalnimada waxa lagu dhaqi doonaa maamulka kastamada marka laga hadlayo badeecadda habraaca kastamada lagu dhamaystirayo ka dib taariikhda warbixinta loo geeyay. Arimaha la xidhiidha asalnimada, hanaanada su'aashu ka taagan tahay waxa ay noqon doonaan kuwa la xidhiidha dhaqangelida Qodobada 21aad ilaa 25aad.

3. Qofka xogtaasi lehi waa inuu awoodaa in uu cadeeyo in:
  - a) **ujeedooyinka ta'riifadeed:** badeecaddaha la xusay in ay si walba ugu dhigmaan kuwa ku xusan warbixinta
  - b) **Ujeedooyin ah asalnimo:** badeecadda laga hadlayo iyo xaaladaha cayimaya in la helo asalka kuwaas oo u dhigma si kastaba badeecadda iyo duruufaha lagu xusay warbixinta.
4. Warbixinta lagu dhaqayaa waxa ay noqon doontaa mid ansax ah muddo lix sanadood ah, marka laga hadlayo ta'riifada iyo saddex sanno marka laga hadlayo asalnimada, taas oo ka bilaabmaysa maalinta la soo saaro, iyadoo nidaam laalid lagu samaynaayo Qodobka 8aad, waana la tirtiri doonaa haddii lagu saleeyo warbixin aan dhamays tirnayn ama aan ku habboonayn codsadaha.
5. Warbixinta lagu dhaqmayaa waxa ay waxba kama jiraan noqon doontaa:-
  - a) Marka laga hadlayo warbixin ta'riifadeed:
    - (i) xaaladaha sharci cusub loo dajiyay iyo warbixintaasina aanay la jaanqaadi karin Xeerarka loo dajiyay;

(ii) xaaladaha aanay la sii jaanqaadi karin tafsiirka mid ka mid ah magacdhawiyada lagu xusay **Qodobka 19<sup>aad</sup>**:

- *Marka laga hadlayo heer qaran, sababaha wax ka badal lagu sameeyay sharaxaada shaxda, ee eraybixinta la ururiyay ama xukun ka soo baxay Maxkamadda Cadaaladda*
- *Heerarka caalamiga ahna, sabab kala saaridda afkaarta ama wax-ka-badalka liiska sharaxaada erey bixinta ee badeecadda la isla gartay iyo nidaamka qaabaynta, ee ay dajiyeen Ururka Kastamada Caalamiga ahi.*

(iii) Haddii lala laabto ama wax laga badalo iyada oo la raacayo **Qodobka 9<sup>aad</sup>**, iyada oo ay shardi tahay in la noqoshada ama wax-ka-badalka la ogaysiiyo qofka wata.

Taariikhda warbixinta lagu dhaqmayaa ay tahay mid aan ansax ahayn sababta lagu xusay xarfaha **(i) iyo (ii)** waxa uu ahaadoonaa taariikhda la shaaciyay talaabooyinka kor ku xusan ama, xaaladaha talaabooyinka caalamiga ah, taariikhda wada xidhiidhka ee ay sameeyeen Ururka Kastamada aduunka, World Customs Organization (WCO).

a) Marka ay khuseyso asalnimada warbixinta:

(i) haddii xeer cusub loo dajiyo ama heshiis ay ku gaadho Soomaaliland warbixintaasina in aanay ahayn xeer la dajiyay;

(ii) Haddii aanay u dhigmin:

- *dal ahaan, qoraalka sharaxaada ahi iyo afkaarta loo dajiyay ujeedooyin ah in la tafsiiro Xeerarka ama xukun makamad cadaalad ah ka soo baxay*
- *heerka caalamiga ah, heshiiska sharciyada asalnimada ee lagu aasaasay Rugta Ganacsiga Adduunka (**World Trade Organization, WTO**)*

*ama qoraalka sharaxaada ah ama asalnimada rayiga ee loo dajiyay tafsiiir ahaan heshiiskaasi;*

(iii) Xaaladaha la laalo ama wax laga badalo iyada oo la raacayo Qodobka 9aad, iyada oo ay shardi tahay in qofka heysa marka hore la wargeliyo.

- *Taariikda warbixinta lagu dhaqmayaa ay tahay mid aan ansax ahayn sababta lagu xusay xarfaha (i) iyo (ii) waxa ay ahaandoonaa taariikhda la shaaciyay talaabooyinka kor ku xusan.*

6. Qofka heysta warbixinta la raacayo ee asaxnimadeedu burtay iyada oo la raacayo farqada (5aad) (a) ama (iii) ama (b) (ii) ama (iii), waxa wali loo adeegsan doonaa warbixintaasi muddo dhan lix bilood oo ka bilaabmasa taariikhda la baahiyo ama la ogaysiiyo, iyada oo ay shardi tahay in uu la galay heshiisyo dhaqangal ah oo ah iibka ama iibka badeecada laga hadlayo, iyada oo la raacayo wabixinta, inta aan talaabadaasi la dhaqangelin.

Marka laga hadlayo farqada (5aad) a) i) iyo b) i), xeerku ama heshiisku waxa uu dajin karaa muddada ku xusan, farqada koowaad ayaana la dhaqangelin doonaa

7. Kala saaridda ama go'aminta asalnimada warbixinta la raacayo ayaa la raaci doonaa, iyada oo la raacayo shuruudaha lagu dajiyay farqada 6aad, iyada oo ay ujeedadu tahay in la go'amiyo cashuurta soo dejinta iyo dhoofka.

## **QODOBO KALE**

### **Qodobka 13aad**

#### **Maamulka Kastamada**

1. Maamulada kastamadu iyaga oo raacaya shuruudaha ku xusan Xeerarka dhaqan galka ah, waxa ay fulin

doonaan dhammaan maamulida ay lagama maarmaan u arkaan si ay u hubiyaan in Xeerarka kastamadu iyo Xeerarka kale ee lagu maamulayo soo gelinta, bixida, gudbida, wareejinta iyo isticmaalka ugu danbeeya ee badeecadda u kala goo Shaysa xuduuda kastamada Soomaaliland iyo dalalka kale iyo joogitaanka badeecadda aanay Soomaaliland lahayn aan ahayn kuwo aan Soomaaliland u socon in si saxa loo dhaqan geliyo.

Maamulka kastamada, iyada oo ay ujeedadu tahay in si saxa loo dhaqan galiyo sharciga Soomaaliland, waxa lagu fulin karaa dal qalaad marka uu sidaas jideynayo heshiis caalami ahi

2. Maamulka Kastamadu, wixii aan ahayn hubin degdeg ah, waxay kusalayn doonaan habka dersida/lafagurka khasaaraha dhicikara, hadii la heli karna waxaa la adeegsan doonaa hab ama farsamo lagu kala guro oo iskeed u shaqaynaysa (automated data processing techniques), iyadoo ujeedadu ay tahay in la ogaado oo la koobo khasaaraha, iyadoo lagu salaynaayo qiimayn si heer qaran ah loo dejiyey, hadii la heli karna, heer caalami ah.

Dawlada Soomaaliland waxa ay aasaasi doontaa, nidaam kombiyuutar ahaan ku shaqeeya, iyada oo la suurto gelinayo maamulka ka hortaga khatarta

3. Haddii xakamaynta (controls) ay qabteen maamul aan ahayn maamulka kastamada, waxa la qaban doona iyada oo iskaashi dhow lala samaynaayo maamulka kastamada, meel kasta oo ku haboon isku waqti iyo isku goob.
4. Iyada oo la raacayo xaaladaha maamul ee lagu xusay Qodobkani, kastamada iyo maamulada kale ee awooda

u lihi, sida dakhaatiirta xoolaha iyo maamulada booliiska, waxa lala socodsiin karaa xogta la helay, ee xidhiidhka la leh soo gelida, bixida, guddida, iyo wareejinta iyo isticmaalka kama danbaysta ah ee badeecadda u kala gooshaysa xuduudka kastamada Soomaaliland iyo dalal qalaad iyo ku sugnaanta xuduudaha kastamada ee Soomaaliland badeecad aanay lahayn Soomaaliland, xaaladaha loo baahanyahay iyada oo ay ujeedadu tahay in la yareeyo khatarta.

Iswaydaarsiga xogta sirta ah ee la waydaarsanayo maamulka kastamada iyo haay'adaha kale (e.g hay'adaha amaanka) ee dalal shisheeye waxa kaliya oo la ogolaan doonaa marka ay sidaasi qaabeynayaan heshiis caalami ahi, iyada oo ay shardi tahay in qodobada khuseeya xogta ee dhaqangalka ah la dhawro

#### **Qodobka 14<sup>aad</sup>**

#### **Waajibaadka Hawlwadeenada Ganacsatada**

Iyada oo ay ujeedadu tahay in la dhaqan galiyo xeerka kastamada, qof kasta oo si toos ah ama si dadban ugu lug yeesha hawlaha khuseeya iyada oo ay ujeedadu tahay ka ganacsiga badeecadda, waxa uu siin doonaa maamulada kastamada dhammaan xogaha uu u baahanyahay iyo warbixin, iyada oon loo eegayn habka la isticmaalayo, dhammaan caawimada la dalbaday iyo waqti kasta oo loo cayimay.

#### **Qodobka 15<sup>aad</sup>**

#### **Xogta Dhawrsoon**

1. Dhammaan xogta dabci ahaan dhawrsoon ama lagu ogaaday qaab dhawrsoon, waxa lagu dhaqi doonaa waajibaadka sirnimada shaqo.
2. Ma shaacin doonaan madaxda ay khuseysaa iyada oo aan fasax cad laga helin qofka ama maamulka ku haboon ama fasax cad laga helin qofkaasi ama

maamulka bixiyay. Is dhaafsiga xogta waxa la ogolaan doonaa, xaaladaha maamulka ay khuseysaa lagu waajibiyay in ay sidaas yeelaan, iyaga oo dabaqaya qodobada dhaqan galka ah, ee gaar ahaana la xidhiidha dhagaysi garmaqal. Soo bandhigid kasta ama xidhiidh xogeed, waxa si dhamaystiran loogu dabaqi doonaa qodobada la xidhiidha illaalinta xogta.

**Qodobka 16<sup>aad</sup>**  
**Mudadda La Heynayo Qoraalada La Socda**

1. Dadka ay khuseysaa waxa ay heyn doonaan qoraalada lagu xusay **Qodobka 14<sup>aad</sup>** sabab la xidhiidh leh maamul Kastam, mudadda lagu dajiyay qodobada dhaqan galka ah ugu yaraan saddex xili sanadood, iyada oon la eegayn habka qoraalka.
2. Mudaddasi waxa ay socon doontaa dhamaadka sanadka taas oo:
  - a) marka laga hadlayo badeecad la fasaxay in ay si bilaasha ku dhaafto taas oo ay keentay xaalad aan ahayn xaaladaha lagu xusay farqada (b) ama badeecad la dhoofinayo, dhamaadka sanadka, taas oo cadeymeheeda sheegaya in bilaash lagu siidaayo ama lagu dhoofiyo la aqbalay;
  - b) Marka laga hadlayo badeecad in si bilaasha ay ku wareegto, waxa lagu wareejin karaa xaddi la dhimay ama xaddi cashuurta soo dejinta oo bilaash ah, iyada oo lagu xisaabtamayo isticmaalkeeda kama danbaysta ah, oo ka bilaabmata dhamaadka sanadka ay soodhowdahay kormeerka kastamadu.
  - c) Marka laga hadlayo badeecad ku sugan habraac kale oo kastameed, waxay qaadan doontaa ilaa dhamaadka sanadka habraaca kastam ee khuseeya la dhamays tiray.

### **Qodobka 17<sup>aad</sup>**

## **Muddo Kordhinta Dhaqangelinta Xeerka Kastamada**

Cayimaada muddada iyo wakhtiga uu jideynaayo Xeerka Kastamadu, ujeedaduna tahay in ladabaqo Xeer, mudaddaasi la kordhin maayo waqtigaas ama saacadasina laga badali maayo haddii aan qodob gaar ah loo samayn xeerkaasi laga hadlayo

### **Qodobka 18<sup>aad</sup>**

#### **Fudeydin**

Wasiirka Maaliyadda ayaa go'aansan kara xaaladaha iyo shuruudaha dhaqangelinta Xeerka Kastamada la fududeyn doono.

### **QAYBTA II AAD**

## **Arimaha Lagu Salaynaayo Cashuuraha Soo Dejinta Ama Cashuuraha Dhoofka Iyo Talaabooyinka Kale Ee Lagu Sharciyeeyay Marka Laga Hadlayo Ganacsiga Badeecadaha Loo Adeegsado**

### **A. TA'RIIFADDA KASTAMADA SOOMAALILAND IYO KALA SAARIDA TA'RIIFADDA BADEECADAHA**

### **Qodobka 19<sup>aad</sup>**

#### **Ta'riifadda Kastamada**

1. Waxaa waajiba sharci ahaan, marka deyn kastameed la galo, in lagu saleeyo Ta'riifadda Kastamada Soomaaliland.
2. Talaabooyinka kale ee lagu dajiyay Xeerarka Soomaaliland si loogu maamulo meelo gaara oo la xidhiidha badeecad ganacsi, waxa loo adeegsan doonaa iyada oo la raacayo kala saaridda tacriifada ee badeecadda xaaladaha ku haboon.
3. Xeerarka Ta'criifada Soomaaliland waxay ka koobnaan doonaan:
  - a) Magac bixinta badeecadaha oo ku salaysan nidaamka Midaynta ee Sifaha Badeecadda iyo



nidaamka taxanaha ah, ee ay dajiyeen Ururka Kastamada Caalamku;

- b) Magac bixinaha kale ee qayb ahaan ama badh ahaan ku salaysan magac bixinta sare lagu xusay ama ka qayb noqonaysa ama farqado dheeraad ah ku soo rogeysa, ama lagu aasaasay xeerar lagu maamulayo meelo mucayina, iyada oo ay ujeedadu tahay dhaqan galinta nidaamka ta'rifadda ee la xidhiidha ka ganacsiga badeecadda;
  - c) Xadiyada iyo waxyaalaha kale ee lagu xukumoo taas oo caadi ahaan ka dhaqangashan oo lagu xusay sida ku cad farqadaha a) iyo b) ee sare oo xidhiidha la leh cashuuraha kastamada;
  - d) Talaabooyinka kala mudnaysiinta ee ta'riifada ee ku xusan heshiis ay Soomaaliland la gashay dalal dhawra ama dalal farabadan kuwaas oo xusaya in la siiyo kala mudnaysiin dhinaca ta'riifada ah;
  - e) Talaabooyinka ta'riifadeed ee kale ee ku salaysan kala mudnaysiinta ee ay dajisay Soomaaliland iyada oo la eegayo dalal dhawra, kooxo dalal ah ama dhulal;
  - f) Talaabooyinka joojined ee xusaya in la dhimo ama in laga qaado waajibnimada cashuurta soo dejinta ee lagu dalacayo badeecado gaar ah';
  - g) Talaabooyinka kale ee ta'riifadeed ee ay xusayaan Xeerarka kale ee u dajisan dalka Soomaaliland.
4. Iyada oon laga talaabsanayn Xeerarka xusaya qiimaha cayiman, talaabooyinka ku xusan farqada 3, d) e) iyo f) ayaa lagu dabaqayaa marka qofka cadaaynta sameynayaa iyo kuwa ku xusan xubinta c) haddii badeecadda laga hadlayaa ay buuxiso shuruudaha lagu dajiyay kuwa talaabooyinka xaga hore ku xusan. Codsii baa lagu samayn karaa ka dib xaalada ku xusan in shuruudaha ku habboon la dhamays tiri karo.

5. Xaaladaha talaabooyinka codsi ee lagu xusay farqada 3, d) e) iyo f) laguna xakameeyay badeecado cayiman oo la soo dajiyay, waxa ay joogsan doontaa marka xadiga badeecadaasi la soo dajiyay la gaadho.
6. Kala saaridda ta'riifadda badeecadeed waxa ay ahaan doontaa mid lagu go'aamiyo, iyada oo la raacayo Xeerarka dhaqangalka ah, ee ku jira cinwaanka mid ka mid ah magacaabista lagu xusay farqada 3) a) ama b).

### **Qodobka 20<sup>aad</sup>**

#### **Habraaca Mudnaanta ee Isticmaalka u danbeeya**

1. Habraaca mudnaanta ta'riifada ee badeecado dhawr ah looga faa'iideyn doono sabab la xidhiidha dabcigooda ama isticmaalkooda ugu danbeeya, waxana ay hoos imaan doontaa shuruudaha ama Qodobada lagu dabikhi karo, haddii fasax loo baahanyahayna **Qodobada 83<sup>aad</sup> iyo 84<sup>aad</sup>** ayaa la dabaqi doonaa.
2. Sida ku cad farqada 1aad, kalmada "habraaca kala mudnaysiinta ta'riifadeed" waxa uu macnaheedu yahay dhimista ama joojinta cashuurta soo dejinta ee lagu xusay **Qodobada 4<sup>aad</sup> iyo 14<sup>aad</sup>**, xataa haduu kujiro qaabdhismeedka jaangoynta ta'riifadeed.

### **A. ASALKA BADEECADAHA**

#### **Qodobka 21<sup>aad</sup>**

#### **Xeerarka Asalnimada aan kala Mudnaysiinta lahayn**

Qodobkani waxa uu qeexayaa badeecadda asalnimo aan kala mudnaysiin lahayn, iyada oo ay ujeedadu tahay:

- a) In lagu dhaqo Ta'riifadda Kastamada Soomaaliland, oo ay ka reeban tahay talaabooyinka ta'riifadda kala mudnaysiinta lihi ee lagu xusay Qodobka 19<sup>aad</sup> farqadiisa 3<sup>aad</sup>) d) iyo e).

- b) Iyada oo lagu dhaqayo talaabooyinka aan ahayn talaabooyin ta'riifadeed ee lagu aasaasay Xeerarka JSL Soomaaliland ee lagu maamulo meelo cayiman oo la xidhiidha ka ganacisga badeecadda;
- c) Diyaarinta iyo soo saarida shahaadooyinka asalnimada.

## **ASALNIMADA AAN MUDNAANTA LAHAYN**

### **Qodobka 22<sup>aad</sup>**

#### **Badeecada Gabi ahaan la soo saaro ama laga Helo**

#### **Wadan**

1. Badeecaddaha ka soo jeeda dal waxa ay ahaan doonaan kuwa gabi ahaan laga helo ama laguna farsameeyo dalkaasi.
2. badeecadahan soo socda, waxa loo tix-gelin doonaa in gabi ahaan lagu farsameeyay ama laga helay dalkaasi:
  - a) dhirta iyo badeecadda la xidhiidha dhirta, ee ay ku jiraan midhaha, ubaxyada, khudrada cagaaran, geedaha, **seaweed**, fungi iyo dhirta kale ee nool, ee la beero, la goosto, la guro, ama lagusoo urursho xuduudeeda kastameed.
  - b) xayawaaanka nool ee kudhashay kunakoray xuduuda kastameed;
  - c) badeecadda laga helo xoolaha nool ee xuduudeeda kastam;
  - d) badeecadda laga helay ugaadhsiga, dabista, kaluumaysiga, beeraha, beera-biyoodka, ururinta ama laga qabtay xuduudeeda kastam;
  - e) macaadiinta iyo walxaha kale ee si dabiici ah u dhacaya ee laga soo dheegtay ama laga helay ciida, biyaha, bada-hoosteeda ama wixii ka hooseeya bada-hoosteeda ee xuduuda kastamada Soomaaliland;

- f) badeecadda lagu helo kaluumaysiga bada iyo badeecadda kale ee bada ee laga soo qaaday badweynta, iyada oo la raacayo sharciyada caalamiga ah, markab kasta oo u diwaangashan dal gaar ah, xaqna u leh in uu ku goosho calanka dalkaasi;
- g) badeecadda lagu sameeyay markab gudini oo ka diwaangashan ama u leeyahay dal gaar ah, xaqna u leh in uu ku goosho calanka dalkaasi;
- h) badeecadda laga keenay bada gunteeda ama wixii ka hooseeya bada gunteeda ee ka baxsan xeeblayda iyada oo ay shardi tahay in dalkaasi uu xuquuq gaar ah u lahaa in uu gurto badaasi gunteeda ama ciida hoosteeda;
- i) qashinka ama hadhaaga ka soo hadha badeecadda ee laga helay hawlaha soo saarined iyo agabka la isticmaalay, haddii la ururiyay, ayna ku habboon yihiin in dib loogu soo celiyo alaabada caydhiin;
- j) Badeecadda lagu sameeyo ama laga helo oo kaliya badeecadda lagu xusay Farqadaha a) ilaa i) ama wixii iyaga laga keenay.

### **Qodobka 23<sup>aad</sup>**

#### **Xeerka badeecadaha isku gurka kala wadanka ah**

Badeecadda soo saaristeedda ay ku lug leedahay in ka badan hal dal, waxa loo qaadan doonaa in ay ka timid dalka ugu danbayntii lagu sameeyay, ka dib, ama farsamaynta dhaqaale ahaan loo cudurdaari karo, ama shaqada hawl loogu talo galay ujeedadaasi oo keenaysa soo saaridda wax soo saar cusub ama oofsanaya darajo muhiim ah oo wax soo saar.

### **Qodobka 24<sup>aad</sup>**

#### **Cadaynta Asalnimada**

Xeerka kastamada ama Xeerarka kale ee dhaqan galka ahi, waxa ay xusi karaan, in qoraal lagu soo saaro cadaynta asalnimo ee badeecadda.

## **ASALNIMADA MUDNAANTA LEH**

### **Qodobka 25<sup>aad</sup>**

#### **Xeerarka Asalnimada Mudnaanta Leh**



1. Xeerarka asalnimada mudnaysiintu, waxay dajin doonaan shuruudaha lagu xukumayo helitaanka asalnimada ee ay tahay in badeecadasi ay dhamays tirto, si looga faa'iideeyo ta'riifadda mudnaysiinta ee raacaysa heshiiska ay Soomaaliland la gashay dalal fara-badan ama dalal gooni ah.
2. Xeerarkaas waxa lagu go'aamin doonaa heshiisyadaasi;

### **C.QIIMAYNTA**

#### **Qodobka 26<sup>aad</sup>**

#### **Xayndaabka Cutubkan**

Xeerarka Soomaaliland ee qiimaynta kastamadu, waxa ay ka koobnaan doonaan cutubkan iyo xeer-nidaamiyayaasha loo dajiyay si loogu fuliyo. Cutubkan waxa lagu dhaqi doona, iyada oon la garab marin Xeerarka gaarka ah ee loo dejiyay qaybaha kale ee la xidhiidha ganacsi dhex mara Soomaaliland iyo dalal kale.

#### **Qodobka 27<sup>aad</sup>**

#### **Ujeedada**

Farqadaha Cutubkan ayaa go'aamin doona qiimaynta kastamada, ujeedooyinka ah in la dhaqan galiyo Ta'riifada Kastamada Soomaaliland iyo talaabooyinka aan ta'riifada ku jirin ee lagu nidaamiyay Qodobo Soomaaliland soosaartay, oo lagu xukumo meelo mucayina oo la xidhiidha ka ganacsiga badeecadda.

#### **Qodobka 28<sup>aad</sup>**

#### **Habka Qiimaynta ee 1<sup>aad</sup> : Qiimaha La Isdhaafsaday**

1. Qiimaha kastamada ee badeecadda la soo dejiyaa waxa ay ahaan doontaa qiimaha iib-gal (transaction value), taas oo ah, qiimaha si rasmi ah looga bixiyay ama ay tahay in laga bixiyo badeecadda marka dhoof loogu iib geynayo xuduuda kastamada Soomaaliland, taas oo lagu dajiyay, haddii ay lagama maarmaan noqoto, hanaan waafaqsan Qodobada 31aad, iyo 32aad, sida lagu sheegay:
- a) In aysan jirin wax caqabad ah, sida isticmaalka ama adeegsiga badeecadda uu adeegsanayo kan iibsaday, marka laga reebo xanibaadaha:
    - i. Lagu soo rogay ama uu jideynayo xeer ama maamulka dawladda Soomaaliland;
    - ii. Lagu xadaynayo xuduuda dhul ahaaneed ee badeecadda dib loogu gadi karo, ama
    - iii. Aan sinaba u saamaynayn qiimaha badeecadda;
  - b) In iibka ama qiimaha aanay ku xidhnayn wax shuruud ama gudasho/tixgelin aan la garan karin qiimaha badeecadda la qiimaynayo;
  - c) In aanay jirin wax qayb ahaan laga dheefay iib kasta oo ka daba dhaca, adeegsi ama isticmaal badeecad oo uu sameeyo iibsaduhu, taas oo si toos ah ama si aan toos ahayn dulsaar ugu noqon doonta iibsadaha, haddii aan cabir ku haboon la adeegsan hab waafaqsan Qodobka 31aad; iyo
  - d) In aanay xidhiidh lahayn iibsadaha iyo iibiyuhu, haddii iibsadaha iyo iibiyuhu ay xidhiidh leeyihiin, in qiimaha iibgal (transaction value) la aqbali karo ujeedooyin la xidhiidha kastamada sida ku cad farqada 2aad.
2. a) Marka la go'aaminayo in qiimaha iib-gal (transaction value) la aqbali karo ujeedooyinka ku xusan farqada 1aad, xaqiiqada ah in iibsadaha iyo iibiyuhu in ay xidhiidh leeyihiin, iyada lafteedu ahaan

mayso mid cadayn ugu filan marka laga hadlayo qiimaha iib-gal oo ah mid aan la qaadan doonin.

Xaaladaha lagama maarmaanka ah, duruufaha khuseeya iibka waa la baadhi doonaa qiimaha iib-galna waxa la aqbali doonaa iyada oo ay shardi u tahay in xidhiidhkaasi aanu saamayn qiimaha. Haddii, iyada oo la raacayo warbixinta uu qofka cadaynta wataa ama si kalaba lagu helay, maamulka kastamadu ay hayaan asbaab sababaynasa in xidhiidhkaasi uu saamayn ku yeeshay qiimaha, waxa ay la wadaagi doonaan asbaabtaasi qofka cadaynta wata, waxaana la siin doonaa fursad macquula oo uu kaga jawaab cesho.

Haddii qofka cadaynta wataa sidaa codsadana, warbixinta asbaabtaasi waxa ay ahaan doontaa mid qoraala.

b) Iibka dhexmara dad xidhiidh leh, qiimaha iib-gal (transaction value) waa la aqbali doonaa badeecadana waxa loo qiimayn doonaa si waafaqsan farqada laad mar kasta oo qofka cadaynta wataa uu muujo in qiimahaasi uu aad ugu dhawyahay midka mid ah qiimayawgan soo socda oo dhacay isku waqti qudha:

- i. Qiimaha iib-gal ee iibka, dhexmara dad wax iibsada iyo qaar wax iibsha oo aan lahayn wax xidhiidha haba yaraatee, oo ka dhacay badeecad la mid ah ama u dhaw oo loo soo dhoofsho Soomaaliland;
- ii. Qiimaha kastamka ee badeecad la mid ah ama shabahda, sida ku xusan Qodobka 29aad, farqadiisa, 2aad) c).
- iii. Qiimaha kastamka ee badeecad la mid ah ama u eg, sida ku xusan Qodobka 29aad, farqadiisa, 2aad) d).

Marka la adeegsanayo hubinta sare ku xusan, tixgalin dhamays tiran baa la siin doonaa kala duwanaanshaha heerarka ganacsi, heerka tiro, arrimaha ku xusan Qodobka 30aad iyo kharashaadka uu galay iibiyaha iibku, iibiyahaas oo aan xidhiidh la lahayn iibsadaha, halka, kharashaadkan aanu gelin iibiye xidhiidh la leh iibsadaha

c) Tijaabada lagu dajiyay farqada b) waxa la adeegsaan doonaa marka uu codsado qofka cadaynta wataa, iyada oo ay ujeedadu tahay oo kali ah is barbardhig. Qiimayaal lagu badalayo laguma aasaasi karo farqadaasi.

3. a) Qiimaha rasmi ahaan la bixiyay ama ay tahay in la bixiyaa, waxa uu noqon doonaa isku geynta lacagta uu bixinayo ama lagu wado in uu bixiyo qofka iibsanayaa. isaga oo siinaya qofka iibinaya ama iibiyaha ah ama qofka iibsanayaa uu siiyo qof saddexaad si uu u fuliyo waajibaadka iibsadaha. Lacag bixintu maaha in ay ahaato oo kaliya qaab bixin lacag naqad ah. Lacag bixinta waxa lagu samayn karaa qaab dalab amaahed (credit) ama waraaqaha leh qiimaha lacagta waxaana lagu samayn karaa si toos ah ama si aan toos ahayn.


b) Hawlqabadyada, ay ku jiraan hawlaha suuq geynta ee uu fuliyo iibsaduhu isaga oo adeegsanaya xisaabtiisa gaarka ah, marka laga reebo kuwa lagu habeeyay Qodobka 30aad, kuwaas oon loo tixgalin in ay yihiin lacag bixin dadban oo loo sameeyay qofka iibsadaha ah, in kasta oo loo qaadan karo in ay faa'iido tarayaan qofka iibsadaha ah ama ay fuliyeen iyada oo heshiis lagula jiro qofka iibsadaha ah, qiimahooduna aan lagu dari doonin qiimaha si rasmi ah looga bixiyay ama ay tahay in looga bixiyo, si loo



go'aamiyo qiimaha kastamada ee badeecadda la soo dajiyay.

**Qodobka 29<sup>aad</sup>**

**Habka Qiimeynta ee kabilowda (2) illaa (5)**



1. Xaaladaha qiimaha Kastamka aan la go'aansan karin sida ku cad Qodobka 28aad, waa in lagu go'aamiyaa sida ay u soo kala horeeyaan xubnaha soo socda ee a), b), c), iyo d) ee farqada 2aad illaa iyo xubinta kowaad ee lagu go'aan qaadan karayo, iyada oo la raacayo fulinta kala horaynta xubnaha c) iyo d) hadana, waa la badali doonaa haddii qofka cadaynta wataa sidaa codsado; waxa keliya oo la adeegsan doonaa marka qiimahaasi aan lagu cayimi karin farqad gaar ah, taas oo shuruudaha farqada kuxigta udhiganto ama lagu lagu fulinkaro.
2. Qiimaha kastamka ee lagu xusay sida ku cad Qodobkan waxa uu ahaan doonaa:-
  - a) Qiimaha iib-gal ee badeeco la mid ah oo loogu talo galay in loo soo dhoofsho Soomaaliland isla waqti ama waqti isu mid ah sida alaabta la qiimeeyay;
  - b) Qiimaha iib-gal (transaction value) ee badeeco la mid ah oo lagu iib geeyay in laga dhoofsho Soomaaliland loona dhoofiyay isla waqti la mid ah kan alaabta la qiimeeyay;
  - c) Qiimaha oo ku salaysan qiimaha hal-beega ee badeecadda la soo dejiyay oo la mid ah ama u dhaw laguna iibiyo Soomaaliland, oo ah xadiga ugu badan oo laga iibiyo dad aanay xidhiidh lahayn iibiyayaasha;
  - d) Isu-geynta qiimaha, oo ka kooban isu geynta:
    - (i) Qiimaha badeecaddu taagantahay ama qiimaha guud ee alaabooyinka iyo samaynta ama warshadaynta loo adeegsado si loo soo saaro badeecadda la soo dajiyay,

- (ii) Qadar loogu talo galay macaash ahaan iyo kharashaadka guud oo taasi la mid ah, taas oo inta badan laga arko iibka badeecada oo isku mid ah ama isku nooca ahna badeecad lagu qiimeeyay taas oo ay sameeyeen wax soo-saarayaasha dalka laga soo dhoofsho ee la keeno Soomaaliland.
- (iii) Qiimaha badeecadu taagantahay ama qiimaha ashyaada lagu xusay Qodobka 31aad, farqadiisa 1aad) xubinta, e).

3. Xaaladaha dheeraadka ah iyo qawaaniinta lagu hirgalinayo farqada 2aad ee sare ku xusan, waxa go'aamin doonaa Wasiirka Maaliyada.

### **Qodobka 30<sup>aad</sup>**

#### **Habka 6aad: ee dib u Noqoshada**

1. xaaladaha qiimaha kastamada ee badeecadda la soo dajiyay aan lagu cayimi karin sida ku cad Qodobada 28aad, ama 29aad, waxa la cayimi doonaa, iyada oo la raacayo xog laga helayo Soomaaliland, lana isticmaalayo nidaam sababaysan oo macquul ah, oo la jaanqaadaysa mabaadiida iyo Xeerarka guud ee:
  - a) Heshiiska lagu fulinayo Qodobka (Qaybta) VIIaad ee Heshiiska Guud ee Ta'riifadaha iyo Ganacsiga
  - b) Qodobka VII ee Heshiiska Guud ee Ta'riifadaha iyo Ganacsiga
  - c) Qodobada Cutubkan
2. Qiime Kastam lagu go'aansan maayo iyada oo la raacayo farqada 1aad, oo lagu salaynayo:
  - a) Qiimaha kala iibsiga ee Soomaaliland ee badeecad lagu sameeyay Soomaaliland;

- b)** Hab ina siinaya iyada oo ay ujeedadu tahay in Kastamadu aqbalu aqbalaan kii sareeya labada qiime ee laysku bedeli karo (alternative values);
- c)** Qiimaha badeecadeed suuqyada gudaha wadanka badeecadda loo dhoofinayo;
- d)** Kharashka ku baxay soo saarida, ee aan ahayn qiimaha la isku geeyay ee lagu go'aamiya badeecad isku mid ah, iyada la raacayo Qodobka 29aad, 2) d)
- e)** Qiimaha dhoofka ee dal kale oo aan ahayn Soomaaliland;
- f)** Qiimaha ugu hooseeya ee kastamada; ama
- g)** Qiime aan sugnayn ama been abuur ah;

### **Qodobka 31<sup>aad</sup>**

#### **Ku Biirinta/Ku Darka**

3. Marka la go'aaminayo qiimaha kastamada sida ku cad Qodobka 28aad, waxa lagu dari doonaa qiimaha rasmi ahaan laga bixiyay ama ay tahay in laga bixiyo badeecadaha la soo dajiyo:
- a)** waxyaabaha soo socda, illaa iyo xadka uu galay qofka alaabta iibsanayaa laakiin aan ku jirin qiimaha rasmi ahaan laga bixiyay ama ay tahay in laga bixiyo alaabada:
- (iv) Khidmada iyo dilaalka, marka laga reebo khidmada iibka;
- (v) Kharashka koontiinarada oo loo qaadan doono in ay yihiin mid, macaamilka kastamada, ee badeecadda su'aashu ka taagantahay;
- (vi) Kharashka bacaynta, ha ahaado mid shaqaale ama agab;
- b)** qiimaha, loo qoondeeyay in uu yahay mid ku haboon, badeecadahan iyo adeegyadan soo socda,

haddii si toos ah ama aan toos ahayn uu u bixiyay qofka iibsaday si bilaasha ama kharash la dhimay isticmaal la xidhiidha wax soo saarida iyo iib geynta dhoofka ee badeecada la soo dajiyay, illaa iyo xadka uu qiimahaasi lagu darin qiimaha guud ahaan laga bixiyay ama laga bixin doono.

- (i) Qalabka, agabka, qaybaha iyo waxyaabaha u dhigma ee la socda badeecadda la soo dajiyay,
- (ii) Tuulka, mishiinada, iyo waxyaabaha u dhigma ee lagu isticmaalay wax soo saarka badeecadda la soo dajiyo,
- (iii) Waxyaabaha ama Qalabka loo isticmaalo wax soo saarka badeecadda la soo dajiyo,
- (iv) Ingineerinka (farsamada dhiska, nashqadaynta iyo isticmaalka mishiinada), horumarinta, hawlaha farsamo, hawlaha naqshadeed, iyo qorshayaasha iyo khariiradda (descriptions) lagu fuliyay meelo kale oon ahayn Soomaaliland ee lagama maarmaanka u ah soo saarida badeecadda la soo dejiyey;

Itaawooyinka ama liisanka dhawrista ikhtiraaca (royalties) iyo ruqsadaha xidhiidhka la leh badeecadda la qiimeeyay ee ay tahay in qofka iibsanayaa uu lacag ka bixiyo, si toos ah ama si aan toos ahayn, illaa iyo xadka itaawooyinkaasi (royalties) iyo ujuurooyinkasi aan lagu darin qiimaha rasmi ahaan laga bixin doono ama laga bixiyey;

Qiimaha qaybkasta oo kamida faa'iidada laga helo iibka labaad (dib u iibinta), isticmaalka ama iibka hadhaaga badeecadda lasoodejiyey, taas oo si toos ah ama si aan toos ahayn uu u helo iibiyuhu;

- (i) kharashka daabulka iyo caymiska badeecadda la soo dajiyay, iyo


(ii) Kharashka dajinta iyo rarista ee lasocda safrinta badeecadda la soo dajiyay, illaa iyo inta la keenayo xuduudka kastamada Soomaaliland.

1. Waxyaabaha lagu daraayo kharashka si rasmi ah looga bixiyay ama loo baahanyahay in labixiyo, waxa lagu samayn doonaa Qodobkan iyada oo lagu salaynaayo hadaf iyo xog tirogal ah.
2. Waxba lagu dari maayo qiimaha rasmi ahaan laga bixiyay ama loobaahanyahay in labixiyo, si go'aan looga gaadho qiimaha kastamada marka laga reebo xaaldaha lagu xusay Qodobkan.
3. Xeerkan, kelmeda 'Komishanka Iibka' waxaa macneheedu yahay, khidmada uu bixiyey lasoodeguhu (importer) ee uu siiyey Wakiilkiisa, oo ah adeega uu ugu metalaayo iibka badeecadda la qiimeeyey
4. iyada oon la raacayn farqada 1 c):
  - a) kharashka lagu dalaco xaqa in dib loogusoo saaro (reproduce) Somaliland gudeheeda alaabta lasoo dejiyey, laguma dari doono qiimaha rasmi ahaan laga bixiyey ama laga rabo in lagabixiyo badeecada lasoo dejiyey, si loo go'aamiyo qiimaha Kastamada; iyo
  - b) Lacagta uu bixiyay qofka iibsadaha ah oo xaq u leh in uu qaybiyo ama dib u iibiyo badeecadda la soo dajiyay haddii lacagtaasi laga bixiyay aanay shardi u ahayn iibka dhoofineed ee badeecadaasi in la keeno Soomaaliland.

### **Qodobka 32<sup>aad</sup>**

#### **Waxyaabaha Laga Goynayo (Deductions)**

1. Iyada oo ay shardi u tahay in si gaar ah looga muujiyey qiimaha rasmi ahaan laga bixiyay ama ay tahay in laga baxsho, kuwan soo socda laguma dari doono qiimaha kastamada:

- 
- a) Khidmada rarka shixnada ee ka danbaysa marka ay timaado meesha ay ka soo galayso xuduudka kastamada ee Soomaaliland.
- b) Khidmada dhismaha, taagida, isku xidh-xidhka, dayac tirka ama caawimada farsamo, ee la qabto ka dib marka ay soo dagto badeecadda la soo dajiyaa sida dhismaha warshada, mishiinada ama qalabka;
- c) khidmada dulsaar ee ku xusan habayn maalgalined oo lala galay iibsadaha lana xidhiidha iibsashada badeecadda la soo dajiyay, iyada oon la dhawrayn in maalgalintaasi uu bixiyay qof iibiye ah ama qof kale, iyada oo ay shardi tahay in habaynta maalgalined lagu sameeyay qoraal ahaan haddii loo baahadana, qofka iibsadaha ahi uu keeni karo in:
- (i) Badeecadaasi rasmi ahaan loogu iibiyay qiimaha lagu cadeeyay qiimaha rasmi ahaan laga bixiyay ama laga bixin doono,
- (ii) Xadiga la sheeganayo ee dulsaar oon ka badan doonin heerka macaamilkaasi ee ka jira dal, waqtigaasi iyo goobtaasi maalgalinta la samaynayo;
- d) Khidmada xaqa in badeecadda dib loogu sameeyo Soomaaliland;
- e) Khidmadaha iibka;
- f) Cashuurta soo dejinta ama khidmadaha kale ee lagu bixinayo Soomaaliland, sabab la xidhiidha soo dejinta ama iibka badeecada

### **Qodobka 33<sup>aad</sup>**

### **Qiimaha Kastamada ee Agabka Saxaafada**

Nidaamyo gaara ayaa uu u dajin doonaa Wasiirka Maaliyadu, si uu u xaqiijiyo qiimaha kastamada ee agabka saxaafadu u adeegsato habaynta iyo kaydinta xogta, awoodana u leh in ay qabtaan xog ama tilmaan bixino.

### **Qodobka 34<sup>aad</sup>**

### **Qiimaha Sarifka**

1. marka xaaladaha la adeegsanayo si looga go'aan gaadho qiimaha kastamada ee badeecadda lagu cabiro lacag aan ahayn tan Shilinka Soomaaliland, qiimaha sarif ee la adeegsanayaa waxa uu ahaan doonaa kan uu baahiyay Bangiga Dhexe ee Soomaaliland.
2. Qiimahaasi waxa uu muujin doonaa sida ugu habboon ee ugu suurto galsan, qiimaha hadda taagan ee lacagtaasi ee lagu galo hawlaha ganacsiga marka la barbar dhigo Shillinka Soomaaliland, waxana la adeegsan doonaa muddada sida uu go'aamiyo Wasiirka Maaliyaddu.

### **Qodobka 35<sup>aad</sup>**

#### **Reebanaan**

1. Qodobada cutubkan ayaa iyada oon meel ka dhac lagu samayn qodobada gaarka ah ee khuseeya go'aaminta qiimaha ee ujeedooyin la xidhidha kastamada ee badeecadda lasiidaayey inay baxdo, ka dib marka la mariyo kale habraac oo ay kastamadu ansixiyeen ama adeegsi.
2. Waxaa iyadoo lagu samaynayo nasakhaad Qodobada 28aad, 29,aad iyo 30aad, qiimaha kastamada ee badeecada baa'ba'da' ee inta badan lagu keeno shixnad, iyada oo uu sidaasi codsanayo qofka cadaynta wataa, lagu go'aansan doonaa xeerar la fududeeyay oo uu go'aamiyay Wasiirka Maaliyaddu.

### **Qodobka 36<sup>aad</sup>**

#### **Xeer-Nidaamiyayaasha Cutubkan**

Wasiirka maaliyadu, isaga oo la tashanaaya masuuliyiinta Kastamada waxa uu soo saarayaa Xeer-nidaamiyayaal si loo dhaqangeliyo qodobada Cutubkan.

## **QAYBTA III AAD**

### **Qodobada Lagu Dhaqayo Badeecada La Keeno Xuduud Kastamadadeedka Soomaaliland Ilaa Loo Sii Daynayo Habraac Ay Kastamadu Ansixiyen Ama Adeegsi**

#### **A. SOO GELITAANKA BADECADA XUDUUDKA KASTAMADA EE SOOMAALILAND**

### **Qodobka 37<sup>aad</sup>**

#### **waajibnimada in la Keeno Cadayn Kooban**

1. Badeecadda la keeno xuduudka kastamada ee Soomaaliland waxa lagu dhaqi doonaa cadayn kooban, iyada oo ay ka reebantahay badeecadda lagu wado hab raritaan iyada oo laga gudbinayo oo kaliya dhul-biyoodka ama hawada sare ee xadka kastamada iyada oon la joojin ama lagu hakin dhulkaasi.
2. Cadayn kooban ayaa la keeni doonaa xafiiska Kastam ee galitaan.
3. Maamulka Kastamku waxa uu ogolaan doonaa cadayn kooban in la keeno xafiiska Kastamka, iyada oo ay shardi tahay in xafiiskani uu si dhakhso ah uu la xidhiidho ama uu u suurto galiyo faahfaahinta lagama maarmaanka ah ee xafiiska Kastam ee soo gelitaan, isaga oo sidaa ku samaynaya qaab elektaroonik ah haddii ay suurto gasho.
4. Maamulka Kastamku waxa uu aqbali doonaa, halkii ay ahayd in loo keeno cadayn kooban, keenitaanka ogaysiinta iyo suurogelinta xogta cadayn kooban ee ku jira nidaamka kombiyuutaar ee ganacsadaha.
5. Cadaynta kooban waxa loo gayn doonaa inta aan badeecadda la keenin xuduudka kastamada ee Soomaaliland.
6. Wasiirka Maaliyadda ayaa go'aamin doona:



a) Xadidaada waqti ee cadaynta kooban la keenay inta aan badeecadda la keenin xuduudka kastamada ee Soomaaliland;

Xeer-nidaamiyayaasha lagu kala reebayo, waxna lagaga badalayo, xadidaada waqti ee ku xusan fartaad laad, iyo;

Shuruudaha cadaynta koobani lagu dhaafi karo ama lagu dajin karo, iyada oo la raacayo duruufaha gaarka ah iyo noocayada gaarka ah ee xamuulka badeecadeed, noocyada xamuul iyo ganacsatada haddii uu heshiis caalami ahi sidaas dhigayana habaynta gaar ahaaneed ee damaanad gaar ah.

### **Qodobka 38aad**

#### **Hanaanka cadaynta kooban**

1. Wasiirka Maaliyaddu waxa uu samayn doonaa qaab xogeed iyo hal-beeg oo lagu sameeyo cadaynta kooban, taas oo ka kooban faahfaahinta lagama maarmaanka u ah lafa-gurka khatarta ah iyo si hufan u adeegsiga maamulka kastamada, iyada oo ay ujeedada koowaad tahay amaanka iyo badbaadada, iyada oo la adeegsanayo, haddii ay ku habboon tahay, heerarka caalamiga ah iyo dhaqanka baayac mushtariga.
2. Haddii ay suurto gal tahay, cadaynta kooban waxa la samayn karaa iyada oo la adeegsanayo hab lagu nidaamiyo xogta.  
Baayac mushtariga, dekada ama isku gududka xogta waxa loo adeegsan doonaa, iyada oo ay shardi tahay in ay isla si ugu dabaqmaan heerka maamulka khatarta sida loogu dhaqo cadaynta kooban ee lagu sameeyay habka xogta lagu nidaamiyo.
3. Cadaynta koobanwaxa gayn doona qofka keenaya badeecadda, ama qofka qaadaya masuuliyada rarka badeecadda ee xuduudka kastamada ee Soomaaliland.

4. iyada oon la raacayn waajibka qofka lagu sheegay farqada 3aad, cadaynta kooban waxa loo gayn doonaa haddii ay:

a) ka magaciisa lagu xusay farqada 3aad, uu matalo; ama qof kasta oo awood u leh in uu keeno badeecadda laga hadlayo ama la keenayo maamulka kastamada ee awooda u leh; ama

Wakiilka mid ah shakhsiyaadka lagu xusay farqada 3aad ama xubnaha a) ama b).

5. Qofka lagu xusay farqada 3aad iyo 4aad waxa ay, marka uu codsado, waxa loo ogolaan doonaa in wax laga badalo mid ama in ka badan oo ka mid ah faahfaahinta ku xusan cadaynta kooban ka dib marka loo keeno. Si kastaba ha ahaatee, wax wax-ka-badal ahi kama suurto gali karaan ka dib marka ay maamulka kastamadu:

a) ay ogaysiiyaan qofka u keenay cadaynta kooban ee ay ugu talo galeen in ay baadhaan badeecadda; ama ay go'aansadaan in faahfaahintaasi ay qaldan tahay; am Ay ogolaadeen in badeecadda lagasaaro

### **Qodobka 39<sup>aad</sup>**

#### **Ka Dhaafida in la Keeno Cadaynta Kooban**

1. Xafiiska Kastamka ee ay alaabtu ka soo gashay waxa ay ka dhaafi karaan keenida cadaynta kooban marka laga hadlayo badeecadda taas oo, inta aanu waqtigu ka dhicin ee lagu xusay Qodobka 37aad 3) ama 4), cadaynta Kastamku la keeno. Xaaladaasi, cadaynta Kastamku waxa ay ka koobnaan doontaa ugu yaraan faahfaahinta lagu sameyay cadaynta kooban, illaa iyo waqtiga ka horeeya laga aqbalayo iyada oo la raacayo Qodobka 61aad, waxa ay lahaan doontaa meeqaamka cadayn kooban lahaan jirtay.

2. Maamulka Kastamadu waxa ay ogolaan doonaan cadaynta kastamada ee loo keenay xafiiska kastamada ee laga soo dajiyo taas oo ka duwan xafiiska Kastamka ee badeecadu ka soo gashay, iyada oo ay shardi tahay in xafiiskaasi in uu si dhakhso leh ula xidhiidho ama loogu suurto galiyo electarooni ahaan faahfaahinta lagama maarmaanka ah ee xafiiska Kastamka ee soo gelintaanka.
3. Haddii cadayn Kastam loo keeno oon ka ahayn iyada oo la adeegsanayo hab xogta lagu habeeyo, maamulka kastamadu waxa ay dabaqi doonaan heer isku mid ah oo ah maamulka khataraha ee xogta sida ay ugu dabaqanto iyada oo la isticmaalayo hab xogta lagu nidaamiyo.

#### **Qodobka 40<sup>aad</sup>**

#### **Kormeerka Kastamada**

1. Badeecadda la keeno xuduuda kastamada ee Soomaaliland waxa ay, laga bilaabo marka ay soo galaan, kastamku waxa uu ku samayn doonaa kormeer. Waxa maamuli doona kastamada iyada oo la raacayo Xeerarka dhaqan galka ah.
2. waxa ay hoos iman doonaan kormeerkaasi illaa iyo xadka lagama maarmaanka ah si loo go'aamiyo marxalada ay ku jiraan xiliga Kastamka, haddii ay ku habboon tahayna, iyo xaaladaha badeecad aanay Soomaaliland lahayn iyada oon lagu xadgudbeyn Qodobka 80aad, illaa iyo marxalada kastameed la badalo ama dib-loo dhoofsho ama la baabiiyo iyada oo la raacayo Qodobka 158aad.

#### **Qodobka 41<sup>aad</sup>**

#### **Soo Gelitaanka Badeecadda**

1. Badeecadda soo galaysa xuduudka kastamada ee Soomaaliland waxa wareejin doona qofka soo galinaya

Soomaaliland iyada si aan habsan lahayn, waxana ay mari doontaa dariiqa ay cayimeen madaxda kastamada iyada oo la raacayo tilmaan bixintooda, haddii ay jiraan, waxa xafiiska Kastam ee uu magacaabay ama uu ansixiyay maamulka kastamadu.

2. Qof kasta kaas oo qaada masuuliyada qaadida badeecadda ka dib marka ay soo gasho xuduudka kastamada ee Soomaaliland, sidoo kalana, keenasada sii gudbin, waxa masuul ka noqon doona si loogu dhaqmo waajibnimada lagu dajiyay farqada 1aad.
3. Farqada 1aad meesha ka saari mayso fulinta qodob dhaqan gal ah marka laga hadlayo socdaalka dalxiis, socdaalka xadka, socodka boosta, oo leh qiime dhaqaale oo laga wada xaajoon karo taas oo ay ku xidhan tahay shardi in kormeerka kastamada iyo maamulka kastamada wixii ka suurtagalnimadooda in aan meel lagada dhicin.
4. farqada 1aad illaa 3aad, iyo Qodobada 37 illaa 40 iyo qaybta 42 illaa 53 looma adeegsan doono badeecada dhul ahaan ka baxaysa xuduudka kastamada ee goobaha dhulkaasi ee bad ahaan ama hawo ahaan, iyada oo ay shardi tahay in qaadista la saameeyo marin toos ah oo ah adeeg diyaaradeed ama markab oo caadi ah kaas oon ku hakanayn dibada xuduudka kastamada ee Soomaaliland.
5. Farqada 1aad looma adeegsan doono maraakiibta ku soo xidhata ama diyaaradaha ka gudbaya biyaha bada ama hawada Soomaaliland iyada oon aan ku socon dakad ama garoon diyaaradeed oo ku yaala Soomaaliland.

**Qodobka 42<sup>aad</sup>**  
**Masiibo Dabiici ah**

1. xaaladaha, waajibka gudashada ee ku xusan Qodobka 41 (1) aan la fulin karin, iyada oo ay sabab u tahay

xaalado aan la sii saadaalin karin ama masiibo dabiici ah, qof kasta oo kale oo isaga wakiil ka ahi waxa uu xaaladaasi ogaysiin doonaa maamulka kastamada si aan habsan ku jirin, haddii duruufaha aan la saadaalin karin ama masiibada dabiiciga ahi, aysan keenayn in badeecadaasi gabi ahaanba baabado, maamulka kastamada waxa lagu ogaysiin doonaa goobta ay dagan yihiin.

2. xaaladaha iyada oo ay sabab u tahay, duruufo aan la saadaalin ama masiibo dabiici ah, markabka ama diyaarada ku xusan Qodobka 41(5) lagu qasbo in uu ku dajiyo dakada ama garoonka si ku meel gaadh ahaana xuduuda kastamada ee Soomaaliland iyo waajibaadka lagu xusay Qodobka 41(1) aan lagu dhaqmi karin, qofka keenaya markabka ama diyaarada xuduudka kastamada ee Soomaaliland ama qof kasta oo kale oo wakiil ka ah waxa uu ogaysiin doonaa maamulka kastamada xaaladaasi iyada oon lagala habsaamin.
3. Maamulka kastamada ayaa go'aan ka gaadhi doona talaabooyinka lagaqaadayo si loo go'aamiyo kormeerka kastamada ee badeecadda lagu sheegay farqada 1aad iyo sidoo kale kuwa saaran markabka ama diyaarada xaaladaha lagu sheegay farqada 2aad si loo hubiyo xaaladaha ku habboon, in isla markaaba lagu waajibiyay xafiis Kastam ama goob kasta oo kale oo uu ogolaaday ama ansixiyay maamulku.

4.

**B) SOO BANDHIGIDA BADEECADAHA**  
**KASTAMADA**  
**Qodobka 43<sup>aad</sup>**  
**Tusida Badeecada Kastamada**

Badeecadda soo galaysa xuduudka kastamada ee Soomaaliland waxa tusi doona kastamada qofka keenay Soomaaliland, haddii ay ku habboonaatana, qofka qaaday masuuliyada qaadida badeecadda ee la socda gelitaanka, iyada oo ay ka reebantahay badeecada lagu qabtay hab safrin ah iyada oo laga gudbinayo oo kaliya xeeblayda ama hawada sare ee xuduudka kastamada ee Soomaaliland iyada oon lagu hakanayn dhulkaasi dhexdiisa. Qofka tusaya alaabtu waxa uu ku samayn doonaa tixraaca cadaynta kooban ama cadaynta Kastamka ee marka horeba badeecadda laga hadlayo loo hayey.

#### **Qodobka 44<sup>aad</sup>**

#### **Xaaladaha Goonida ah ee Bandhigida**

Qodobka 43aad meesha kama saarayo fulinta Xeerarka dhaqangalka ah ee la xidhiidha badeecada

- a) Ay wataan dad socdaal ku jiraa;
- b) La galiyay habraac Kastam balse aan loo bandhigin kastamada

#### **Qodobka 45<sup>aad</sup>**

#### **Baadhida hore**

Badeecadda ka dib marka la tuso kastamada, iyada oo wadata fasaxa maamulka Kastamka, waa la badali karaa, tusmo tijaabo lagu sameeyo ayaa laga qaadi karaa, si looguxilsaaro habraac uu Kastam ansixiyay ama isticmaal, fasaxaasi waxa la siin karaa marka ay codsadaan qofka loo ogolyahay in uu cid u xilsaaro habraaca uu Kastam ansixiyay ama isticmaal, fasaxaasi waxa la siin karaa, marka uu codsado qofka loo ogolyahay in uu cid u xilsaaro marisa badeecadda habraaca ama isticmaalka.

#### **Qodobka 46<sup>aad</sup>**

#### **Dejinta Badeecadda La Tusay Kastamada**

1. Badeecadda waa la dajin doonaa ama waa la sii rari doonaa iyada oo la adeegsanayo habka rarka ee lagu siday iyada oo fasax looga qaadanayo maamulka kastamada meelaha loogu talo galay ama lagu ansixiyay maamulka Kastamka.

Si kasta ha ahaatee, fasax looma baahna haddii ay jirto khatar dhaw oo lagama maarnaan ka dhigasa in si dhakhso ah looga dajiyo dhammaan ama wax ka mid ah badeecadaha xaaladaasi ku xusan, maamulka Kastamkana si buuxda ayaa loo ogaysiin doonaa.

2. Iyada oo ujeedadu tahay in la baadho badeecada iyo habka rar ahaan lagu qaadayo, maamulka Kastamku waxa uu waqti kasta uga baahan karaa in badeecad laga dajiyo ama laga furo bushqada.

### **Qodobka 47<sup>aad</sup>**

#### **Saarida Badeecadda**

Badeecadda lagama saari karo meesha ay rasmiga ku tahay iyada oon fasax laga sii haysan maamulka Kastamka.

### **Qodobka 48<sup>aad</sup>**

#### **Waajibka in Loo Xilsaaro Badeecad Habraac ay Kastamadu Ogolaadeen ama Adeegsi**

Badeecadda aan u socon Soomaaliland ee la tuso kastamada waxa loo xilsaari doonaa habraac uu kastam ansixiyay ama adeegsi. Loogu talagalay badeecadda aan u socon Soomaaliland

### **Qodobka 49<sup>aad</sup>**

#### **Xadidaada Waqti ee in La Mariyo Badeecadda Habraac ay Kastamadu Ansixiyeen ama Adeegsi**

1. Haddii badeecadda lagu sheegay cadayn kooban, nidaamka lagama maarmaanka u ah si loo mariyo

habraac ay kastamadu ansixiyeen ama adeegsi waa in lagu fuliyaa:

- b) 45 maalmood oo ka bilaabmasa maalinta cadaaynta kooban loo keenay marka laga hadlayo badeecad bada soo martay;
- c) 20 maalmood oo ka bilaabmasa muddada cadaaynta kooban loo keenay marka laga hadlayo badeecad soo martay jid aan ahayn bad.
2. Haddii ay duruufuhu sidaa suurto galinayaan, maamulka kastamadu waxa ay dajin karaan muddo ka gaaban ama waxa ay ogolaan karaan in muddo kordhin loo sameeyo muddada lagu xusay farqada laad. Muddo kordhintaasi si kastaba ha ahaatee, kama badan karto, baahiyaadka dhabta ah ee ay saamaxayaan duruufuhu

## **B. KEYDINTA MUDDO GAABAN EE BADEECADA**

### **Qodobka 50<sup>aad</sup>**

### **Marxalada Badeecadda ee La KeenayKastamada Soomaaliland**

Illaa iyo waqtiga loo geeyay habraac kastamadu ay ansixiyeen ama adeegsi, badeecadda la keenay kastamada, ka dib marka la keeno, waxa ay lahaan doonaan meeqaanka badeecadeed oo si ku meel gaadh ahaana loo keydiyo. Badeecadaasi wixii halkan ka danbeeya waxa lagu sifayn doonaa **“badeecad ku meel gaadh ahaan u keydsan”**.

### **Qodobka 51<sup>aad</sup>**

### **Ansixinta Keydinta**



1. Badeecadda ku meel gaadh ahaan loo keydinayo, waxa lagu keydin doonaa oo kaliya goobaha ay ansixiyeen maamulka kastamadu, iyada oo ay shardi u tahay shuruudaha ay dajiyeen maamuladaasi.
2. Maamulka kastamadu waxa uu uga baahan karaa qofka badeecadaasi haya in uu bixiyo amaanka isaga oo hubinaya lacag bixinta dayn kastameedka oo dhalan karta ama imaan karta, sida ku cad Qaybta VII ee Xeerkan.

### **Qodobka 52<sup>aad</sup>**

#### **Rarida Badeecadda Ku Meel Gaadh ahaan u Keydsan**

Iyada oon la garab marayn farqadaha Qodobka 45aad, badeecadda ku meel gaadh ahaan u keydsan waxa lagu dabaqi doonaa keliya noocyada rar ee loo qorsheeyay si loo hubiyo illaalintooda xaalad aan waxba laga badalin iyada oon muuqaalkooda aan la badalin ama sifahooda farsamo.


### **Qodobka 53<sup>aad</sup>**

#### **Cayimaada Muddada Keydinta Ku Meel Gaadhka ah**

1. Maamulka kastamadu waxay si aan dib u dhac ku jirin u qaadi doonaan dhammaan talaabooyinka, ay ku jirto iibka badeecadda, si loo joogteeyo xaalada badeecadda taas oo nidaamyada lagama maarmaanka u ah ee loo dajiyay habraac ay kastamadu ansixiyeen ama adeegsi kaas oon lagu bilaabin muddada lagu cayimay iyada oo la raacayo Qodobka 49aad.
2. Maamulka kastamadu waxa ay, iyada oo wixii khatar ah iyo kharash ahba uu qaadayo qofka wataa, waxa ay badeecad laga hadlayo u wareejin karaan meel gooni ah, taas oo ayku kormeerayaan, illaa oo xaaladda badeecadda caadi lagu soo celinayo

## Qodobka 54<sup>aad</sup>

### Badeecadda aan Soomaaliland u socon ee maraysa Nidaamka sii Gudubka



Haddii badeecad aan u socon Soomaaliland oo maraysa nidaamka sii gudubka ay gaadhaan meesha lagu soo hagaajiyay ee xuduuda kastamada Soomaaliland lana tusay kastamada iyada oo la raacayo Xeerarka lagu maamulo gudubka, Qodobada 44aad iyo 53aad ayaa la dabaqi doonaa

## Qodobka 55<sup>aad</sup>

### Burburinta Badeecadda Taala

Haddii ay xaaladi keento, maamulka kastamadu waxa ay burburin karaan alaaba la keenay kastamka. Maamulka kastamadu waxa ay ogaysiin doonaan qofka leh badeecadda burburintaasi. Kharashka burburinta badeecadda waxa laga qaadi doonaa qofka alaabta wata

## Qodobka 56<sup>aad</sup>

### Badeecadda Soogelitaankeeda aan Laga Warhayn

Haddii maamulka kastamadu ogaado in badeecad la soo galiyay iyada oon wax fasax ah loo heysan xuduudka kastamada ee Soomaaliland ama lagu soo qabtay kormeer ay sameeyeen kastamadu, waxa laga qaadi doonaa waxii talaabo ah ee lagama maarmaan ah, oo ay ku jiraan in la gado badeecadaasi, si loo dajiyo xaaladooda.

## QAYBTA IV AAD


### Habraaca Ay Kastamadu Ansixiyeen Ama Adeegsiga

#### A. QODOBO GUUD

## Qodobka 57<sup>aad</sup>

### Qeexitaano

3. Xilliyada hakinta heshiisyadii lagu dhaqmayay, waxa loo qaadan doonaa in loo jeedo, marka laga hadlayo badeecad aan Soomaaliland u socon, habaynahan soo socda:
- gudbinta;
  - bakhaarada kastamada;
  - habaynta gudaha oo ah qaab kala dhiman;
  - habaynta ku timaada maamulka kastamada
  - Soo dejinta ku meelgaadhka ah.
4. Meelaha erayga “habraac Kastam oo leh saamayn dhaqaale” loo adeegsado, waxa loo fahmi doonaa in loo jeedo habaytan soo socota:
- Bakhaarada kastamada
  - Habaynta gudaha;
  - Habaynta hoos timaada maamulka kastamada;
  - Soo dejinta ku meelgaadhka ah;
  - Habaynta ka baxsan kastamda



### **Qodobka 58<sup>aad</sup>**

#### **Xadidaada iyo Madnuucaadka**

- Iyada oon la garab marin xaaladaha kale ee la xuso, badeecaddu waxa ay waqti kasta, iyada oo la raacayoshuruudaha dajisan, waxa loo qorshayn doonaa habraac kasta oo Kastam ansixiyay ama adeegsi iyada oon loo eegayn dabciga ama tirada, ama dalka ay ka yimaadeen, shixnada ama meesha ay ku socdaan.
- Farqada laad meesha ka saari mayso soo dejinta madnuucaadka ama xanibaadaha lagu sababeeyay iyada la raacayo mooraalka bulsho, siyaasadda caamka ah, ama nabadgalyada guud, illaalinta caafimaadka iyo nololaha bani'aadamka, xayawaanka ama dhirta, illaalinta waxyaabaha qiimaha u leh qaranka, nidaaminta sawirada, oo leh qiime

taariikheed ama asaar qadiimi ah ama illaalinta hantida warshadaha iyo hantida ganacsi



## **B. CADAYNTA KASTAMADA**

### **Qodobka 59<sup>aad</sup>**

#### **Nooca Cadaynta**

Cadaynta kastamadu waxa ay ahaan doontaa:

- a) Qoraal ahaan; ama
- b) Iyada oo la adeegsanayo hab xogta lagu nidaamiyo meelaha ay xusayaan xeer nidaamiyaha uu dajiyay Wasiirka Maaliyaddu ama meelaha ay u ogolaadaan maamulka kastamadu; ama
- c) Qaab cadayn afka ah ama fal kasta oo kale oo gofka haysta alaabtu uu ku cabiro rabitaankiisa in uu galiyo habraac Kastam, meelaha suurto galnimadaasi ay xusayaan Xeerarka uu dajiyay Wasiirka Maaliyaddu

### **Qodobka 60<sup>aad</sup>**

#### **Cadaynta Qoraalka ah**

1. Cadaymaha qoraalka ah waxa lagu samayn doonaa foom u dhigma ka rasmiga ah ee loo dajiyay ujeedadaasi. Waa la saxeeji doonaa waxana ay ka koobnaan doonaan dhammaan faahfaahinta lagama maarmaanka u ah fulinta qodobada lagu maamulo habraaca kastamada ee ay badeecadda lagu cadeeyay.
2. Cadaynta waxa la socon doonta dhammaan qoraalada looga baahanyahay fulinta qodobada lagu maamulayo habraaca kastamada eebadeecadda lagu cadeeyay.


### **Qodobka 61<sup>aad</sup>**

#### **Aqbalaada Cadaynta**

Cadaymaha waafaqsan shuruudaha uu dajiyay Qodobka 60aad waxaa aqbali doona maamulka kastamada si degdeg ah, iyada oo ay shardi tahay in badeecada la sheegayaa in la tuso kastamada.

**Qodobka 62<sup>aad</sup>**

**Shuruudaha Lagu Samaynayo Cadayn**



1. Iyada oo ay shardi u tahay Xeerarka lagu maamulayo xaqa wakiilnimo, cadaynta kastamada waxa samayn doona qof kasta oo awood u leh in uu tuso badeecdaas laga hadlayo ama ay tahay inla tuso maamulka kastamada, iyada oo ay la socdaan dhammaan qoraalada kuwaas oo looga baahan yahay in la soo saaro oo ah codsiga Xeerarka lagu maamulayo habraaca kastamada iyada oo la eegayo xaalada badeecadaasi lagu cadeeyay.
2. Si kastaba ha ahaatee;
  - a) Haddii aqbalaada cadaynta kastamku ay ku waajibiso waajib gaar ah qof gooni ah, cadayntaasi waa in uu sameeyaa qofkaasi ama cid isaga kawakiil ah;
  - b) Qofka cadaynayaa waa in uu degen yahay Soomaaliland.

Si kastaba ha ahaatee, shuruuda ah in uu aasaas ku yeesho Soomaaliland looma adeegsan doono shakhsiyaadka:

- a) sameeya cadayn ah gudbinta ama soo dejinta ku meel gaadhka ah;
  - b) Cadeeya inay badeecaddu tahay mid xili'le ah (occasional basis), iyada oo ay shardi tahay in maamulka kastamda ay tixgaliyaan in taasi loo cudur daaro.
3. Farqada 2, b) meesha ka saari mayso codsiga, Heshiisyada laba geesoodka ah ee lala galay dawladdo

ajaanib ah, ama macaamilka dhaqan ahaan ee la saamaynta ah, taas oo muwaadiniintu dalalkaasi waxa ay samayn doonaan cadaynta kastameed ee dhulka Soomaaliland, iyada oo ay shardi u tahay heshiis laba geesood ah.

### **Qodobka 63<sup>aaad</sup>**


### **Wax ka badalka La Ogolyahay**

1. Cadayntu waxa ay, marka la codsado, waxa loo ogolaan doonaa in uu wax ka mid ama laba ka mid ah faahfaahinta cadaynta, ka dib marka ay aqbaleen kastamadu. Wax ka badalku ma laha saamaynta in ay siiso cadaynta in ay ahaato mid lagu dhaqo badeecad aan ahayn kuwii ay marka horeba lagu sheegay.

Haddana, wax ka badal loo ogolaan maayo haddii ogolaansho laga dalbado madaxda kastamada.

- a) la ogaysiiyo qofka cadaynta in ay ku talo galaan in la baadho badeecadda; ama,
  - b) la aasaaso in waxyaabaha gaarka ah ee su'aashu ka taagantahay in ay yihiin qaar sax ah, ama,
  - c) La sii daayo badeecada.
2. Si loo xaqiijiyo cadaynta ay aqbaleen, maamulka kastamadu waxa ay:
    - a) Baadhi karaan qoraalada lagu maamulayo cadaynta la socota. Maamulka kastamku waxa ay u baahan doonaan qofkacadaynta samaynta in uu keeno, qoraalada kale iyada oo ay ujeedadu tahay in la xaqiijiyo saxnaanta faahfaahsan ee ku xusan cadaynta;
    - b) Waxa ay baadhi doonaan badeecadda, waxana ay tijaabo ka qaadi doonaan si ay u baadhan si loogu sameeyo baadhis faahfaahsan.

**Qodobka 64<sup>aad</sup>**  
**Burinta Cadaynta**



1. maamulka kastamadu waxa ay, marka uu codsado cadeeyuhu, waxa ay burin doonaan cadaynta mar hore la aqbalay haddii cadeeyuhu keeno cadayn in badeecadaasi lagu cadeeyay si qaldan oo ah habraac Kastam oo hoos timaad cadayntaasi ama, iyada oo ay keentay duruufo gaar ahi, in alaabta la keeno habraac Kastam oo lagu cadeeyay kaas oon loo cudur daari karin.
2. Sidaas oo ay tahay, haddii maamulka kastamada uu ogaysiiyo cadaynta qofka sameeyay rabitaankooda ah in ay baadhaan badeecada, codsi burin ah oo ka dhana cadaynta lama aqbali doono illaa ay baadhistu ay dhamaato.
3. Cadayntaasi lama burin karo ka dib marka badeecadda la sii daayo, marka laga reebo xaaladaha uu qeexo Wasiirka Maaliyaddu.
4. Burinta cadaynta waxa ay ahaan doontaa iyada oon la dhaafayn dabaqaada qodobada ciqaabeed ee dhaqangalka ah.


**Qodobka 65<sup>aad</sup>**  
**Taariikhda Aqbalaada Cadaynta**

Iyada oo la dhawrayo siyaabaha kale ee si cad loo sheego, taariikhda loo adeegsan doono ujeedooyinka ah qodobo lagu xukumo habraaca kastamada taas oo badeecadda la cadeeyay waxa ay ahaan doontaa waqtiga ay aqbalayaan cadaynta ee ay sameeyeen maamulka kastamadu.

**Qodobka 66<sup>aad</sup>**  
**Cadymaha aan Ahayn Qoraalka**

1. Haddii cadayn Kastam lagu sameeyo nidaam ah qaab loo nidaamiyo xogta oo la macno ah Qodobka 59aad, c) Qodobada 60aad illaa 63aad ayaa si isku mid ah loo

adeegsan doonaa iyada oon la garab marin mabaadiida lagu dajiyay halkaasi.



2. Haddii cadayn Kastam lagu sameeyo had ahi xogta oo la habeenayo, maamulka kastamadu waxa ay u ogolaan karaan qoraalada la socda ee lagu xusay Qodobka 60aad 2) oon la socon doonin cadaynta. Xaaladani qoraalada waxaa hayn doona maamulka kastamada.

### **C. TALAABOYINKA HUBINEED**

#### **Qodobka 67<sup>aad</sup>**

#### **Awooda Baadhida Badeecadda**

Si loo xaqiijiyo cadaynta kuwaas oo ay aqableen, maamulka kastamadu waxa ay:

- a) Waxa ay baadhi doonaan qoraalada cadaynta lagu muujinayo iyo qoraalada la socda. Maamulka kastamadu waxa ay uga baahan karaan qofka cadaynta samaynaya in uu keeno qoraalo kale iyada oo ay ujeedadu tahay in uu xaqiijiyo saxnaanta faahfaahinta ku jirta cadaynta;
- b) Waxa uu baadhi doona badeecadda waxana uu ka qaadi doonaa muunad uu ku lafo-gurayo ama baadhis dhamays tiran.

#### **Qodobka 68<sup>aad</sup>**

#### **Baadhista Kastamada**

1. Rarka badeecadda ee loo rarayo meesha lagu baadhayo muunada lagaga qaadayo, iyo dhammaan macaamilka ay waajibiyeen baadhista noocan ahi ama qaadista muunadeed, waxa qaban doona oo ka masuul ah qofka cadeeynta u heysta. Kharashka lagu galay waxa qaadi doona qofka cadaynta u heysta.



2. Qofka cadaynta lihi waxa uu xaq u leeyahay in uu goob joog ka ahaado marka badeecadda la baadhayo ama marka muunada laga qaadayo. Haddii ay lagama maarmaan noqotana, maamulka kastamadu waxa la fari doonaa qofka cadaynta leh in uu joogo ama la matalo marka badeecadda la baadhayo ama la matalayo ama muunad laga qaadayo si loo siiyo caawimada lagama maarmaanka u ah in ay fududeeyaan baadhistaasi ama qaadista muunadeed.
3. Iyada oo ay shardi tahay in muunad laga qaado iyada oo la raacayo qodobada dhaqan galka ah, maamulka kastamadu kama masuul noqon doonaan in ay magdhaw ka bixiyaan halkaa balse waxa ay qaadi doonaan dhammaan kharashaadka tijaabada iyo baadhista.

#### **Qodobka 69<sup>aad</sup>**

#### **Qayb ka mid ah Baadhista Badeecadda**

1. Haddii qayb ka mid ah badeecadda la baadho, natiijada qayb ka mid ah badeecadda waxa loo qaadan doonaa in lagu dabaqo dhammaan badeecadda lagu sheegay cadaynta.]Si kastaba ha ahaatee, qofka cadaynta wataa waxa uu codsan karaa baadhis dheeraad ah in lagu sameeyo haddii natiijada baadhista aan dhamaystirnayn aanay sax ahayn marka laga hadlayo hadhaaga kalee badeecadda ee badeecadda la cadaynayo.
2. Ujeedooyinka farqada laad, haddii foomka cadaynta lagu maamulayo laba ama in ka badan oo alaabo ah, faahfaahinta la xidhiidha shay kasta waxa loo qaadan doonaa in uu leeyahay cadayn gaar ah.

#### **Qodobka 70<sup>aad</sup>**

#### **Natiijada Xaqiijinta**

1. Natiijada lagu xaqiijinayo cadaynta waxa loo adeegsan doonaa ujeedooyinka ah in la dabaqo qodobada lagu maamulayo habraaca kastamada ee badeecadda la galiyay.
2. Haddii aan cadaynta la xaqiijin, qodobada lagu xusay farqada laad waxa loo adeegsan doonaa iyada oo lagu salaynayo faahfaahinta ku jirta cadaynta.

**Qodobka 71<sup>aad</sup>**  
**Talaabooyinka Aqoonsi**

1. Maamulka kastamadu waxa ay qaadi doonaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah si ay u aqoonsadaan badeecadda haddii loo baahdo aqoonsi si loo hubiyo in la dabaqo shuruudaha lagu xukuumayo habraaca kastamada badeecadaasi la xusay la cadeeyay.
2. qaabka aqoonsi ee la xidhiidha badeecadda ama habka safrinta waxa meesha ka saari doonaa ama waxa baabiin kara maamulka kastamada oo kali ah ama iyada oo fasax loo heysta haddii aanay, iyada oo ay ugu wacantahay duruufo aan la saadaalin karin ama masiibo dabiici ah, baabiintooda ama burburintooda ay lagama maarmaan u tahay in la burburiyo ama la baabiyo si loo hubiyo in badeecada la illaaliyo ama habka safrintooda.

**Qodobka 72<sup>aad</sup>**  
**Siidaynta Badeecadda**

1. Iyada oon la garab marayn Qodobka 73aad haddii shuruudaha in alaabta la dhigo badeecadda habraaca ay su'aashu ka taagantahay lana dhamays tiro badeecadda la sheegayana aanlugu dhaqayn talaabooyin xakamaynta ama mabnuucitaan ah, maamulka kastamadu waxa ay sii dayn doonaan

badeecadda isla marka faahfaahinta ku xusan cadaynta la xaqiijiyo ama la aqbaloo iyada oo la xaqiijin. Waxa iyana sidaa lagu dhaqi doonaa haddii xaqiijinta noocas ah aan lagu dhamays tiri karin muddo caqli gal ah badeecadaasina aanay ahayn mid looga baahanyahay in la tuso ujeedooyin la xidhiidha xaqiijin.

2. Dhammaan badeecadda uu ka hadlayo cadayntu isla mar baa la sii dayn doonaa. Iyada oo ay ujeedadu tahay farqadani, haddii foomka cadaynta lagu xuso laba ama in ka badan oo ah shayo, faahfaahinta la xidhiidha shay kasta waxa loo qaadan doonaa in ay tahay cadayn gaar ahaaneed.

### **Qodobka 73<sup>aad</sup>**

#### **Waajibinta Cashuurta Kastamda**

1. Haddii aqbalaada cadaynta Kastamka ay ka dhalato dayn kastameed, oo kor u kaca badeecadda lagu xusay cadayntu lama sii dayn doono illaa cashuurta Kastamka la bixiyo ama la damaanad qaado. Si kasta ha ahaatee, iyada oo la jabineyn farqada 2aad, qodobkani lagu dabaqi maayo soo dejinta ku meel gaadhka ah ee qayb ahaan laga daayay cashuurta soo dejinta.
2. Haddii, iyada oo la raacayo xeerarka lagu maamulayo habraaca Kastamka ee badeecadda la cadeeyay, maamulka Kastamku waxa ay dalban karaan damaanad la dhigo, badeecadaasi la xusayna lama sii dayn doono habraac kastameed ee ay su'aashu ka taagantahay illaa oo damaanadaasi la keeno.

### **Qodobka 74<sup>aad</sup>**

#### **Badeecadda aan la Sii Dayn Karin**

Talaabooyinka lagama maarmaanka ah, ee ay ku jiraan la wareegida iyo iibinta, waxa loo qaadan doonaa in ay la xidhiidhaan badeecadda:-

**a)** Aan la sii dayn karin sababta oo ah:

i) Aanay suurto gal ahayn in ay qaadaan ama ay sii wadaan baadhista badeecadda muddada hore ay u sii dajiyeen maamulka kastamadu sababo loo aanayn karo qofka cadaynta samaynaya, ama.

ii) Qoraalo ay tahay in la soo saaro inta aan badeecadda la gayn habraac Kastam oo la codsaday in la soo saaro; ama.

iii) Lacag bixin ama damaanad laga sameeyay ama la bixiyay oo khuseysa cashuurta soo dajinta ama cashuurta dhoofka, kolba sida uu xaalku yahay, taas oo dhacday ama la bixiyay muddadii loo cayimay; ama

iv) ay ku dabaqmaan mamnuucaadka ama xanibaad;

**b)** Lagaga saaro muddo macquula ka dib marka la sii daayo

### **Qodobka 75 aad**

### **Cadaynta iyo Baadhitaanka ka Horeeya La Bixidda**

1. Maamulka kastamadu waxay, iyaga oo ku socda rabitaankooda ama marka uu ka codsado qofka cadaynta wataa, waxa ay wax ka badali karaan cadaynta ka dib marka la soo daayo badeecadda.
2. Maamulka kastamadu, ka dib marka la sii daayo badeecada si ay ugu qancaan laftoodu saxnaanta faahfaahinta ku jira cadaynta, waxa ay baadhi karaan waraaqaha ganacsi iyo xogta la xidhiidha dhoofka iyo soo dejinta marka laga hadlayo badeecadda khuseysa ama macaamil hawlo ganacsi oo ku xiga oo ku lug leh badeecaddaasi. Baadhitaanka noocaas ah waxa laga fulin karaa dhismayaasha qofka cadaynta leh, waxana fulin kara oo si toos ah ama aan toos ahayn ugu lug leh hawlaha noocaas ah shaqo ahaan ama qof kasta oo kale oo gacanta ku haya dhokomanka la xusay iyo xogta ganacsi ahaan. Maamulkaasi waxa kale oo ay

baadhi doonaan badeecadda haddii ay suurto gal tahay in la soo saaro.

3. Haddii ku noqoshada cadaynta ama baadhista ka horeysa soo saarida ay muujinaso in qodobada lagu maamulo habraaca kastamada ee khuseeyay in loo dabaqay iyada oo la raacayo warbixin aan dhamays tirnayn ama aan sax ahayn, maamulka kastamadu waxa ay iyada oo la raacayo qodobada u dajisan, ay qaadi doonaan talaabooyinka ay ku soo celinayaan xaaladaasi caadigeedii.

### **Qodobka 76<sup>aad</sup>**

#### **Fududeyn**

1. Si loo fududeeyo dhamaystirka nidaamka iyo habraaca illaa iyo xadka suurtoogalka ah iyada oo sidoo kale la hubinayo in hawlaha loo fuliyo hab quman, maamulka kastamadu waxa ay, iyada oo la eegayo shuruudaha uu dajiyay Wasiirka Maaliyaddu, waxa ay fasax u siin doonaan:
  - a) In cadaynta ku xusan Qodobka 60aad in laga tago qaar ka mid ah faahfaahinta lagu xusay farqada 1aad ee Qodobkaasi qaar ka mid ah qoraalada lagu xusay farqada 2aad ee Qodobkaasi oon lifaaq u noqon doonin;
  - b) Qoraal ganacsi iyo mid maamul, oo ay weheliyaan codsi badeecadeed oo la galin doono habraaca Kastam ee su'aashu ka taaganahay, oo la geyn doono meesha cadaynta ee lagu xusay Qodobka 60aad;
  - c) c) Badeecadda habraaca su'aashu ka taagantahay la galinayaa iyada oo la marinayo diwaan galinta, xaaladaasi, maamulka kastamadu waxa ay ka dhaafi karaan shardiga in qofka cadaynayaa uu tuso badeecadda kastamada.

2. Cadaynta la fududeeyay, qoraalka maamul ama ganacsi ama galitaanka diwaanada waa in uu ugu yaraan ka koobanadaa faahfaahinta lagama maarmaanka u ah in lagu garto badeecadda. Haddii badeecadda la galiyo diwaanada, muddada galitaana waa in ay sidoo kale lagu daraa.
3. Marka laga reebo xaaladaha uu go'aamin doono Wasiirka Maaliyaddu, qofka cadaynta samaynayaa waxa uu keeni doonaa cadayn dheeraad ah taas oo ahaan doonta mid guud, muddo leh ama dabci ahaan soo noqnoqota.
4. Cadaynta dheeraadka ah iyo cadaynta la fududeeyay ee lagu xusay farqadaha 1, a), b), iyo c), waxa loo qaadan doonaa in ay yihiin isla qoraal kaliya oon qaybsami karin oo dhaqan galasa marka la aqbalo ee cadaynta la fudeydiyay, xaaladaha ku xusan farqada 1aad c), galitaanka diwaanadu waxa ay lahaan doontaa fulin sharci oo la mid ah aqbalaada cadaynta ee lagu xusay Qodobka 60aad.
5. Habraaca la fudeydiyay ee cadaymaha ee habraaca gudubka waxa go'aamin doona Wasiirka Maaliyadda.

**D. HABRAACYADA KASTAMADA**  
**U Sii Deynta Gooshitaanka Badeecadaha**

**Qodobka 77<sup>aad</sup>**

**Meeqaamka Badeecadda**

1. U sii deynta in badeecaddu si xor ah u gooshto waxa lagula macaamili doonaa badeecadda ay Soomaaliland leedahay ee meeqaamkoodu yahay marxalad kasta oo badeecad Soomaaliland ah.
2. Waxa ay u baahnaan doontaa codsiga talaabooyinka ganacsi, dhamaystirka nidaamyada kale ee ay dajiyeen

marka laga hadlayo badeecadda la soo dajiyo iyo ku dalacida wixii cashuuro ah



**Qodobka 78aad**  
**Xilliga Aqbalaada**

1. Iyada oo ay shardi tahay xadiga cashuureed ee lagu xusay Qodobka 4(14) in la dhimo ka dib taariikhda la aqbalay cadaynta si loogu sii daayo gooshitaanka xor ah balse inta aan badeecada la sii dayn, qofka cadaynta wataa waxa uu codsan karaa xadi uga nastexo badan.
2. Farqada laad laguma dabaqi doono haddii ay ahayd mid aan suurtoagal ahayn in la sii daayo badeecad asbaabooloo aanaynayo qofka cadaynta samaynaya.

**Qodobka 79aad**  
**Kala saarista Ta'riifadda**

Haddii shixnadi ka koobantahay badeecad kala ta'riifado duwan, lana xidhidha mid kasta oo ka mid ah badeecadaasi iyada oo loo eegayo ta'riifadeeda sabab la xidhiidha cadaynta waxa ay u baahan doontaa xadiga shaqo iyo kharashaadka aan ku qumanayn cashuurta dhoofka ee lagu dalacayo, maamulka Kastamadu waxa ay, haddii uu ka codsado qofka cadaynta lihi, waxa ay ku waafaqi karaan in cashuur dhoof la saaro shixnadda oo dhan iyada oo lagu salaynayo kala saarista badeecadeed ee badeecadda taas oo ugu xadi sareysa cashuurta soo dajinta.

**Qodobka 80aad**  
**Isticmaalka U dambeeya**

3. Haddii badeecad loo sii daayo in ay si xor ah u gooshto iyada oo cashuurta laga dhimay ama laga daayayba iyada oo sababtu tahay isticmaalkooda u danbeeya, waxa ay hoos iman doonaan kormeerka

Kastamada, kormeerka Kastamadu waxa uu dhammaan doonaa haddii badeecadaasi loo dhoofsho ama la baabiiyo ama haddii isticmaalka badeecadda sabab aan ahayn kuwa ku xusan adeegsiga cashuurta la dhimay ama laga daaayay ee loo ogolaaday iyada oo ay shardi u tahay cashuurta taagan in la bixiyo.

4. Qodobka 82aad iyo 84aad ayaa loo adeegsan doonaa hadba sida wax looga badalo badeecadda ku xusan farqada laad.

### **Qodobka 81aad**

#### **Badalaada Meeqaamka Kastamada**


Badeecadda loo ogolaaday in ay si xor ah u gooshtaa waxa ay meeqaamkoodaasi Kastamad lumin doontaa iyaga oo noqonaya badeecad Soomaaliland u socota haddii:-

- a) Cadaynta ah in loo sii daayay in ay si xor ah u gooshto la tirtiro ka dib marka la sii daayo;
- b) Cashuurta soo dejinta ee laga bixinayo badeecadaasi dib loo bixiyo ama la xawilo:
  - i. Habraaca nidaaminta gudaha oo ah qaabka dib ula noqoshada; ama
  - ii. Marka laga hadlayo badeecadda cilada leh ama badeecadda ku guulaysan wayda in ay waafaqdo shuruudaha heshiiska; ama
  - iii. Xaaladaha dib u bixinta ama dib u celinta ay tahay mid ku shardiyaaysan badeecadda la dhoofiyay ama dib loo ceshay ama loo habeeyay habraac u dhigma ama adeegsi.

**Gudbinta la Hakiyey iyo Saameynta habka kastamada  
Qodobo u gaarka ah dhowr hab**



**Qodobka 82<sup>aad</sup>**  
**U ogolaansho**



Isticmaalka hab kasta oo kastam ee saameya dhaqaalaha waa in ay ahaadaan qaar shuruudi ku xidhan tahay in la soo saaro ogolaanshaha ay soo saareen haa'yadaha kastamadu.


**Qodobka 83<sup>aad</sup>**  
**Xaaladahawax lagu fasaxayo**

1. Iyadoon wax loo dhimaynin xaaladaha siyaadada ah ee gaarka ah ee maamulaya habka su'aashu ka taagan tahay, ogolaanshaha lagu sheegay qodobka 82 aad iyo ta lagu sheegay qodobka 96aad waa la ogolaan karaa kaliya:-
  - a) Marka haa'yada kastamadu ay kormeeri karaan iyagoo hubinayaa habka iyadoon la sameynin isku dubaridka maamul ee saamiga quman baahida dhaqaale ee taagan.
  - b) Ashkhaasta bixiya waxkasta oo damaanada oo loogu baahdo habsami u socodka hawlahato ;
2. Badeecadda la soo dejiyo waxa loola jeedaa Badeecadda lagu soo rogay nidaam hakineed iyo alaabta taasoo, habka qaab nidaameed ee lagu dhigay qaab dhismeedka faa'idiisa iyo khasaarihiisa, ayaa maraya qaabka caadiga ah ee wareega iyo qaababka lagu sheegay qodobka 120aad.
3. Badeecadda aan la dhalan rogin waxa loola jeedaa alaabta la soo dajiyo taasoo Maraysa habnidaameedkeedii lagu dhigayay ama nidaamka uu kastamku gacanta ku hayo

**Qodobka 84<sup>aad</sup>**  
**Bedelaada Amarka**

1. Duruufaha nidaamka la isweydiinayaa loo isticmaalayo waa in lagu dejiyo ogolaanshaha.

2. Qofka sita ogolaanshaha waa inuu ogeysiiyaa masuuliyiinta kastamadda dhammaan arrimaha ka dhalanaya ka dib ogolaanshaha marka la siiyey taas oo saameynaysa socodsiintiisa ama nuxurkiisa.



### **Qodobka 85<sup>aad</sup>**

#### **Amniga**

Masuuliyiinta kastamkawaa u banana tahay in ay sameeyaan dhigidda badeecadda ku jirta joojinta gudbinteedda iyadoo ay shuruud u tahay bixinta illaalinta si loo hubiyo deynta kastamka ee ku baxi karta alaabtaasi la bixiyey. Qodobo gaara oo khuseeya bixinta illaaladda waa loo dajin karaa xaaladdaha gaarka ah ee joojinta gudubka.

### **Qodobka 86<sup>aad</sup>**

#### **Nidaam soo Dejinta**

1. Joojinta gudubka ee leh saameyn dhaqaale waa in ay dhamaadaan marka nidaamka Kastameed ee cusub ama isticmaal lagu
2. Masuuliyiinta kastamadu waa in ay qaadaan dhammaan talaabooyinka muhiimka ah si loo joogteeyo goobta badeecadda taasoo nidaamkeedda aan wali la tirtirin iyadoo la raacayo xaaladaha la sheegay.

### **Qodobka 87<sup>aad</sup>**

#### **Wareejinta Xuquuqaha iyo waajibaadyadda**

Xuquuqaha iyo waajibaadyadda shakhsiga habka kastamka ee saameynta dhaqaale leh, duruufaha ay u dejiyaan masuuliyiinta kastamku, ay tahay mid loo wareejin karo si is xigta shakhsi kale kaas oo buuxiyey shuruud kasta oo ku dhigan si looga faa'idaysto nidaamka la sheegayo.

## **GUDUBKA**

### **Qodobka 88<sup>aad</sup>**

#### **Isticmaalka Nidaamka Gudbinta**



1. Nidaamka gudubku waa inuu u ogolaaddaa dhaqdhaqaaqa meel illaa meel kale ee xuduudaha kastamka ee badeecadda aan Soomaaliland ahyn, iyadoo aan laga qaadayn badeecadaasi waajibaadkii soo dejineed iyo khidamadaha kale ama siyaasadaha xakameynta. ;
2. Dhaqdhaqaaq sida lagu sheegay qaybta I waa in ay dhacaan:
  - a) Iyadoo loo marayo habka gudubka ; ama
  - b) Iyadoo huwan ama ay saran yihiin.
  - c) Boostadda (oo ay ku jirto boostadda la sii qaado).
3. Nidaamka gudubka waa la dabaqayaa iyadoon lagu xad gudbin qodobadda gaarka ah ee lagu dhaqayo dhaqdhaqaaqa badeecadda maraysa nidaamka badeecadda ku jirta nidaamka badeecadeed ee saameynta dhaqaale leh.

### **Qodobka 89<sup>aad</sup>**

#### **Dhamaadka Nidaamka**

1. Nidaamka gudubku wuxu dhamaanayaa iyadoo waajibaaadka shakhsiga uu yahay inuu dhamaado marka badeecadda la marinayo nidaamka iyadoo dhammaan dhukmentigii loo baahnaa uu soo saaray xafiis kastameedka goobtii loo socday ku yaala si waafaqsan qodobadda nidaamkaas lasheegay. Markaana ay waajib tahay in uu buuxiyo
2. Masuuliyiinta kastamku waa in ay gabo gabeeyaan nidaamka marka ay gaadhaan meesha ay ku gaadhi karaan iyagoo ka duulaya isbarbar dhiga

xogta ay hayaan iyo ta taala xafiis kastameedka meesha loo socday taasoo ah in nidaamku ku dhamaaday si sax ah.



**Qodobka 90aad**  
**Damaanadaha**

1. Wakiishuhu waa inuu bixiyaa damaanadda si loo hubiyo bixinta dayn kasta oo kastamkaas ama dayn kasta oo lagu galay alaabtaasi.
2. Damaanaddu waa inay noqotaa laba mid uun:-
  - a) Damaanad shakhsiyeed koobsanaysa hal hawlgal gudbin
  - b) Damaanad wadareed koobsanaysa dhowr nidaam hawl gal gudub taasoo wakiishaha ay u fasaxayso inuu isticmaalo damaandasi masuuliyiinta kastamka.
3. Fasaxa lagu sheegay qaybta 2 b waa in kaliya la siiyaa qofka kaasoo
  - a) Lagu asaasay Soomaaliland
  - b) Si joogta ah u isticmaaleyaasha nidaamka gudubka ama qaar ay garanayaan masuuliyiinta kastamku in ay yihiin qaar leh awooda in ay buuxiyaan waajibkooda la xidhiidha nidaamkaasi.
  - c) Aan galin danbi laxaad leh ama soo noqnoqday oo ka dhana shuruucda kastameed iyo
4. Ashkhaasta ku qanciya masuuliyiinta kastamadu in ay yihiin qaar buuxiyay halka ugu sareysa ee shuurdaha aaminimo waa loo ogolaan karaa inay isticmaalaan damaanad wadareed oo qadar hoos loo dhigay ama damaanad laga saamaxay.

Shuruudaha dheeriga ah ee fasaxan waa in lagu daraa:

- a) Hagaag u isticmaalka hababka gudubka ee Soomaaliland muddo cayiman
- b) Wada shaqaynta masuuliyiinta kastamadda, ama
- c) Markay la xidhiidho laga dulqaadaha damaanadadeed, meel wanaagsan ka jooga dhaqaale ahaan taasoo ku filan in ay buuxiso wixii laga rabay shakhsigaas la sheegayo

Shuruucda fasaxyada ee faahfaahsan ee lagu damanaad qaaday faqraddan waxaa go'aamin doona wasiirka maaliyadda.

5. Damaanad qaadaha oo loogu fasaxay si waafaqsan faqradda 4 waa in aan lagu dabaqin hawl galada gudub ee la xidhiidha badeecadda taasoo sida lagu go'aamiyey wasiirka maaliyadda waxaa loo tix galin doonaa korodh khatar taagan.
6. Iyadoo lala eegayo mabadiida faqradda soo socta 4, dib ugu laabashadda damaanad qaadida fidsan hoos u dhigidda xadiga markay timaado xaaladda gudubku, ahaan karaa mid si ku meel gaadha loo hakiyey wasiirka maaliyadda soo rogyo dheeri ah ee xaaladaha gaarka ah.
7. Iyadoo lala eegayo mabadiida faqradda soo socta 4, dib ugu laabashadda damaanad qaadida arkay timaado xaaladda gudubku, ahaan karaa mid si ku meel gaadha loo hakiyey wasiirka maaliyadda.

### **Qodobka 91<sup>aad</sup>**

#### **Kala Noqoshadda damaanadda**

Iyadoo laga reebayo xaaladaha marka ay noqoto laga maarmaan uu go'aaminayo wasiirka maaliyaddu, damaanad looma baaahna in la keeno:

- a) Safarka hawadda

- b) Xambaarka beebabka ama xadhigcarriage
- c) Rarka tareenadda



**Qodobka 92<sup>aad</sup>**  
**Waajibaadka Masuulka**

1. Wakiishuhu waa inuu ahaadaa loo wadaha nidaamka gudubka. Waana inuu ka masuul ahaadaa:
  - a) Soo saarista badeecadda gabi ahaanba ee xafiiska meesha lagu socday ee kastamadda ee wakhtiga la cayimay iyadoo taxadir ay siinayaan masuuliyiinta kastamaddu aqoonsiyadda
  - b) Indha- indhaynta qodobadda la xidhiidha hanaanka gudubka
2. Iyadoon loo eegayn waajibaadka sitaha ee ku dhigan faq 1, sitaha ama guddoomaha badeecadda ee gudooma badeecad uu ogyahay in ay ku socoto hanaanka gudubka waxaa uu sidoo kale ka masuul yahay soo saarista badeecadda gabi ahaanba ee xafiiska kastamka ee loo socday wakhtiga loo cayimay iyadoo si taxadir leh loo eegayo dhamaanba talaabooyinka ay isku raaceen masuuliyiinta kastamka si loo hubiyo

**Qodobka 93<sup>aad</sup>**  
**Qawaaniin iyo reebitaano faahfaahsan**

Xeerarka faahfaahsan ee nidaamka hawl gal iyo reebitaanadda waxaa go'aan ka gaadhi doona wasiirka maaliyadda.

**E. BAKHAARADA KASTAMADA**

**Qodobka 94aad**  
**Habka isticmaalka**



1. Habka bakhaar dhigidda kastamka waa inuu ogolaaddaa kaydinta badeecadda aan soomaaliland ahayn, iyadoon badeecadaasi aan laga qaadi doonin cashuurta soo dejinta takaaliifaha kale ee siyaasad ganacsi soo rogtay.
2. Bakhaarada kastamka waxaa loola jeeddaa meel kasta oo ay ansaxinteedda iyo kormeerkeeddaba leeyihiin masuuliyiinta kasatamaddu meeshaas oo lagu kaydin karo badeecadda iyadoo la raacayo shuruudaha loo dajiyey.
3. Xaaladaha kuwaasoo badeecadda lagu sheegay faqrada laad la dhigi karo hanaanka bakhaarada kastamka iyadoo la raacayo waa in uu gooyaa wasiirka Maaliyaddu.

**Qodobka 95aad**  
**Qaybaha kala duwan ee Bakhaarada**


Bakhaarada kastamku wuxuu noqon karaan qaar dawliya iyo qaar gaar loo leeyahay midkood:-

- a) Bakhaar dawliya waxa loola jeedaa bakhaarka kastamka ee loo diyaariyey inuu qof kastaa dhigto badeecadda
- b) Bakhaar gaar loo leeyahay waxa loola jeedaa bakhaar kastam ee dad gaar ahi ku kaydsadaan badeecaddooda

Bakhaar hayuhu waa shakhsiga amarka ku haysta inuu ka hawl galo bakhaarka kastamka.

Dhigtuhu waa inuu ahaadaa shakhsiga isagoo fulinaya amarka sheegaya inuu mariyo dhigo badeecadda hanaanka bakhaarka kastamka ama ka xaqa iyo wajibaadka shakhsiga ahloo wareejiyey.

**Qodobka 96<sup>aad</sup>**  
**Amar fasax**



1. Hawl galka bakhaarka kastamku waa in loo helo fasax ay soo saareen masuuliyiinta kastamku, haddii aan masuuliyiintaasi laftoodu aanay u shaqayn bakhaarka kastamka.
2. Shakhsi kasta oo doonaya bakhaarka kastamka waa inuu soo qortaa codsi qoran oo ay ku qoran tahay warbixinta looga baahan yahay si loogu ogolaado.
3. Shuruudaha waxa lagu cadaynayaa habka uu u isticmaalayo bakhaarka.
4. Ogolaanshaha kaliya waxa loo siin karaa kaliya ashkhaasta ka asaasan Soomaaliland.

**Qodobka 97<sup>aad</sup>**

**Waajibaadka Bakhaar Hayayaha**

Bakhaar hayuhu wuxuu masuul ka yahay:-

- a) Inuu hubiyo badeecadda bakhaarka taal in aan amar la'aan lagu saari karin
- b) Inuu fuliyo bakhaar hayuhu waajibaadka badeecadda taala bakhaarka isagoo raacaya nidaamka u yaala kastamada
- c) Inuu raaco amarada gaarka ah ee masuuliyiinta kastamka

**Qodobka 98<sup>aad</sup>**

**Masuuliyadda Loo Kaydiyaha**

1. Dariiqadda ay sheegayso qodobka 97aad halka awood siintu ay khusayso bakhaarka iyo masuuliyada sida ku cad qodobka 97aad (a iyo b), waxay khusaynaysaa loo kaydiyaha.
2. Loo kaydiyuhu wuxuu had iyo jeer masuul ka yahay waajibaadka ka imanaya dhigista badeecadda sida ku cad nidaamka bakhaarka kastamka.



## **Qodobka 99<sup>aad</sup>**

### **Xawilaadda Shuruucda iyo Waajibaadka (Wareejinta)**

Bakhaar hayaha waxa lagu badali karaa qof kale iyadoo la raacayo shuruucda iyowaajibaadka kastamka.



## **Qodobka 100<sup>aad</sup>**

### **Damaanad**

Iyadoon la jabin qodobka 85aad maamulka kastamku wuxuu u baahan yahay inuudamaanad buuxda ka helo bakhaar hayaha sida ku cadqodobka 97aad

## **Qodobka 101<sup>aad</sup>**


### **Diwaan-galinta Badeecadda**

1. Qofka maamulka kastamku u magacaabo, wuxuu diwaan galinayaa badeecadaha taala bakhaarka isagoo gelinaya foomam sharciyaysan oo kastamku leeyahay. Daruuri maaha in bakhaarada dadwaynaha la dhigo badeecadda.
2. Iyadoo la tixraacayo qodobka 83aad, maamulayaasha kastamku waxay diwaan galinayaan badeecadda taal bakhaarka iyadoo la raacayo qodobka 97aad (a,b) lana fulinayo oo la marayo shuruucda kastamka sida foomka caddaynta ee badeecadda.

## **Qodobka 102<sup>aad</sup>**

### **Kaydinta Badeecadda**

1. Baahi dhaqaale meesha ay jirto, kastamkana aanay saamayn ku lahayn, maamulka kastamku waxa uu ogolaanayaa:

- 
- a) Iyadoo la raacayo amarka maamulka kastamka, badeecadda waxa la dhigayaa bakhaarka
- b) Badeecadda aan Soomaaliland lahayn waxa la dhigayaa agagaarka bakhaarka iyadoo la raacayo nidaamka badeecadaha soo dega. Badeecaddahaasi waxay ku bixi karaan amarka wasiirka maaliyadda
- c) Badeecadaha aanay Soomaaliland lahayn waxa la dhigayaa agagaarka bakhaarka iyadoo la raacinayo nidaamka badeecadaha hubinta kastamada, badeecadahaasi waxay ku bixi karaan amarka Wasiirka Maaliyada.
2. Xaaladaha aan ku xusnay (1), badeecaddaasi ma marayso nidaamka bakhaarka ee kastamka.
3. Maamulka kastamku waxa uu u baahnaan karaa badeecadda ku qoran (1) in la diwaan galiyo sida ku xusan qodobka 101aad.

### **Qodobka 103<sup>aad</sup>**

#### **Habka diwaan-galinta Badeecadaha**

Marka la keeno badeecad bakhaarka kastamka, badeecadaas waala diwaan galinayaa sida waafaqsan sharciga iyo nidaamka kastamka ee ku xusan qodobka 101aad.

### **Qodobka 104<sup>aad</sup>**

#### **Xadaynta Wakhtiga**

Wax xadaynayaa ma jiro muddada badeecaddu ay bakhaarka kastamka oolayso. Si kastaba ha ahaatee maamulka kastamku wuu xadayn karaa oolitaanka badeecadaasi taala bakhaarka kastamka, qofka badeecadda lehna waxa la siin karaa heshiis cusub.

### **Qodobka 105<sup>aad</sup>**

## **Foomamka lagu Isticmaalayo Badeecadda**

1. Badeecadda soo degta waxa la galinayaa foomamka caadiga ah ee ay ku tiilay si loo xafido.
2. Foomamka ku xusan (1) waa inay ahaadaan kuwo maamulka kastamku hore u sharciyeeyey.
3. Foomamka ku xusan (2) waa inay noqdaan foomam uu hore u soo sharciyeeyey wasiirka maaliyaddu

### **Qodobka 106<sup>aad</sup>**

#### **Badeecad si ku Meel Gaadha loo Saaray**

Marka ay duruufi timaado, badeecaddii hore u taalay bakhaarka kastamka, si ku meel gaadha waa loo saari karaa iyadoo la raacayo amarka maamulka kastamka. Badeecadi marka ay dibada taalo, waxa la galinayaa foomamka ku xusan qodobka 105aad.

### **Qodobka 107<sup>aad</sup>**

#### **Wareejinta Badeecadda**

Maamulka Kastamadu waxay ogolaan karaan in badeecad loo dhigay habka Bakhaarka Kastamada, loo wareejiyo Bakhaar kale oo Kastam.

### **Qodobka 108<sup>aad</sup>**

#### **Galitaanka Qaan Kastam ( Dayn)**

1. Marka ay dhacdo in qaan kastam lagu galo badeecad soo degtay, iyadoo qiimaha badeecadaas ku salaysantahay sicirka dhab ahaan laga soo bixiyey badeecadaas- ama - sicirka laga bixin doono , taas oo ay ku jirto kharashka bakhaar dhigista , hagaajinta , iyo tayeynt , muddada ay taalo bakhaarka, Kharashyadaas oo aan loo baahnayn in logu daro qiimeynta kastamka haddii ay si gooniya loogu qoray oo ka baxsan sicirka badeecadda laga soo bixiyey - ama laga bixin doono.

2. Haddii badeecadda kor ku xusani ay soo martay habka loo yaqaan (USUAL FORM OF HANDLING) oo macnaheedu yahay sida ku qeexan qodobka 105aad nooca badeecaddaasi, qiimaha iyo tirrada la qaadan doono marka la soo saarayo cashuurta soo dejinta haddii uu soo codsado” soo dejiyuhu “ in aanay soo marin habka “ usual form of handling “ sidaasna loogu cashuurayo. Inkastoo dhaqan gelinta qodobkan loo raacayo xeer nidaamiga uu soo saarayo Wasiirku.
3. Badeecaddii laga bixiyay cashuurta ku waajibtay waa la sii daynayaa iyadoo la raacayo nidaamka kastamka u dhigan haddii ay is waafaqaan cosdsiga soo dejiyaha iyo habka qiimaha alaabta iyo nidaamka loo raacay

## **F. NIDAAMKA LASOO GELISTA**

### **Qodobka 109<sup>aad</sup>**

#### **Ku Dhaqanka Nidaamka**

1. Iyadoo aan la jabin qodobka 110aad, nidaamka gudaha ee raacayaa waxa uu ogolaanayaa in badeecad lagu isticmaali karo Soomaaliland hal mar iyo wixii ka badanba
  - a) Badeecad aan Soomaaliland lahayn oo dib loo dhoofinayo, waxa loo raacayaa nidaamka kastamka u degsan.
  - b) Badeecad la sii daayay oo cashuurteeda la bixiyay oo dib u dhoofaysa, waxa loo raacayaa nidaamka kastamka u degsan
2. Ereyadan soo socdaa waxay leeyihiin macnayaashan:
  - a) Qaabka hakinta nidaamka gudaha waxa loo raacaya 1(a)
  - b) Qaabka dib u celista nidaamka gudaha waxa loo raacaya 1(b)

c) Habka hawl fulineed ka

- *Badeecadaha shaqayntooda waxa ka mida qoqomin , isugayn iyo isku xidh – xidhista alaaboyinka*
- *Farsamaynta badeecadda iyo*
- *Dayactirka badeecadda waxa ka mida xarayntooda iyo isku hayntooda nidaamkan.*
- *Badeecadaha uu gaarka u tilmaaman Wasiirka maaliyadda kaas oo aan ku jirin kuwa magdhowga leh laakiin wax soo Saar leh.*



- d) Wax soo saarka magdhawga leh: dhammaan natiijada farsamaynta shaqo
- e) Badeecadaha isu dhigma alaabta Soomaaliland ee u dhiganta halkii alaabta soo degta ee waradaysan
- f) Qiyaasta laga helaayo: boqolkiiba inta laga helayo magdhowga wax soo saarka alaabta farsamaysan ee soo degta.

### **Qodobka 110<sup>aad</sup>**

#### **Badeecaddaha Isu-dhigma**

1. Marka la fulinayo shuruudaha ku yaal qodobada 2 iyo 4, maamulka kastamku wuxuu ogolaanayaa:
  - a) badeecadaha isu dhigma waxa lagu bixinayaa si isleeg
  - b) badeecadaha isu dhigma ee dib loo dhoofinayo waxa lagu bixinayaa si isleeg
2. badeecadaha isu dhigma waa in ay isku nooc ahaadaan, amarka xaaladaha gaarka ah waxa bixinaya wasiirka maaliyadda
3. marka la bixinaayo qaybta (1) badeecadda soo degtay waxa loo tixgalinayaa sida uu qabo sharciga kastamka ee isku dhignaanta badeecaddaha

4. Badeecaddaha mamnuucaadka ah ee xaalado gaara ah ku yimaada ee ku xusan (1) waxa loo cuskanayaa amarka wasiirka
5. Sida qodobada laad faqrada (b) sheegayo, badeecadda dhoofaysa waxa ku waajib ah in laga qaado cashuurta dhoofinta (Export Duty) Haddii aan dib u dhoofin lagu samayn uu farsameynta Gudaha ka bacdi , qofka haysta ogalaansho waxa looga baahan yahay in uu soo dhigo damaanad ah in uu ku bixin doono cashuurta badeecaddaas kaga waajibi doonta.

#### **Qodobka 111<sup>aad</sup>**

#### **Dalab Awoodee**

Qofka badeecadda sitaa marka uu keeno codsigiisa, waxa amar lagu bixinayaa in loo fuliyo hawshiisa

#### **Qodobka 112<sup>aad</sup>**

#### **Bixinta Awooda**

Amarka waxa lagu bixinayaa oo kaliya:

- a) Dadka degan Soomaaliland iyo kuwa aan deganaynba waxa lagu ixtiraamayaa in awood sharci leeyihiin
- b) Iyada oo aan la jabin badeecad la dalbaday ee ku xusan qodobka 109aad faqradiisa c) badeecadda soo dagtay waxa lagu cadeeyay qodobka 110aad iyadoo la cadaynayo xaaladaha ay ku sugan tahay badeecaddu.
- c) Nidaamka ay bakhaarka u soo galaan badeecadd dib u dhoofaysa ama la dhoofinayo oo ay ku xeeran yihiin duruufo dhaqaale waxa go'aankeeda iska leh wasiirka maaliyadda

#### **Qodobka 113<sup>aad</sup>**

## **Mudada Dib u Dhoofinta**

1. maamulka kastamku wuxuu cayimayaa mudada dib loogu celinayo alaab la soo badalayo taasoo go'aan dambe laga qaadanayo mudada
2. badeecadda aanay Soomaaliland lahayn, muddada ay bakhaarka kastamka oolayso waxa samayn kara maamulka kastamka iyadoo loo fududaynayo ganacsadaha badeecadda sita
3. Iyadoo la tix raacayo Qodobada 110 (1,b) maamulka kastamku wuxuu cayimayaa in badeecadda aanay Soomaaliland lahayn ee taala bakhaarka la siiyo muddo cayiman. Mudadu waxay ka bilaabmaysaa maalinta la ogolaado codsigiisa dib u dhoofinta ee alaabta magdhawga ee isku dhiganta.
4. Xiliyadda duruufaha gaarka ah waxa mudada cayimaya wasiirka maaliyadda.

### **Qodobka 114<sup>aad</sup>** **Qadarka Cashuurta**

1. Maamulka kastamku waxa uu dejinayaa qadarka cashuurta, waxaanu dhigayaa meesha ku habboon. Qadarka cashuurta waxa lagu salaynayaa duruufaha kolba taagan.
2. Marka ay duruufuhu Saamaxaan, qadarka cashuurta waxa lagu bixinayaa nidaamkakastamku lahaa ee la Mari jiray.

### **Qodobka 115<sup>aad</sup>**

#### **Badeecad aan Xaaladeeda la Badali Karin**

Badeecaddaha ku sugan xaaladaha aan la badali Karin, ama aan badeecadda magdhabka ah go'aanka lagu sii daynayo waxa iska leh wasiirka maaliyadda.

### **Qodobka 116<sup>aad</sup>**

## **Sixid Deyn Kastam**

1. Iyadoo la tixgalinayo qodobka 119aad, khalad dhacay marka la saxayo, waxa dib loogu noqonayaa badeecaddii iyo foomamkii cadaynta si dib loo saxo Iyadoo la raacayo sharciga kastamka u yaal
2. Iyadoo la tixraacayo (1) waxa dib loo saxayaa badeecaddii lagu khaldamay waxaana la
3. Waafajinayaa ta'riifadda Iyadoo haddii laga waayo ta'riifadda lagu cashuurayo ta ugu dhaw

## **Qodobka 117<sup>aad</sup>**


### **Badeecad la Celinaayo**

Tixraac qodobka 116aad ee badeecadda khaladkeeda la saxay:

- a) waxa lagu salaynayaa cashuurta soo dejinta, iyadoo meesha ay ka muuqata foomamkii cadaymaha ee wasaaradda maaliyadda Iyadoo la barbar dhigayo qaybtii dhoofinta ee badeecadda la celinaayo (Compensation) si kaste ha ahaate waxa la waydiinaya cashuurta la qiimeeyay wax soo saarka sida ku cad qodobka 116aad
- b) Cashuurta waxay ku dhacaysaa cashuurta soo dajinta Iyadoo la raacayo xeerka u dejisan nidaamka kastamka:
  - i. Qofka ay khusayso wuxuu codsanayaa in loo sameeyo sida ku cad qodobka 116aad
  - ii. Xaaladaha badeecadda la isku badalay waxay ku dhacaysaa wixii ku waajibay cashuurta soo dejinta in leeg ayuu bixinayaa sida ku cad qodobka 116aad
- c) waxa loo raacayaa xeerarka qiimaynta kastamka ee ku cad habraaca habka hubinta kastamada



- d) Waxa loo raacayaa ta'riifada haddii la waayana ka ugu dhaw ee u eeg ayaa la qaadanayaa.
- e) Waxa la ogolaanayaa in lagu sii daayo cashuur dhaaf haddii ay jiraan kuwo hore oo la mida.



### **Qodobka 118<sup>aad</sup>**

#### **Dhoofin ku meel Gaadh ah**

1. Badh ama gabi ahaanba badeecadda la xanibay ama badeecadda aan la badalayn si ku meel gaadha waa looga dhaafin karaa iyadoo looga danleeyahay nidaam Marin dheeriya oo ka baxsan xuduudaha kastamka ee Soomaaliland haddii ay ogolaadaan masuuliyiinta kastamka, si wafaqsan shuruudaha u yaala nidaamka bixida.
2. Haddii la galay dayn kastam marka la soo dejinayay alaabtaasi, waxaa la saari doonaa:
  - a) Cashuurta soo dajinta alaabta la magdhabayay ama badeecadda aan la soo badalin ee lagu sheegay faqradda 1, ee lagu xisaabiyey si waafaqsan qodobka 116aad iyo 117aad ,iyo
  - b) Cashuurta soo dejinta alaabta dib loo soo dejiyay ka marka la soo mariyey meel ka baxsan xuduudaha kastamka ee Soomaaliland, qadarka la xisaabiyey waa in lagu xisaabiyaa si waafaqsan qodobadda la xidhiidha habka nidaamka bixista shuruud la mida ta lagu dhaqayo alaabaha la dhoofinayo si waafaqsan nidaamka dambe ee loo saaray isu gudub lacag la'aan ah ka hor intaanay dhoofintaasi dhicin.

### **Qodobo Gaara Oo La Xidhiidha Nidaamka La Bixista**

#### **Qodobka 119<sup>aad</sup>**

#### **Qaabka Dib- u Celinta**

1. Qaabka dib u celinta waa loo isticmaali karaa badeecadaha oo dhan, waa in aanay, ahayn, mid la isticmaali karo, wakhtiga ogolaanshaha bixista isu gudubka lacag la'aanta ah.
  - a) Alaaabta soo degaysa waxay mutaysanaysaa xadidaadaha soo degista ee xaga tirada. ,
  - b) Ta'riifadda lagu soo rogay ee cayiman ayaa lagu dhaqayaa badeecadda soo degaysa ama ,
  - c) Cashuurta dhoofinta ee la laba jeer bixiyey ama cashuurta loo gooyey alaabta la magdhabyo.
2. Waxaa dheer, gadaal ka bixinta cashuurta soo dejinta ee qaabka bixista waa suurto gal, wakhtiga dhawaqa bixista alaabta la magdhabyo la ogolaaddo, cashuur gadaal ka bixin loo sameeyo.
  3. Waxa xadidaad ku sameyn Kara faq 1 iyo 2 wuu soo saari karaa wasiirka maaliyaddu.

### **Qodobka 120<sup>aad</sup>**

#### **Waxyaabaha Gaar loo sheegayo**

1. Cadaymaha alaabtu ku baxayso waxa la soconaya amar gaar ah.
2. ka dib codsiga maamulka kastamka , ogolaanshaha waxa lagu dajinayaa cadaynta badeecadda la sii daayay.

### **Qodobka 121<sup>aad</sup>**


#### **Waxyaabaha ka Reeban Habka Dib-ula-bixista**

Nidaamka dib ula bixista, Qodobka 110, 1) b), 3) and 5), Qodobka 113, 3), Qodobkas 115 and 116, Qodobka 117 c), and Qodobka 124 laguma dabaqayo.

### **Qodobka 122<sup>aad</sup>**

#### **Dhoofinta qaabka dib ula bixista ku meel gaadhka ah**

Dib u dhoofinta alaabta la magdhabayo ee loo qaaday sida ku sheegan Qodobka 118aad, 1) looma tix galin doono dhoofin. Marka laga reebo markay alaabtaasi aanay ahayn mid dib loogu soo dajinayo Soomaaliland muddo cayiman.



**Qodobka 123aad**  
**Dib u bixin ama dhimis**

1. Loo fasaxaha waa la waydiisan karaa in cashuurta soo dejinta mar labaad la bixiyo ama la soo diro haddii ay sidaasi qanciso masuuliyiinta kastamka markay alaabta soo degtay ee loo sii daayey isu gudubka qaabka dib ula bixista oo u qaab alaab la magdhabayo leh ama alaab aan la bedelin oo ah laba mid uun:
  - a) Mid la dhoofinayo , ama
  - b) Haddii ay dib u dhoofayso oo ay marayso nidaamka gudubka badeecadaha, waxa la marinayaa nidaamkii bakhaarka, sida soo dejinta ku meel gaadhka ah (Supportive Arrangement). Shuruudaha oo dhami waa inay fulaan.
2. 2. Iyadoo loo eegayo in loo sameeyey hab dhaqan kastameed ansax ah ama isticmaal ee lagu sheegay qaybta labaad ee faqradda 1, alaabta la magdhabayaa ama badeecadda aan la badelin waa in loo tixgalinayaa badeecad aan Soomaaliland ahyn.
3. 3. Muddada ay tahay in codsiga dibu bixinta la sameeyo waxaa goynaya wasiirka Maaliyadda.
4. Iyadoon waxba loo dhimeyn tilmaamaha b) ee Qodobka 116aad, haddii alaabta la magdhabayaa ama badeecadda xaaladda aan la badelin la mariyo nidaamka kastamka si waafaqsan qodobka 1 la soo fasaxo isu gudub , qadarka cashuurta dib loo bixinayo ama la dhiibay waa in loo tixgaliyaa qadarka daynta kastamka.

Iyadoo looga danleeyahay go'ynta qadarka cashuurta soo dejintu in ay ahaato mid dib loo bixiyey ama la dhiibay Qodobka 117aad, waa in loo maraa si isku mida.



### **Qodobka 124aad**

#### **Cashuur Dhaafka Badeecadda Dhoofaysa**

Soo galinta farsameyneed ee nidamka, lagu dhaqayo hanaanka waa in uu sidoo kale si ay ugu gudubto alaabta dib loo hagaajinayo Nidaamka galista si loo soo hagaajiyo way u gudbi heli kartaa dhafista cashuurta dhoofinta taasoo alaab la nooc ahi ay ka heshay Soomaaliland

### **Habka Ku Hubinta Nidaamka Kastamka**

#### **Qodobka 125aad**

##### **Ku Dhaqanka Nidaamka Kastamka**

Nidaamka sii habaynta ee masuuliyiinta kastamadda waa in ay u ogolaadaan badeecadaha aan Soomaaliland ahayn in loo isticmaalo xuduudaha kastamka ee Soomaaliland hawl gal badelaya noocooda iyo xaaladoodaba, iyagoon laga qaadi doonin cashuurta soo dajinta ama siyaasadaha lagu culaysiyo ganacsi ahaan ee kale, iyadoo ay tahay in ay u ogolaadaan alaabtaasi ka dhalatay hawl galkaasi in gasho isu gudubka badeecadaha cashuur soo dejineed oo ku habboon. Alaabtaasi waxa loogu yeedhi doonaa alaabaha la sii habeeyey.

#### **Qodobka 126aad**


##### **Duruufo gaara**

Xalaadaha iyo duruufaha gaarka ah ee uu marayo nidaamka sii habaynta ee masuuliyiinta kastamku waa loo isticmaali karaa waxaana go'yn doona wasiirka maaliyadda.

## **Qodobka 127<sup>aad</sup>**

### **Amar fasax**

Amarka masuuliyiinta kastamka ee habaynta waa la damaanad qaadayaa ka dib codsiga shakhsiga fulinaya habeynta ama isku dubaridka iyada si loo sii wado.



## **Qodobka 128<sup>aad</sup>**

### **Ogolaansho Fasax siin**

Fasax waxa la siin karaa kaliya:

- a) Shakhsiyaad laguaasaasay;
- b) Marka badeecadda la soo dejinayo loo garto in ay yihiin alaab la habaynayo/warshadaynayo ;
- c) Marka badeecadda aan dhaqaale ahaan dib loo sii habayn Karin noociyadoodii ama xaaladooddii siday ahayaan markii ay mareen habka.
- d) Marka marista habku aanu sababaynin wax isdaba marin lagu la kaco xeerarka khuseeya asalka iyo tiradda la xakameeye ee lagu dhaqayo badeecadaha la soo dejinayo. ;
- e) Marka habka Shuruudaha daruuriaga ee caawinaya dhisida iyo hanashadda alaabta la habaynayo ee Soomaaliland iyadoon si baahsan wax loogu dhimaynin danaha laaab la mid ah soo saareyaasha la midka ah ee Soomaaliland(shuruudo dhaqaaleedyo) la buuxiyo.
- f) Xaaladaha loo qaadan karo in la buuxiyey shuruudo dhaqaaleedyadda waxaa go'yn doona wasiirka maaliyadda.

## **Qodobka 129<sup>aad</sup>**

### **Marxaladda Dajinta Badeecadaha**

Qodobka 113, 1), 2) iyo 4) iyo Qodobka 114 waa in lagu dhaqaa xaaladaha isku midka ah.



### **Qodobka 130<sup>aad</sup>**

#### **Galista daynta kastamadda**

Marka dayn kastamdeed ka dhalatay badeecadda aan nooceda la dhalan rogin ama ku jirta heerka dhexe oo la barbar dhigay laguna ansaxiyey ogolaanshaha, qadarka dayntaasi waa in lagu gooya qadarka la saarayo shay kasta ee fuuli kara badeecadda soo degtay, wakhtiga la aqbalayo codsiga lagu dalbanayo badeecadda ee nidaamka kastamka.

### **Qodobka 131<sup>aad</sup>**

#### **Hab dhaqanka la kala doortay**

Markay badeecadda la soo dejinayo u qalanto habdhaqan tix galin gaara marka la marinayo habka habeynta ee masuuliyiinta kastamka, iyo habdhaqanka gaarka ah ay tahay mid lagu dhaqayo alaabaha la midka ah alaabta la soo habeeyey ee loo sii dayey suuqa, cashuurta soo dejinta taasoo alaabta ku waajibtay waana in lagu xisaabiyaa qadarka waajib habdhaqankaasi

Marka habdhaqanka ta'riifadda ee lagu sheegay faqradda 1 ee la taxaluqdda badeecadda soo degaysa ay mutaysatay xadidaad ta'riifadeed ama liisto ta'riifadeed , ee lagu dhaqayo qadarka cashuurta ee lagu sheegay faqradda 1 ee la xidhiidha alaabta la habaynayo waa in iyadana loo eegaa shuruudaha habdhaqanka ta'riifadeed ee la doorbiday lagu dhaqayo badeecadda soo degaysa wakhtiga la ogolaaday suuq galinteeda . Xaaladda tiradda badeecadda soo degaysaa si dhab ah loogu isticmaalayo soo saaraha. Xaaladan tirada badeecadda soo dagaysa waxa la marinayaa habkii ta'riifta waana la cashuurayaa ka dibna waa la fasaxayaa.

### **Qodobka 132<sup>aad</sup>**

#### **Soo dejinta ku meel-gaadhka ah**

Habka soo dejinta ku meel gaadhka ah, waa in loo ogolaadaa, alaabta soo gashay Soonaha Kamstamada Soomaaliland, gabi ahaanba ama qayb ahaan in laga dhaafo cashuurta soo galista iyadoo aan la marinayn, siyaasado ganacsiga lagu xakamaynayo

### **Qodobka 133<sup>aad</sup>**

#### **Ogolaanshaha Ganacsi**

Waa in lagu ogolaadaa ka dib codsiga shakhsiga, kaas oo alaabta/badeecadda u isticmaalaya ama u diyaarsaday inuu adeegsado

### **Qodobka 134<sup>aad</sup>**

#### **Kala saarida alaabta/badeecadda**

Masuuliyiinta Kastamadu waa ay diidi karaan, ogolaanshaha habka soo dejinta alaabta ee kumeel gaadhka ah, marka aanay suurta gal ahayn in la saxo, oo la garto alaabta soo degaysa. Haddaba masuuliyiinta kastamku way ogolaan karaan, isticmaalka habka soo dejinta alaabta ee ku-meel gaadhka ah iyagoo aan aqoonsanin Alaabtaas/Badeecaddaas, marka ay la noqoto in alaabtaa noocyadeeda ama hawlgalka lagu isticmaalayaa, ay ka maqan tahay talaabooyinkii lagu ogaanayay ama lagu hubinayay nooceeda, aanu ahayn mid dhalinaya ku xad gudub nidaam.

### **Qodobka 135<sup>aad</sup>**

#### **Muddada dib u dhoofinta**

1. Masuuliyiinta kastamka ayaa qoondaynaya, muddada gudaheeda ay alaabta la soo dhoofiyay dib looga dhoofinayo, ama la siinayo habdhaqan kastameed oo cusub ama isticmaal. Muddadaasi waa

in aanay ka badan muddada ogolaanshaha loo siiyay.

2. Iyadoo aan lagu xad gudbayn muddada gaar ah ee loo qoondeeyay si waafaqsan qodobka 136aad, muddada ugu badan ee alaabi ay si ku meel gaadh ah ugu sugnaan karto, habka soo dejinta ee ku-meel gaadhka waa 24-bilood. Haddaba, muddo intaa ka gaaban, waa la isku waafiqi karaa, hadduu ogolaado qofka ay khusaysaa.
3. Haddaba, marka ay duruufo gaar ahaaneed daruuri ka dhigaan, masuuliyiinta kastamku ka dib shakhsiga codsaday, way kordhin karaan wakhtiga ama muddada lagu sheegay faqrada 1, 2, si ay u ogolaadaan, isticmaalka haddii ay suura gal noqoto.

### **Qodobka 136aad**

#### **Shuruudaha ka dhaafista buuxda.**

Xaaladaha iyo shuruudaha gaarka ah, ee habka soo dejinta ku meel gaadhka ah loo isticmaali karo, in si buuxda looga dhafo, cashuurta soo dejinta waxa goyn doona, wasiirka wasaaradda Maaliyadda.

### **Qodobka 137aad**

#### **Badh ka dhimis/Ka Dhaafis**

1. Isticmaalka habka soo dejinta ku meel gaadhka ah, ee badh lagaga dhaafayo cashuurta soo dejinta waa in la siiyaa, iyadoo la tix-galinayo alaabta aan ku xusnayn, qodobada, ansaxa ah ee waafaqsan qodobka 136 ama ku jira qodobadaasi, laakiin aan buuxinin shuruudaha halkaas ku qoran, ee siinta soo dejinta buuxda.
2. Liiska alaabta ee aan loo tixgalin doonin, habayaraatee habka soo dejinta, looma isticmaali doono iyadoo loo eegayo shuruudaha, habka loo



adeegsan doono, ama loo isticmaali doono waa inuu gooyaa wasiirka maaliyaddu



### **Qodobka 138<sup>aad</sup>**

#### **Bixinta Cashuurta iyo xaaladaha badh ka dhimista**

1. Xadiga cashuureed ee ku waajibay, alaabta/badeecada, maraysa habka soo dejinta ee badh ka dhaafista, waa in uu ku salaysnaado 3% bil kasta ama bilo kala duwan, oo ay alaabtu taalay, habka soo dejinta ee badh ka dhimista ee qadarka cashuureed ay ahayd in laga bixiyo,
2. Badeecaddaa la sheegayo, haddii ay tahay mid loo fasaxay suuqa, isla markii ay soo gashay, habka soo dejinta ee ku meel gaadhka ah.
3. Qadarka cashuurta soo dejinta ee la saarayaa waa in aanu ka badnaan, xadiga la saari lahaa, haddii alaabtaa gaarka ah, loo sii dayn lahaa suuqa, isla wakhtiga ay soo gashay habka soo dejinta eek u meel gaadhka ah iyadoo aan loo xisaabinayn dul saarka ku waajibi kara
4. Wareejinta xuquuqaha iyo waajibaadyada ka dhashay habka soo dejinta ee ku meel gaadhka ah ee ku dhigan qodobka 87, loogama jeedo, ka dhaafis la mid ah, in loo suurta galiyo, muddo kasta oo isticmaal.
5. Marka wareejinta ku xusan faqrada 3, loo sameeyo labada qof ee loo ogolaaday isticmaalka habka, inta lagu gudo jiro isku bil, qofka la siiyay ogolaansho bil ah, waa ku waajib in uu bixiyo qadarka cashuurta soo dejinta ee lagu leeyahay gabi ahaanba bishaas.

### **Qodobka 139<sup>aad</sup>**

#### **Deyn ka gelid Kastam**

1. Marka deyn kastam lagu galo, alaab soo dejin, qadarka alaabtaas, waa in lagu gooyo iyadoo sal looga dhigayo, mabaa'diida cashuureed ee ku habboon alaabtaas, wakhtiga ogolaanshaha waydiisashada marista habka soo dejinta ee ku meel gaadhka ah. Haddaba, marka qodobka 136aad uu sidaas sheegay qadarka deynta ee ku habboon, waxa lagu salaynayaa mabaadii'da cashuureed ee ku habboon alaabtaas la sheegayo, wakhtiga uu kastamku alaabtaasi ku soo dhamaatay, taas oo ah xaalad kastamka deyn laga galay, haddaba, marka warbixinta ay heli karaan masuuliyiinta kastamku ay u suura galinayso, inay fahmaan in deyn kastam la galay, ka hor intii aanay ka gun gaadhin, xadiga cashuurta soo dejinta ama dhoofinta ee ku waajibtay alaabtaas aynu soo sheegnay waa in lagu jaan gooyaa, xeerarka qiimaynta ee la taxaluqa alaabta mudda hore loogu lahaa deynta kastamka ee ka dhalatay xaalad, ka soo baxday warbixin jirta markaa.
2. Marka sababta loo dhigay alaabtaas habka badh ka dhaafista cashuurta dhoofinta, deyn kastameed la xidhiidha, alaab la dhigay habka aynu sheegnay, qadarka denytaasi waxa uu la mid noqonayaa, farqiga u dhexeeyay labada cashuurood ee loo xisaabiyay hab waafaqsan faqrada 1, iyadoo bixinteedana loo mari doono qodobka 138aad.Saarista si loo soo habeeyo

## **Habka Nidaam La Bixista**

### **Qodobka 140<sup>aad</sup>** **Isticmaalka habka**

1. Habka saarista si loo soo habeeyo, iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobada maamulaya habka

isku badalka ee ku dejisan qodobka 149aad, 154aad ama qodobka 118aad, waa in loo ogolaaday alaabta ay tahay in soonaha kastamada Soomaaliland si ku meel gaadhka ah looga dhoofiyo, si ay u soo marto hawl gal dib u soo habayn, oo sababaya in alaabtaas loo ogolaado inay gasho suuqa iyadoo gabi ahaanba ama badh ahaanba laga dhaafayo cashuurta soo dejinta.

2. Dhoofinta alaabta Soomaaliland ee ku meel gaadhka ah, waa in lagu dhaqo xeerarka dhoofinta cashuurta, laguna xakameeyo siyaasad ganacsi iyo hababka kale ee rasmiga ah ee alaabta Soomaaliland kaga baxayso xuduudaha kastamada Soomaaliland.
3. Waa in lagu dhaqaa Qeexitaanadan soo socda:
  - a) Dhoofinta alaabta ee ku-meel gaadhka ah, waxaa loola jeeda in la mariyo alaabta habka bixista, si loo soo habeeyo.
  - b) Hawl galka habaynta waxa loola jeeda, hawl galka lagu sheegay qodobka 109aad, 2, (c) faqrada 1, 3,
  - c) Alaab la soo hagaajiyay, waxa loola jeeda dhammaan alaabaha ku dhashay hawl gal hagaajineed,
  - d) Qiimaha ugu sareeya waxa loola jeeda, tirada ama boqoleyda alaabta la soo hagaajiyay ee laga helay, dhoofinta ku meel gaadhka ah ee tiro alaab ah oo gaar ah.

### **Qodobka 141<sup>aad</sup>**

#### **Shuruudaha**

1. Habka saarista si loo soo habeeyo waa in aanu u furnaanin ama uma banaana alaabaha Soomaaliland:
  - a) Kuwa dhoofintoodu ay dhalinayso, laba jeer bixinta ama dib ka bixin cashuurta soo dejinta.

- b) Taas oo ka hor dhoofinteedi loo sii daayay suuqa gabi ahaanba iyadoo laga dhaafay cashuurta soo dejinta, illaa iyo dhamaadka isticmaalka iyo inta shuruudaha ogolaanshaha ka dhaafistu ay wali dhaqan gal yihiin
- c) Taas oo dhoofinteeda ay ka dhalanayso, in loo damaanad qaaday dib u bixinta cashuurta dhoofinta.

2. Haddaba, xadidaadaha faqrada 1, waxa goyn doona wasiirka wasaaradda Maaliyadda.

### **Qodobka 142<sup>aad</sup>**

#### **Ogolaansho**

1. Ogolaanshaha habka isticmaalka soo habaynta ee saarista ah/bixinta ah waa in lagu soo saara ka dib codsiga qofka isku duba ritay hawl galka soo habaynta, si loo fuliyo.
2. Iyadoo lagu koobayo ogolaanshaha isticmaalka, habka saarista si loo soo habeeyo ee lagu siiyay qof kale alaab asal ahaan Soomaaliland ka soo jeeda, marka hawl galka habayntu uu ka kooban yahay, isku jir alaabta laga helay Soomaaliland iyo alaab/badeecad la soo dhoofiyay, sidii alaab la soo hagaajiyay, taas oo keenaysa isticmaalka habkaasi inuu kor u qaadayo iibka alaabta la dhoofinayo iyadoo aan waxba loo dhimayn dhinacna danaha muhiimka ah ee soo saarayasha alaabta alaabta la midka ah ee Soomaaliland ama alaab la soo hagaajiyay, ama alaab la mid ah alaab la soo hagaajiyay oo soo degtay. Xaaladaha isku duba ridkaasi, faqrada soo socota la dabiqli doono waxa goyn doona wasiirka.

### **Qodobka 143<sup>aad</sup>**

## **Bixinta Ogolaanshaha**

Ogolaansho waa in la siiyaa kaliya:



- a) Dadka degan Soomaaliland
- b) Marka loo arko inay suurta gal tahay in laga sameeyo, alaab hagaajin ay sabab u tahay, habaynta ku meel gaadhka ah ee alaabta dhoofaysa. Xaaladaha kuwaas oo xadidaad ay tahay in lagu sameeyo waa in uu gooyaa wasiirka wasaaradda maaliyaddu.
- c) Marka ogolaanshaha habka isticmaalka, saarista si loo soo habeeyo aanay si halis ah u dhaawacayn danaha Soomaaliland ee habaynta xaaladaha dhaqaale.

### **Qodobka 144<sup>aad</sup>**

#### **Xadidaada muddada dib u soo dejinta**

1. Maamulka kastamku waa inay cayimaan Muddada ay tahay in alaab la soo hagaajiyay dib loogu soo celiyo xuduudaha kastamada Soomaaliland. Way kordhin karaan mudada soo galista codsiga la haysto e sida habboon ogolaanshihiisa lagu helay.
2. Maamulka kastamadu waa inay dejiyaan, qiimaha ugu sareeya ee hawl galka ama haddii ay muhiim noqoto qaabka lagu goynayo qiimaha

### **Qodobka 145<sup>aad</sup>**

#### **Ka Dhaafista Cashuurta soo dejinta**

1. Dejinta ee ku sheegan qodobka 146aad, faqradiisa 1, waa in la siiyaa kaliya marka alaabta la soo hagaajinayo la fasaxo oo lagu dhawaaqo inay suuqa ku galaan magaca ama wakaalada.
  - a) Fasax ogolaansho haystaha ama

b) Qof kasta oo kale oo degan Soomaaliland oo uu siiyay qofkaasi, isagoo fasaxaas ku helay ogolaanshaha ama raali ahaanshaha iyo shuruudaha masuuliyiinta oo uu buuxiyay.

2. Ka dhaafista gabi ahaan ama badh ahaan ee cashuuraha lagu sheegay qodobka 146aad, waa in aan loo ogolaan, marka halka shuruud ama waajibaad oo la xidhiidha habka saarista si loo soo habeeyo, aan la buuxinin, haddii aanu ka baaqsigaasi saamayn xoog ah ku lahayn, habsami u socodka hawl galka la soo sheegay.

### **Qodobka 146<sup>aad</sup>**

#### **Qiyaasta wax dhaafista**

1. Gabi ahaanba ama badh ahaan ee ka dhaafista cashuurta ee lagu sheegay qoddobka 142aad, waa in ay saamaysaa, jarista qadarka cashuurta soo dejinta ee ku waajibtay alaabta, la soo hagaajinayo ee loo sii daayay suuqa iyo qadarka cashuurta soo dejinta ee ku waajibta, taariikh isku mid ah, alaab si ku meel gaadh ah loo dhoofiyey, haddii lagu soo dejiyay xuduudaha kastamada Soomaaliland iyadoo ka dib soo habeeyay ama hawlgalka habaynta ee ugu danbeeyay.

2. Qadarka jarista ee ku sheegan faqrada 1, waa in la isugu daraa iyadoo sal laga dhigayo tirada iyo nooca alaabta la sheegayo, wakhtiga la siiyay ogolaanshaha habka bixista si loo soo habeeyo iyadoo sal looga dhigayo, shay'ada kale ee la saarayo qadarka ku waajibaywakhtiga la aqbalayo codsiga la xidhiidha saarista suuq galista alaabta la soo hagaajay. Qiimaha alaabta sida ku meel gaadhka ah loo dhoofinayo, waa inuu ahaada ka

lagu xisaabiyay alaabtaasi markii loo goynayay qiimo kastameedka alaabta la hagaajiyay si waafaqsan qodobka 31, faqradiisa 1, (b) (i) ama haddii aan qiimaha qaabkaas.

3. Lagu goyn karin, faraqa u dhexeeya qiimaha kastamka alaabta la hagaajinayo iyo qiimaha habaynta. Haddaba, marka ka hor intaan la marin, habka saarista soo habaynta, siku meel gaadh ahaan u dhoofinta alaabtaas loo sii daayo suuq gelis jaban, oo hoos loo dhigay qiimaheda iyadoo ay sabab u tahay, dhamaadka isticmaalka iyo shuruudihii loogu ogolaaday hoos u dhiga qiimahoodi la naaqusay, qadarka ay tahay in laga jaro, waa inuu ahaadaa xadiga cashuurta soo degitaan ee dhab ahaan u saarnayd alaabta markii loo sii daynayay suuqa.
4. Marka alaab ku meel gaadhka u dhoofaysaa ay u baahato in loo sii daayo suuq galis, qiimo hoos loo dhigay ama eber uu saaran yahay iyadoo loo eegayo dhamaadka isticmaalkeeda, qadarkaasi ayaa loo xisaabin doonaa oo wuu ugu jirayaa xisaabta, iyadoo siin doonta alaabtaasi inay marto hawl gal, la jaan qaadi karaya dhamaadka isticmaalka, ee dalka marka hawl galka soo habaynta ama markii ugu danbaysay ee hawl galkaasi uu dhaco.
5. Marka alaabta la soo hagaajiyay ay u qalanto talaabooyin hab dhaqan tacriifadeed iyadoo alaabooyinka ku guul daraystay ta'riifad la heer ah, sida ta alaabta la dhoofinayo ee ku meel gaadhka ah, qadarka cashuurta soo dejinta waxa xisaabta lagu darsanayaa marka, hoos u dhimid lagu samaynayo, qadarka lagu sheegay, faqrada 1, waana inuu ahaadaa, ka ay tahay in lagu dhaqo

haddii, ku meel gaadh ku dhoofinta alaabta la buuxiyay, shuruudaha lagu dabaqayo hab dhaqanka xadidaada ta'riifada.

6. Qodobkan iyadoo aan waxba loo dhimayn dabaqaada qodobada la isla qaatay ama lagu dhaqayo, ganacsiga Soomaaliland iyo dalalka kale, kaas oo siinaya cashuur dhaafka alaabaha gaar ah ee la soo hagaajiyay.

### **Qodobka 147<sup>aad</sup>**

#### **Dib u habayn**

1. Marka ujeedada hawl galka alaabta la soo habaynayo ay tahay hagaajinta ku meel gaadhka ah ee alaabta la dhoofinayo, waa in loo sii daayo suuqa, iyadoo gabi ahaanba laga dhaafayo cashuurta soo dejinta, markii ay timaado inay ku qancaan masuuliyiinta kastamka Soomaaliland in alaabta lagu soo hagaajinayo lacag la'aan, iyadoo ay sababtu tahay heshiis ama waajib xeer oo ka dhashay damaanad qaad, sabab uu yahay cilad xaga soo farsameeyaha ah ama warshada ah.
2. Faqrada 1, laguma dhaqayo marka qorshaha lagu daray, cilada alaabta la sheegayo suuqa loo sii dayay.

### **Qodobka 148<sup>aad</sup>**

#### **Dajinta cashuurta xaaladaha dib u habaynta**

Marka ujeedada hawl galka soo hagaajinta alaabta ku meel gaadhka loo dhoofinayo, iyadoo hagaajintaasna loo samaynayo si looga helo lacaga kharashkii lagu bixiyay, badh ahaan ka dhaafista cashuurta soo dejinta ee lagu sheegay qodobka 140, waa in loo damaanad qaadaa iyada oo la samaynayo, qadarka cashuureed ee ku waajibka ah iyadoo sal looga dhigayo, mabaa'diida cashuureed ee saaran alaabta la soo hagaajinayo wakhtiga la ogolaaday,



codsiga ku sii daynta alaabtaas ee suuqa, iyadoo qorshaha lagu darsaday qiimo kastameedka, qadar la mid ah kii lagu soo hagaajiyay, lana siinayo, qiimahaasi inuu u taagan yahay kaliya, intii uu ka eegayay qofka haysta ogolaanshahaas, iyadoo aanay wax saamayn ah ku lahayn, xidhiidh ka dhexeeya qofka haysta iyo ku hawl galaha. Kuma jirto qodobka 146aad, wasiirka wasaaradda Maaliyadda ayaa goyn doona xaaladaha iyo shuruudaha gaarka ah ee alaab lagu si dayn karo, si ay suuqa u gasho oo ay la socoto hawl galka saarista soo habaynta, iyadoo uu dheer yahay qiimaha habaynta hawl galka, oo lagu salaynayo qiimaynta looga dan leeyahay meel marinta ta'riifada kastamada Soomaaliland.

**Qodobka 149<sup>aad</sup>**  
**Habka isku badalka**

1. Si waafaqsan shuruudaha u degsan qaybta koowaad ee sida dheeraadka ah loogu dabaqayo qaabka isku bedelka waa inay u ogolaadaan, alaabta la soo dejiyay, oo halkan loogu yedhi doono alaabta la badalayo, inay badalaan alaabta la hagaajiyay.
2. Maamulka kastamku waa inay u ogolaadaan qaabka isku badalka lacagaha in loo isticmaali karo, hawl galka soo habaynta ee la xidhiidha alaab Soomaaliland.
3. Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobka 154aad, qodobada lagu dabaqayo alaabta la soo hagaajinayo ayaa sidoo kale lagu dabaqayaa alaabta la badalayo.
4. Maamulka kastamku waa inay iyagoo raacaya shuruudaha loo dejiyay u ogolaadaan alaabta la badalayo in laga dhoofiyo, ka hor dhoofinta alaaba ee ku meel gaadhka ah, (Intaanay dhoofin). Xaalada soo dejin bedel waa in damaanad la dhigaa si loo daboolo, qadarka cashuurta soo dejinta.



### **Qodobka 150<sup>aad</sup>**

#### **Bedelka alaabta**

1. Alaabta la soo badalay waa in ay yeelataa heer ta'riifadeed oo isku mid ah, marka ay tayo ganacsi oo isku mid ah leedahay, waana inay lahaataa, hab dhaqan farsameed isku mid ah, marka ay alaabaha mar labaad la dhoofinayaa marayaan hagaajinta la sheegayo.
2. Marka alaabaha sida ku meel gaadhka ah loo dhoofinayaa la isticmaalay ka hor dhoofka, badelka alaabahaasina wuxuu noqonayaa isna mid la isticmaalay, mana noqon doono alaab cusub. Masuuliyiinta kastamku way ka reebi karaan qodobkan haddii badelka alaabtaas lagu soo bixiyay lacag la'aan, iyadoo ay sabab u tahay, heshiis ama waajib xeer oo ka dhashay damaanad qaad ama cilad farsamo oo xaga farsamada ah.

### **Qodobka 151<sup>aad</sup>**

#### **Shuruudaha isticmaalka qaabka isku badalka**

Xaaladaha isku badalka waa la ogolaan karaa, kaliya marka la hubiyo in la buuxiyay shuruudaha ku yaala qodobka 150aad.

### **Qodobka 152<sup>aad</sup>**

#### **Soo Dejinta ka Hor**

1. Xaaladaha soo dejinta ka hor la sameeyay waa in alaabaha la dhoofinayo lagu dhoofiya, laba bilood ka hor oo ka bilaabmaya wakhtiga ay ogolaadeen masuuliyiinta kastamku baaqa la xidhiidha alaabta la badalay, inay suuqa gasho.
2. Haddaba, marka xaalado gaar ah, ay taas daruuri ka dhigaan, masuuliyiinta kastamku ka dib

codsiga qofka danaynaya, muddo macquul ah ku kordhin karaan wakhtiga lagu sheegay faqrada koowaad.



### **Qodobka 153<sup>aad</sup>**

#### **Taariikhda Xisaabta Dhinaanshaha**

Xaaladaha soo dejinta hore, taas oo Qodobka 147 lagu dhaqayo qadarka laga dhimayo waxa goyn doona oo sal uga dhigaya qiimaha la saarayo, alaabta sida ku meel gaadhka ah u dhoofaysa, taariikhda la aqbalay codsiga lagu marinayo nidaamka.

### **Qodobka 154<sup>aad</sup>**

#### **Waxyaabaha Reeban**

Qodobka 142, (2) iyo qodobka 143, (b) Nuxur ahaan ma dabaqayaan halbeega isku badalka qiyaasta.

### **Qodobka 155<sup>aad</sup>**

#### **Nidaamka Siyaasada Ganacsiga**

Waxa lagu dhaqayaa, nidaamka dhoofinta dibada ee arrimaha lagu muujiyay, sidoo kale in ay noqdaan kuwo waafaqsan habka tacriifada qaabka siyaasada ganacsiga

### **DHOOFINTA**

#### **Qodobka 156<sup>aad</sup>**

#### **Hab Isticmaalka**

1. Hababka Dhoofinta loo ogol yahay alaabooyinka Soomaaliland ee ka baxaya goobaha Kastamadda Soomaaliland waxay noqonayaan. Waxa waajib ah in nidaamka dhoofintu waafaqsanaado siyaasada dhoofinta ganacsiga oo lagu daray, heshiisyada ganacsi iyo nidaamka dhoofinta
2. Marka laga reebo badeecadaha dhammaan maray habka diyaarinta dhoofinta dibadda, dhammaan

alaabaha Soomaaliland ee dibada loo dhoofinayo waa in la mariyaa hanaanka nidaamka dhoofinta.

3. Xaaladaha iyo Shuruudaha ay ka waajibayso in badeecada laga saaro goobta Kastamka Soomaaliland, ma noqonayaan kuwo lagu sheego cadayn ka timaada dhinaca wasiirka Maaliyadda.
4. Dhoofinta waxa waajib ah inay cadaynteeda bixiyaan, kastamka ugu xilsaaran, dhoofinta, qaybinta, habaynta iyo cabaynta badeecadaha iyo Rarista Maraakiibta, marka laga reebo, marar kooban oo dhinaca wasiirka ay ka imanayaan.

### **Qodobka 157<sup>aad</sup>**

#### **Sii Deynta Dhoofinta**

Ogolaansho bixid/dhoofin, waxaa Shuruud u ah, Alaabtalaga hadlayo waxay kaga baxaysa goobta Kastamka Soomaaliland, marka xaalada noocaas ahii jiraan, waxay kaga baxaysaa sidii cadayntii hore ee la ogol yahay

## **D. KASTAMADU WAXA AY U OGOLAANAYAAN MACAAMIL AMA ISTICMAAL**

### **Qodobka 158<sup>aad</sup>**

#### **Dib-u-celin Bixideed/dhoofin, Burburin iyo ka guuris/Haajirid**

1. Alaabooyinka aan Soomaaliland ahayn way banaan tahay in:
  - a) Dib-looga bixiyo/dhoofiyo goobta kastamada
  - b) Burburin;
  - c) Ka guurid/Haajirid dalkaas.

2. Dib u dhoofintu waa inay noqotaa, mid looga dan leeyahay, nidaamka u degsan alaabta baxaysa siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaanba.

Waxa jiri kara Xaalado badeecooyin/alaabta aan Soomaaliland laga lahayn ee laga mariyay nidaamka joojinta, kuwaas oo aan lagu dabiqi doonin siyaasada dhoofinta ganacsiga ee wasiirka Maaliyadda.

3. Waxa lagu joojin karaa, xaaladaha wasiirka maaliyaddu baabiiyay, in la helo cadaymo masuuliyiinta Kastamadu hore uga soo saareen. Kala noqoshada dhoofinta/bixida ee Masuuliyiinta Kastamadu waa inay noqotaa dhaqan galinta iyo fulimaha ku cad qoraalka kowaad ee faqrada 2, laga bilaaba markaa waxa badeecadaa la marinayaa ama lagu dabaqayaa habka ganacsiga kastamka ee goobaha kastamada Soomaaliland, oo ka soo saari kara dib u dhoofin ama dib u bixin.

Waxa lagama maarmaan ah in si deg deg loo dhaqan galiyo go'aanka uu Kastamku ka soo saaray xalaadan, si deg deg ah ayaa loo dhaqan galinayaa. Waxaanay noqonaysaa mid si qaran loo fulinayo

4. Burburinta iyo ka Guurista aan laga bixinayn xisaabta dawladda

Khashin kasta ama iskaraab uu sababay burburintu waa in ogolaansho looga helaa kastamka, ama khashinkaasi waxa lagu haynayaa ka warqabida kastamka

**QAYBTA-V AAD**  
**ALAABOYINKA LAGA SAARAY SOONAHA**  
**KASTAMADA SOOMAALILAND**

**Qodobka 159<sup>aad</sup>**

**Waajibaad ka Qaadist Cadaynta rasmiga ah**

1. Alaabooyinka ka baxayay soonaha Kastamada Soomaaliland, marka laga reebo alaabooyinka rarka ah ee ay sidaan gaadiidka, ka gudbaya xad biyoodka, ama hawada ee kastamka oo aan la joojinayn, waa waajib in la siiyo cadaynayo ama kastamadu bixiyaan bayaan hor dhac ah.
2. Wasiirka Maaliyaddu wuxuu cadaynayaa: - :

- a) Wakhti xadidan ama soo ururinaya cadaymaha ay bixiyeen masuuliyiinta goobta kastamadu u qaabilsan qaybta bixida, ka hor intaan alaabta la dhaafin goobta kastamka
- b) Sharciyada laga soocay ama ka badalan wakhtiga loo xadiday waxa la tix raacaya xaga sare,
- c) Shuruudaha ay noqonayso in la tanaasulo/raali galinta cadaynta loo baahan yahay, ee hordhaca ah waa kuwo lulumaya iyo
- d) Xaaladaha shardiga ama waajibka ka dhigaya in alaabtu ka baxdo soonaha Kastamada Soomaaliland, ma marayso xaaladaha hordhaca ah ama bayaan kastamku bixinayo. Taas oo waafaqsan xaalado kooban, marka loo eego ku saabsan noocyo dhaq dhaqaaq oo cayiman, badeecado ama gaadiid ganacsi oo ku shaqaynayay nidaamka caalamiga ah iyo heshiisyada dawliga ah.

### **Qodobka 160<sup>aad</sup>**

#### **Goobta la Dhigayo Cadaymaha Kooban**

1. Marka alaab ka baxaysa goobaha kastamada Soomaaliland ay dhamaystirmaysaa si waafaqsan habka macaamilka Kastamada iyo sharciyada, kastamadani waxay cadaynayaan, inay dhamaystiran tahay, bixida alaabooyinkan, waxaanay siinayaan

cadayn muujinaysa in alaabtaasi ay ka baxday kastamada Soomaaliland.

2. Marka alaab baxaysa aanay waafaqsanayn nidaamka, waxa waajib ah in xafiiska kastamka u sameeyo bixid, ama la xidhiidho kastamkii kale, haddii ay suura gal tahay in si elegtaroonig ah ay awoodi karaana waxay u samaynayaan, bixis. Waana in uu faahfaahin iyo cadayn bixiyo kastamkaasi.
3. Maamulka kastamku wuxuu aqbalayaa, halkii uu ka dhigi lahaa alaabta inuu sameeyo cadyn kooban ee ay dhigtaan wa in ay noqotaa mid si fudud loo heli karo xogta dhaqaale ee xogta halwgalka kanbiyuuter

**Qodobka 161<sup>aad</sup>**  
**isku xidhka bayaanada urursan**

1. Wasiirka Maaliyaddu wuxuu samaynayaa Bayaano wada jir ah iyo isku xidhka soo saarista hordhacyo urursan, kuwaas ka kooban qaybaha qaadaa dhigaya halisaha iyo dabaqaadaha madaxda kastamadu soo gaadhsiiyeen. Ee ahmiyada koowaad siinaya nabad iyo ammaanka. Kuwaas oo loo raacayo habka ugu haboon ee waafaqsan lana jaan qaadaysa habka caalamiga ah ee nidaamka ganacsiga.
2. Marka ay duruufu saamaxayso arrimahaa waa in la soo saara cadaynta bixida ee hordhaca ah, waana in la adeegsado xogaha in lagu isticmaalo hab farsamada tignoolajiga ah. mubaax tahay in la soo saaro. Waa suura gal in loo isticmaalo ganacsiga, Dekada iyo gaadiidka xamuulka, ee ay u dhamaystiran yihiin shuruudaha aasaasiga ah ee looga bahan yahay Masuuliyiinta Kastamadu waa inay aqbalaan cadaymaha waraaqaha ee sugan, waxaana shardi ah in si siman oo isku mid ah u maareeyaan heerka halista la maamulay, taas oo cadaynta urursan lagu

bayaaminayo isticmaalka loo adeegsaday xogta lagu hirgaliyay habka tignikalka ah.



**Qodobka 162<sup>aad</sup>**

**Kormeerka Kastamadda**

Badeecadaha ka baxaya xuduudaha kastamka ee Soomaaliland waa in ay kormeeraan masuuliyiinta kastamku waa uu hubin karaan masuuliyiinta kastamka Soomaaliland si waafaqsan xeerka markaasi dhaqan galka ah. Waa ay ka bixi karaan xuduudaha aynu soo sheegnay, hadday habboon tahay hiliinka ay raacayaana way goyn karaan masuuliyiinta kastamka Soomaaliland si waafaqsan habka ay u dejiyeen masuuliyiintaasi.

**QAYBTA –VI AAD**

**QODOBADA CASHUUR DHAAFKA**

**Qodobka 163<sup>aad</sup>**

**Cashuur Dhaafka Kastamada**

Wasiirka Maaliyadda ayaa go'aamin doona xaaladaha uu, isaga oo eegaya duruufo gaar ah, la siin doono cashuur dhaaf xaga soo dejinta ama cashuurta dhoofinta haddii badeecadda loo sii daayay in ay si bilaasha u gooshaan ama loo dhoofsho.

**Qodobka 164<sup>aad</sup>**

**Badeecada La Soo Celiyo**

1. Badeecada Soomaaliland, ee laga dhoofshay xuduudka kastamada ee Soomaaliland, ee lagu soo celiyay xuduudka loona fasaxay in ay si bilaasha u gooshaan muddo dhan saddex sanno waxa ay iyada oo uu sidaa codsanayo qofka wataa waxa laga dhaafi doonaa cashuurta soo dejinta.
2. Si kastaba ha ahaatee, muddada dhan saddexda sanno waa la kordhin doonaa si loo tixgasho duruufo khaas ah;



3. Cashuur dhaafka soo dejinta ee lagu sheegay fargada laad lama siin doono marka laga hadlayo badeecadda laga dhoofiyay xuduudka kastamada Soomaaliland habraaca nidaaminta khaarajiga ah haddii badeecadaasi aysan ahayn xaaladii lagu dhoofiyay.

#### **Qodobka 165<sup>aad</sup>**

#### **Xaalada Badeecada La Soo Celiyay**

Ka cashuur dhaafka dhoofka ee lagu xusay Qodobka 163aad waxa la siin doonaa keliya haddii badeecadda dib loo dhoofiyo xaaladii lagu dhoofiyay. Duruufaha iyo shuruudaha iyo dalabaadka laga dhaafi doono waa laga dhaafi doonaa waxana go'aan ka gaadhi doona Wasiirka Maaliyadda.

#### **Qodobka 166<sup>aad</sup>**

#### **Soo Celinta Badeecada La Magdhabayo**

Qodobada 164aad iyo 165aad ayaa la dabaqi doonaa kolba sida wax looga badalo badeecada la magdhabayo ee asal ahaan loo dhoofiyay ama dib-loogu dhoofiyay taas oo ku soo xigtay habraaca nidaaminta ee gudaha.

Xadiga cashuurta dhoofka ee sifo sharci ah lagu waajibiyay waxa go'aamin doona iyada oo lagu saleynayo Xeerarka dhaqangalka ah habraaca nidaaminta gudaha ah, taariikhda dib-u-dhoofinta iyada oo loo heysto taariikhda la sii daayay in ay si bilaasha u gooshaan.

### **QAYBTA VII – CASHUURTA KASTAMADA**

#### **A. WAAJIBINTA CASHUURTA KASTAMADA**

#### **Qodobka 167<sup>aad</sup>**

#### **Cashuurta waxaa lagu Bixin Doonaa Meesha lagu Cadeeyay**

1. Dhammaan badeecadda laga soo dajiyay ama laga dhoofiyay xuduudka kastamada ee Soomaaliland waxa lagu waajib karaa, marka cashuuraha kale lagu daro, cashuurta soo dejinta iyo dhoofinta waqtiga ay

soo galayso habraac ay kastamadu ansixiyeen ama adeegsi.

2. ujeedooyinka ku xusan farqada laad badeecadda waxa loo qaadan doonaa in ay soo galeen marka cadaaynta, la sameeyay uuna saxeexay qofka cadaaynta sameenayaa iyada oo la raacayo Qodobka 60aad, la aqbaloo lana saxeexo kasmada cashuur kasta oo taagan ama dhigaal eek u xusan Xeerkan marka la eegayo badeecada la soo dajinayo ama la dhoofinayo la bixiyay, ama la dhigay damaanad si loo waafaqo Xeerkan.

### **Qodobka 168<sup>aad</sup>**

### **Cashuur Dhiman oo la Qaaday**

1. Haddii cashuur dhiman qof laga qaado ama si qalada lacag loogu celiyo, qofka bixiyay qadarkaasi dhiman ama lacagtaasi dib loogu celiyay lacagta qaladka ah loo sameeyay kolba sida uu xaalku yahay, iyo qadar kasta oo ka mid ah lacagtaasi maqan waxa lagu soo badi doonaa iyada oo loo aqoonsanayo in badeecadaasi lagu leeyahay cashuurtaasi.
2. Haddii codsi lagu sameeyo iyada oo la raacayo farqada laad, qadarkaasi waxa loo qaadan doonaa in ay tahay mid ku waajibtay qofka lagu leeyahay muddada ogaysiiska la siiyay isaga/iyada, haddii lacagtaasi lagu bixin muddo dhan 30 maalmood oo daba socota maalinta ogaysiinta la siiyay, ama muddada kale ee ka badan ee Kastamadu ay ogolaadeen, ganaax lacageed oo dheeraad ah lana mid ah 5% ka mid ah qadarkii la codsaday ayaa waajibi doona uuna bixin doona qofkii ay ku waajibtay waxana bil kasta ku kordhi doonaa ganaax dhan 2%.
3. kastamadu ma samayn doonaan waxa codsiya muddo ka danbaysa saddex sanno oo ka bilaabmata taariikhda cashuurtaasi dhiman la dalacay ama lacag

celintaasi qaladka ah la sameeyay, kolba sida ay xaaladu tahay, haddii aan cashuurtaasi dhiman iyo lacag celintaasi qaldan ama lacag celintaasi qaldani ku imaan sabab la xidhiidha khiyaano uu keenay qofka bixin lahaa dhimaanshahaasi ama lacag celintaasi qaldan heley, kolba sida uu xaalku yahay.

## **B. BIXINTA CASHUURTA KASTAMADA EE DHIMAN**

### **Qodobka 169<sup>aad</sup>** **Galitaanka Xisaabaadka**

1. Mid kasta oo ka mid ah cashuurta soo dejinta ama dhoofinta ee ka dhalatay deynta kastamka waxa xisaabinaya maamulka kastamka marka ay helaan tafaasiisha badeecadda iyagoo marinaya nidaam xisaabeedka
2. Waa in aanay dabaqin:
  - a) Meelaha Qashin qubka ah cashuuri kuma waajibayso
  - b) Qadarka cashuurta ah ee sharciga ahi ma socdaa, waa inuu ku salaysan yahay heshiis
  - c) Marka sharciyadda la iska dhaaf, wixii looga baahnaa maamulka kastamadu in ay galiyaan xisaabaadka deynta ah
3. Xeerarka kale ee xisaabeed ee la xidhiidha deynta kastamada waxa go'aaminaya wasiirka maaliyadda.

### **Qodobka 170<sup>aad</sup>** **Daboolista Cashuurta Khaldan**

1. Haddii badeecadda lagu leeyahay cashuur, markaa cashuurtaasi waxa ay noqon doontaa deyn madani ah oo ay leeyihiin maamulka Kastamada ee Soomaaliland, oo lagu dalacayo badeecadda

cashuurtaasi lagu leeyahay, cashuurtaasi waxa bixin doonaa mulkiilaha badeecadda iyada oon meel lagaga dhacayn in lagu bixiyo si kasta oo lagu bixin karo, waxana lagu qaadi karaa dacwad oogis ay dawladdu samayso.

2. Badeecadda hoos timaad maamulka kastamada ee uu leeyahay qof cashuur lagu leeyahay, iyo badeecad kasta oo markaa la helaa, oo la soo dajiyay ama soo gashay iyada oo uu dhoofinayay qofkaasi, waxa ku waajib noqon doona in damaanad ahaan loo iibin karo deyntaasi waxana xidhi kara Kastamada illaa oo cashuurtaasi la bixiyo sheegaso nooca ay doontaba ha ahaatee ama qof kasta oo kale oo leh badeecadaasi badeecadaasi waa la iibin karaa si loo bixiyo cashuurta ku waajibtay haddii aan cashuurtaasi lagu bixin muddo dhan laba bilood ka dib marka badeecadaasi la xidhay.
3. Haddii cashuuri ay ku waajibtay Kastamada sida ku cad farqada laad ama ganaax ku xusan xeerkani aan lagu bixin muddo dhan hal bil oo ka danbaysa maalinta ay waajibtay, Kastamadu waxa ay amri karaan in la xayiraad lagu soo rogo ashyaada soo socota:-
  - a) Badeecadda, hanti-maguurto ah iyo wixii la saamayn karo;
  - b) Agabka wax lagu soo saaro ee qalabka warshadaha;
  - c) Dhismayaasha, gawaadhida ama hantida kale;
  - d) Xoolaha, kuwaas oo uu leeyahay ama uu gacanta ku hayo:-
    - i) qofkaasi;
    - ii) wakiiladiisa/teeda
    - iii) qof kasta oo kale oo matalaya;

4. Waaranka xayiraadda ee ay soo saarayaan Kastamadu waxa go'amin doona Wasiirka Maaliyadda.
5. Qofka loo ogolaaday in uu xayiro sida ku cad farqada 3aad, haddii ay lagama maarmaan noqoto, waxa uu furan karaaa dhisme kasta maalintii iyada oo uu la socdo sargaal booliis ah ama qof kale oo si sharci ah u caawin kara.
6. qofka lagu amray xayiraadu waxa uu illaalin doonaa agabka xayiraada laga qaaday iyada oo kharashka uu bixinayo qofka mulkiilaha ahi, muddo dhan 14 casho oo ka bilaabmasa muddada la xayiray ama ilaa oo qadarka taagani, oo ay la socoto kharashka iyo khidmad kasta oo kale la bixiyo si dhamaystiran inta aysan dhammaan muddo 14 maalmood, haddii aan lacag bixintaasi la samayn muddadaasi qofka la amar siiyay waxa uu iibin karaa shaygaasi.
7. haddii shaygaasi la iibiyo iyada oo la cuskanayo farqada 6aad wixii laga dhaliyo iibkaasi waxa loo adeegsan doonaa sidan soo socota:-
- a) bixinta cashuurta ay Kastamadu leeyihiin;
  - b) bixinta ganaaxyada ee khuseysa lacag aan la bixin, haddii ay jiraan;
  - c) bixinta lacagta kharashka ah ama wixii lagu dalaco ee kale ee lagu soo rogo xaga xayiraada iyo iibka
8. Qadarka ka soo hadha ka dib lacag bixinta ku xusan farqada 7aad markii la sameeyay haddii ay jirto, waxa la siin doonaa mulkiilaha badeecadda, ama xaaladaha Kastamadu ay ku guul daraystaan in ay suurto galiyaan sida celinta baaqiga, haddii la codsadaana, lacag bixinta qadarkaasi iyada oo leh dheefo kor siciral suuqa taagan ayaa la siin doonaa mulkiilaha iyada oon la kharargalin muddo dhan laba

iyo toban bilood oo ka bilaabmasa muddada iibka agabka la rahmay.



### C. **NABADGALYO**

#### **Qodobka 171<sup>aad</sup>**

#### **Nabadgalyada Badeecadda Cashuurta aan la Bixin**

Haddii qof, leh dhul ama dhisme iyo guryo kale oo ku yaala Soomaaliland, uu ku guul daraysto in uu bixiyo wax cashuur ah ama wadar kale ama lacag oo uu ku waajibiyay Xeerkani, Kastamadu waxa ay ogaysiis qoraala ku ogaysiin doonaan diwaangalisay hantida qofkaasi in lagu soo rogay damaanad cashuureed ama qadar kasta oo kale oo lagu cayimay ogaysiinta, iyada oo la raacayo Xeerarka dhaqan galka ah.

### D. **TIRTIRIDA DEYN TA KASTAMADA**

#### **Qodobka 172<sup>aad</sup>**

#### **Dhaqangalka Waajibka in la Baxsho Deyn**

1. Haddii waxa waajibaada la galo, ha ahaato mid damaanad ah ama si kalaba, oo la xidhiidha bixinta deyn kasta, waajibkaasi waxa loo qaadan doonaa in ay tahay waajib ah in la baxsho dhammaan cashuuraha kuwaas oo ah ama ay tahay in la baxsho ama dib loola noqon karo sida ku cad qodobada Xeerkani.
2. Haddii la xaqiijiyo in qayb ama dhammaan kasta oo ka mid ah cashuur ama cashuur uu waajibiyay sida ku cad Xeerkani aan si haboon aan looga kaban karin sabab la xidhiidha:
  - a) Suurogal la'aan ama kakanaan aan la malayn karin, ama
  - b) Kharash dheeraad ah si loo daboolo.

3. Kastamadu waxa ay ogaysiin doonaan Wasiirka Maaliyadda qoraal ahaan, iyada oo xusaya sababta ay u codsanayaan in la qiimo tiro deynta guud ahaan ama qayb ahaan.



**E. LA NOQOSHADA, DIB U CELINTA, BADH KA DEYNTA IYO DIB UGU CELINTA**

**Qodobka 173<sup>aad</sup>**  
**La Noqoshada Cashuurta**

1. La noqoshada waajib cashuureed waxa la ogolaan karaa marka laga hadlayo dhoofinta badeecadda, qadarka, iyo shuruudaha, ay dajiyaan Kastamadu.
2. haddii qofka badeecadda iska lehi uu sheegto, ama uu soo jeediyo sheegashada, in u dib ula noqdo badeecad, waxa uu/ay, iyada oo shuruud u ah in la siiyo dib ula noqoshadaasi:-
  - a) waxa uu badeecadaasi u cadayn doonaa qaabka iyo foomka loo dajiyay iyada oo saamaynasa in shuruudaha lagu ogolaaday la noqoshada loo ogolaan karo in la dhamays tiro;
  - b) waxa uu samayn doonaa una qori doonaa foom cadayn ama qaab suurto galinaya in shuruuda la noqoshada lagu ogolaanayo in la buuxiyay iyo
    - i) in badeecadaasi si rasmi ah loo dhoofiyay
    - ii) in badeecadaasi aan dib loo soo dajin laguna talo galo in dib looga dejiyo Soomaaliland; iyo
    - iii) in qofka alaabta lehi uu xaq u lahaa, una leeyahay in uu la noqdo waqtigii cadaynta badeecadeed la sameenayay; iyo
  - c) Waxa uu soo bandhigi doonaa sheegashaddiisa/deeda la noqoshada muddo dhan 12 bilood oo ka bilaabmata waqtiga dhoofinta badeecada ama la fuliyo shuruudaha la noqoshada lagu ogolaan karo.

3. La noqoshada looma ogolaan doono badeecad kasta taas oo-

- a) Qiimaha badeecadaasi ee isticmaalka guriga uu ka yaryahay xadiga waajib ee loo ogolaan doono la noqoshada iyo
- b) Cashuurta soo dejinta ee badeecaddu ay ka yarayd boqol kun oo Shilinka Soomaaliland ah.

#### **Qodobka 174<sup>aad</sup>**

#### **Dib-u-celitna Cashuurta**

Haddii wax badeecado ahi ay lumaan ama ay baaba'aan si shil ah inta aan badeecada la sii daynin kastamada, kastamadu waxa ay celin doonaan cashuurta laga bixiyay badeecadaasi, iyada oo la raacayo Qodobka 160aad ee farqada 5aad.

#### **Qodobka 175<sup>aad</sup>**

#### **Celinta Deynta**

Haddii badeecad ka soo degtay Soomaaliland ay dhaawacan tahay inta aanay sii deynin kastamadu farqadaha Qodobka 174aad aya la dabaqi doonaa, kolba sida wax looga badalo, iyada oo loo shardin doono Xeerarka qiimeynta ee lagu qeexay Qodobka 28aad.

#### **Qodobka 176<sup>aad</sup>**

#### **Dib u Bixinta Cashuurta Kastamada Waqtiga ay Badeecadu Soo Noqoto**

1. Iyada oo la dabaqayo Qodobka 177aad ayna hoos imaanaso shuruudaha ay kolba Kastamadu ku soo rogaan, dib-u-bixinta cashuurta Kastamada waxa la siin doonaa marka lagu qanciyo Kastamada in badeecadaasi laga soo dajiyay iyada oo la raacayo heshiis iib iyo faafhaafhinta, tayada, xaalada ama wacyiga badeecadu aysan waafaqsanayn heshiiska,



ama in badeecadaasi lahayd wax dhaawaca inta aan badeecadaasi laga sii deynin kastamada.

2. Dib-u-bixinta badeecadda lama siin doono sida ku cad farqada laad illaa oo qofka sheeganayaa dib-u-bixinta uu keenayo sheegasho muddo dhan laba iyo toban bilood oo ka bilaabmaysa taariikhda la bixiyay cashuurtaasi.

### **Qodobka 177<sup>aad</sup>**

#### **dib-u-celinta cashuurta lagu bixiyay si khaldan**

1. kastamadu waxa ay dib-u-celin doonaan cashuur kasta oo soo dejin ama dhoof oo si khaldan lagu bixiyay
2. Dib-u-celinta cashuurta soo dejinta ama dhoofka ama qayb ka mid ah, lama bixin doono sida ku cad farqada laad ilaa oo qofka ku doodaya dib-u-celintaasi uu ku keeno cadayntaasi muddo dhan laba iyo toban bilood oo ka bilaabmasa taariikhda la bixiyay cashuurta.

### **QAYBTA –VIII AAD**

#### **DANBIYADA LAGA GALO KASTAMADA**

### **Qodobka 178<sup>aad</sup>**

#### **Dambiyada la Xidhiidha Saraakiisha kastamka**

1. Sarkaal kasta oo :
  - a) Si dadban ama toos ah u waydiista ama u qaata xilliyada shaqada wax ka qaato ama balan qaad loo sameeyo, waxa uu sharcigu qabaa in lagu dacweeyo.
  - b) Dacwadaha la xidhiidha heshiisyada haddii uu ka caago wixii uu qarir jiray dhamaantood waxa uu sarkaalkaasi noqonayaa dambi la'aan
  - c) Haddii uu si qaawan u galo dambiga, markhaatina loo helo waxa dambigiisa ansixinaya wasiirka

maaliyadda waxaana la gaynayaa maxkamadda  
waxaanu mutaysanayaa xabsi

- i. waxa uu mudan doonaa xabsi aan ka yarayn  
saddex sanno
- ii. ama waxa loo raacayaa xeerka ciqaabta



2. Qofka si aan dacwad ahayn:

- a) Si toos ah ama dadban wax u siiya sarkaalka ama u balan qaada wax kasta ha ahaatee sida ama abaalmarin kale wax la xidhiidha lacag ama balan ama badbaado
- b) U soo jeediyey ama la galay heshiis sarkaalka si uu uga qalqaaliyo ama ka aamuso, u ogolaado u qariyo hawlaha xatooyo ee uu ku jiro si ay uga hirgasho khiyaamadiisu taas oo lid ku ah xeerkan ama shaqadii hufnayd ee sarkaalku qaban lahaa wuxuu noqonayaa dambiile waxaana la ganaaxayaa toban lab (10).

Cashuurta laga hadlayo haddii aan la xisaabin qadarka cashuurta waxa la ganaaxayaa saddex laab (3) qiimaha badeecadda ee la soo saaray ama xadhig


- I. Muddo aan ka badnayn 3 sanno ama
- II. Waxa loo raacayaa xeerka ciqaabta

**Qodobka 179<sup>aad</sup>**  
**Rabshada Qof ku Sameeyo Kastamka**

1. Qofka:

- a) Si masuuliyad darro ku jirto usoo galiya gaadiid xilliga shaqada
- b) Si badheedha u dhaawaca sarkaalka isagoo shaqadiisa ku jira

- c) Gala rabshad ama dambiyadda ku xusan Qodobka 4, wuxuu noqonayaa dambiile, waxaanu mutaysanayaa xadhig aan ka badnayn 20 sanno ama waxa loo raacayaa xeerka ciqaabta ee yaala



2. Qofka:

- a) waxa uu galay dambi isaga oo hubaysan
- b) waxa la qabtay isaga oo hubaysan, badeecadihii uu watay waa lala wareegayaa waana dambiile isagoo mutaysanaya xadhig
  - i. aan ka badnayn 10 sanno
  - ii. waxa loo raacayaa xeerka ciqaabta

3. Qoflka:

- a) waa dambiile isagoo qarinaaya badeecadda si kasta ha ahaatee
- b) badeecaddii uu qariday waa lala wareegayaa iyadoo la raacayo sharciga waana dambiile mutaysanaya
  - i. xabsi aan ka badnayn 3 sanno
  - ii. waxa loo raacayaa xeerka ciqaabta

4. Qofka:

- a) jabiya ama burburiya ama ka tuura gaadiidka badeecad isaga oo la baxsanaya
- b) isagoo jabiyay, burburiyay amd badeecad ka tuuray gaadiid lana qabtay isla markaana isku daya inuu difaaco badeecadiisa
- c) isagoo isku dayay inuu difaaco qof dambiile ah oo sharciga lagu hayo
- d) isagoo isku dayay inuu sarkaal shaqadiisa haysta is hortaago wuxuu noqonayaa dambiile

5. Ujeedada qaybahani waa rabshad macnaheedu yahay awood sheegasho dambi ama qof lagu waxyeelaynayo ama hantidiisa u adeegsanaya waxyaabo khatar ama hub dambi lagu galayo si loo argagax galayo qof kasta.

**Qodobka 180<sup>aad</sup>**  
**aad-Isku Day Dambi**

Qofka isku daya inuu dambi galo, waxa uu noqonayaa dambiile isagoo mutaysanaya ciqaab la xidhiidha dambiyada uu galay

**Qodobka 181<sup>aad</sup>**  
**Dambiga laga Galo Sarkaal Kastam**

1. Qof kasta oo u hanjabo ama ishortaaga shaqadiisa wuxuu noqonayaa dambiile waxaanu mutaysanayaa xabsi:-
  - a) Aan ka badnayn lix sanno ama
  - b) Waxa loo raacayaa xeerka ciqaabta ama ganaax sida ku xusan qodobka 178aad (2) ama labadaba.
2. Marka qof lagu qaado dambi la xidhiidha qaybtan
3. Qof baa difaacaya qof kale isagoo siinaya digniin, qofkana haddii uu soo galo goobta shaqada looma qabsan karo wax nidaam ah

**Qodobka 182<sup>aad</sup>**  
**Dambi qof isku haysta Shaqsiyad Sarkaal**

1. Qof aan ahayn sarkaal oo qaatay ama ku shaqaynaya magac sarkaal isagoo ujeedadiisu tahay:
  - a) inuu sii daayo diyaarad, weel, gaadhi ama dhisme
  - b) ku shaqaynaya xeer aanu lug ku lahayn oo isku magacaabay awoodna isa siiyay
  - c) fulinaya wax aanu sharci u lahayn waa dambiile mutaysanaya xadhig

- i. aan ka badnayn 3 sanno ama
- ii. waxa loo raacayaa xeerka ciqaabta



Waxa inta dheer ciqaabkastoo kale oo ku waajibtay sharci daradaas u sameeyay

### **Qodobka 183<sup>aad</sup>**

#### **Kaptanka weelasha ah ee lagu isticmaalayo Koontarabaanka, Dhuumasho Dambiilenimo ah**

Wadaha diyaaradda, markabka ama gaadhiga ee ku sugan Soomaaliland

- a) Ee samaysta meelo qarsoon oo lagu qariyo badeecadaha ama
- b) Ka soo dejiya badeecadaha xeebo kale ama ka dhoofiya si aan waafaqsanayn sharciga ama
- c) Badeecadii saarnayd diyaaradda ama markabka ama gaadhiga ku tuura meel qarsoon, jebiya, badbaadiya, baabiiya si uu uga difaaco in gacanta lagu dhigo waa dambiile.

Wuxu noqon doona danbile ku waajiba

- i. Masuulka diyaaradda ama markabka ama gaadhiga waa la ganaaxayaa sida ku cad qodobka 178(2). Weelka lagu qabtay badeecadda waa la xidhayaa illaa inta ganaaxa la bixinayo, badeecadda lagu qabtay weelkana waala ganaaxayaa
- ii. Haddii lagu yeesho dulsaar kiro qof leh gawaadhida taala barxada kastamka waxa lagu ganaaxaya sida ku cad qod 178(2) ,gawaadhida iyo badeecadaha galay denbigaa waxa laga qaadayaa dulsaar ganaax

### **Qodobka 184<sup>aad</sup>**

#### **Dambiyada Badeecad La Joojiyay ama la Mamnuucay ama aan Caadi ahayn**

1. Qofka



a) Soo dejiya

- i. Badeecad la mamnuucay ha rarnaato ama yay rarnaanin
- ii. Badeecad la joojiyay oo lid ku ah soo dajinta, ha rarnaat'e

b) Dajin badeecad soo degtay

- i. Badeecad la mamnuucay ama
- ii. Badeecad la mamnuucay oo ka soo degtay xeebaha oo lid ku ah xaaladihii soo dajinta

c) Dhoofinta badeecad dayuurad, markab ama gaadhi keeno kastamka madaarka, ama xayndaabka kastamka ee la dhigo bakhaarka si loo dhoofiyo

- i. Badeecad la mamnuucay ama
- ii. Badeecad la joojiyay oo lid ku ah xaaladaha kastamka oo taala bakhaarada si loo dhoofiyo

d) Waxaad hesho eed leedahay, ilaaliso, qariso si aad u kasbato qarinteeda oo uu ogyahay ama uu sababeeyey:-

- i. Badeecad la mamnuucay ama
- ii. Badeecad la joojiyay oo lid ku ah xaaladaha soo dejinta
- iii. Badeecad aan caadi ahayn,

Waa dambiile wuxuuna mutaysanayaa:-

- i. Xadhig aan ka badnayn 5 sanno
- ii. waxa loo raacayaa xeerka ciqaabta
- iii. waa la ganaaxayaa sida ku cad qodobka 178 farqadiisa 2aad
- iv. ganaax iyo xadhig labadaba

2. Qof kasta oo leh dhisme, una ogolaada qof kale inuu isticmaalo dhismihiisa ama bakhaarkiisa ama ku iibiya badeecad waxa uu mudanayaa ganaax dambi sida ku cad qodobka 178 farqadiisa 2aad



### **Qodobka 185<sup>aad</sup>**

#### **Dambiga soo Dajinta ama Dhoofinta Badeecad la Qariyay**

Qofka soo dajiya ama dhoofiya badeecad

- a) Oo si uun loo qariyay ama
- b) Iyada oo lagu xidhay cartoon oo badeecad kale la dhex galiyay si loogu khiyaameeyo kastamka ama
- c) Iyada oo lagu soo riday Kartoono, kuna jirin dhokomentigii lagu soo raray badeecada waxay noqonaysaa dambi

### **Qodobka 186<sup>aad</sup>**

#### **Dambiyada lagu galo Dhokomenti Been abuur ah**

Qofka xidhiidh la leh kastamka ee

- a) sameeya qoraal galin been ah ama aan sax ahayn
- b) sameeya cadaymo, shahaadooyin, codsiyo, xisaab celin ama dhokomenti kale oo been abuur ah ama khalad ah
- c) marka loo baahdo in wax sharci la xidhiidh uu ka jawaabo ama su'aal uu sarkaal waydiiyo diida inuu ka jawaabo ama si khaldan uga jawaaba
- d) sameeya cadayn been ah si uu u helo saamaxaad, lacag celin, dib u gurasho
- e) wax aan aqoontiisa ahayn raba in uu ku helo dib u gurasho cafis, iyo lacag celin

- f) khiyaamo been ah oo dhuumasho ku jirto raba inuu lacag ku helo
- g) marka laga reebo awooda dhaqaaqa, wuxuu faragalinayaa isaga oo iska dhigaya sarkaalkii hubinta
- h) wuxuu la yimid ama haystaa waraaqo cad cad ama qaan sheeg aan dhamaystirnayn ama dhokomenti kale oon dhamaystirnayn ayuu rabaa inuu ku been abuurdo badeecad soo degtay

- i. wuxuu been abuuraa dhokomenti nooc kasta oo baxaya oo kastamku leeyahay

Waa dambiile wuxuuna mutaysanayaa:-

- i. xadhig aan ka badnayn 3 sanno
- ii. waxa loo raacayaa xeerka ciqaabta
- iii. waa la ganaaxayaa sida ku cad qodobka 178 farqadiisa 2aad ama labadaba oo la iskugu daro

### **Qodobka 187aad**

### **Diidmada Soosaarid Dhokomenti**

Marka qofka loo baahdo in loo adeegsado xeer:-

- a) Si loo saaro buug, decumenti ama waxyaalo kale oo uu haysto oo gacantiisa ku jira ama
- b) Si u soo saaro xeer ama xisaab celin diiday ama ku guul daraystay inuu sidaa u sameeyo waxaa uu noqonayaa dambiile


### **Qodobka 188aad**

### **Dambiga Lagu Mutaysanayo Isticmaalka Halbeeg Been Ah**

Qofka:-



- a) Isticmaala, haysta ama isticmaala halbeeg been ah ama qalab wax lagu miisaamoama lagu cabiro
- b) Si kastaba ha ahaatee, wuxuu difaacayaa in sarkaalku la yimaado xisaab sax ah
- c) Ama miisaan sax ah ama sameeyo baadhitaan sax ah badeecadda iyo alaabta



Wuxuu noqonayaa dambiile si kasta ha ahaatee cabiraada qalabka wax lagu qiyaaso, miisaanada badeecadaha iyo alaabta dambiga lagu galay wuxuu mutaysanayaa in lala wareego.

### **Qodobka 189<sup>aad</sup>**

#### **Dambiga Lagu Galo Faragelinta Hantida Kastamada**

Qof kasta oo jara, tuura, wax sabay,? Burburiya, ama waxyeeleeya, khariba si kastau farageliya weel, ama baabuur, booyadaha ama baroosiin, silsilad ama xadhig calaamado ama alaab kastamku isticmaalo wuxuu noqonayaa Dambiile wuxuu mudanayanaa ganaax sida ku cad 178.2.

### **Qodobka 190<sup>aad</sup>**

#### **Badeecad Aan Caadi Ahayn oo la Laga War-helay**

Qofka hela badeecad aan caadi ahayn ka hela dhulka ama sabaynaysa, ama badda ku degtay oo ku guul darraysta inuu u soo sheego sarkaalka ugu dhaw, wuxuu noqonayaa Dambiile wuxuuna mudanayaa ganaax sida ku cad 178.2. badeecad kasta oo lagu galo dambi waa lala wareegayaa.

### **Qodobka 191<sup>aad</sup>**

#### **Badeecad Wax Aanay Ahayn Lagu Sheegay oo Kotarabaan ah**

Badeecad lasoo bandhigay oo la doonayo in la iibiyo oo aan ahayn badeecad caadi ah waxay mutaysanaysaa in lala wareego.



**Qodobka 192<sup>aad</sup>**

**Caawiyayaal, Kaaliyayaal I.W.M**

1. Qofka caawiya ama kaaliya ama la taliya ama siiya khidmad la xidhiidha dambiga xeerkan ama awood u siiya qof kale waxaa lagu oogayaa ciqaab si uu isagu dambigii galay.
2. Marka dambe lagu lago xeerkan ee uu galo qof gaar ahi oo uu shaqaaleeyay urur qof kasta oo ahaa, agaasime ama maareeye guud ama xoghayn ama sarkaal ka mid ah ururka oo matalayay masuuliyadda waxa uu noqonayaa Dambiile ilaa uu caddeeyo inuu dambigaas waxba ka ogayn kana qayb qaadan.

**Qodobka 193<sup>aad</sup>**

**Mamnoocida Iibinta Shiidaalka La Badhxo**

1. Qofna ma:-
  - a) Badhxi karo shidaal sifaysan ama
  - b) Sooma bandhigi karo inuu iibiyo shidaal badhxaan ama shidaal sifaysan oo aanay soomaaliland caddayn tayadiisa waxqabad.
2. Qofka ka hor yimaada ku shaqaynta Par(1) waa dambiile waxaanu mutaysanmayaa ganaax sida ku cad qaybta 178.2 ama muddo ayuu xidhnaanayaa.
  - i. Aan ka badnayn (3)saddex sanno ama
  - ii. Waxaa loo raacayaa xeerka ciqaabta ama labadaba, badeecadda uu dambigani ku dhacayna waa lala wareegayaa.

## **Qodobka 194<sup>aad</sup>**

### **Ciqaabta Guud**



1. Qofka dambiilaha ah ee aan xeerkan cayimani ku dhicin waxaa uu mudanayaa ganaax sida ku cad 178.2.
2. Qofka ku xukuman dambi ee aan xeer cayimin, wuxuu mutaysanayaa ganaax sida ku cad 178.2 iyada oo ujeedada loo qiimaynayo qiimaha badeecadda.
  - a) Maamulka kastamku wuxuu sababaynayaa badeecad uu ka talo bixiyay sarkaalkii ku haboonaa iyadoo loo raacay shuruucdii qiimaynta sida ku cad qaybta 28 ilaa 34.
  - b) Talom bixinta ama qiimaynta uu sameeyay maamulka kastamku waa caddayntii dhabta ahayd ee qiimaha badeecadaas.

## **Qodobka 195<sup>aad</sup>**

### **Badeecaddaha Ku Haboon in Lala Wareego**

Marka la eego duruuf kasta oo jirta badeecadaha lala wareegayaa waxay noqonayaan:

- a) Badeecadaha mamnuuca ah
- b) Badeecadaha la joojiyay oo lid ku ah shuruucda soo dejinta iyo dhoofinta
- c) Badeecadaha la Ogolayn
- d) Badeecadaha aan caadiga ahayn
- e) Badeecadaha ka soo dega ama ka dhoofa xeebaha, iyagoo u muuqda in lagu khiyaamaynayo maamulka kastamka.
- f) Badeecad soo dagtay ama dhoofaysa oo ku xidhan karaatoon oo aan wadan codsigii dhoofinta ama soo dejinta ama codsigii qoraal gelinta (Entry) oo aan waafaqsanayn badeecadda

- g) Badeecad taala kastamka oo la tahriibiyay ama la qariyay iyadoo maamulka kastamku waxba ka ogayn
- h) Badeecad si kastaba ha ahaatee la xidhiidhaysa kastamka oo aan wadan qoraal gelin (Entry) ama caddayn ama wadata decoment kale oo been ah oo aan sax ahayn ku baxaysa
- i) Badeecad lala noqoday, la qariyay, ama cashuurtii dib loo celiyay oo si sharci daro lagu helay.

### **Qodobka 196<sup>aad</sup>**


#### **Awoodda lagu wareegayo badeecadda gacanta lagu dhigo**

1. Sarkaalka kastamku ama sarkaalka Boliska ahi haddii ay gacata ku dhigaan Dayuurad, Markab, ama Gaadhi badeecad xayawaan ama badeecada kale oo sharcigu rumaysan yahay in lala wareegi karo iyadoo lagu oogin dambi sida sharcigu qabo waa lala wareegayaa.
2. Dayuurad, Markab, Gaadhi, badeecad ama xayawaan gacanta lagu dhigo waa la dhigayaa sida sharcigu qabo waxaana la gaynayaa bakhaarka kastamka ama meel kale si loo sugo nabadgelyada iyadoo ku taala awooda maamulka kastamka.
3. Maamulka kastamku xilli kasta ayuu bilaabi karaa talaabada sharci ka qaadida ah ee Dayuuradda, Markabka, Gaadhiga, Xoolaha, badeecada gacanta lagu dhigay wuu sii dayn karaa waxaana loo celiniyaa qofkii lagu qabtay haddii maamulka kastamku ku qanco in aan xaq loogu lahayn la qaban Karin.
4. Sarkaalna kama qaadi karo talaabo sharci, talaabo kasta oo loo qaado dhinaca wanaagsan ee arrintan la xidhiidha.

### **Qodobka 197<sup>aad</sup>**

#### **Nidaamka la Raacayo marka Badeecad Gacanta lagu Dhigo**

1. Marka gacanta lagu dhigo badeecad si xeerka waafaqsan, waa in uu joogo mulkiilihii badeecadu sidoo kale diyaarada iyo markabka waa in uu joogaa qofkii masuulka ka ahaa. Sarkaalka badeecadda soo qabtay waa inuu bil gudaheed qoraal ogaysiin ah ku siiyaa mulkiilaha badeecadda iyo masuulka diyaaradda iyo markabka.
- a) Wax ogaysiis gacan ku dhigida ah lama siinayo, haddii qofku ku soo dacwoon waayo mudadii bisha ahayd ee la siiyay soona sababayn waayo waxyaabaha badeecadiisa gacanta loogu dhigay, dambigaas waxa lagu darayaa qodobka 202 marka ogaysiiska la siiyo dabadeed, inta ka horeysana waxa badeecadda loo aqoonsanayaa in aan la isticmaali Karin sida xeerku yahay.
- i. Dacwadda waa la keenayaa, dabadeed badeecadda waxa lagula macaamilayaa iyada oo la tix raacayo qodobka 198aad haddii aan ogaysiin la siin.
- ii. dambigu haddii uu isku jiro badeecadda waxa lola macaamilayaa Iyadoo la tixraacayo qayb haddii aan ogaysiin la siin
- b) marka badeecadda gacanta lagu dhigayom haddii uu joogo qof matalaya mulkiilihii, sarkaalka badeecadda qabtay daruuri maaha inuu siiyo ogaysiin qoraal ah qof ka matalaya mulkiilaha
- c) Qofk aad ogaysiiska siinayso ee matalaya mulkiilaha, waa inuu ahaado qof fikir ka haysta ood garanayso oo kaaga duwan dadka kale.
- d) Haddii aanad garanayn qofka matalaya mulkiilaha, daruuri maaha inaad siiso ogaysiis khuseeya badeecadda la qabtay

- 
2. Badeecadda la qabtay hadday tahay mid dhakhsa u qudhmays, ama xayawaan maamulka kastamku wuu iibinayaa isla markiiba ama waa la xaraashayaa ama qof heshiis lala wadaago ayaa laga iibinayaa. Lacagta laga iibiyana waxa loo haynayaa sidii badeecad oo kale.
  3. Badeecadda la qabtay waa lala wareegayaa iyadoo la raacayo qaanuunka qabashada
    - a) haddii qof lagu dacweeyo dambiga ah in badeecad lagu qabtay, badeecadda waa la haynayaa illaa go'aan adag la gaadhayo waxaana loo raacayaa qodobka 198aad
    - b) Badeecadda la qabtay waa la haynayaa ilaa muddo bil ah oo ka bilaabanta xilliga la qabtay ama ogaysiiska la siiyay sida ku cad (1). Haddii aan wax dacwad ah la samayn mudada bisha ah sida ku cad (4), badeecadda waa la xukumayaa
  4. Badeecad kasta oo lala wareegay oo la qabtay sida ku cad (1) iyo (3) sababtaasina ka timid mulkiilaha muddo bil ah gudaheed ama ogaysiiska la siiyay ka bilaabanta maalintii la qabtay sida ku cad (1), maamulka kastamku wuxuu dacwad ku soo oogayaa badeecadda.
  5. Marka ogaysiin dacwad ah la siiyo iyadoo la raacayo (4), badeecadda la qabtay waxa lagu haynayaa kastamka. Maamulka kastamku wuu u sii dayn karaa badeecadda qofka dacweysanaha ah. Intaa dabadeed qaybtan waxa loo raacayaa qofka dacwoonaya si nabadgalyo ah na wuxuu u keenayaa qiimihii badeecadda (payment of value).

**Qodobka 198<sup>aad</sup>**

**Raadka Denbi Xukumista ee Badeecaddaha ay tahay in lala Wareego**

1. Qofka lagu dacweeyo in uu galay dambi ah badeecad lala wareegay isagoo og inuu dambigaas galay, xukunka qofk dambigaas galay isagoon amar dambe la siin waa la xukumayaa badeecadda
2. Qofka lagu soo dacweeyo dambi la xidhiidha badeecadd sharciga lagula wareegay oo sababaysay in aanu lug ku lahayn dambiga ee sababeeyay in eedaysanuhu aanu lug lahayn dambigaas, maxakamadu waxay badeecadda ka gaadhi kartaa ama
  - a) in loo sii daayo badeecadda qofka mulkiilaha ah
  - b) in loo hayo badeecadda qaranka

### **Qodobka 199<sup>aad</sup>**

#### **Nidaamka ka Dambeeya Ku Wargalinta Dacwadda**

1. Sida ku xusan qodobka 2 meesha mulkiilaha badeecadda la qabtay ka dacwoonayo isagoo siinaya ogaysiis maamulka kastamka waxa uu sii wadayaa hawsha sida uu ku gaadhayo oo kuna xusan qodobka 197. Mulkiilaha badeecaddo muddo laba bilood gudahood ah oo ka bilaabanta marka la siiyo ogaysiiska bilaabayaa in talaabo sharci ka qaadid ah la sameeyo oo la helo badeecadda wixii lumay ama la xaday. Haddii aan wax sharci ka qaadid ah la samayn muddada la cimay, badeecadda la qabtay waala xukumayaa
  - a) Mulkiilaha badeecadda la qabtay waxa lagu oogayaa dambi iyadoo sabab looga dhigayo in badeecadiisii la qabtay
  - b) Xukunka la doorbiday wuxuu ku xigayaa dib ula noqosho sabab kasta ha ku dhacdee mudada ku cayiman(1) waxay ka bilaabmaysaa taariikhda xukunka dib loola noqonayo

2. Marka talaabo sharci la qaadayo sida ku cad (1), badeecadda la qabtay waa la xukumayaa

a) haddii ay maxkamadu ku qanacdo badeecadda

i. in si sharci ah loola wareego ama

ii. ay ahayd badeecad madnuuc ah ama la joojiyay oo si badheedh ah loo soo dajiyay ama loo dhoofinayay oo ka hor imanaysa sharciga

b) Haddii aanay maxkamadu ku qancin in qofka dacwoonayaa yahay mulkiilihii ama qofkii u xilsaarnaa badeecadda

3. Haddii badeecad la qabtay aanu xukun ku dhicin sida ku cad (3) maxkamadu way sii daynaysaa badeecadda mulkiilaha ah ee bixinayay wixii cashuur ee loo baahdo.

### **Qodobka 200<sup>aad</sup>**

#### **Shuruudaha la Xidhiidha Xukunka**

1. Marka badeecad la qabto sida sharcigu qabo ama xukun kale ee la wareega ah, xukumista badeecadaasi ma saamaynayso xaqiiqada ah in mulkiilaha badeecadda aanay sinaba u khusayn dambiga ama xeerka ka turjumaya in lala wareego badeecadda

2. marka badeecad la xukumo sida sharcigu qabo dabadeed:-

a) mawduuc kasta oo khuseeya shuruudaha xukunka badeecadda lala wareegay waa la iibinayaa, la burburinayaa haddii kale doonista maamulka kastamka ayaa ka fekeraya

b) Xukunka badeecaddu wuxuu raad ku yeeanayaa xogta xisaabta marka loo eego la wareegista



c) iyadoo la raacayo sharciga, xukunka dhacay qofku racfaan ayuu ka qaadan karaa dhamaad ayay noqon kartaa sida ku cad qodobka 201, codsi dib u soo celin ah oo qofku helayaa ma jirto

3. Badeecadda xukunku ku dhacay, haddii ay cid kale hayso waxa lagu soo celinayaa kastamka sida nidaamku ku xusan (2)

### **Qodobka 201<sup>aad</sup>**

#### **Dib Usoo Celin Badeecad la Qabtay**

1. Marka badeecad la qabto sida xeerku qabo, qofka leh badeecadda la qabtay codsi ayuu u soo qoranayaa wasaaradda maaliyadda. Wasaaradda maaliyaddu toos ayay ugu sii dayn kartaa qofka codsiga keenay iyadoo la eegayo xaaladaha
2. Codsigan ku xusan (1) waxa uu noqonayaa mid qoraal ah oo wasiirka loo qoro lana soo mariyo maamulka kastamka

### **Qodobka 202<sup>aad</sup>**

#### **Xalinta Kiisaska ee Maamulka Kastamada**

1. Maamulka kastamka waxa laga yaabaa inuu ku qanacsan yahay in qof dambiile ah xukun ku dhacay sida sharcigu qabo ee la ganaaxay ama badeecadiisa lala wareegay Iyadoo lagu amray inuu bixiyo lacag aan gaadhayn tii ganaaxa oo loo qaban karo dambigii lagu xukumay ama laga yaabaa in lagu amro in ay xidhiidh la leeyihiin badeecadii lala wareegay ee la xukumay Iyadoo shuruud laga dhigayo in maamulka kastamku aanu ku takrifalin awiidiisa ee qaybtan ilaa qofku ogolaado inuu galay dambigaas codsanayana in uu kala xaajoodo dambigaas

2. Maamulka kastamku wuxuu bixinayaa amar sida ku xusan qaybtan

- a) Amarka waxa lagu bixinayaa qoraal waxaana lagu lifaaqayaa codsiga qofka si loola xaajoodo maamulka kastamka
- b) Amarku wuxuu cadaynayaa dambiga qofku galay, maamulka kastamkuna wuu ganaaxayaa
- c) Nuqul ka mida amarka la siiyay ayaa la siinayaa haddii uu qofku codsado



## **QAYBTA IX – RAFCAANADA**

### **Qodobka 203<sup>aad</sup>**

### **Codsiga Dib-u-Eegista Go'aanadda**

1. Qof kasta oo si toosa iyo si dadbanba u sameeya go'aan ama tirtirid ka timid kastamka oo la xidhiidha talaabo rasmi ah oo la qaado, codsi dib u eegis ah oo la xidhiidha go'aanka ama tirtirida ayaa la samaynayaa muddo 30 cisho gudahood oo ka bilaabanta maalinta la qaatay go'aanka ama tirtirida.
2. Codsiga lagu xusay farqada (1) wuxuu noqonayaa caddayn qoraal ah oo sheegaysa cidhibta ama maxsuulka talaabada rasmiga ah ee la qaadayo
3. Haddii ay jirto duruufo kale oon la arkayn, waxa la qaadayaa caddaymo kale oo qancinaya kastamka oo ah muddo kordhin caddaynaysa racfaan sida ku cad (1)
4. Muddo 30 cisho gudahood ah marka la helo codsiga qoraalka ah ee ku xusan (2) iyo warar kale oo dheeraad ah, kastamku wuxuu qofka uga baahnaanayaa caddaymo codsi ah. Kastamku wuxuu sheegayaa go'aankiisa isagoo qoraal ku siinaya qofkii

keenay cadaymaha qoraalka ah sheegayana sababta go'aankan loo gaadhay

5. Haddii aanu kastamku qofka u sheegin go'aankiisa khuseeya cayimida wakhtiga sida ku cad (4) kastamku wuxuu qirayaa inuu aqbalay codsigan
6. Illaa inta aan go'aan laga gaadhin codsigan wata cadaynta ee qaybtan kastamka codsiga qofkaa ee khuseeya in la sii daayo badeecadda iyadoo la raacayo codsigii caddaynta watay ee lacagta lagu shubay sida uu qeexay kastamku oo nabadgalyo ku filan leh ee cashuurta bixiyay.
7. Caddaynta rasmiga ah ee racfaanku ma khusayso ciqaabta qofka codsadaha ah

#### **Qodobka 204<sup>aad</sup>**

#### **Racfaanka Gudida Dacwadaha Cashuuraha**

1. Qofka ku qanci waaya go'aankii kastamka ee ku xusan qodobka 203 wuxuu racfaan u qaadanayaa Gudida Dacwadaha Cashuuraha ee la aasaasay iyada oo la raacayo qodobka 205
2. Racfaanka ku xusan qaybtan (1) waxa lagu cadaynayaa 45 cisho ka dib marka qofku uu adeegsado go'aanka lagu muujiyay (4) ee qodobka 203 kastamkana waa in la ogaysiiyo racfaanka

#### **Qodobka 205<sup>aad</sup>**

#### **Asaasida Gudidda Dacwadaha Cashuuraha**

Iyadoo la raacayo shuruucda ka jirta Soomaaliland, waxa la aasaasayaa **Gudida Dacwadaha Cashuuraha oo** ujeedadeedu tahay inay dhagaysato racfaanada ku lidka ah go'aamada kastamka

**QAYBAHA SHARCIGA EE KAMA DAMBAYSTA AH**

## Qodobka 206<sup>aad</sup>

### Fulinta Qodobada Sharci

Qodobada sharci ee fulinteeda loo baahan yahay ee ku xusan xeerkan waxa go'aaminaya wasiirka maaliyadda



## Qodobka 207<sup>aad</sup>

### Magacaabista Goob- Kastam

1. Wasiirka maaliyadda oo la tashanaya maamulka kastamka ayaa magacaabaya aaga kastamka iyo xuduudaheeda
  - a) Dekedaha
  - b) Madaarada
  - c) Xuduudka iyo Xarumaha Beriga
2. Magacaabista lagu sameeyay qaybta 207(1) waxa kastamku u qaadanayaa inay ku haboon tahay sida meel ay dagaan saraakiishu.

## Qodobka 208<sup>aad</sup>

### Xeerarka iyo Xeernidaamyahooda La nasakhay

Halkan waxa lagu nasakhay Xeerkan hoos ku xusan, ee XEERKA KASTAMKA IYO HAB- RAACCIISA, **XEER LR 91/96.**

## Qodobka 209<sup>aad</sup>

### Qoraalka Somaliga ah Ayaa La Raacayaa

1. Iyadoo ay tahay lagama maarmaan, in la hubiyo iswaafaqsanaanta adeegsiga iyo tafsiirka Xeerkan, oo ay kujiraan kelmedda inta badan loo isticmaalo

arimaha dhaqaalaha, waxaa halkan lagu cadaaynayaa, iyadoo loo eegayo Qodobka 6aad ee Dastuurka JSL, in nuqulada Af-Soomaaliga iyo Af-Ingiriisida ee Xeerkani ahaan doonaan rasmi.

2. Haddii ay nuqulada Afafka Somaliga iyo Ingriisiga ay ku jirto ismaandhaaf amaba iska horjeed labadooda, waxa la raacayaa Kan Afka Somaliga

**Qodobka 210<sup>aad</sup>**

**Dhaqan Gal**

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa markuu Golaha Wakiilada JSL ansixiyo, madaxweynuhuna saxeexo (laguna soo saaro faafinta rasmiga ah).

**ALLAA MAHADLEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle.**

**Baashe Maxamed Faarax**

**Xog.Guud ee G/Wakiilada JSL**  
**Wakiilada JSL**

**K/SGudoomiyaha Golaha**

**QAYBTA LABAAD:**

**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO**

**DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:**

**REPUBLIC OF  SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-4079/072016

DATE....05/07/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0649/072016**

**Cafis Madaxweyne**  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



Markuu Arkay: Qodobka 90aad, xubintiisa 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka Cigaabta Guud;

Markuu Arkay: Talo-bixinta Sharci ee Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka;

**Wuxuu go'aamiyey**

In uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo maxaabiista xukuman ee kale ah:

1. Axmed Cabdillaahi Maxamuud
2. Daahir Xuseen Axmed

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**



**SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-4086/072016

DATE....14/07/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0650/072016**

**MAGACAABID DEGMO**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 109aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 10aad ee Xeerka Gobollada iyo Degmooyinka oo tilmaamaya wax-ka-badelidda Qaab-dhismeedka Dalka;

Markuu Tixgeliyey: Codsiyada ka yimaada Madax-dhaqmeedyada, Waxgaradka Culimada iyo Odayaasha Deegaanka;

Markuu Tixgeliyey: Baahida looqabo in Deegaanka Wadaamagoo loo magacaabo Degmo cusub;

Markuu Dhegeystay: Soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

### **Wuxuu go'aansaday**

In uu Wadaamagoo u magacaabo Degmo, taasi oo ka tirsanaan doonta Gobolka Saraar

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT


JSL/M/XERM/249-4087/072016

DATE....14/07/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0651/072016**

**MAGACAABID DEGMO**

## **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



- Markuu Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 109aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 10aad ee Xeerka Gobollada iyo Degmooyinka oo tilmaamaya wax-ka-badelidda Qaab-dhismeedka Dalka;
- Markuu Tixgeliyey: Codsiyada ka yimaada Madax-dhaqmeedyada, Waxgaradka Culimada iyo Odayaasha Deegaanka;
- Markuu Tixgeliyey: Baahida looqabo in Deegaanka Faqayuuub loo magacaabo Degmo cusub;
- Markuu Dhegeystay: Soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

### **Wuxuu go'aansaday**

In uu Faqayuuub u magacaabo Degmo, taasi oo ka tirsanaan doonta Gobolka Togdheer.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-4088/072016

DATE....14/07/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0652/072016**



# MAGACAABID DEGMO

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



- Markuu Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 109aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 10aad ee Xeerka Gobollada iyo Degmooyinka oo tilmaamaya wax-ka-badelidda Qaab-dhismeedka Dalka;
- Markuu Tixgeliyey: Codsiyada ka yimaada Madax-dhaqmeedyada, Waxgaradka Culimada iyo Odayaasha Deegaanka;
- Markuu Tixgeliyey: Baahida looqabo in Deegaanka Bali-Mataan loo magacaabo Degmo cusub;
- Markuu Dhegeystay: Soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

### Wuxuu go'aansaday

In uu Bali-mataan u magacaabo Degmo, taasi oo ka tirsanaan doonta Gobolka Maroodi-jeex

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4089/072016

DATE....14/07/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0653/072016**

**MAGACAABID DEGMO**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



- Markuu Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 109aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 10aad ee Xeerka Gobollada iyo Degmooyinka oo tilmaamaya wax-ka-badelidda Qaab-dhismeedka Dalka;
- Markuu Tixgeliyey: Codsiyada ka yimaada Madax-dhaqmeedyada, Waxgaradka Culimada iyo Odayaasha Deegaanka;
- Markuu Tixgeliyey: Baahida looqabo in Deegaanka Gumburaha loo magacaabo Degmo cusub;
- Markuu Dhegeystay: Soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

**Wuxuu go'aansaday**

In uu Gumburaha u magacaabo Degmo, taasi oo ka tirsanaan doonta Gobolka Hawd.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**


JSL/M/XERM/249-4090/072016

DATE....14/07/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0654/072016**

**MAGACAABID DEGMO**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



- Markuu Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 109aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 10aad ee Xeerka Gobollada iyo Degmooyinka oo tilmaamaya wax-ka-badelidda Qaab-dhismeedka Dalka;
- Markuu Tixgeliyey: Codsiyada ka yimaada Madax-dhaqmeedyada, Waxgaradka Culimada iyo Odayaasha Deegaanka;
- Markuu Tixgeliyey: Baahida looqabo in Deegaanka Gebo-gebo loo magacaabo Degmo cusub;
- Markuu Dhegeystay: Soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

**Wuxuu go'aansaday**

In uu Gebo-gebo u magacaabo Degmo, taasi oo ka tirsanaan doonta Gobolka Togdheer.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**



**SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**



**XEER MADAXWEYNE Lr: 0655/072016**

**MAGACAABID DEGMO**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 109aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 10aad ee Xeerka Gobollada iyo Degmooyinka oo tilmaamaya wax-ka-badelidda Qaab-dhismeedka Dalka;
- Markuu Tixgeliyey: Codsiyada ka yimaada Madax-dhaqmeedyada, Waxgaradka Culimada iyo Odayaasha Deegaanka;
- Markuu Tixgeliyey: Baahida looqabo in Deegaanka Adhi-cadeeye loo magacaabo Degmo cusub;
- Markuu Dhegeystay: Soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

**Wuxuu go'aansaday**

In uu Adhi-cadeeye u magacaabo Degmo, taasi oo ka tirsanaan doonta Gobolka Sool.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-4093/072016

DATE: 14/07/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0656/072016**

**MAGACAABID DEGMO**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 109aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 10aad ee Xeerka Gobollada iyo Degmooyinka oo tilmaamaya wax-ka-badelidda Qaab-dhismeedka Dalka;
- Markuu Tixgeliyey: Codsiyada ka yimaada Madax-dhaqmeedyada, Waxgaradka Culimada iyo Odayaasha Deegaanka;
- Markuu Tixgeliyey: Baahida looqabo in Deegaanka Shaxda loo magacaabo Degmo cusub;
- Markuu Dhegeystay: Soo jeedinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

**Wuxuu go'aansaday**

In uu Shaxda u magacaabo Degmo, taasi oo ka tirsanaan doonta Gobolka Xaysimo.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-4111/072016

DATE: 14/07/16

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0657/072016**

**Cafis Madaxweyne**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, xubintiisa  
5aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka  
Ciqaabta Guud;

Markuu Arkay: Qoraalka Madax-dhaqmeedka,  
Qayska iyo Odayaasha  
Deegaanka Maxbuuska;

Markuu Arkay: Talo-bixinta Sharci ee Xeer-  
ilaaliya Guud ee qaranka

**Wuxuu go'aamiyey**

In uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo maxbuus Maxamed Xasan Yoonis Habane, islamarkaan wixii hanta ah ee gaar loogu leeyahay waxa mas'uuliyadooda qaadi doona Odayaasha iyo Madax-dhaqmeedka halkan ku lifaaqan.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**QAYBTA AFRAAD:**  
**AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**  
**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**  
**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**



XIG/JSL/140/2016.

21/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.


**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha .

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SOMPOLAH GROUP, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay suganyihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **SOMPOLAH GROUP, Astaanteeduna tahay:** - (Xabad Qamadi ah), shaqadeeduna tahay soo dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/06/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/141/2016.

21/06/2016

Hargeysa


Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.  
**(Sole Proprietorship)**



**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha



**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **BIG BOOS CONSTRUCTION AND CONTRACTOR COMPANY.**

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaha shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **BIG BOOS CONSTRUCTION AND CONTRACTOR COMPANY. Astaanteeduna tahay:-** (Magaca shirikada), shaqadeeduna tahay Dhismaha **(Construction)**, xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/06/2016.

Allaa Mahad Leh

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/142/2016.

19/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SERVICE SOLUTIONS GROUP (SSG), oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11 (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **SERVICE SOLUTIONS GROUP (SSG)**, Astaanteeduna tahay:- xarfaha SSG), shaqadeeduna tahay Bixinta adeega ICT (ICT), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeisa , laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 19/06/2016



Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**  
**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/143/2016.

21/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HARGEISA AUTHOMOTIVE LIMITED, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka

11aad (2) (a) Somaaliland Company law.

**Markuu Arkay:-**

In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.



**Markuu arkay:-**

Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **HARGEISA AUTHOMOTIVE LIMITED, Astaanteeduna tahay:-** (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay soo dejinta iyo dhoofinta allaabooyinka (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/06/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**


XIG/JSL/144/2016.

27/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.



Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AL-HUSEINI GROUP TRADIN, oo ay ku cadyihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11 (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda ay Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **AL-HUSEINI GROUP TRADIN, Astaanteeduna tahay:-** (magaca shirikada oo maabka aduunka kujira), shaqadeeduna tahay Soo dejinta alaabooyinka (import) xarunteeduna tahay

Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 27/06/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)



**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**  
**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/145/2016.

14/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HORN GARDENS COMPANY, oo ay ku cadyihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11(2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of

Somaliland, saamiyadooduna ay suganyihiin.



**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **HORN GARDENS COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (Caleen iyo Cadceed), shaqadeeduna tahay ka ganacsiga wax kasoo saarka beeraha (Agriculture Production), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeisa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 14/06/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/146/2016.

30/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Caddeyn Midow Shirikadeed (Join Venture)

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland ee u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya diiwaangelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda ay ku Midoobeen labada shirikadood ee kala ah GENERAL ELECTRIC COMPANY IYO ALMIS ELECTRIC COMPANY, oo ku midoobey magaca cusub ee SOMPOWER, sida ku cad heshiiskooda.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilayda Shirkadda midowga ah ay wadda saxeexeen.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiska Xeer ilaalinta Guud ee Qaranka ay ka diiwaangashan tahay shirkada midowga ah (**JOINT VENTUR**) ee ay ku midoobeen labada shirikadood ee kala ah GENERAL ELECTRIC COMPANY IYO ALMIS ELECTRIC COMPANY, kuwaas oo ku midoobey magaca **SOMPOWER**, astaanteeduna tahay:- SOMPOWER oo calaamadda laydhku kudhexjirto, xarunteeduna tahay magalaada Hargeisa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 30/06/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**



JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/147/2016.

29/06/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - **Qodobadda** 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha .

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, PRECISE CONSTRUCTION LIMITED, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad(2)(a) Somaliand Company Law.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **PRECISE CONSTRUCTION LIMITED, Astaanteeduna tahay:-** (Dhisme Jaajuur ah iyo wado, magaca shirkadu ku dhex yaalo), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 29/06/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**  
**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/148/2016.

29/06/2016

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.  
**(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay,  
HORN AQUA TECH

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaha shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **HORN AQUA TECH.**

**Astaanteeduna tahay:-** (Magaca shirkada oo qasabad dhinaca kaga taal), shaqadeeduna tahay bixinta adeega talo bixinta xaga tayada adeega biyaha iyo ilaalinta deegaan (Consultancy), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 29/06/2016.

Allaa Mahad Leh

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/149/2016.

10/07/2016

Hargeysa.



Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.  
**(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HILAAL SOM GENERAL TRADING COMPANY.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **HILAAL SOM GENERAL TRADING COMPANY: - Astaanteeduna tahay** (Bil iyo Wiish), shaqadeeduna tahay bixinta adeegyadda saadka (Logistics and Procurement), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 10/07/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL



JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/150/2016.

10/07/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.  
**(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay HARAR TRANSPORTATION SERVICE.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.



Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **HARAR TRANSPORTATION SERVICE, Astaanteeduna tahay:-** (Laba Baabuur oo is dhaafaya), shaqadeeduna tahay bixinta adeegyada socdaalka (Transportation Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Berbera, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 10/07/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**  
**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/151/2016.

10/07/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeedo:- Caddayn Midow Shirikadeed (Join Venture).**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Diiwaangelinta Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda ay ku midoobeen saddexda shirkadood ee kala ah MUUQBILE CONSTRUCTION COMPANY, HALDOOR ENGINEERING CONSULTING AND CONSTRUCTION COMPANY IYO AL-NUR CONSTRUCTION COMPANY, oo ku midoobey magaca cusub ee HADH-QABOOBE Join Venture, sida ku cad Heshiiskooda.

**Markuu Arkay: -** Saxeexa Saamilayda Shirkada Midowga ah ay wadda saxexeen.

### **Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiska Xeer ilaalinta Guud ee Qaranka ay ka diiwaangashan tahay Shirkada midoga ah **(JOIN VENTURE)** ee ay ku midoobeen saddexda Shirikadood ee kala ah MUUQBILE CONSTRUCTION COMPANY, HALDOOR ENGINEERING CONSULTING AND CONSTRUCTION COMPANY IYO AL-NUR CONSTRUCTION COMPANY, kuwaas oo ku midoobay Magaca HADH- QABOOBE , **Astaanteeduna tahay:-** Magaca shirkada , xarunteeduna tahay Magaaladda Burco, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 10/07/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**  
**MAXKAMADDA DEGMADA HARGEISA**



Hargeisa District Court

MDH/J/DML/1165/2016

28/07/2016

**Ku: Radio Hargeisa**

**Ku: Garyaqaanka Guud ee Qaranka**

**Ku: Wargeys-yada Madaxa Banaan ee Hargeisa**

**Ujeedo: Baafin Dacweysanta Magaceedu tahay**

**(Aamina Qowdhan Xaashi)**

Maxkamadda Degmada Hargeisa waxay baafinaysaa dacweysanta Magaceedu sare ku xusan tahay inay ku timaado muddo dhan (90) cisho oo ka bilaamaya marka laga baahiyo idaacada Radio Hargeisa iyo Wargeysyada Madaxa banaan ee Hargeisa kasoo baxa.

Dacweysanta waxa lagu amrayaa inay dhowrto wakhtiga loo qabtay ee Maxkamadu u mudeysay in ay ku timaado hadii aad ku iman weydo Maxkamadu waxay kaa qaadi doontaa talaabo sharci ah oo la xidhiidha arintaada.

Maxkamadu waxay u cuskatay qodobka sharci ee 121 XHM.

AALLAH Mahad Leh

Ilyas Da'ud Ibrahim

Garsooraha: Maxkamadda Degmadda Hargeisa

Kaaliye: C/Laahi Axmed Xasan